38. *Waxbarashada gaarka* micnaheedu waa waxbarasho gaar ah ee loo habeeyey iyadoon qarash ugu kacayn waalidiinta, si ay u buuxiso baahida ardayda naafada ah, oo ay ku jirto baritaanka fasalka gudihiisa, cisbitaal ama dugsi iyo meel kale; iyo casharada dhiska jidhka. Kalmada waxaa ku jira adeegyada ku hadalka luqaddaha/hadalka iyo waxaa dhici kara inay ku jiraan adeegyo kale ee la xiriira, tababar safar, iyo waxbarasho farsamo ee quseeya, haddii ay ka soo baxaan sharaxaada waxbarashada gaarka ah.

    *Qarash ma leh* micnaheedu dhammaan waxbarashada gaarka loo habeeyay aan lagu soo dalacayn, laakin aysan ku jirin ujrooyinka lama filaanka ah ee sida caadiga ah la soo dalaco ardayda aan naafada ahayn ama waalidiintooda iyadoo ay qeyb ka tahay barnaamijka waxbarashada caadiga ah.

39. *Waxbarashada sida gaarka loo habeeyey* micnaheedu waa la qabsashada, sida ku haboon baahida ardayga u qalma iyadoo ay hoos timaado Xeerarkan, qeybaha, dariiqa, ama qaabka loo soo gudbiyo si loo:

a. Wajaho baahida gaarka ah ee ardayga ee dhalisay naafada aradyga.

b. Si loo hubiyo in ardayga uu helo waxbarashada guud, si markaa isaga ama iyada ay uga soo baxaan heerka waxabarashada ee hoos timaada xadka awood sharciga ee LEA ee quseysa dhammaan ardayda oo dhan.

40. *Ardayda naafada ah* micnaheedu waa arday, da'da 3 ilaa 21 jir ah, la qiimiiyey sida waafaqsan Xeerarkan sida inuu qabo ootisam, dhinaanta hadalka ama luqada, dhegoole-camoole ah, khalkhal niyadeed leh, Dhegaha ka culus oo ay ku jiraan dhego la'aan, naafo maskax furnaansho, laxaad la'aan dhawr ah, laxaad la’aanta muruqyada, dhinaanshaha kale ee caafimaad, naafonimada waxbarashada gaarka ah, ama arday seddex jir ilaa iyo todoba jir ee qaba korniin raagtey oo naafadadiisa ay saameynaysa waxqabadka waxbarashadiisa/eeda iyo kaaso, sabab kasta, u baahan waxbarasho gaar ah iyo adeegyo la xiriira.

Haddii la go'aamiyo, iyadoo loo marayo qiimeyn ku haboon ee hoostimaada Xeerarkan, in ardayga uu qabo mid ka mid ah naafonimadan kor ku xusan, balse ardayga kaliya u baahan yahay adeegyada la xiriira oo uusan ubaahnayn waxbarasho gaar ah (sida ku qeexan waxbarashada sida gaarka loo habeeyey), ardayga ma ahan mid u qalma sida arday naafo ah sida hoos timaada Xeerarkan.

Haddii, sida joogtada u sharaxaadda waxbarashada gaarka ah ee hoos timaada Xeerka I.E.38, adeegyada la xiriira ee uu ubaahan yahay ardayga waxaa loo tixgeliyaa waxbarasho gaar ah halkan ay ka ahaan la'hayd adeegyada la xiriira ee hoos timaada Xeerarkan, ardayga waxaa loo go'aamiyaa inuu yahay arday naafo leh.

41. *Taageerada iyo adeegyada sooraaca* micnaheedu waa gargaar, adeegyo, iyo taageero kale ee la bixiyo fasalada gaarak ah ee caadiga ama meelo waxbarashada kale la xiriirta si ardayga naafada ah ay awood ugu siiyo in wax lala baro ardayga aan naafo ahayn ilaa iyo in ku haboon sida waafaqsan Xeerarkan, oo ay ku jirto shuruudadaha LRE (Xeerarka III.P-S).

42. *Adeegyada kalaguurka* micnaheedu waa howlo la isku soo dabarariday oo loogu talagalay ardayda naafada ah ee:

a. Waxaa loogu talagay in ay udhaxeyso natiijooyinka hanaanka, ahmidda la saaro hagaajinta akadeemiyadda iyo guusha howsha ardayga leh naafada in ay u fududeyso dhaqdhaqaaqa ardayga iskuulka ilaa howlaha iskuulka ka dib, oo ay ku jiraan waxbarashada iskuulka ka dib, waxbarasho xirfadeed, shaqada midaysan (oo ay ku jirto taageerada shaqada), waxbarashada ardayga qaangaarka ah ee socota, adeegyada qaangaarka, nolosha madaxbanaan, ama ka qeybgelinta jaaliyadda;

b. Waxay ku saleysan tahay baahida ardayga shaqsiga ah, in xisaabta lagu daro ardayga kartidiisa, dooqiisa, iyo danahiisa; oo ay ku jiraan

waxbarashada, adeegyada la xiriira, qibraddaha jaaliyadda, kobcinta shaqada iyo hadafyada nolosha qaangaarka ah ee iskuulka ka dib iyo, haddii ay haboon tahay, helista xirfaddaha nolol maalmeedka iyo qeybaha qiimeynta xirfaddaha waxqabadka.

c. Waxaa dhici karta in ay tahay waxbarashada gaarka ah, haddii loo fidiyo waxbarashada sida gaarka loo habeeyey, ama adeegyada la xiriirta, haddii loo baahdo in ay ardayga naafada ah ka caawiso inuu ka faa'ideysto waxbarashada gaarka ah.

43. *Tababarka safarka* micnaheedu waa waxbarasho, sida ku haboon, ee la siiyo ardayga qaba naafonimo fahamdaro daran, iyo ardayda naafo ah ee ubaahan waxbarashadan, si ay karti ugu siiso in:

a. Ay la yimaadaan wacyigelin ku aadaan deegaanka ay ku noolyihiin.

b. Ay bartaan xirfaddaha daruuriga ah si dhaqan gal ah ugu dhaqaaqa oo ammaan ah hal meel ilaa iyo meel kale ee isla deegaankii (tusaale ahaan, iskuulka dhexdiisa, guriga dhexdiisa, shaqada, iyo xaafadda dhexdeeda).

44. *Maganta Gobolka* micnaheeda waa ubad, sida uu qeexay gobolka uu degan yahay ilmaha la korinayo, maganta gobolka ah, ama ku jiro gacant dadwaynaha ee hay'adda daryeelka ubadka uu ku jiro. Sharaxaadda Maganta Gobolka kuma jiro ubad la koriyo oo ay koriyaan waalidka ilmaha korsanaya oo soo buuxiya sharaxaadda waaldi sida hoos timaada Xeerka I.E.29 ee kore.

# II. AQOONSI, GOOB, IYO QIIMAYN

## II.A. NIDAAMKA UBAD HELIDDA (§300.109 and §300.111).

1. La socda shuruudaha Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarkan, LEA kasta waa in ay la timaadaa shuruucyo iyo hanaan ah in la hubiyo in dhammaan ardayda naafada ah ee deggan xadka awoodda sharci ee LEA, oo ay ku jiraan ardayda naafada ah ee dhashay ilaa iyo 21 jir, iyo kuwa dhgta iskuullada gaarka ah, iyadoon loo eegeyn xadka naafaddooda, iyo kuwa ay yihiin kuwa ubaadan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, ee la magacaabay, la meeleeyey, oo la qiimeeyey. Tani waa in ay ka mid noqotaa habka fulinta ee in lagu ogaanayo ardayga iminka hesha waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriria.

2. Shuruudaha qeybtan waxay quseysaa:

    a. Ardayda naafada ah ee aadka u socsocda (sida ardayda soo galootiga ah iyo kuwa hoyga la' (§300.311(c)(2))).

    b. Ardayda iskuulka laga joojiyay io kuwa la soo buriyay ((§300.101(a)).

    c. Ardayda aan dugsiga sare uga qalinjebin shahaadada dugsiga sare ee caadiga ah (§300.102(a)(3)(iii)).

    d. Ardayda loogu tuhunsan yahay inuu yahay arday naafo ah sida hoos timaada Xeerarka oo ubaahan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, xitaa iyagoo fasalo horumarin ah lagu baray fasalba fasalka xiga (§300.111(c)(1)). Go'aansashada ah in arday uu yahay "arday naafo ah" sida hoos timaada Xeerarka waa in ay ahaataa mid shaqsiyan ku salaysan, oo ay gaaraan koox ka kooban waalid iyo shaqaalaha iskuulka sida ay go'aaminayso LEA ga ardayga.

    e. Ardayda iskuulka guriga ee xuduudaha LEA ga.

3. iskuullada dadweynaha ee madaxa bannaan ayaa mas'uul ka ah Helista Ubad ee loogu talagalay in ardayda lagu qoro iskuul u gooni ah, oo aysan jirin wax mas'uuliyad ah ee ku aaddan Helida Ubad ee ardayda iskuulka gaarka loo leeyahay.

4. Qeybo muhiim ah oo ka mid ah Nidaamka Helista ubadka waxaa ku jira:

    a. Hirgelinta iyo isuduwaha LEA ee howlaha Helista Ubadka, oo ay ku jiraan iskuullada gaarka ah ee ku dhexyaalla xuduudaha LEA ee (§300.131).

    b. Qeybaha USOE ee joogtada ah ee taageerada farsamo ee LEAs (oo ay ku jiraan iskuullada dadweynaha ee madaxa bannaan), iskuullada

gaarka ah, iyo hay'addaha Gobolka ee hirgelinta nidaamka Ubad Helidda.

c. Hirgelinta nidaamka ururinta macluumaadka gobolka oo dhan ee loogu talagalay warbixinta macluumaadka ardayga, oo uu ku jiro tirada ardayda Federaalka (§300.640–641).

d. Wada shaqeynta iyo isuduwaha ee Waaxda Gobolka iyo Maxalliga ee Caafimaadka, ee mas'uuliyadda ka saaran bixinta adeegyada dhexgalka hore ee loo fidiyo sabiga iyo dhallaanka naafada ah, da'da dhalashada ilaa iyo laba jir, oo hoos yimaada Qeybta C ee IDEA (Heshiiska Hay'addaha).

Ururinta iyo isticmaalka macluumaadka si ay ubuuxiso shuruudaha qeybtan waxaa qabanaya asturnaantaa macluumaad ee Xeerarkan hoos yimaada.

## II.B. XIGASHO.

Waalidka ama LEA midkood ayaa bilaabi kara codsashada qiimeynta hore si loo go'aamiyo haddii ardaygu yahay arday naafo ah sida hoos timaada Qeybta B ee Xeerarkaan iyo Xeerarka IDEA.

## II.C. OGOLAANSHAHA WAALIDKA EE QIIMEYNTA (§300.300).

1. LEA waxay ku talinaysaa in la qabto qiimeyn hore si loo ogaado haddii ardayga uu uqalmo sida arday naafo ah sida hoos timaada Xeerarkan waa, ka dib marka waalidka la siiyo ogeysiis qoraal, oo ogolaansho rasmi ah laga helo waalidka dhalay ardayga ka hor inta aan qiimeynta la samayn.

2. Ogolaanshaha waalidka ee qiimeynta koowaad waa in aannan loo micnayn sida ogolaansho koowaad ee bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira.

3. LEA waa in ay qaadaan dadaal suurtogal ah si loo helo ogolaansho lagu war-geliyey waalidka ee loogu talagalay qiimeynta hore si loogu ogaado haddii ardayga yahay arday naafo ah.

4. Qiimeynta koowaad kaliya, haddii ardayga uu ku jiro maganta Gobolka oo uusan la degnayn waalid(iinta) ardayga, LEA loogama baahna in ay waalidka kala yimaadaan ogolaansh wargelin haddii:

   a. Inkastoo dadaallo suurtogal ah loo galay in loo samaayo, LEA ma awooddi karto in ay gacanta-kudhigaan halka ay waalidka(iinta) ardayga ay joogaan;

   b. Xuquuqda waalidiinta ee ardayga laga joojiyay sida uu qabo sharciga Gobolka; ama

c. Xuquuqda waalidka(iinta) ee ay go'aamo waxbarasho ku gaaraan uu garsoore ka xayoobiyay sida uu qabo sharciga Gobolka oo ogolaansho qiimeynta hore la siiyay shaqsiga uu garsooraha magacaabay inuu matalo ardayga.

5. Haddii waalidka(iinta) arday lagu qorey iskuullada dadwaynaha ama u raadinaya in lagu qoro iskuullada dadwaynaha uusan keenin ogolaansho ah qiimeynta koowaad, ama ku guul dareysto inuu ka soo jawaabo codsiga ah inuu ogolaansho bixiyo, LEA waxaa dhici karta in ay, balse looguma baahna, in ay dabagalaan qiimeynta koowaad ee ardayga iyaga oo isticmaalaya Habraaca Badbaadada ama habsami u socodka sharciga ee Xeerarkan. LEA kuma xadgudbayaan waajibaadyadooda sida hoos timaada qeybaha Ubad Helidda ee Xeerarkan haddii aydiido si la sii dabagalo qiimeynta iyadoo la isticmaalayo Habraaca Badbaadada ama habsami u socodka sharciga.

6. Ogolaanshaha waalidka looma baahna ka hor inta:

   a. dib loo eegayo macluumaadka horey ay uhaysteen sida qeyb ka ah qiimeynta ama dib uqiimeynta; ama

   b. Maareynta imtixaan ama qiimeyn kale oo laga qaaday dhammaan ardayda aysan ka ahayn, ka hor inta aan laga qaadin imtixaankaas ama qiimeyntaas, ogolaanshaha looga baahnaa waalidiinta ee dhammaan ardayda oo dhan.

7. Haddii waalidka ardayga ee guriga wax loogu dhigo ama dhigta iskuul gaar loo leeyahay oo ay waalidiinta geeyeen iyaga oo qarashka la baxaya ogolaansho ma u bixinayaan qiimeynta koowaad, waxaa dhici karta in LEA aysan isticmaalin Habraaca Badbaadada oo ay ku jiraan dhexdhexaadin iyo hab-socodka sharciga oo suuban, oo LEA looguma baahna in ay texgeliyaan ardayda in ay yihiin arday xaq u leh waxbarasho gaar ah iyo adeegdyada la xiriira.

8. Waxaa dhici kara in LEA aysan isticmaali karin diidmada waalidka in uu ogolaado hal adeeg ama howl in waalidka ama ardayga loo diido adeeg kale, manfac, ama howlaha LEA, aysan ka ahayn sida ay uga baahan tahay qeybtan.

## II.D. QIIMEYNTA KOOWAAD (§300.301).

1. LEA kasta waa in ay si buuxda iyo si shaqsi ahba u qabtaan qiimeynta kowaad si loo ogaado haddii ardayga yahay "arday naafo ah" sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarkan, iyo in la ogaado baahida waxbarasho ee ardayga.

2. Qiimeynta koowaad:

a. Waa in lagu fuliyaa muddo 45 maalmood ee maalmaha iskuulka ah gudahood marka la helo ogolaanshaha waalidka ee qiimaynta; iyo

b. Waa inuu ka koobnaadaa hanaanka ogaanshaha:

(1) Haddii ardaygu yahay arday qaba naafo; iyo

(2) baahida waxbarashada ee ardayga.

3. Waqtiga loo qabto waa in aysan quseyn LEA haddii:

a. Waalidka dhalay ardayga si joogto ah ugu guud dareystey ama diiday inuu ardayga usoo wado qiimeynta; ama

b. Ardayga uu isku qoro iskuul ay uqabatay LEA ka dib marka uu bilowdo waqtiga loo qabtay, iyo ogolaansho horey ah ee ardayga LEA hore ee ah in ardayga uu yahay arday naafo ah.

c. Si ka baxsan II.D.3.b waxaa kaliya ay quseysaa haddii LEA ee xigga ay horumar ku filan samayneyso si loo hubiyo dhamaystir deg deg ah ee dhanka qiimeynta, oo waalidka iyo LEA ee xigga ay isku raacaan waqti go'an goorta qiimeynta la dhammaystirayo.

## II.E. ULAJEEDOOYIN WAXBARASHO AWGEED LOO BAARAYO. (§300.302)

Baaritaanka ardayga ee macalinka ama taqasuslaha uu qaadayo si loo ogaado tabaha waxbarasho ee ku haboon manhajka loo hirgelinayo waa in uusan ahayn mid loo tixgeliyo inuu noqdo qiimeynta xaq u yeelashada waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira.

## II.F. HANAANKA QIIMEYNTA. (§300.304)

LEA kasta waa in ay aasaastaa oo ay dhidabada utaagtaa hanaan buuxiya qiimeynta looga baahan yahay Qeybta B ee IDEA oo Xeerarkan waa sida soo socota:

1. Marka la qabanayo qiimeynta, LEA waa in ay:

a. Isticmaashaa aalado iyo tabo qiimeyn oo dhowr ah si loo helo waxqabad, kobcin, iyo macluumaad akadeemiyad ee quseeya oo ku saabsan ardayga, oo ay ku jiraan macluumaad laga heley waalidka, ee ay dhicikarto in ay wax ka taraan ogaanshaha:

(1) Haddii ardaygu yahay arday qaba naafo; iyo

(2) Waxa ku qoran IEP ga ardayga, oo ay ku jiraan macluumaad la xiriira ee ardayga awood usiiya inuu kaalin ku lahaado iyo horumarka

manhajka waxbarashada guud (ama, ardayga iskuulka barbaradka, inuu ka qeybqaato howlaha ku haboon);

b. Aannan la isticmaalin hal hanaan kaliya sida in ay noqoto hal nooc oo lagu ogaado in haddii ardaygu yahay arday laxaad lah iyo in lagu ogaado barnaamij waxbarasho ee ku haboon ardayga; iyo

c. Isticmaal qalab farsamo oo laga yaabo inuu qiimeyn karo waxyaabaha fahamka iyo dabeecaada wax ku soo kordhiya, intaa waxaa u dheex waxyaabaha korniinka iyo jirka.

d. LEA kasta waa in ay hubisaa in qiimeynta iyo walxaha qiimeynta kale ee la isticmaalay in ardayga lagu qiimeeyo:

(1) Waxaa loo xulay oo laga qaaday si markaa aysan u noqon takoor ku salaysan ee noqon dhaqan ama jinsi.

(2) Waxaa loo bixiyay oo looga qaaday luqadda uu udhashay ardayga ama qaab kale oo wadaxiriir, iyo qaab u badan in ardayga uu keeno macluumaadka ee ardayga waxa uu yaqaano oo uga soo bixi karo akadeemiyad ahaan, kobcin, iyo waxqabad, aysan ka ahayn haddii ay iska caddahay in aan sidaa la samayn karin.

(3) Loo isticmaalay ulajeedooyin ah in qiimeynta ama cabbirrada ay sax ka yihiin oo la isku halayn karo;

(4) Oo ay qaadaan shaqaale u tababaran oo aqoonna u leh; iyo

(5) Oo loo qaado sida waafaqsan tilmaamaha ku qoran soo saaraha qiimeynta.

e. LEA waa in ay hubisaa in:

(1) Qiimeynta iyo walxaha qiimeynta ee kale ay ku jirto kuwa loogu talalgay in ay qiimeeyaan meelaha baahida waxbarasho ee gaarka ah oo aysan ahayn kaliya kuwa loogu talalgay in ay bixiyaan hal maxsul ee garashada guud.

(2) Qiimeynta waxaa loo xulay oo loo qaadayaa in marka sida ugu wanaagsan loo hubiyo in haddii qiimeynta laga qaaday ardayga qaba naafo dhanka dareemayaasha, jir, ama xirfaddaha hadalka, natiijada qiimeynta si saxan ayay u tilmaantaa heerka guusha ee ardayga ama wax kale oo kasta ee sida saxan loogu isticmaalay ulajeedada imtixaanka in lagu cabirro, halka ay ka sheegi lahayd dareemayaasha ardayga, jirka, ama xirfaddaha hadalka (aysan ka ahayn xirfaddaha ay sheegayaan in imtixaanka uu cabirrayo si kale).

(3) Ardayga waxaa laga qiimeeyaa meelo kasta oo la xiriira meelaha looga shakinsan yahay ee naafada ah, oo ay ku jirto, haddii ay haboon tahay, caafimaad, aragtida, maqalka, xaaladda bulsho iyo shucuur, caqliga guud, waxqabadka akadeemiyadda, xaaladda wada xiriirka, iyo kartida maskaxda.

(4) Qiimeynta ardayda naafada ah oo ka soo wareejinta mid LEA ah kuna usoo warjeesina LEA kale ee isla sanad dugsiyeed waxaa lala xiriirayaa ardayda iskuulkoodii hore iyo iskuuladda la xiriira, sida daruuri ah oo ugu dhaqsaha badan ee suurtogalka ah, si loo hubiyo dhammaystir buuxa ee dhanka qiimeynta ah.

(5) Inta lagu jiro qiimeynta arday kasta ee naafo ah, qiimeynta si buuxda ayay u dhammays-tirin tahay inay caddeyso dhammaan waxbarashada gaarka ah ee ardayga iyo adeegyada uu ubaahan yahay, ha ahaato mid si caam ahana ugu xiran qeybta naafada ee ardayga loo magacaabay iyo in kale.

(6) Aaladdaha qiimeynta iyo taabaha ee fidiya macluumaad quseeya ee sida tooska ah shaqsiga uga caawiya ogaanshaha baahida waxbarasho ee ardayga loo fidinayo.

## II.G. HANAANKA DIB U QIIMEYNTA. (§300.303)

1. LEA waa in ay hubiyaan in dib uqiimeyn laga qaado arday kasta ee qaba naafo waa in laga qaadayaa:

   a. Haddii LEA ay go'aamiso in baahida waxbarashada ama adeegyada la xiriira, oo ay ku jirto guusha akadeemiyadda iyo waxqabadka la wanaajiyo, ee awoodda ardayga ee meynta; ama

   b. Haddii ardayga waalidkiisa ama macalinkiisa dib uqiimeynta soo codsado.

2. Dib uqiimayn:

   a. Waxay dhici kartaa in ka badan sanadkiiba mar, aysan ka ahayn haddii waalidka iyo LEA ay ku heshiiyaan mooyee; iyo

   b. Waa in ay qabsamaan ugu yaraan mar seddexdii (3) sannadood, aysan ka ahayn waalidka iyo LEA ay ku heshiiyaan in dib uqiimeyn aysan daruuri ahayn.

3. Ogolaanshaha waalidka ee qiimeynta (§300.300).

   a. LEA kasta waa inuu la yimaadaa ogolaansho wargelin ee waalidka ka hor inta aan la qaban dib uqiimeyn kasta ee laga qaadayo ardayga naafada ah.

b. Haddii waalidka uu diido inuu ogolaado in dib loo qiimeeyo, LEA waxaa dhici karta, laakin looguma baahna, inuu dabagalaan dib uqiimeyn iyaga oo isticmaalaya ogolaanshaha tirtiraya hanaanyada ku qoran Habraaca Badbaadada, oo ay ku jiraan dhexdhexaadin ama hanaan habsami u socodka sharci.

c. LEA kuma xadgudb waajibaadyada sida hoos timaada Helista Ubadka haddii ay diidan tahay dabagalka dib uqiimeynta.

d. Ogolaanshaha waalidka la wargeliyay waa in lala yimaadaa haddii LEA ay si cad ah u muujiyaan in:

(1) Dadaal suurtogal ah ay u gashay in ay hesho ogolaansha; iyo

(2) Waalidka ardayga kuu guul dareystey in ay ka soo jawaabaan.

## II.H. SHURUUDO DHEERAAD AH EE QIIMEYNTA KOOWAAD IYO HANAANKA DIB U QIIMEYNTA (§300.305).

1. Iyadoo ay qeyb ka tahay qiimaynta hore oo kasta (haddii ay haboon tahay) iyo iyadoo ay qeyb ka tahay dib uqiimeyn kasta, kooxda IEP iyo kuwa kale ee uqalma, xirafadlayaal, sida ku haboon, waa in ay:

a. Eegaan macluumaadka qiimeynta ee hore ee ardayga, oo ay ku jirto:

(1) Qiimeynta iyo macluumaadka laga helay waalidiinta dhalay ardayga;

(2) Qiimeynta fasalka hadda uu dhigto, maxalliga, ama qiimeynta gobolka, iyo kala socoshadii fasalka dhexdiisa; iyo

(3) La socoshadii maclinka iyo adeegyada la xiriir kuwa bixinaya; iyo

b. Iyadoo sal looga dhigayo dib u eegistaas, iyo tala laag helo waalidiinta ardayga, magacow macluumaadka dheeraad ah waxa ay tahay, haddii ay jiraan, ee loo baahan yahay si loo go'aamiyo.

(1) Haddii ardayda yahay arday leh naafo iyo baahida waxbarasho ee ardayga; ama, kiisa dib uqiimeynta ardayga, ha noqoto haddii ardayga uu weli naafo yahay, iyo baahida waxbarasho ee ardayga;

(2) a ee guusha akadeemiyadda iyo baahida kobcinta ee la xiriirta ee ardayga;

(3) Ha noqoto baahida ardayga ee waxbarashada gaarka iyo adeegyada la xiriirta; ama, kiiska dib uqiimeynta ardayga, ha noqoto haddii ardayga uu sii wato baahida waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira; iyo

(4) Ha noqoto wax ku siyaadin ama wax baddellaad ee waxbashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee loo baahan yahay si ardayga ay karti ugu siiso inuu ka soo baxo himilooyinka qorshe sanadeedka ee lagu qorey IEP ga ardayga iyo inuu ka qeybqaato, sida ku haboon, ee manhaja guud ee waxbarasho.

2. Kooxda IEP iyo xirfadlayaasha uqalma ee kale, sida ku haboon, waxaa dhici kara in ay qabtaan dib-u-eegidda iyaga oo aanay wax shir ah qaban.

3. LEA waa in ay qaadaan qiimeynta iyo cabirraaddaha qiimeynta ee kale ee ay dhacdo in loo baahdo si loo soo saarto macluumaadka loo baahan yahay in la ogaado xaq u yeelashada sii socota.

4. Haddii kooxda IEP iyo xirfaddalayaasha uqalma ee kale, sida ku haboon, ay go'aamiyaan in aysan loo baahanayn macluumaad dheeraad ah ee lagu ogaanayo haddii ardayga uu sii wadanayo inuu sii ahaado arday naafo ah, iyo in la go'aaiyo baahida waxbarasho ee ardayga, LEA waa in ay wargelisaa waalidka(iinta) ardayga in:

   a. Go'aanka iyo sababta go'aanka; iyo

   b. Xuquuqda waalidka(iinta) in ay soo codsadaan qiimeyn in lagu go'aamiyo haddii ardayga sii wadanayo inuu ahaado arday naafo ah iyo in kale, iyo in la go'aamiyo baahida waxbarasho ee ardayga.

5. LEA loogama baahna in ay qabato qiimeyndib uqiimeynta ku qeexan Xeerka II.H.4 aysan ka ahayn haddii laga soo codsado in ay sidaa samayso waa ay waalidka(iinta) ay ka soo codsadaan mooyee.

6. Qiimeynta isbadelka xaq u yeelashada ka hor.

   a. LEA waa in ay qiimeysaa ardayga naafada qaba ka hor inta ay go'aamin in ardayga uusan intaa ka badan ahayn arday naafo ah.

   b. Qiimeynta ma ahan mid looga baahan yahay ka hor go'aaminta xaq y yeelashada ardayga sababtoo ah qallan-jebinta dugsiga sare ee shahaadada caadiga, ama sabab la xiriirta inuu ka weynaanaayo da'da xaq u yeelashada sida hoos timaada sharciga Gobolka ee FAPE.

   c. Ardayga xaq u yeelashadiisa ujoogsata sabab la xiriirta ka qallan-jebinta dugsiga sare ee shahaadada dugsiga sare ee caaadiga ama ay ku weynaatay da'da xaq u yeelashada sida hoos timaada sharciga Gobolka ee FAPE, LEA waa in ay ardayga ay u fidisaa qoraal oo kooban oo ah waxqabadka guusha ardayga iyo howsha waxqabakda ardayga, ee ay ku jiri karto talosiin sida ardayga looga caawiyo in ardayga uu ka soo baxo hadafyada dugsiga sare ka dib.

7. Ogolaanshaha waalidka looma baahna ka hor (§300.300) inta:

    a. dib loo eegayo macluumaadka horey ay uhaysteen sida qeyb ka ah qiimeynta ama dib uqiimeynta; ama

    b. Maareynta imtixaan ama qiimeyn kale oo laga qaaday dhammaan ardayda aysan ka ahayn, ka hor inta aan laga qaadin imtixaankaas ama qiimeyntaas, ogolaanshaha looga baahnaa waalidiinta ee dhammaan ardayda oo dhan.

8. Haddii waalidka ardayga ee guriga wax loogu dhigo ama dhigta iskuul gaar loo leeyahay oo ay waalidiinta geeyeen iyaga oo qarashka la baxaya ogolaansho ma u bixinayaan qiimeynta koowaad, ama waalidinta oo ku guuldareystey in ay ka soo jawaaban codsi ah in ay ogolaansho bixiyaan:

    a. Waxaa dhici karta in LEA aysan isticmaalin tirtiraya hab-socodka sharciga oo suuban; iyo

    b. Oo LEA looguma baahna in ay texgeliyaan ardayda in ay yihiin arday xaq u leh waxbarasho gaar ah iyo adeegdyada.

9. Si loo buuxiyo dadaalada suurtogalka ah ee shuruuda qeybtan, LEA waa in ay dokumentigareysaa isku dayga laga raadinayo ogolaanshaha waalidka.

## II.I. GO'AAMINTA XAQ U YEELASHADA (§300.306).

1. Marka la dhammeeyo qaadista qiimeynta iyo cabirraadka kale, koox ka mid ah xirfadlayaasha uqalma iyo waalidiinta ardayga si loo go'aamiyo xaq u yeelashada hoos timaada Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarkan, oo ay ku jirto:

    a. Haddii ardaygaas yahay arday qaba naafo; iyo

    b. Haahida waxbarashada ee ardayga.

2. LEA waa in ay waalidiinta siiyaan nuqdi ah warbixinta qiimeynta iyo dokumeniga go'aanka xaq u yeelashada.

3. Ardayga ma ahan in loo go'aamiyo arday qaba naafonimo:

    a. Haddii wax go'aaminaya go'aankaas yahay:

        (1) waxbarasho la'aan oo haboon ee dhanka aqriska, oo ay ku jirto qeybta assaasiga ee dhanka aqriska (kartida garashada, alfa beetada, kalmado, fahamka, iyo kartida aqriska);

        (2) Waxbarasho la'aan oo haboon ee dhanka xisaabta; ama

        (3) Aqoon Xaddidan ee Af-Ingiriiska; iyo

b. Haddii ardayga uusan ka soo baxin shuruudaha xaq uyeelashada.

4. Hanaanka ogaanshaha xaq uyeelashada iyo baahida waxbarasho.

a. Tarjumaada macluumaadka qiimeynta ee ulajeeda ogaanshaha haddii arday yahay arday naafo ah, oo baahida waxbarasho ee ardayga, LEA kasta waa:

(1) Macluumaadka ka soo xigtaa ilo dhowr ah, oo ay ku jirto guusha imtixaanada iyo kartida waxqabadka, talada waalidka, talooyinka macalimiinta, xaaladda jirka, bulsho ama dhaqamada ka soo jeedo, iyo dabeecada la qabatimay; iyo

(2) In la hubiyo in dhammaan macluumaadka laga kala heley illooyinkan la diiwaangeliyay oo si taxadir leh loo tixgeliyay.

b. Haddii go'aan laga gaaro in ardayga qabo naafonimo oo u baahan yahay waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xiriira, waa in ardayga IEP loogu sameeyaa 30 maalmood gudahood.

## II.J. QEYBAHA SHARAXAADDA, SHURUUDA, IYO QIIMEYNTA (§300.8).

Qeybtan waxay magacaabaysaa shuruudaha iyo hanaanka qiimeynta, qeyb ahaan, si loo go'aamiyo ardayda naafada ah sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarkan.

1. **Ootisam “Autism”**

a. **Sharaxaad:**

*Ootisam* waa naafonimo oo dhanka korriinka ah oo si weyn u saamaysa xidhiidhka hadalka iyo kan hadalka ahayn iyo dhexgalka bulshanimo, badiyaa muuqda kahor 3 sanno jirka oo si ba’an u saamaysa ilmaha hawshiisa waxbarasho. Sifooyinka kale ee la xidhiidha autism waa ku celcelinta ficil iyo dhaqdhaqaaq u ekaansho, u-adkaysiga isbedelka cimilada ama isbedelka hawsha maalinlaha, iyo jawaabcelin aan caadi ahayn xagga waayoaragnimada dareenada.

(1) Ootisam ma quseyso haddii ardayga waxqabashadiisa waxbarasho si kale ay usaameyneyso maxaa yeeley ardayga wuxuu qabaa l niyadeed ama naafo maskax furnaansho, sida ku qeexan Xeerarkan.

(2) Ardayga muujiya sifooyinka ootism da'da seddex sano ka dib waxaa lagu caddeyn karaa inuu qabo ootisam haddii kooxda ay go'aamiso in ardayga uu buuxiyo sharaxaadda ootism sida hoos timaada Xeerarkan.

b. **Cabir Xaquyeelasho.**

Koox ka mid ah xirfadlayaal uqalma iyo waalidka(iinta) ardayda ayaa go'aaminaya xaq uyeelashada sida kor ku xusan.

(1) Ootisam waa in ay saamaysaa ardayga waxqabadkiisa dhanka waxbarashada.

(2) Ardayga ootisimka qaba waa inuu ubaahnaadaa waxbarasho gaar ah iyo adeegyo la xiriira.

(3) Kooxda waa in ay go'aamisaa in ootisim ay tahay naafada koowaad ee ardayga, inkastoo ardayga ay dhici karto inuu qabo sifooyin kale oo xaalad naafonimo ah sida khalkhal niyadeed ama naafo maskax furnaansho. Ootisam waxaa dhici karta in ay ku jirto xaaladdo kale xanuunka ootisamka (autism spectrum), sida qof ootisam qaba waxqabadna leh, xanuunka Asperger, iyo xanuun korniinka ah oo aan meli la magacaabin.

(4) Si xaq loogu yeesho qeybtan, ardayga waa in lagu arkaa wax dhib ku ahaansho oo weyn ee dhanka ficilka iyo/ama wadahadalka aan ficilka ahayn iyo dhexgalka bulsho. Ardayga waxaa dhici karta inuu muujiyo sifooyinka kale ah ku celcelinta ficil iyo dhaqdhaqaaq u ekaansho, u-adkaysiga isbedelka goob ama isbedelka hawsha maalinlaha, iyo jawaabcelin aan caadi ahayn xagga qibraddaha dareenada.

    (a) Dhib wayn oo isdhexgalka bulsho waxaa ka mid ah, laakiin aysan ku koobnayn:

        (i) Ku guuldareysiga isticmaalka caadooyinka aan kalmadaha la isticmaaleyn sida kala socoshada indhaha, muuqaalka wajiga, iyo jirka, iyo tilmaamaha bulsho ee kale.

        (ii) Ku guuldareysiga in lala yimaado xiriir saaxiibtanimo ee ku haboon heerka korniinka.

        (iii) Ka maqan bilaabid in dadka kale lala wadaago danaha, waxa la jecelyahay, ama guusha.

    (b) Dhib wayn oo wadaxiriirka ah waxaa ka mid ah, laakiin aysan ku koobnayn:

        (i) Ka raagid ama hadal luqad oo aan jirin isku day hadal iyadoo loo maro qaabab kale sida tilmaanta ama dhawaaq hadal la'aan.

        (ii) Shaqsiyaal hadal ku filan:

(A) Karti darida bilaabid ama wadid dadka kale la sheekeysi.

(B) Karti darida ah in la isticmaalo caadooyinka hadalka xiriirka bulsho ama hadalka sida loo kala leeyahay.

(iii) Isticmaalka hadalka ee ku celceliska iyo waxa loo haysto ama luqad u gooni ah.

(iv) Ciyaar aan dhowr ahayn, ciyaar dhacday, ama ciyaar bulsho ku dasi, ku haboon heer ku haboon.

(c) Leh dabeecad habdhacyo aad u xadeysan, celcelis ah, iyo habdhacyo dabeecad, xiixo, iyo ciyaar oo ay ku jiraan, laakiin aysan ku koobnayn:

(i) Habdhacyo xadeysan oo isla mid ka ah xawliga ama ahmiyadba.

(ii) Adeecid adag oo gaar ah, hab-raac aan waxqabad lahayn ama aan caado ahayn.

(iii) Dhaqdhaqaaq la sheego ama celcelis ah ah (tusaale ahaan, gacanta ama faraha ama wareejin, ama dhaqdhaqaaq jirka oo dhan ah).

(iv) Dadka, waxa dhacaya, ama walxaha si joogto ah ugu mashquula.

(d) Cagajiid aan caadi ahayn ee isbadelka goobta ama isbadelka hab-raaca joogtada ah oo ay ku jirto, laakiin aysan ku koobnayn, cagajiid ku aadan:

(i) Dadka qaangaarka cusub ama ardayga fasalka la fadhida, sida macalin ku meelgaar ah.

(ii) Isbadel qaabka kuraasta loo dhigey.

(iii) Isbadelka jadwalka howlaha maalin la'ha.

(e) Jawaabcelin aan caadi ahayn ee ku aaddan qibradaha daree-mayaasha oo ay ku jiraan, laakin kuma koobna oo kaliya, jawaabcelinta aan caadiga ahayn ama aadka u daran ee:

(i) Dhawaaqa aadka usareeya ama dhawaaqyada codka dheer.

(ii) Meelaha dusha kore oo adag ama sareysa ama dharka jirka taabta.

(iii) Nalka aadka u iftiima ama isbadelka iftiinka ee aan caadiga ahayn.

(iv) Dhadhanka ama urka aan la garanayn ama aadka u adag.

(5) Shuruudaha Xeerka II.I waa in la buuxiyaa.

c. **Qiimayn.**

(1) Cabiraad dhowr ah (mid rasmi ah iyo mid aan rasmi ahayn), oo ay ku jiraan cabir liiska warbixin/heerka ootisam, ayaa loo baahan yahay in loo isticmaalo maskax furnaanta, akadeemiyadda, wadaxiriirka, bulshada, iyo howlaha waxqabadka.

(2) Ardayga daweyntiisa hore iyo taariikhda korniinka oo ka timaada xirfadle caafimaad waa in ay diiwaangashan tahay kaasoo sheegaya xanuunka gaarka ah, welwelka caafimaad, daawada, iyo macluumaad kasta ee loo arko in ay daruuri u tahay qorshaynta barnaamijka waxbarashada ee ardayga.

(3) Shuruudaha Xeerarka II.D-H waa in la buuxiyaa.

2. **Dhago iyo indho la’aan**

a. **Sharaxaad:**

*Dhegoole-camoole* micnaheedu waa dhinaanshaha maqalka iyo araga, labadooda oo isu jira oo sababa wadahadal xiriir oo ba'an iyo baahid kobcin iyo waxbarasho ee aannan wax looga qaban karin barnaamijyada waxbarashada gaarka ah kaliya ee ardayga dhagaha la' ama ardayga indhaha la'.

b. **Cabir Xaquyeelasho.**

Inkastoo ay jiraan dokumenti hore ee ka timid xirfadlayaal uqalma ee sheegaya in ardayga qabo dhinaanshaha maqalka iyo araga oo isla socda kaasoo buuxiya qeexida kore, kaliya waxaa xaquyeelashada kor ku xusan go'aamin kara koox ka socota xirfadlayaal uqalma iyo waalidka(iidiinta) ardayga.

(1) Dhegoole-camoolinimada waa in ay saamaysaa ardayga waxqabadkiisa dhanka waxbarashada.

(2) Ardayga dhegoole-camooliga ah waa inuu ubaahnaadaa waxbarasho gaar ah iyo adeegyo la xiriira.

(3) Kooxda waa in ay go'aamisaa in ardayga yahay arday qaba dhegoole-camoolenimo, laakiin waxaa dhici karta in ay la dhasheen walaalo xaaladdo dheeraad ah oo ka duwan maqal iyo aragga la'.

(4) Waa in ay jiraan kuwa soo socda oo isku jira:

(a) Arag la'aan oo ah mid ama laba ka mid ah kuwa soo socda:

(i) Dhinnaanshaha aragga, iyadoo la saxa ama aannan la saxin, si ba'an u saameysa kartida ardayga ee helista macluumaadka iyo in lala yimaado xirfaddaha aragga ee howsha waxbarashada. Tan waxaa ka mid noqon kara aragga oo hooseeya/qeyb kaliya ah ama indhoolenimo.

(ii) Camoole shaqeysa, qaabka isha oo ay dhici karta in ay shaqeyso, laakin ardayga oo aanan doonayn, tijaabinayn, isticmaalay, ama si sax ah u socodsiinayn macluumaadka aragga. Tan waxaa ka mid noqon karta aragtida oo dhiman ama bartamaha aragtida oo dhiman.

(b) Maqal la'aanta waa in ay ku jirtaa mid ama laba ka mid ah kuwa soo socda:

(i) Dhegaha culus oo, oo la socda ama aysan la socon caawiyaha maqalka, oo si ba'an u saameeya kartida ardayga ee maqalka macluumaadka iyo kobcinta luqadda iyo wadaxiriirka waxqabadka waxbarashada. Tan waxaa ka mid noqon karta dhegaha culus ama dhegoolenimo.

(ii) Maqal la'aan oo shaqeysa (faham maqal oo aan caadi ahayn), mar qeybaha nidaamka maqalka ay dhici karto in ay shaqeynayaan, laakin ardayga maqlayn, ka jawaabayn, dhageysanayn, isticmaalayn, ama si sax ah macluumaadka uga shaqeysiinayn. Tan waxaa dhici karta in ay ka mid tahay dhegaha oo cuslaada, xanuun socodsiinta maqalka, ama xidada/qeybaha maqalka oo adkaada.

(5) Shuruudaha Xeerka II.I waa in la buuxiyaa.

c. **Qiimayn.**

Cabirraado dhowr ah (mid rasmi ah iyo mid aan rasmi ahayn) waa in la isticmaalaa si loo qiimeeyo aragga iyo maqalka iyo dhammaan qeybaha looga tuhmo. Qiimeynta waa in ay la socotaa oo sidoo kale waa in la taxgeliyaa saameynta ay ku yeelanayso maqal la'aanta iyo aragti la'aanta. Qiimeynta waa in ay ahaataa qiimeyn waxqabad ah iyo mid daraasad caafimaad.

(1) Qeybtaha qiimeynta waa in ay la socotaa:

(a) Qiimeyn magalka.

(i) Bukaan eegid—baaritaan dhawaaqa waxaa ka mid noqon kara:

(A) Baaritaanka dhawaaqa waxaa la socon kara natiijooyinka; qiimeynta caawiyaha maqalka oo la socon kara natiijooyika; baaritaanka maqalcabiraha codka buundooyinka hadalka iyo fahamka hadalka; iyo waxqabadka haboon, cabirka, iyo dabagalka qalabka maqalka caawiya.

(B) Baaritaanka Otoacoustic Emission Testing (OAE).

(C) Baaritaanka Jawaabcelinta Auditory Brainstem Response (ABR).

(ii) Kartida qiimeynta waxqabadka maqalka.

(b) Qiimeynta Aragtida.

(i) Baaritaanka daweynta indhaha.

(A) Qiimeynta bukaan-eegida aragga, qeybta aragga, hagaajinta iyo dhaqdhaqaaqa, qaladada bedala, iyo qaabka caafimaadk isha.

(B) Baaritaanno ogaansho dheeraad ah sida Jawaabcelinta Visual Evoked Response (VER), Sawiridda Sugnaanta Birlabeed/Em Aar (MRI), iyo Electroretinogram (ERG).

(ii) Qiimeynta kartida waxqabadka aragtida.

d. **Qiimeynta Waxbarashada.**

(1) Kooxda waa in ay tixgelisaa oo ay qiimeysaa, haddii ay haboon tahay:

(a) Baahida luqadda iyo wadaxiriirka.

(b) Baahida iminka iyo tan mustaqbal ee Braille ama isticmaalka Braille.

(c) Baahida Jihaynta iyo Dhaqdhaqaaqa (O&M).

(d) Meeleyn iyo baddellaad darruuri ah si ardayga uu uhelo manhajka guud iyo ciyaaraha kale.

(e) Baahida tiknoolajiyada gargaarka.

(2) Shuruudaha Xeerarka II.D-H waa in la buuxiyaa.

3. **Daahitaan Korniin.**

a. **Sharaxaad:**

Ardayda ay da'doodu udhaxayso seddex ilaa todobo, *daahitaanka korniinka* micnahiisu waa daahitaan ba'an oo ku aadan mid ama in ka badan ee kuwan soo socda: korniin xagga jirka ah, korniin xaga caqliga ah, korniin xagga wadahadalka, koniin xagga bulsho ama shucuur, ama korniin xagga la qabsiga. Daahitaanka waa in ay saamaysaa ardayga waxqabadkiisa dhanka waxbarashada.

LEAs ee doorta inuu isticmaalo sifooyinka daahitaan korniin waa inuu soo xaqiijiyaa sharaxaadda Gobolka ee ku aadan daahitaanka korniinka, oo ay ku jirto qeybo dhowr ah ee ay Gobolka isticmaasho.

b. **Cabir Xaquyeelasho.**

Koox ka mid ah xirfadlayaal uqalma iyo waalidka(iinta) ardayda ayaa go'aaminaya xaq uyeelashada sida kor ku xusan.

(1) Kooxda waa in ay go'aamisaa naafada koowaad ee ardayga in ay tahay daahitaan dhanka korniinka, oo aysan ahayn mid ka mid ah qeybaha naafonimo ee kale. Kooxda waa in ay sidoo kale samaysaa qiimeyn ku filan oo macluumaadka la heli karo ee ardayga taasoo muujinaysa in ardayga uu buuxiyay mid ka mid ah qeybaha naafonimada ee gaarka ah ee kale. Goorta la helo macluumaad qiimeyn oo ku filan, ardaygu waa in lagu sifeeyaa mid ka mid ah qeybaha naafonimada gaarka ah ee kale.

(2) Daahitaanka waa in ay saamaysaa ardayga waxqabadkiisa dhanka waxbarashada.

(3) Ardayga daahitaankiisa waa inuu ubaahnaadaa waxbarasho gaar ah iyo adeegyo la xiriira.

(4) Ardayda xaq u leh adeegyada oo ay ku jiraan ardayda lagu ogaaday in ay qabaan daahitaan ba'an ama isdhin ah mid ama in ka badan ee kuwan soo socda:

(a) Korniinka Fahamka.

(b) Korniinka jirka/maskaxda.

(c) Korniinka luqadda/hadalka.

(d) Korniinka bulsho/shucuurta.

(e) Xirfadaha iscaawinaada/caadada la qabatimo.

(5) Daahitaan ba'an waxaa lagu qeexaa sida tan:

(a) 1.5 oo ah cabirka qiyaasta oo ka hooseysa, ama ku taagan ama ka hooseysa boqolkiiba todoba ee seddex meelood ee qeybta korniinka ah.

(b) 2.0 oo ah cabirka qiyaasta oo ka hooseysa, ama ku taagan ama ka hooseysa boqolkiiba laba ee laba meelood ee qeybta korniinka ah.

(c) 2.5 oo ah cabirka qiyaasta oo ka hooseysa, ama ku taagan ama ka hooseysa boqolkiiba hal ee hal meelood ee qeybta korniinka ah.

(6) Shuruudaha Xeerka II.I waa in la buuxiyaa.

c. **Qiimayn.**

Cabirraado dhowr ah (mid rasmi ah iyo mid aan rasmi ahayn) waa in la isticmaalaa si loo qiimeeyo meesha (meelaha) daahitaanka lagu tuhmay.

(1) Qiimeynta la xushey waa in ay ahaataa mid ku haboon ardayda ay da'doodu udhaxeyso seddex jir ilaa iyo todobo jir oo ayna ku salaysnaataa xadidaada dareenka, maskaxda, iyo wadahadalka ardayga.

(2) Shuruudaha Xeerarka II.D-H waa in la buuxiyaa.

4. **Khalkhalka Niyadjabka.**

a. **Sharaxaad:**

*Khalkhalka niyadeed* micnaheedu waa xaalad muujisa mid ama in ka badan ee kuwan soo socda sifooyinka waqti dheerna soo jirtay oo lagu calaamadeeyo heer ay dhib ku noqoto waxqabaka waxbarashada ardayga:

(1) Karti la’aan waxbarasho oo loo fasiri Karin asbaab garasho, dareen ama caafimaad.

(2) Karti la’aan dhisitaanka ama haynta xidhiidhka faca iyo macalimiinta.

(3) Noocyo dhaqan aan haboonayn ama dareeno imaan kara xaaladaha caadiga ah.

(4) Niyad guud ahaan ay ku jirto dudmo iyo niyadjab ama murugo.

(5) U-dabacsanaan kobcinta calaamado jidh ahaaneed ama cabsi la xidhiidha dhibaatooyinka qofka ama dugsiga.

khalkhal niyadeed waxa ka mid ah xanuunka dhimirka. Erayga laguma dabiqi karo ilmaha aan bulshanimo la qabsan, ilaa la garto oo la go'aamiyo in ay qabaan in khalkhal weyn oo niyabjab ah. jiro.

*khalkhal niyadeed* waa kalmad ku tacalluqsan laba ka mid ah noocyadan dabeecad oo adag, kuwaasoo labaduba aan kala baxsanayn oo ay dhici karto in ay saameyso waxqabad waxbarashada ardayga.

(a) *Dibad usoo saarid (Externalizing)* waxaa loola jeedaa dhibaatooyin caado dibad soo saarid oo dhanka ardagya ah kuwasoo ku sii jeeda bulshada, oo waxay badanaaba lug ku leedahay dabeecaddo isdhaafsan.

(b) *Gudi ku celin (Internalizing) waxaa loola jeedaa dhibaatooyin caado kala duwan kaasoo ku sii noqota, oo badanaaba caadooyin dib ugu noqda.*

b. **Cabir Xaquyeelasho.**

Koox ka mid ah xirfadlayaal uqalma iyo waalidka(iinta) ardayda ayaa go'aaminaya xaq uyeelashada sida kor ku xusan.

(1) Khalkhal niyadeed waa in ay saamaysaa ardayga waxqabadkiisa dhanka waxbarashada.

(2) Ardayga khalkhal niyadeed qaba waa inuu ubaahnaadaa waxbarasho gaar ah iyo adeegyo la xiriira.

(3) Kooxda waa in ay go'aamisaa in khalkhalka niyadeedda ay tahay naafada koowaad.

(4) Ka hor inta aannan ardayga lagu sifeyn arday qaba khalkhal niyad, kooxda waa in ay go'aamiyaan in caadooyin aannan haboonayn aysan ku iman naafo maskax furnaansho, aragti ama maqal dari, ama xaaladdo caafimaad ee kale; ama maareynta fasalka oo aannan haboonayn.

(5) Shuruudaha Xeerka II.I waa in la buuxiyaa.

c. **Qiimayn.**

Cabirraad dhowr ah (mid rasmi ah iyo mid aan rasmi ahayn) waa in loo isticmaalaa qiimeynta caado, bulsho, iyo waxbarashada oo waa in la raaciyaa mid ka mid ah kuwa soo socda:

(1) Dokumentiyo sheegaya in caado si daran u saameynaya howsha waxqabadka ardayga lagu arkay mudo dheer iyo heer lagu calaamadeeyey.

(2) Indho indhaynta waxarbashada ardayga kaasoo ay raacsiisan tahay ugu yaraan seddex shan iyo toban-daqiiqadood oo indho indhayn ah ee tilmaamaysa caado. Arday aan ahayn ardayga naafonimo qaba lagu barbardhigaa oo aanan loogu yeerayn waa in la xulaa oo waa in la isla indho indheeyaa isla meel lagu eegaa lagana baaraa isla caadadii ardayga kale lagu tilmaamay. Kooxda xubnaha ee ku qoran oo aanan ahayn macalinka fasalka caadiga u dhiga ayaa sameyn doona indho indhaynta waxbarasho ee ardayga. (Indho indhayntan waxaa looga baahan yahay oo kaliya qiimeynta koowaad ee sifaynta, oo ma ahan dib uqiimeyn, aysna ka ahayn haddii la go'aamiyo in ay u baahan yihiin kooxda IEP ga.)

(3) Dhammaystir dokumentiyaashanshan ku jira diiwaangelinta ardayga ee qeybo ka mid ah kuwan soo socda:

(a) Waxqabadka akadeemiyadda sida ku cad imtixaanadii laga qaaday, baaritaannadii iyo imtixaanadii akadeemiyadda, warqaddaha warbixinta, diiwaangelinnada la'isku uruuriyey, qiimeynta gobolka oo dhan, iyo macluumaad kale.

(b) Liis-warbixineed bulsho/caado/qabatin ama heer cabbirraad oo fidiya macluumaad ku saabsan habdhacyada hore iyo kuwa iminka ee ardayga ee isdhexgalka asxaabtiisa, qoyskiisa, macalimiintiisa, dadka qaangaarka, iyo kuwa kale.

(c) Caadooyinka ardayga ee loo soo direy.

(4) Shuruudaha Xeerarka II.D-H waa in la buuxiyaa.

5. **Dhegaha Culus/Dhegoole.**

a. **Sharaxaad:**

(1) *Dhago-culayska* waa maqal dari, ha ahaato mid joogto ah ama isbedela, ee xoog u saameeya ilmaha hawshiisa waxbarasho, laakiin aan ku jirin macnaha dhago-la’aanta.

(2) *Dhegoolenimo* waa maqal dari oo aad u ba'an oo ardayga dhib ku hayso inuu socodsiiyo macluumaadka hadalka ee usoo maraysey maqalka, ha isticmaalo caawiya maqalka ama haddii kaleba, oo si ba'an ay u saamaynayso waxqabad waxbarashada ee ardayga.

b. **Cabir Xaquyeelasho.**

Koox ka mid ah xirfadlayaal uqalma iyo waalidka(iinta) ardayda ayaa go'aaminaya xaq uyeelashada sida kor ku xusan.

(1) Dhegoolenimo/camoolinimada waa in ay saamaysaa ardayga waxqabadkiisa dhanka waxbarashada.

(2) Ardayga qaba dhegoolenimo/camoolinimada waa inuu ubaahnaadaa waxbarasho gaar ah iyo adeegyo la xiriira.

(3) Kooxda waa in ay go'aamisaa in dhegoolenimada/camoolinimada tahay naafonimada koowaad.

(4) Cabbirraadaha marka laga hadlayo go'aamiyaha ama boqolkiiba inta ay tahay, buundooyinka takoorka, nooca maqal la'aanta, barta ay tahay, iwm., waxa kaliya ay hage u tahay hanaanka xaq u yeelashada.

(5) Ka hor inta aan ardayga la sifayn sida arday qaba dhegoolenimo/camoolinimada, kooxda waa in ay:

(a) La go'aamiyo haddii baahi waxbarasho ay jirtey, aysan ka ahayn kuwa sida tooska ah la xiriirta oo ay dhego culusnaanta ay ugu wacan tahay.

(b) Xisaabta lagu daro haddii nooca dhegoolenimada ama maqal darida ay tahay isqab, maqal darida sababtay, ama isku jir ah.

(c) Xisaabta ku dar haddii nidaamka dareemaha bartamaha ee dhinnaanshaha, waxqabadka maqal la'aanta, ama xanuunka socodsiinta maqalka (meel qeybaha nidaamka maqalka ay dhici karto in ay shaqeyso, laakin ardayga iskuma dayo, kama jawaabo, ma soo gudbiyo, ama si saxan macluumaadka uma socodsiiyo) ay sababayaan in ardayga uu umuuqdo sida ardayga qaba maqal dari ama dhegoolinimo.

(6) Shuruudaha Xeerka II.I waa in la buuxiyaa.

c. **Qiimayn.**

Cabirraad dhowr ah (mid rasmi ah iyo mid aan rasmi ahayn) ayaa looga baahan yahay in ardayga laga tuhmay inuu yahay arday maqal dari ay hayso.

(1) Qeybtaha qiimeynta waa in ay la socotaa:

(a) Qiimeynta maqalka, kaasoo ay dhici karto in ay ku jiraan:

(i) Baaritaanka dhawaaqa waxaa la socon kara natiijooyinka; qiimeynta caawiyaha maqalka oo la socon kara natiijooyika; baaritaanka maqalcabiraha codka buundooyinka hadalka iyo fahamka hadalka; iyo waxqabadka haboon, cabirka, iyo dabagalka qalabka maqalka caawiya.

(ii) Baaritaanka (Otoacoustic Emission Testing) (OAE).

(iii) Baaritaanka Jawaabcelinta (Auditory Brainstem Response) (ABR).

(iv) Kartida qiimeynta waxqabadka maqalka.

(b) Kobcinta iyo korniinka luqadda (calaamad, ku hadal, ama qoraal) waa in uu qiimeeyaa shaqsiyaad uqalma oo isticmaala qalab lagu qiimeeyo iyo hanaan ku haboon ogaanshaha nooca cudur iyo ogaansho ah maqal darida la tuhunsan yahay.

(c) Qiimeynta hadalka iyo luqadda.

(i) Hadal aan la garanayn waxaa dhici karta in lagu qiimeeyo qiimeyn cod, qalab (dhawaaq, mudada dhawaaqa, xawliga dhawaaqa, qaylida dhawaaqa), iyo hadalqeexnaanta noocyada (kalmadaha, xarfaddaha, si ay isu raacaan, darsamaan).

(ii) Qiimeynta luqadda (dhawaaqyada sida ku magacaaban Xeerarka II.J.5.c.(1)(c)(i) ee kor, qaabka dhismada luqadda).

(iii) Qaabka luqadda iyo wadaxiriirka.

(d) Horrumarinta Akadeemiyadda.

(2) Meelaha qiimeynta kale ee la tixgelinayo, sida ku haboon, waxaa ka mid ah:

(a) Kartida Maskax furan Goorta maskax furnaanta la qiimeeyo, natiijooyinka waa in uu tarjumaa shaqaale uqalma.

(b) Caadada la qabatimo, sida laga soo ururiyay waalidinta iyo shaqaalaha iskuulka.

(3) Shuruudaha Xeerarka II.D-H waa in la buuxiyaa.

6. **Naafo maskax Furnaansho.**

a. **Sharaxaad:**

*Naafo maskax Furanaanshaha* micnaheedu waa waxqabadka guud ee maskaxda oo aad u hooseysa, iyadoo oo ay garabsocoto caadada la qabatimo ee kale iyo soo socotay inta lagu jirey mudada korniinka, kaasoo si ba'an u saameysey waxqabadka waxbarashada ardayga.

b. **Cabir Xaquyeelasho.**

Koox ka mid ah xirfadlayaal uqalma iyo waalidka(iinta) ardayda ayaa go'aaminaya xaq uyeelashada sida kor ku xusan.

(1) Naafonimadiisa maskax furnaanshaha waa in ay saamaysaa ardayga waxqabadkiisa dhanka waxbarashada.

(2) Ardayga naafonimadiisa maskax furnaansha qaba waa inuu ubaahnaadaa waxbarasho gaar ah iyo adeegyo la xiriira.

(3) Kooxda waa in ay go'aamisaa in naafonimadiisa maskax furnaanshada ay tahay naafada koowaad.

(4) Maskax furnaanshaha, akadeemiyadda, iyo natiijooyinka qiimeynta la qabatimo waxay si joogto ah ay u muujinaysaa heerar cabirraad oo hooseeya.

(5) Shuruudaha Xeerka II.I waa in la buuxiyaa.

c. **Qiimayn.**

Cabirraad dhowr ah (mid rasmi ah iyo mid aan rasmi ahayn) ayaa looga baahan yahay ardayga loogu tuhunsun yahay inuu qabo naafonimo maskax furnaansho, oo waa in ay la socotaa:

(1) Qiimeyn maskax furnaansho.

(a) Imtixaan weyn oo maskax furnaansho shaqsi ah waa in uu qaadaa imtixaanqaade uqalma. Dokumentiyo waa in la fidiyaa oo tilmaamaya waxqabadka maskax furnaanshaha ee aadka uhooseeya (guud ahaan laba nooc) oo cabbir buuxa ah.

(b) Haddii buundooyinka hadalka ama waxqabadka ay yihiin mid kiiba kan kale ka duwan, qiimeyn dheeraad ah waa in la qabtaa oo lagu ogaanayo sababta kala duwanaanshaha ay ku timid oo si loo hubiyo in ardayga uu dhab ahaantii uu qabo naafonimo maskax furnaansho.

(2) Diiwaangelin horrumarin akadeemiyad sida uu cabbirey imtixaanaadka guusha, baaritaannada iyo imtixaanaadka akadeemiyadda fasalka, warqaddaha warbixinta, diiwaangelinta oo la'isku uruuriyey, iwm.

(3) Diiwaangelinta ah dhibka dabeecad la qabatimo oo daran sida lagu cabbirey qiimeynta manhajka iyo/ama caadiga ku salaysan waa in ay soo ururiyaan waalidiinta iyo shaqaalaha iskulka.

(4) Shuruudaha Xeerarka II.D-H waa in la buuxiyaa.

7. **Laxaad la’aan Dhawr ah.**

a. **Sharaxaad:**

*Laxaad la'aan Dhawr ah* micnaheedu waa karti la'aan la xiriira (sida naafonimo maskax furan-indhoolenimo ama naafonimo maskax furan-jabka lafaha oo daran) oo ay saameyso waxqabadka waxbarashada ardayga. Naafonimo wadasocda waa in ahaataa mida sababtay baahida waxbarashada ee daran oo aanan barnaamijyada waxbarashada gaarka ah kaliya wax looga qaban karin. Qeybaha laxaad la'aan dhawr ah kuma jirto dhegoole-camoolenimada.

b. **Cabir Xaquyeelasho.**

Koox ka mid ah xirfadlayaal uqalma iyo waalidka(iinta) ardayda ayaa go'aaminaya xaq uyeelashada sida kor ku xusan. Kooxda waa in ay caddeeyaan naafonimada oo ayna hubiyaan in ardayga uu buuxiyay shuruudaha naafonimada dhowr ah ee kasta. Naafonimada maskax furnaanshaha ma ahan in ay ahaato mid ka mid ah naafonimada dhowrka ah ee la caddeeyey.

(1) Naafanimada dhowr ka ah waa in ay saamaysaa ardayga waxqabadkiisa dhanka waxbarashada.

(2) Ardayga laxaad la'aan dhawr ah qaba waa inuu ubaahnaadaa waxbarasho gaar ah iyo adeegyo la xiriira.

(3) Shuruudaha Xeerka II.I waa in la buuxiyaa.

c. **Qiimayn.**

Cabirraado dhowr ah (mid rasmi ah iyo mid aan rasmi ahayn) waa in la isticmaalaa si loo qiimeeyaa dhammaan meelaha welwelka uu ka taagan yahay. Meelaha la doonayo in loo tixgeliyo waxaa ka mid ah kartida fahamka, xirfaddaha akadeemiyadda, xirfaddaha la qabsiga, luqadda iyo wadahalka, waxqabsiga bulshada (sida isgargaarka iyo xirfaddaha isku filnaanshaha nololeed), xirfaddaha shaqada, iyo xirfaddaha daree-mayaasha/dhaqdhaqaaqa.

Hanaanka qiimeynta waxaa go'aamiya koox qiimeeyayaal oo waa in ay la socotaa imtixaanaaadka isku jira, wareysiyo lala yeesho dadka ay ardaygu is yaqaanaan, iyo indho indheynta lagu qabtey meelaha ardaygu uu garanayo.

(1) Kartida fahamka waa inuu qiimeeyaa imtixaanqaade xirfadle ah. Xeeladaha caadiga ee qiimeynta kartida fahamka waxaa dhici karta in qiimo sidaa ah ugu lahayn ardayda loogu tuhunsun yahay in ay qabaan laxaad la'aan dhawrka ah.

(2) Isticmaalka qalabka gargaarka iyo nidaamka dhaqdhaqaaqa waa in la tixgeliyaa inta uu socdo qiimeynta oo waa in la diiwaangeliyaa.

(3) Ardayga taariikhdiisa caafimaad ee hore, oo laga heley xirfadle caafimaad oo uqalma, waa in diiwaanka ku jiraa haddii ay jiraan xaaladdo gaar ah, dhibaatooyin caafimaad oo gaar ah (tusaale ahaan dalool qoorta (tracheotomy), daawo, iyo saadaaliska takhtar ka bixiyo ee daaweynta mudada dheer waa wax welwelku ah shaqsiyaadka.

(4) Meelaha soo socda ee daree-mayaasha/dhaqdhaqaaqa waa in qiimeynta loo tixgeliyaa:

(a) Dareen aan caadi ahayn ama dareenka isdhexgalka,

(b) Dhaqdhaqaaqa iyo nooca muruq ee aan caadiga ahayn,

(c) Isdhexgal barashada hore la'aan,

(d) Miisaan ama isuduwid la'aan,

(e) Dhaqdhaqaa maskax ee isku xig xigga,

(f) Xirfaddaha maskaxda, ama

(g) Mid ama kuwa kore oo isku jira.

(5) Halka lagu tuhmo dabeecadaha la qabtimo, waa in la cabbiraa oo la diiwaangeliyaa qiimeynta caadiga iyo/ama qiimeynta manhaj ku salaysan iyadoo ay waalidiinta iyo shaqaalaha iskuulka ay talo bixinayaan.

(6) Aragtida iyo maqalka waa in la qiimeeyaa.

(7) Shuruudaha Xeerarka II.D-H waa in la buuxiyaa.

8. **Laxaad la’aanta Muruqyada.**

a. **Sharaxaad:**

*Laxaad la’aan muruqyada* micnaheedu waa laxaad la'aan muruqyada ah oo daran oo aad u saamaysa waxqabadka waxbarashada ardayga. Erayga waxaa ku jira dhinaansho ay keento wax lagu dhashay, maqnaansho uu sababay cudur (tusaaale ahaan, dabaysha, laf qaaxada); iyo dhinaansho ay waxyaabo kale keenaan (sida curyaannimo, adin la jaray , iyo jabitaan ama dab keenay ururSanaan jidh).

b. **Cabir Xaquyeelasho.**

Koox ka mid ah xirfadlayaal uqalma iyo waalidka(iinta) ardayda ayaa go'aaminaya xaq uyeelashada sida kor ku xusan.

(1) Laxaad la’aanta muruqyada waa in ay saamaysaa ardayga waxqabadkiisa dhanka waxbarashada.

(2) Ardayga qaba laxaad la'aanta muruqyada waa inuu ubaahnaadaa waxbarasho gaar ah iyo adeegyo la xiriira.

(3) Kooxda waa in ay go'aamisaa in laxaad la'aanta muruqyada tahay naafonimada koowaad.

(4) Shuruudaha Xeerka II.I waa in la buuxiyaa.

c. **Qiimayn.**

(1) Ardayga taarikhdiisa caadimaad hore oo ka timaada xirfadle caafimaad waa in ay diiwaangashan tahay kaasoo sheegaya xanuunka gaarka ah, welwelka caafimaad, daawada, iyo macluumaad kasta ee loo arko in ay daruuri u tahay qorshaynta barnaamijka waxbarashada ee ardayga.

(2) Cabirraad dhowr ah (mid rasmi ah iyo mid aan rasmi ahayn) waa in la isticmaalaa oo lagu qiimeeyaa dhammaan meelaha lagu tuhmay

(tusaale ahaan, dhanka waxbarashada, qabatinka, dabeecadda, jirka).

(3) Shuruudaha Xeerarka II.D-H waa in la buuxiyaa.

9. **Dhinaanshaha Kale ee Caafimaad.**

a. **Sharaxaad:**

Lahaanshaha itaal xadidan, tamar, ama feejignaan, ay ku jirto dareen kacsan xagga fejignaanta cimilada dareenkeeda, taas oo keenta fejignaan dhiman oo la xidhiidhka waxbarashada oo ka timid sababo caafimaado daro ba’an sida xiiq (neef), sonkorow, feejignaan la'aanta ama xanuun haad-haadnimada, qalalka, wadne-xanuun, suuxitaan, dhinaan xagga feejignaanta ah, dhiig yaraan, suntan naxaasta dhiiga, ifilo lafaha, iyo xaaladda Torette, nephritis; buro maskaxeed, iyo Fayruuska hoos u ridda difaaca jirka (HIV)/Cudur dilaa ah oo dhameeya difaaca jirka, ama dhaawac dhanka maskaxda ah oo dhaliyay dhibaatooyin caafimaad daro sida bararka maskaxda, bararka xuub ee unugada xiriiriya maskaxda iyo xariga laf-dhabarta, faaligga oo saamaynta ba’an ku yeesha waxbarashada ardayga.

b. **Cabir Xaquyeelasho.**

Koox ka mid ah xirfadlayaal uqalma iyo waalidka(iinta) ardayda ayaa go'aaminaya xaq uyeelashada sida kor ku xusan.

(1) Dhinnaanshaha caafimaad waa in ay saamaysaa ardayga waxqabadkiisa dhanka waxbarashada.

(2) Ardayga qaba dhinnaanshaha caafimaadka waa inuu ubaahnaadaa waxbarasho gaar ah iyo adeegyo la xiriira.

(3) Kooxda waa in ay go'aamisaa in dhinaanshaha kale ee caafimaad noqotaa naafonimada koowaad ee ardayga.

(4) Shuruudaha Xeerka II.I waa in la buuxiyaa.

c. **Qiimayn.**

(1) Ardayga taariikhdiisa caadimaad hore oo ka timaada xirfadle caafimaad waa in ay diiwaangashan tahay kaasoo sheegaya xanuunka gaarka ah, welwelka caafimaad, daawada, iyo macluumaad kasta ee loo arko in ay daruuri u tahay qorshaynta barnaamijka waxbarashada ee ardayga.

(2) Cabirraad dhowr ah (mid rasmi ah iyo mid aan rasmi ahayn) waa in la isticmaalaa oo lagu qiimeeyaa dhammaan meelaha lagu tuhmay

(tusaale ahaan, dhanka waxbarashada, qabatinka, dabeecadda, jirka).

(3) Shuruudaha Xeerarka II.D-H waa in la buuxiyaa.

10. **Naafonimada Waxbarashada Gaarka ah.**

a. **Sharaxaada (§300.8(C)(10)).**

*Naafonimada Waxbarashada Gaarka ah* micnaheedu waa xanuun oo hal ama in ka badan ee ku saabsan hanaanka aasaasiga maskaxda ee fahamka ama isticmaalka luqadda, hadalka ama qoraalka, kaasoo laga yaabo in ay tahay mic iska cad oo ubadka awood u la'hayn dhageysiga, fekirka, hadalka, aqriska, qorista, hikaadka ama xisaab ka shaqeynta, oo ay ku jirto xaaladda sida naafonimo cad, dhaawac maskax, maskax itaal-daran, daayleksiya, iyo aamusnaanta ka timaada xanuun maskaxda, ee saameeya waxqabsiga waxbarashada ardayga.

*Naafonimada waxbarashada gaarka ah* kuma jirto dhibka kowaad ee waxbarashda ee ka dhashay aragga, maqalka, ama naafonimada maskaxdan; naafonimada maskax furnaanshaha; khalkhal niyadeed; ama goobaha, dhaqan, ama faa'ido daro dhaqaale.

b. **Hanaanka lagu aqoonsanayo Ardayda Qaba Naafonimo Waxbarasho Gaar ah (§300.307).**

(1) LEA waxaa dhici karta in ay isticmaalaan noocyada soo socda mid ka mid ah ee ay ku ogaanayaan xaq uyeelashada ardayga ee hoos yimaada qeybta naafonimada waxbarasho gaarka:

(a) Nidaam ku salaysan jaawaabcelinta ardayga ee ku salaysan sayntiifigga, daaraasaadka ku saleysan.

(b) Aqoonsiga farqiga daran ee u dhaxeeya kartida maskax furnaanshaha iyo guusha.

(c) Isku jirka (a) iyo (b).

(2) Xubnaha kooxda (§300.308).

Go'aansashada in haddii ardayga loogu tuhunsan yahay inuu qabo naafonimada waxbarashada gaarka ah yahay arday naqa naafonimo waa in ay soo sheegaan waalidiinta ardayga iyo kooxda xirfadlayaasha uqalma, oo ay ku jiraan:

(a) Macalinka caadiga ee ardayga; ama

(b) Haddii ardayga uusan qabin macalin caadi ah, macalin caadiga ee fasal dhigga ee uqalma inuu baro arday jira/jirta isla da'daas; ama

(c) Ardayga ay da'diisu da' iskuul ka yar tahay; shaqsi uqalma oo ka socda USOE inuu baro arday jira/jirta isla da'daas; iyo

(d) Ugu yaraan hal qof oo uqalma inuu qabto baaritaanka lagu ogaanayo shaqsiga ardayga, sida dhakhtarka cilmi-nafsiga ee iskuulka jooga, daaweeeyaha luqadda/hadalka, macalinka aqirska ama aqriyaha gaarka ah, ama macalinka waxbarashada gaarka ah.

(3) Ogaanshaha jiritaanka naafonimada waxbarashada gaarka ah (§300.309).

Kooxda la sheegay ayaa waxaa dhici karta in ay go'aamiyaan arday naafonimo waxbarasho gaar ah haddii:

(a) Ardayga si ku filnaan ahaan uma gaarayo marka loo eeggo da'da ardayga ama ka soo baxo heerarka fasalka ee uu Gobolka ansaxiyay mid ama in ka badan ee kuwan soo socda ee qeybahan ah, goorta loo fidiyo qibraddo waxbarasho iyo waxbarasho ku haboon da'da ardayga ama heerarka fasalka ee uu Gobolka ansaxiyay.

(i) Hadal Gudbinta;

(ii) Fahamka Dhegeysiga;

(iii) Qoraal Gudbinta;

(iv) Xirfaddaha Aqriska Aasaasiga;

(v) Xirfaddaha Faseexonimada Ariska;

(vi) Fahanka Aqriska;

(vii) Xisaabinta Xisaabaadka;

(viii) Xalinta layliska xisaabaadka; iyo

(b) **Hanaanka Jawaab-celinta Dhexgalka (Response to Intervention (RtI)**

Ardayga ma sameeyo horumar ku filan si uu usoo buuxiyo da'da ama heerarka fasalka ee uu Gobolka ansaxiyay mid ama in ka badan oo ah meelaha la magacaabay ee Xeerarka

II.J.10.b.(3)(a) goorta la isticmaalayo nidaam ku salaysan jaawabcelinta ardayga ee saytiifigga, dhexgal daraasad ku salaysan (kooxda waa in ay raadraacdaa *USOE Tilmaamaha Xaq Uyeelashada ee Naafonimada Waxbarashada Gaarka ah* goorta hanaankan ay isticmaalayaan); ama

(c) **Hanaanka Farqiga.**

Buundooyinka ardayga waxay muujinayaan in ay jiraan farqi ba'an oo u dhaxeeya guusha ardayga iyo kartida maskax wanaagsanaanta ee mid ama in ka badan meelaha naafonimada waxbarashada gaarka ah ee ku qoran sida hoos timaada Xeerka II.J.10.b.(3)(a); ama

(d) **Hanaanka Iskujirka.**

Ardayga wuxuu muujinayaa iskujir ah (b) iyo (c); iyo

(e) Kooxda ayaa go'aaminaysa in waxa ay ogaadaan aysan marka kowaad ahayn:

(i) Naafonimo dhanka aragga, maqalka, ama maskaxda;

(ii) Naafo maskax Furnaansho;

(iii) Khalkhalka niyadjabka;

(iv) Saameynta dhaqanka;

(v) Faa'ido daro dhaqaale ama deegaan; ama

(vi) Aqoon Xaddidan ee Af-Ingiriiska.

(4) Naafonimo waxbarashada waa in ay saamaysaa ardayga waxqabadkiisa dhanka waxbarashada.

(5) Ardayga naafonimadiisa maskax furnaansha qaba waa inuu ubaahnaadaa waxbarasho gaar ah iyo adeegyo la xiriira (§300.8(a)).

c. **Qiimeyn (§300.309(b-c)).**

(1) Si loo xaqiijiyo guuldarida ardayga la tuhunsan yahay inuu qabo naafonimo waxbarasho gaar ah aysan ku iman waxbarasho ku haboon darteed ee uusan helin ee qeybta aqriska ama xisaabta, kooxda waa in ay tixgelisaa, sida qeyb ka ah qiimeynta:

(a) Macluumaad muujinaya in ka hor, ama ayadoo qeyb ka ah, nidaamka tixraaca, ardayga waxaa loo fidiyay waxbarasho ku

haboon ee lagu qabtay gob waxbarasho oo caadi ah, maclinka ahaa shaqaale uqalma; iyo

(b) Macluumaad ku salaysan diiwaangelin qiimeyn celcelis ah ee guusha waqtiyo suurtogal ah, muujinaysa qiimeynta rasmi ah ee horumarka ardayga inta ay socotay waxbarashada, oo ay fidiyeen waalidiinta ardayga.

(2) LEA waa in isla markiiba ay soo codsataa ogolaansho waalidka ah si loo qiimeyo ardayga loona ogaado haddii ardayga qabo baahi ku aadan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, oo waa inuu adeecaa waqtiga qiimeynta ee 45-maalmood-ee-iskuulka, aysan ka ahayn haddii la dheereeyo heshiis qoraal oo la isku waafaqsan yahay ee waalidka(iinta) ardayga iyo kooxda xirfadlayaasha uqalma:

(a) Haddii, ka hor inta aan la gudbin, ardayga ma samyn horumar ku filan mudo ka dib sida ay ogaatay LEA goorta waxbarasho ku haboon loo fidiyay, iyo

(b) Goor kasta ardayga loo gudbiyo qiimeyn.

(3) Ilkuhayn (§300.310(a–c)).

LEA waa in ay xaqiijisaa in ardayga lagu eegay barta ardayga wax uu ku barto (oo ay ku jirto barta fasalka caadiga ah) si loogu qoro waxqabadka akadeemiyadda ardayga iyo caadada ee meelaha ku adag.

(a) Kooxda waa in ay go'aamisaa in:

(i) La isticmaalo macluumaad ka tumid eegidda waxbarashada fasalka ee joogtada iyo kor kala socoshada waxqabadka ardayga ee horey loo qabtay ka hor inta ardayga qiimeynta aannan loo gudbin; ama

(ii) Ugu yaraan hal ka mid ah xubanaha kooxda ay qabtaan indho indhaynta waxqabadka akadeemiyadda ardayga ee fasalka caadiga ka dib markii ardayg loo wareejiyo qiimeynta iyo ogolaanshaha waalidka la helo.

(b) Haddii ardayga guriga wax lagu baro, LEA waxaa dhici karta inay go'aamiso sida ay indho indhaynta ay uqaban la'hayd iyo qofka qaban la'haa.

(c) Marka ay timaado arday ay da'diisu ka yar tahay da'da iskuulka ama aan iskuul ku jirin, koox xubno ah waa in ay eegtaa ardayga isaga jooga deegaan ku haboon ardayga da'daas jira.

(4) Diiwaangelin gaar ah ee go'aan xaq u la'haanshaha (§300.311).

Diiwaangelinta kooxda ee go'aaminta xaq uyeelashada naafonimo waxbarasho gaar ah waa in ay ku jiraan oraahdaan:

(a) Haddii ardayga leeyahay naafonimo waxbarasho gaar ah;

(b) Go'aanka la gaaray waxa uu salka ku hayo;

(c) Dabeecadda quseysa, haddii ay jirto, ee la sheegay inta ay socotay indho indhaynta ardayga iyo xiriirka ay la leedahay dabeecadda kor ku xusan ee waxqabadka akadeemiyadda ardayga;

(d) Natiijo caafimaad ee quseeya waxbarasho ahaan, haddii ay jiraan;

(e) Haddii ardayga:

(i) Uusan si ku filan uusan ugaarin da'da ardayga ama uusan ka soo bixin heerarka fasalka ee uu Gobolka ansaxiyay; iyo

(A) Uusan keenin guul ku filan si uu uga soo baxo da'da ama heerarka fasalka ee uu Gobolka ansaxiyay (RtI); ama

(B) Buundooyinka ardayga waxay muujinayaan in ay jiraan farqi ba'an oo u dhaxeeya guusha ardayga iyo kartida maskax wanaagsanaanta ee mid ama in ka badan meelaha naafonimada waxbarashada gaarka ah (Farqiga); ama

(C) Uu Muujinayo iskujir (A) iyo (B) ee kore.

(f) Kooxda go'aaminaysa ee welwelka saameynta naafonimada dhanka aragga, maqalka, ama maskaxda; naafonimada maska furan; khalkhal niyadeed; saameynta Dhaqanka; faa'ido daro dhaqaale ama deegaan; ama Aqoonta Af-Ingiriiska oo Xadidan ee heerka guusha ee ardayga; iyo

(g) **Hanaanka Jawaab-celinta Dhexgalka (RtI) (§300.311(a)(7)).**

Haddii ardayga uu ka qeybqaatay hanaan qiimeeya jawaabcelinta ardayga ee sayntiifigga, dhexgalka daraasadda ku salaysan oo qeyb ka ah go'aansashada haddii ardayga uu leeyahay naafonimo waxbarasho oo gaar ah:

(i) Tabaha waxbarasho ee la isticmaalay iyo macluumaadka ardayga laga ururiyay; iyo

(ii) Dokumentiyada waalidiinta ee lagu wargeliyay ku saabsan:

(A) Sharciyada Gobolka ee ku saabsan xaddiga iyo qaabka macluumaadka waxqabadka ardayga ee la ururiyay iyo adeegga waxbrashada gaarka guud ee la fidiyay (kooxda waa in ay tixraacdaa *USOE Naafonimada Waxbarashada Gaarka ah Tilmaamaha Xaq Uyeelashada* goorta nidaamkan la isticmaalayo);

(B) Tabaha lagu kordhinayo cabirka waxbarashada ardayga; iyo

(C) Xuquuq ah codsi iyo qiimeyn; ama

(h) **Hanaanka Farqiga.**

Haddii kooxda ay isticmaalayso farqi ba'an oo udhaxeeya guusha ardayga iyo karti dhanka maskaxda oo qeyb ka ah nidaamka go'aansashada haddii ardayga uu qabo naafonimo waxbarasho gaar ah, kooxda waa ay diiwaangelisaa:

(i) Waxqabadka ardayga ee imtixaanadda caadiga, caadiga loo tixraacay, cabbirradaada guusha ee imtixaanaadka shaqsi ee qeybaa naafonimo ee lagu tuhusun yahay, iyo

(ii) In ardayga uu keeney buundo dhaafsiisan naafonimada dhanka maskaxda ee imtixaanada caadiga, imtixaanadda caadiga loo tixraacay, cabbirradaha guusha ee imtixaanaadka shaqsi ee qeybta naafonimada kartida dhanka maskaxda, iyo

(iii) Barbardhigga buundooyinka caadiga ee imtixaanadan guusha iyo kartida maskax furnaanshaha.

(A) Kooxda waa in ay soo saartaa warbixin muujinaysa firqi weyn, oo ku salaysan barnaamij kombiyuutar ganacsi ee si cad uga shaqeysisa qaacida dib u dhaca la magacaabay ee tixgelinaysa xiriirka ka dhaxeeya caqli badan maskax fiican leh iyo kartida guusha imtixaanaadka iyo sidoo kale isku halaynta imtixaanadda, iyo

(B) Kooxda waa in ay diiwaangelisaa tixgelinta warbixinta firqiga iyo go'aanka kooxda ee haddii ama in aysan u dhigmayn firqi weyn.

(5) Shuruudaha Xeerarka II.D-H waa in la buuxiyaa.

(6) Xubin kasta oo kooxda ka tirsan waa inuu qoraal ahaan ku caddeeyaa haddii warbixinta ay sheegeyso gabagabada xubnaha (§300.311(b)). Haddii aysan sheegayn gabagabada xubnaha, xubnaha kooxda waa in ay soo gudibyaan oraal gooni ah ee soo bandhigaysa gunnaanudaka xubahaha.

11. **Dhinaanta hadalka/luqadda.**

a. **Sharaxaad:**

*Dhinaanta Hadalka ama Luqada* micnaheedu waa xaalad xidhiidh, sida haghagada, qumanaan u hadalka oo aan haagasanayn, dhinaan xagga afka ama codka oo si ba'an u saamaysa ardayga waxbarashaddiisa.

b. **Cabir Xaquyeelasho.**

Koox xirfadlayaal uqalma iyo waalidiinta ardayga, oo uu ku jiro daaweeeyaha luqadda/hadalka oo uqalma (SLP), ayaa go'aaminaya xaq uyeelashada sida kor ku xusan.

(1) Dhinaanta hadalka ama luqada waa in ay saamaysaa ardayga waxqabadkiisa dhanka waxbarashada.

(2) Ardayga qaba dhinaanta hadalka ama luqada waa inuu ubaahnaadaa waxbarasho gaar ah iyo adeegyo la xiriira.

(3) Arday uqalma qeybaha naafonimada oo aannan ka ahayn dhinaanta hadalka ama luqadda waxaa dhici karta inuu uqalmo adeegyada hadalka ama luqadda; hase-yeeshee, si ardayga loogu magacaabo inuu yahay dhinaan xagga afka, kooxda waa in ay go'aamisaa dhinaan xagga afka tahay naafonimada koowaad ee ardayga.

(4) Si ardayga luqaddiisa guriga ee koowaad aannan ahayn luqadda Ingiriiska uu xaq ugu yeesho in lagu magacaabo inuu qabo dhinnaanshaha dhinaan xagga afka ah, kooxda (oo ay ku jiraan SLP) waa in ay go'aamiyaan in dhinaanta xagga afka ay jirtay luqadda koowaad ee ardayga oo aysan ahayn wax dhiliyay barashada Ingiriiska sida luqad labaad.

(5) Ardayga qaba Xanuunka Orofacial Myofunctional Disorder ama OMD (horey loogu yeeri jirey Tongue Thrust) waxaa dhici karta in loo adeeggo <u>kaliya haddii uu la xiriiro dhinnaansho dhanka afka ama luqadda ah.</u>

(6) Ardayda qaarkood ee qaba dhinnaanshaha dhanka maqalka oo yar waxaa dhici kara in lagu magacaabo sida inuu qabo dhinnaansho

dhanka afka ama luqadda ah, haddii ay ku bilaabatay naafinimada aysan oo ay kaliya qeyb ka tahay sida dhinnaanta xagga afka ama luqadda oo adeegyada macalinka ee dhindhaanshaha maqalka looma baahna.

(7) Shuruudaha Xeerka II.I waa in la buuxiyaa.

c. **Qiimayn.**

Cabirraad dhowr ah (mid rasmi ah iyo mid aan rasmi ahayn) ayaa looga baahan yahay ardayga lagu tuhmo inuu qabo dhinaanta hadalka ama luqada (naafada koowaad ama adeegyada la xiriira u baahan).

(1) Ardayga waa inuu qiimeeyaa xirafadle SLP oo isticmaalaya qalabyada qiimeynta iyo hanaan ku haboon ee go'aamista iyo qiimeynta dhinaanta hadalka ama luqadda.

(2) Diiwaangelin waa laga bixiyaa taasoo tilmaamaysa in ardayga uu qabo dhinnaanshaha dhegeysiga, sababaynta, iyo/ama hadalka ilaa her uu waxbarashada gaarka ah loogu baahan yahay.

(3) Ardayga loogu tuhmay inuu qabo dhinnaansho hadalka ah, kooxda waa in ay tixgelisaa xiriirka suurto gal noqon kara ee ka dhaxeeya dhinnaanshaha socodsiinta hadalka iyo qaabka ku hadalka.

(4) Dhammaystir qiimeynta (tusaale ahaan, qiimeyn maskax furnaansho, jir, ama caadada la qabatimo) waxaa dhici kara in aannan loo baahan si loo go'aamiyo in dhinaan xagga afka ay jirto. Qiimeynta loo baahan yahay waxaa go'aaminaya kooxda.

(5) Shuruudaha Xeerarka II.D-H waa in la buuxiyaa.

12. **Dhaawac Ba’an oo Maskaxda ah.**

a. **Sharaxaad:**

*Dhaawac Ba'an oo Maskaxda ah* micnaheedu waa dhaawac soo gaaray maskaxda ee sababay xoog dibada jirka ah, oo dhaliyay naafonimo waxqabsi nus ama gebi ahaanba ama dhinnaansho dhanka dhimir ahaaneed, ama labadaba, oo saamayn ba’an ku yeesha waxqabadka waxbarashada ardayga. Dhaawac ba'an oo maskaxda ah waxay quseysaa dhaawac dhanka madaxa ah oo xiran ama furan ee dhinnaanshaha mid ama lama ka badan jiidaha, sida garaadka; afka; xasuusta; fejignaanta; macquulnimada; fekirka naasibka ah; xiska; xalinta dhibaatada; awoodda dareenka iyo dhaqdhaqaaqa; xaaladaha waxqabadka maskaxda iyo jidhka; jilcinta macluumaadka; iyo hadalka. Dhaawac ba'an oo maskaxda ah laguma dabiqi karo dhaawac garadka

ama dhaawac ku yimid dhalsho ahaan, ama dhaawac maskax oo keentay argagax dhalasho.

b. **Cabir Xaquyeelasho.**

Inkastoo la doonayo inuu jiro dokumenti hore ee uu qorey takhtar oo uu ku sheegayo inuu qabo dhaawac soo gaaray dhanka maskaxda oo saababay xoog jir oo dibabada ah, koox xirfadlayaal oo qilma iyo waalidka(iinta) ardayga si ay u go'aamiyaan xaq uyeelashada.

(1) Dhaawac ba'an oo maskaxda ah waa in ay saamaysaa ardayga waxqabadkiisa dhanka waxbarashada.

(2) Ardayga dhaawaca ba'an oo maskaxda qaba waa inuu ubaahnaadaa waxbarasho gaar ah iyo adeegyo la xiriira.

(3) Kooxda waa in ay go'aamisaa in dhaawac ba'an oo xagga maskaxda ah yahay xaaladda naafonimo tan koowaad.

(4) Shuruudaha Xeerka II.I waa in la buuxiyaa.

c. **Qiimayn.**

(1) Cabirraado dhowr ah (mid rasmi ah iyo mid aan rasmi ahayn) waa in la isticmaalaa si loo qiimeeyo dhammaan qeybaha looga tuhmo. Qiimeyn aan rasmi ahayn iyo baritaan barasho waa in ay qeyb buuxda ka ahaataa qiimeynta. Macluumaadka la ururiyay waa inuu ka koobnaadaa macluumaadka ardayga ee taariikhda korniinka iyo/ama dhaawac ka hor barashada iyo waxqabadka waxbarashada.

(2) Ardayga daweyntiisa hore iyo taariikhda korniinka oo ka timaada xirfadle caafimaad waa in ay diiwaangashan tahay kaasoo sheegaya xanuunka gaarka ah, welwelka caafimaad, daawada, iyo macluumaad kasta ee loo arko in ay daruuri u tahay qorshaynta barnaamijka waxbarashada ee ardayga.

(3) Inkastoo qiimeynta kale la tixgelin karo, qeybaha soo socda waa in loo tixgeliyaa qiimeynta:

(a) Qaab wadahadal ee badella ama kaba baahida adeegga (Augmentative communication),

(b) Qiimeynta koox dib u carbin,

(c) Iscaawinaada/caadada la qabatimo,

(d) Akadeemiyada,

(e) Luqadda/hadalka,

(f) Xifaddaha bulsho iyo dabeecadda fasalka,

(g) Maskax furan/faham,

(h) Tabbar shaqo (ardayda dugsiga sare), iyo

(i) Xirfaddaha Dhaqdhaqaaqa Maskaxda.

(4) Shuruudaha Xeerarka II.D-H waa in la buuxiyaa.

13. **Dhinnaanshaha aragga (oo ay Ku jirto Indho la'aantu).**

a. **Sharaxaad:**

*Dhinnaanshaha aragga (oo ay ku jirto indho la'aantu)* micnaheedu waa dhinnaansho aragga oo, xitaa haddii la saxo, saamaynta ba;an ku leh ilmaha waxbarashaddiisa. Kalmadda waxaa ka mid ah laba qeybood ee aragga iyo indhoolanimada ee saamaynta ba’an ku yeesha waxqabadka waxbarashada ardayga.

b. **Xaq uyeelashada.**

Inkastoo ardayga taariikhdiisa aragga ee ka timaada xirfadle indhaha daryeela ee uqalma waa in ay diiwangashan tahay, kooxda xirfadlayaasha ee uqalma iyo waalidka(iinta) ardayga waa in ay go'aamiyaan xaq uyeelashada sida kor ku xusan.

(1) Dhinnaanshaha aragga waa in ay saamaysaa ardayga waxqabadkiisa dhanka waxbarashada.

(2) Ardayga qaba dhinnaanshaha aragga waa inuu ubaahnaadaa waxbarasho gaar ah iyo adeegyo la xiriira.

(3) Kooxda waa in ay go'aamisaa in dhinnaanshaha aragga tahay naafonimada koowaad.

(4) Shuruudaha Xeerka II.I waa in la buuxiyaa.

(5) Goorta la caddeynayo arday inuu ardaygu yahay mid qaba dhinnaansho arag, kooxda IEP waa in ay tixgeliyaan haddii dhinnaanshaha kale fargellin ku samaynayso araggti iyo/ama maqal kiciye oo isku jir ah.

c. **Qiimayn.**

(1) Qeexitaan ah dhinnaanshaha aragga iyo kartida aragga waa in ay diiwaangashan tahay xirfaddle daryeella caafimaadka indhaha ee uqalma.

(2) Cabirraad dhowr ah (mid rasmi ah iyo mid aan rasmi ahayn) waa in la isticmaalaa oo lagu qiimeeyaa dhammaan meelaha lagu tuhmay (tusaale ahaan, dhanka waxbarashada, qabatinka, dabeecadda, jirka).

(3) Xirfadle uqalma waa inuu soo qiimeeyaa:

(a) Nooca iyo baaxada casharbixin ee loo baahan yahay, waxay saleysan tahay heerka waxqabad ee ardayga ee iminka, oo uu ku jiro heerka waxqabadka ee ardayga ee la qabsanaya dhibaatooyinka aragga iyo guusha waxbarasho iyo bulsho uu ka gaarayo.

(b) Ardayga baahidiisa iminka iyo tan mustaqbal ee casharbixinta Braille ama isticmaalka Braille.

(4) Jihaynta iyo Dhaqdhaqaaqa (O&M) waa in la qiimeeyaa haddii ardayga loo go'aamiyo inuu yahay indhoole ama camoole.

(5) Shuruudaha Xeerarka II.D-H waa in la buuxiyaa.

## III. DIYAARINTA IEP ga IYO ADEEGYADA BIXINTA (IEP DEVELOPMENT AND SERVICE DELIVERY).

### III.A. BARNAAMIJKA WAXBARASHADA SHAQSIGA (INDIVIDUALIZED EDUCATION PROGRAM (IEP).

LEA kasta waa inuu soo saaraa sharciyada iyo hanaanka hirgelinta ee shuruudaha IEP, oo ay ku jirto shuruudaha LRE, isku si ahayn oo ah Qeyb B ee IDEA iyo Xeerarkan.

### III.B. GOORTA IEP ga LA DOONAYO IN LA HOWLGELIYO (WHEN IEPs MUST BE IN EFFECT) (§300.323).

1. Bilowga sanad dugsiyeed kasta, LEA kasta waa la howl geliyaa, arday kasta oo qaba naafonimo ilaa iyo xadka awoodda, IEP.

2. LEA kasta waa inuu xaqiijiyaa in:

   a. Kulan ah in ardayga loogu sameeyo IEP waa in lagu qabtaa 30 maalmood si loo go'aamiyo in ardayga u baahan yahay waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xiriira; iyo

   b. Sida ugu dhaqsaha badan ee ka dambeysa sameynta IEP, waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee loo diyaariyo ardayga sida waaqsan ardayga IEP giisa.

   c. LEA kasta waa inuu xaqiijiyaa in ardayga IEP giisa:

      (1) Ee uu heli karo maclinka kasta oo barra waxbarashda caadiga ah, maclinka waxbarashada gaarka ah, fidiyayaalka adeegga la xiriira, iyo adeeg kale oo kasta ee uu bixiyo ee ka mas'uulka ah hirgelintiisa; iyo

      (2) Macalin kasta iyo bixiyayaal kasta waa lagu wargelinayaa in:

         (a) Mas'uuliyadihiisa/eeda gaarka ah ee la xiriira hirgelinta IEP ga ardayga; iyo

         (b) Meeleynta, hagaajinta, iyo taageeradda gaarka ah ee la doonayo in loo fidiyo ardayga sida waafaqsan IEP ga.

### III.C. BEDELKA ARDAYDA (TRANSFER STUDENTS) (§300.323).

1. Bedellaada Utah dhexdeeda.

   a. Marka laga hadlayo arday noofo ah oo iminka haysta IEP oo ka soo bedesha hal LEA una soo bedesha mid kale oo isla Gobolka ah ee isla sanad dugsiyeed, oo isku qora iskuul cusub, LEA ga, wadatashi marka

waalidka(iinta) lala sameeyo, waa in ardayga loo fidiyaa FAPE, oo ay ku jirto adeegyada udhigma kuwa ku qoran IEP hore uu uhaystay, ilaa laga gaarayo waqtiga LEA cusub:

(1) Qaadanayo IEP horey uu uhaystay, ama

(2) La imanayo, qaadanayo, iyo uu hirgelinayo IEP cusub ee ah ee la siman xeerarka Federaalka iyo Xeerarkan.

2. Ubedellanaya Gobolka meel ka baxsan.

   a. Marka laga hadlayo arday naafo ah oo iminka haysta IEP oo ka soo bedesha hal LEA una soo bedesha mid kale oo isla sanad dugsiyeedka, ee isku qora iskuul cusub, oo haysta IEP ka shaqeynayay Gobol kale, LEA ga, wadatashi marka waalidka(iinta) lala sameeyo, waa in ardayga loo fidiyaa FAPE, oo ay ku jirto adeegyada u dhigma kuwa ku qoran IEP hore uu uhaystay, ilaa laga gaarayo waqtiga LEA cusub:

      (1) Qabanaya qiimeyn, haddii LEA ay u aragto in ay daruuri tahay; oo

      (2) Samaynaysa IEP cusub, haddii ay haboon tahay, kaa soo ah mid la siman sharciga Gobolka iyo kan Federaalka ah.

   b. Qiimeynta xaq uyeelashada oo ay dhici karto in la qabtay si loo helo in LEA ay tixgeliso qiimeynta koowaad, oo ma ahan dib u qiimeyn (IDEA 2004 Xeerar Faallo, b. 46681–82).

3. Si loo fududeeyo bedellaada ardayga kor lagu xusey:

   a. LEA cusub ee ardayga lagu qorey waa in ay qaadaan tallaabo suurtogal ah si isla markiiba loo helo diiwaangelinta ardayga, oo ay la socoto IEP ga iyo dokumentiyada taageera iyo diiwaangelin kasta ee la xiriirta qodobada waxbarashada gaarka ah ama adeegyada la xiriira ee ardayga la siiyo, ee ka timaada LEA ga hore ee ardayga horey uu ugu qornaa; iyo

   b. LEA ga hore ee ardayga uu horey ugu qonaa waa in ay qaadaa tallaabo suurtogal ah oo ay isla markiiba uga jawaabcelinayso codsiga ka yimaada LEA ga cusub.

4. Dhibaato kala kulmaya helista IEP ka yimaada LEA ga hore kama saamaxayso LEA halka ardayga uu iminka isku qorey waajibaadkiisa ah in iminka IEP loo sameeyo ardayga xaq u leh.

## III.D. WAAJIBAADKA LEA EE KULANKA IEP (LEA RESPONSIBILITY FOR IEP MEETINGS).

1. LEA kasta ayaa ka mas'uul ah in ay bilowdo oo ay qabato kulmada loogu danleeyahay in lagu sameeyo, dib loogu eeggo, oo waxna looga badello IEP ga ardayga naafada ah ee 3 ilaa 21 jirka ah, la simanna Xeerarkan.

2. Kulan ah in ardayga loogu sameeyo IEP waa in lagu qabtaa 30 maalmood si loo go'aamiyo in ardayga u baahan yahay waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xiriira (§300.323(c)(1)).

## III.E. XUBIN KA AHAANSHAHA KOOXDA IEP (IEP TEAM MEMBERSHIP) (§300.321)

LEA waa inuu hubiyaa in kooxda IEP ee arday kasta oo naafo ah ay ku jiraan:

1. Waalid(iinta) ardayga;

2. Ma ahan in ka yar hal macalin ardayda caadiga waxbara (haddii ardayga uu, ama dhici karta in, uu ka qeybqaadanayo fasalada waxbarashada caadiga ah);

3. Ma ahan in ka yar hal macalin waxbarashada caadiga ah ee ardayga, ama halka ay ku haboon tahay, ma ahan in ka yar hal macalin waxbarashada caadiga ah ee aradayga waxbara;

4. Wakiilka LEA oo waa:

    a. Horjooge, ama fidiye uqalma inuu fidiyo qeyb, waxbarasho gaar ah ee buuxiya baahida gaarka ah ee ardayga naafada ah;

    b. qof aqoon u leh manhaj guud ee waxbarasho; iyo

    c. qof aqoon u leh ilaha ay LEA heli karto.

    d. LEA waxaa dhici karta in ay magacaawdo xubin ka tirsan LEA u magacaawdo kooxda IEP si sidoo kale uu unoqdo wakiil ka socoda LE, haddii shuruudaha kor la soo buuxiyo.

5. Shaqsi tarjumi kara natiijooyinka ka hadlaya waxbarashada, oo ay dhici karto inuu xubin ka yahay kooxda kor ku xusan ee qeybtan;

6. Go'aanka waalidka ama LEA, shaqsiyaadka kale ee aqoonta u leh ama leh khibrad gaar ah u leh ilmaha, oo ay ku jiraan shaqaalaha adeegyada la xidhiida waxbarista gaarka ah marka ay haboon tahay; iyo

7. Goor kasta oo ay haboon tahay, ardayga qaba naafada.

8. Go'aamista aqoonta ama qibradda gaarka ah ee shaqsi kasta sida ku qeexan Xeerka III.E.6 ee kore waa in ay sameyaan kooxda (waalidka ama LEA) ee casuumay shaqsiyaadka in ay xubin ka noqdaan kooxda IEP.

9. Haddii ulajeedada kulanka kooxda IEP ay tahay in laga baaraandeggo himilooyinka dugsiga sare ka dib ee ardagyga iyo adeegyada ka gudubka ee loo baahnaan doono ee ardayga ka caawinaya inuu himilooyinkan gaaro, LEA waa in ay casuuntaa ardayga naafada qaaba inuu soo xadir kulanka IEP. Haddii ardayga uusan kulanka IEP ga soo xaadirin, LEA waa in ay qaadaa tallaabo kale oo ay ku xaqiijinayso in ardayga waxyaaba oo duurbiddayo iyo waxyaabaha uu xiisaynayo loo tixgeliyo.

10. Ilaa iyo inta ku haboon, oo idinna laga haysto waalidiinta ama ardayga gaaray da'da 18 sanno jir ama ka weyn, LEA waa in ay casuuntaa wakiil ka socda hay'adda ka qeybqaadanaysa oo ay ubadan tahay in ay mas'uul ka tahay in ay fidiso ama ay bixiso adeegyada loo wareejinayo.

## III.F. KOOXDA IEP SOO XAADIRTA (IEP TEAM ATTENDANCE) (§300.321).

1. Xubin loo baahan yahay oo ka tirsan kooxda IEP ee la doonayay inuu soo xaadiro kulnka kooxda IEP ee gaar ah, dhammaan ama qeyb ka ah, haddii waalidka(iinta) dhalay ardayga naafada ah iyo LEA ay isku raacaan, qoraal ahaa, in soo xaadirista xubinka aysan daruuri ahayn madaama maadada manhajka ee xubinka ama adeegyada la bixiyo aysan waxba laga baddelin ama kulanka looga hadlayn.

2. Xubnaha loo baahan yahay oo ka tirsan kooxda IEP waxaa dhici karta in loo cudur daaro inuu soo xaadiro kulanka IEP, nus ama qeyb ka mid ah, goorta kulanka uu looga hadlayo in wax laga beddelo ama looga munaaqishoonayo maadada manhajka ama adeegyada la xiriira ee xubinkaas, haddii:

    a. Waalidka, qoraal ahaan, iyo ogolaanshaha LEA ee cudurdaarka; iyo

    b. Xubinka ayaa soo gudbinaya, qoraal ahaan, oo usoo dirayaa waalidka iyo kooxda IEP, talo wixii ka soo kordha ka hor inta aan la qaban kulanka IEP ga.

## III.G. KA QEYBQAADASHADA WAALIDKA (PARENT PARTICIPATION) (§300.322).

1. LEA kasta waa inuu qaadaa tallaabo lagu xaqiijinayo in mid ama labada waalidiinba ee dhalay ardayga qaba naafada ay goobjoog yihiin kulan kasta ee IEP ah ama la siiyo fursad ay uga soo qeybgalaan, oo uu ku jiro:

    a. In waalidka(iinta) lagu wargeliyo kulanka la siiyo waqti ku filan oo xaqiijinaya in ay fursad u heli doonaan oo ay soo xaadiri doonaan; iyo

    b. Loo balmiyo kulanka waqti iyo goob la isku raacsan yahay lagu balmiyo.

2. Haddii waalidiinta midkooda soo xaadiri karo, LEA waa in ay isticmaashaa nidaam kale oo lagu xaqiijinayo ka qeybgalka waalidka, oo uu ku jiro si shaqsi ahaan ama lagu qabto dhanka telfoonka. Waalidka(iinta) dhalay ardayga naafada ah iyo LEA waxaa dhici karta in ay isku raacaan in la isticmaalo qaab kale oo ka duwan oo kulanka looga qeybqaadan karo, sida fiidiyow ahaan ama qatka telfoonka looga qeybqaato (§300.328).

3. Kulanka waxaa dhici karta in la qabto iyada oo aan waalidka xaadir ahayn haddii LEA aysan waalidka(iinta) aysan ka dhaadhicin karin in ay soo xaadiraan. Marka arrinka sidan yahay, LEA waa in ay diiwaangelisaa in ay isku dayday in ay qaban-qaabiso kulan lagu heshiin karo waqtiga iyo barta lagu qaban lahaa, sida:

    a. Faahfaahin diiwangelin oo ah inta jeer ee talefoon loo direy ama la isku dayay iyo natiijada ka soo baxday markii la wacay;

    b. Nuqdooyin ah warqaddihii waalidiinta loo direy iyo jaawaabaha ay ka heleen; iyo

    c. Faahfaahin diiwangelin ee booqoshooyinka guriga ama goobta waalidka uu ka shaqeeyo iyo natiijooyinka ka soo baxay booqashooyinkan.

4. LEA waa in ay qaadaa tallaabo kasta ee daruuri ah si loo xaqiijiyo in waalidka(iinta) ay fahmayaan in kulamada lala yeelanayo kooxda IEP ga, waa in ay ku jirtaa in la keeno tarjumaan loo keeno waalidka(iinta) dhalay ardayga dhagooliga ama ardayga luqaddiisa dhaladka ay tahay luqad afka Ingiriiska aan ahayn.

5. Waalidka(iinta) dhalay ardayga naafada ah oo la qeybqaadanayo shaqaalaha iskuulka in ay isla diyaariyaan, isla eegaan, waxna looga bedello kulanka IEP ee ardaygooda. Tani waa door ama kaalin firfircoon oo uu waalidka(iinta):

    a. Ay ku bixin karaan macluumaad muhiim ah oo quseeya kartida ubadkooda oo ayna ku sheegi karaan welwelkooda ku aaddan wanaajinta waxbarashada ardaygooda;

    b. Ka qeybqaato wadahalka looga hadlayo baahida ubadkooda ee waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, iyo taageerada iyo adeegyada sooraaca; iyo

    c. Ay ka qeybqaatayaasha kale ku biiraan oo go'aaminaya sida ardayga ay kaalin uga qeybqaadan doono iyo horumarka manhajka guud, sida ardayga uu uga qeybqaadan doono qiimeynta Gobolka iyo midda degmo, iyo adeegyada LEA ay ardayga u fidin doonto iyo halka ay noqo doonto.

6. LEA waa in waalidka ay siiyaan nuqdi ka mid ah IEP ga ardayga iyagoon wax qarash ah uga baxayn.

## III.H. OGEYSIISKA KULANKA (NOTICE OF MEETING) (§300.322).

1. Ogeysiiska kulanka ee la doonayo in waalidka(iinta) waa inuu:

    a. Tilmaamaa ulajeedka, saacadda, iyo goobta kulanka ka dhici doono iyo cida kulanka soo xaadiri doonta; iyo

    b. Waalidka(iinta) ku wargeli ku talagalka shaqsiyaadka kale ee ka soo qeybgali doona ee wax ka og ama ah qabiir gaar ah oo ku saabsan kooxda IEP ee ardayga.

    c. Waalidka(iinta) ku wargeli in haddii ay soo codsadaan isuduwaha adeegga ee Qeybta C ama wakiillo kale oo ka socoda nidaamka Qeybta C oo ay dhici karto in ay ka soo qeybgalaan kulanka hore ee kooxda IEP ee arday hore waxlooqu qabtay sida hoos timaada Qeybta C ee IDEA.

2. Arday naafo ah laga bilaabo in aan ka yarayn IEP uga horeeyey ee taabo-galaysa goorta ardayga uu 16 jirsado (sida kulan IEP ee la qabtay goorta ardaygu uu 15 sanno jirsado), ama ka yar haddii ay kooxda IEP go'aamiso inay ku haboon tahay, sidoo kale ogeysiiska waa :

    a. Inuu tilmaamaa in ulajeedka kulanka uu noqon doono in lagu tixgeliyo himilooyinka dugsiga sare ka dib iyo adeegyada loo bedelli doono ardayga; iyo

    b. Inuu tilmaamo in LEA ay casuumi doonto ardayga; iyo

    c. In lagu caddeeyo hay'ad kale oo kasta ee lagu casuumi doono, iyadoo waalidka idin laga haysto, in ay wakiil soo dirsadaan.

3. Goorta la qabanayo kulamada kooxda IEP ga iyo kulamada meeleynta iyo goorta laga hadlayo arrimaha maareynta, waalidka(iinta) dhalay ardayga naafada ah iyo LEA waxaa dhici karta in ay isku raacaan in la isticmaalo qaab kale oo ka duwan oo kulanka looga qeybqaadan karo, sida fiidiyow ahaan ama qatka telfoonka looga qeybqaato (§300.328).

## III.I. SAMEYNTA, DIB U DARSIDDA, DIB-U-EEGIDDA IEP ga (DEVELOPMENT, REVIEW, AND REVISION OF THE IEP (§300.324).

1. Sameynta, dib u darsidda, dib-u-eegidda IEP ga.

    a. Marka la diyaarinayo IEP ga arday kasta, kooxda IEP ga waa in ay tixgelisaa:

        (1) Kartida ardayga;

        (2) Welwelka waalidka(iinta) ee wanaajinta waxbarashada ee ubadkooda;

(3) Natiijooyinka qiimeynta hore ama qiimeynta ugu dambeysay ee ardayga, iyo

(4) Baahida akadeemiyad, horumar, iyo waxqabad ee ardagya.

b. Kooxda IEP, ee qabashada kulan ah in la sameeyo, dibu u loogu darso iyo, haddii ay haboon tahay, wax looga bedello IEP ardayga ee saameynta gaarka ah ee soo raaca:

(1) Marka laga hadlayo ardayga aqoontiisa afka Ingiriiska ay xadidan tahay, u tixgeli baahida luqad ee ardayga sida baahidaha la xiriira IEP ga ardayga;

(2) Marka laga hadlayo ardayga indhoolaha ah ama camoolaha ah, casharbixinta Braille ku sii oo Braille isticmaal aysan ka ahayn haddii ay kooxda IEP go'aamiso maahane, qiimeynta ardayga ka dib ee xirfaddaha aqriska iyo qoraalka, baahida, iyo gudbinta aqriska iyo qoraalka ku haboon (oo ay ku jirto qiimeynta baahida mustaqbalka ardayga ee cashar bixinta Braille ama isticmaalka Braille), in cashar bixin Braille ama isticmaalka Braille aysan ardayga ku haboonayn;

(3) Tixgeli baahida wadahalka ee ardayga iyo, marka laga hadlayo ardayga dhegooliga ah ama maqalka ku adag, tixgeli baahida ardayga ee dhanka luqadda iyo wadahadalka, fursaddaha tooska ah ee wada hadalka asaaga iyo shaqsiyaadka xirfadleyaalka ee nidaamka wadahadalka ee luqadda ardayga, heerka akadeemiyadda, iyo baahida kala nooca ah, oo ay ku jirto fursaddaha tooska ah ee cashar bixinta nidaamka wadahadalka iyo luqadda ardayga;

(4) Tixgeli haddii ardayga uu ubaahan yahay qalabyada teknoolijiyada ee caawisa iyo adeegyada; iyo

(5) Marka laga hadlayo arday anshaxiisu ay ka hor istaagayso waxbarashada ardayga ama ardayda kale, ku fekir in aad isticmaasho dhexgalada aadaabta iijaabada ah ama taageero, iyo tabo kale, oo aad ku wajahayso anshaxdaas.

(a) Goorta aad go'aan ka gaareyso dhexgalka dabeecaddaha, kooxda IEP waa inay tixraacaan *USOE Tilmaamaha Waxabarshada Gaarka ah Ugu Yaraan Dhexgalka Anshaxda ee ugu Xadid Yar (LRBI)* ee macluumaad ku salaysan daraasaad hanaan dhexgal.

(b) Ulajeedka *Tilmaamaha LRBI* ee la xiriira isticmaalka akhlaaq wanaagsan oo taageerta iyo dhexgalada aadaabta ee iskuullada waa in:

(i) Ay ilaalisaa ammaanka iyo badqabka ardayda naafada ah;

(ii) Ay dhowrta ardayda, macalimiinta, iyo shaqaalaha iskuulka ee kale, LEAs, iyo USOE; iyo

(iii) Xaqiijisaa in waalidiinta ay lug ku leeyihiin tixgelinta iyo xulashada dhexgalada aadaabta ee ardaygooda loo isticmaali doono.

(c) Goorta ay xaaladdo deg degga ahi dhacdo ee loo baahdo in la isticmaalo dhex-dhexaad deg deg ah ama dhexgal isla markaas ah si loo ilaaliyo ardayda ama kuwa kale in ay ku waxyeelloobaan, shaqaalaha waa in ay dhammaystirtaa oo soo gudbisaa macluumaadka lagala xiriirayo marka ay xaalad deg degga ah timaado ee LEA oo laguna wargelinayo waalidka(iinta) dhalay ardayga 24 saacaddood gudahood.

(d) Sida haboon, ardaygu waa inuu helaa qiimaynta waxqabadka dabeecadda iyo adeegyada dhexgalka aadaabta iyo wax baddellaadda ee loogu talagalay in ay wajahdo dabeecadda (§300.530(d)(1)(ii)).

c. Haddii, marka la tixgelinayo saameynta gaarka ah ee kor ku sharaxan, kooxda IEP ee go'aaminaysa in arday uu ubaahan yahay qalab gaar ah ama adeegyo oo ulajeedo waxbarasho ah (oo uu ku jiro dhexgal, isku hagaajin, ama isku hagaajin barnaamij kale ah) si ardayga markaa uu uhelo FAPE, kooxda IEP waa in ay soo raacisaa bayaan ee taas la xiriira ee lagu qoro IEP ardayga.

d. Macalinka waxbarashada caadiga ee wax udhiga arday naafo ah, sida xubin ka tirsan kooxda IEP, waa in, ilaa inta ku haboon, ka qeybqaataa soo saarista IEP ga ardayga, oo ay ku jirto go'aaminta:

(1) Dhexgala aadaabta ku haboon ee iijaabiga iyo taageerida iyo tabaha kale ee ardayga; iyo

(2) Taageerada iyo adeegyada sooraaca, isbadellada barnaamijka, iyo taageerida shaqaalaha iskuulka sida ay la socoto IEP.

2. Isbedellada IEP ga.

a. Isbedel ku sameynta IEP ardayga ka dib marka la qabto kulanka kooxda IEP ee sanadlaha ee sanad dugsiyeedka dhexdiiisa, waalidka(iinta) dhalay ardayga naafada ah iyo LEA waxaa dhici karta in ay ku heshiiyaan in aysan isugu iman kulanka IEP ee ulajeedkiisu ahaa isbedelladan, oo bedelkeeda waxay sameyn karaa dokumenti qoraal ah oo lagu bedallayo ama wax laga duwayo IEP ga ardayga ee iminka.

b. Marka la soo dalbado, waalidka(iinta) waa in la siiyaa nuqdi dib loo hagaajiayay ee IEP ee la raaciyay bedellaada.

c. Haddii isbedellada lagu sameey IEP ga ardayga iyadoo loo maray hanaanka sixida, LEA waa in xaqiijisaa in kooxda IEP ardayga lagu wargeliyo isbedelladan.

3. Haddii ay suurtogal tahay, LEA waa in ay ku dhiirigelisaa isku darka dib uqiimeynta kulamada iyo kulamada kooxda IEP ee kale ee ardayga loo qabanayo (§300.324(a)(5)).

4. Dib u eegida iyo ku noqoshada IEP.

LEA kasta waa inuu xaqiijiyaa in kooxda IEP:

a. Marmar dib u eegto IEP ardayga, laakiin waa inaysan noqon in ka yar hal sao, si loo go'aamiyo in haddii himilooyinka sanadlaha ah ee ardayga in la gaaray; iyo

b. Waxay wax ka bedellayaan IEP, sida haboon, si loo wajayo:

(1) Horumar kasta ee aannan la gaarin ee la filanayay oo ahayd himilooyinkii sanadlaha ee IEP ku qornaa iyo manhajka waxbarashada guud, haddii ay haboon tahay;

(2) Natiijada dib u qiimayn kasta ;

(3) Macluumaad ku saabsan ardaga ee la bixiyay, ama laga helay, waalidka(iinta);

(4) Baahida la filnaay ee ardayga; ama

(5) Arrimaha kale.

c. Qabashada dib u eeggida IEP ardayga, kooxda IEP waa in ay tixgelisaa saameynta gaarka ee III.K.1.b.

d. Macalinka waxbarashada caadiga ee ardayga udhigga, sida xubin ka mid ah kooxda IEP, waa inuu ka qeybqaataa dib u eegida iyo dib u saxida IEP ardayga, haddii ardayga uu ama ay dhici karto inuu ka qeybqaato fasalada waxbarashada guud ee caadiga ah.

e. Haddii ay hay'ad ka soo qeybqaadanayso, ee aan ahayn LEA, ay ku guuldareysato in ay bixiyo adeegyada loo gudbin doono ardayga ee IEP kor ku xusan, LEA waa in dib la isugu yimaadaa kulanka IEP si loo caddeeyo tabo ka duwan ee lagu buuxinayo hadafyada ka gudubka ee ardayga kaasoo lagu qorey IEP ardayga.

f. Qeybtan ma jirto hay'ad kasta oo ka qeybqaadanaya oo ay uga qafiifinayso, oo ay ku jiraan hay'adda dhaqan-celinta mihno ee Gobolka, mas'uuliyad ay ku fidiyaan ama ay ku bixiyaan adeeg kasta oo u gudbin ah ee hay'adda haddii kale fidin la'hayad ardayga naafada ah ee soo buuxiya shuruudaha xaq uyeelashada ee hay'addaas.

## III.J. SHARAXAADA BARNAAMIJKA WAXBARASHADA QOF AHAANEED (IEP) (§300.320).

1. Sharaxaada barnaamijka waxbarashada qof ahaaneed (IEP).

   Kooxda *barnaamijka shakhsiyadeed ee waxbarasho* ee (IEP) micnaheedu waa bayaan qoran oo loogu talagalay ardayda qaba naafonimo oo loo qoro, dibna loo eeggo, oo dibna loo saxo sida uu waafaqsan yahay Xeerarkan iyo Qeybta B ee IDEA uu qabo.

2. IEP waa in ay ku jirtaa:

   a. Qoraalka heererka iminka ah ee guusha akadeemiyadda iyo howsha waxqabadka ardayga, oo ay ku jirto:

      (1) Sida ardayga la'xaad la'aantiisa ay usaameyso kaalin ka qaadashada ardagya iyo horumarka manhajka waxbarashada guud (tusaale isku manhaj la yaha ardayga aan naafada ahan); ama

      (2) Ardayda iskuulka barbaradka, sida ku haboon, sida naafada ay usaameyso ardayga ka qeybqaadashadiisa ciyaarha ku haboon;

   b. Qoraal himilooyinka qorshe sanadeedka ah, oo ay ku jirto hadafyada akadeemiyadda iyo waxqabadka ardayga ee loogu talagalay:

      (1) Buuxi ardayga baahidiisa ee ka timid naafada ardayga oo ardayga karti usii inuu kaalin ka qaato oo uu horumar sameeyo oo ka qeybqaato manhajka waxbarashada guud; iyo

      (2) Buuxi baahida waxbarasho ee kale ee ardayga ee ka timid naafada ardayga;

   c. Ardayda naafada ah ee qaata qiimeyn ka badellan oo la socota heerarka guusha, sharaxaada cabirada ama bartilmaameedyada waqtiga-dhaw;

   d. Sharaxaad ah:

      (1) Sida ilmahaagu horumar uga samaynayo inuu ka soo baxo himilooyinka sanadlaha ah ee la cabiri doono; iyo

      (2) Goorta warbixinno joogto ah loo diro waalidka(iinta) ee horumarka ardayga uu ka sameynayo inuu ka soo baxo himilooyinka sanadlaha

(sida iyada oo maro isticmaalka seddexdii biloodlaba mar ama warbinno jogo ah, ee waafaqsan soo saarista kaarka warbixinta) ayaa la bixin doonaa;

e. Qoraal ah waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira iyo taageerada iyo adeegyada sooraaca, oo ay ku saleysan tahay daraasaad qof kale dib u eegay ilaa xad in la qaban karo, oo ardayga loo fidiyo, ama iyadoo magaca ardayga hoos imanayo, iyo qoraal ah barnaamijka wax laga bedellay ama taageerada shaqaalaha sikuulka ee loo fidinayo si ardayga awood loogu isiiyo.

(1) In loo kordhiyo si haboon ee lagu gaarayo himilooyinka sanadlaha;

(2) Kaalin loogu yeesho oo horumar loogu sameeyo manhajka waxbarashada guud, iyo si loogu qeybqaato manhajka waxbarashada ka baxsan iyo howl kale oo aan waxbarasho ahayn; iyo

(3) Si wax loo barro oo ugu qeybqaato ardayda naafada ah ee kale iyo ardayda aan naafada ahayn ee howlaha qeybtan lagu sharaxay;

f. Sharaxaad ilaa xadka, haddii uu jiro, kaasoo ardayga uusan la qeybqaadanayn ardayda aan naafada ahayn ee kula jira fasalada waxbarashada caadiga ah iyo howlaha qeybtan lagu sharaxay;

g. Qoraalka ah:

(1) Shaqsi kasta ee ku haboon meelayn daruuri ah in la cabbiro guusha akadeemiyadda iyo howsha waxqabadka ardayga ee imtixaanada Gobolka- iyo degmo ahaanba; iyo

(2) Haddii kooxda IEP ay go'aamiso in ardayga looga baahan yahay inuu qaato qiimeyn ka bedellan halka uu ka qaadan la'haa midka gaarka ah ee Gobolka- ama qiimeynta guud ahaan degmada ee guusha ardayga, qoraal ah sababta:

(a) Ardayga kama qeybqaadan karao qiimeynta caadiga ah; iyo

(b) Qiimeynta ka bedellan ee gaarka ah ee loo dooray waa mid ku haboon ardayga; iyo

h. Taariikhda loo qabtay in adeegyada iyo bedellaada ay bilaabato, iyo inta jeer ee la filanayo, goobta, iyo mudada adeegyada ama bedellaada ay soconayso.

i. Qoraal iskuul ilaa iskuulka ka dib ee adeegyada looga gudbayo. Laga bilaabo in aan ka yarayn IEP uga horeeyey ee taabo-galaysa goorta ardayga uu 16 jirsado (sida kulan IEP ee la qabtay goorta ardaygu uu 15

sanno jirsado), ama ka yar haddii ay kooxda IEP go'aamiso inay ku haboon tahay, iyo markaas ka dibna sanadle ahana loo cusboonaysiin doono, IEP waa inuu ku jiraa:

(1) Himilooyin cabbir ee dugsiga sare ka dib ee ku haboon ee ku salaysan da'da-ku haboon qiimeynta bedellaada ee la xiriira tababar ama waxbarasho, shaqo, iyo, halka ay ku haboontahay, xirfaddaha isku filnaanshaha nololeed; iyo

(2) Adeega ubedelashada (oo ay ku jirto koorsooyinku la qaatay) ee loo baahan yahay si ardayga loogu taageero inuu gaaro ujeedooyinkan.

j. Xuquuqda badellida ee xiliga qaan gaarka. Laga bilaabo in aan ka yarayn hal sanno ka hor ardayga wuxuu gaarayaa xiliga qaangaarka, da'da 18 gobolkan Utah, IEP waa in ay la socotaa qoraal ah in ardayga lagu wargeliyay xuquuqda ardayga ee hoos timaada Qeybta B ee IDEA ee loo gudbinayo ardayga gaaray da'da qaanqaarka ah.

k. Ma jiro qeyb ka mid ah oo la macneeyey ee u baahan macluumaad dheeraad ah in la raaciyo IEP ardayga ee ka baxsan waxa sida cad looga baahan yahay Qeybta 614 ee Qeybta B ee IDEA, ama looga baahan yahay kooxda IEP la raacinayo macluumaadka hoos imanayo hal qeyb ee IEP ardayga ee kaa soo horeyba ku jira qeyb kale ee ku qoran IEP ardayga.

## III.K. IEP IYO ADEEGYADA ARDAYDA BARBARADKA AH EE SEDDEX ILAA SHAN JIRKA AH (IEP AND SERVICES FOR PRESCHOOL STUDENTS AGES THREE THROUGH FIVE).

1. IEP samaynta iyo waxa ku qoran (§300.323):

   a. IEP usameynta arday naafo ah ee jira seddex ilaa shan ama, LEA uu go'aamiyo, ardayga laba sanno jirka ah ee naafada ah oo seddex sanno u galayso inta sanad dugsiyeedka lagu jiro, kooxda IEP waa in ay tixgelisaa waxa ku qoran Qorshaha Adeegga Qoyska ee Shaqsiyeed (IFSP) ee ku qoran bayaanka iyo qeybta kor u qaadaysa diyaarinta iskuulka oo raacinaysa xirfaddaha aqriska, luqadda, iyo xisaabta.

   b. IFSP ma noqonayso IEP ga ardayga.

   c. LEA waa in ay ardayga u sameysaa IEP sida waafaqsan hanaanka Xeerarkan.

2. Adeegyada ardayda naafada ah ee jira seddex ilaa shan sano, ee dhigtay barnaamijyada barbaradka ee LEA, waa in ay isku si ah ay u fidiyaan sida waafaqsan Xeerarkan (§300.124).

3. Qorshaha ugagudubka ardayda laga soo direy fidiyayaasha Part C waa in si siman loola filiyaa heshiiska uga gudubka ee Gobolka kuna qoran Qeybta C. Qorshayntan waa in la hirgeliyaa ugu yaraan 90 maalmood, sida looga baahan yahay xeerarka Qeybta C 637(a)(9), ka hor inta ardayga uusan xaq ugu yeellan barnaamijka barbaradka ee hoos yimaada Qeybta B ee IDEA sida waafaqsan Xeerarkan. LEA kasta way ka qeybqaadan doontaa kulanka qorshaynta uga gudubka ee ay qabanqaabiso hay'ada hogaanka u wada ee barnaamijka Qeybta C (§300.124):

4. Adeeggaha ardayda seddex jirka ah.

    a. Xaq uyeelashada ardayga dhalashadiisa seddex jirka, LEA waa in ay xaqiijisaa in in IEP loo sameeyo oona loo hirgeliyo ardayga (§300.124(b)).

    b. Haddii ardayga seddexdiisa sano ugasho sanad dugsiyeedka ka dib,LEA waa in ay xaqiijisaa in IEP loo sameeyay, iyo in ardayga kooxdiisa IEP ay go'aamiyaan taariikhda sanad dugsiyeedka xigga ee goorta adeegyda hoos imaanaya IEP ay bilaaban doonnaan, aysan ka ahayn haddii kooxda IEP ay go'aamiso in adeegyada sanad dugsiyeedka la dheereeyo loo baahan yahay in ka baxsan mudada sanad dugsiyeedka.

5. Ardayda la xisaabay barnaamijyada barbaradka ee dhigta Dugsiga Bilowga Hore waa in ay soo buuxiyaan dhammaan shuruudaha Xeerkan, oo ay ku jirto shuruuda xaq u yeelashada ee qeybta FAPE.

## III.L. WAXBARASHADA JIMICSIGA (PHYSICAL EDUCATION) (§300.108).

1. Waxbarashada Jimicsiga ee ardayga, taasoo gaar ahaan loogu talagalay haddii ay daruuri tahay, waa in loo diyaariyaa arday kasta oo naafo ah ee hela FAPE, aysan ka ahayn LEA ay ardayda ku qorto iyaga oo aan naafo ahayn oo aysan ardayda u fidin waxbarashada jimicsiga arday aan naafo ahayn ee ay isku fasal dhiganayaan.

2. Arday kasta ee naafa ah waa in la siiyaa fursad ay uga qeybqaatan barnaamijka waxbarashada jimicsiga ee caadiga ah ee ay helaan kan ardayda aan naafada ahayn iysan ka ahayn:

    a. Ardayga uu ku qoran yahay meel gooni ah oo waqti buuxa ah; ama

    b. Ardayga uu ubaahan yahay waxbarasho jimicsi oo gaar ahaan loogu talagalay, sida ku qoran IEP ga ardayga.

3. Haddii IEP lagu waxbarashada jimicsiga ee si gaarka ah loogu talalgalay, LEA ayaa mas'uul ka ah waxbarashada loo baahan yahay in ardayga loo fidiyo adeegyada tooska ah ama ay qabanqaabo u sameeyaan in adeegyadan loo fidiyo iyadoo loo marinayo barnaamijyada shacabka ee kale ama barnaamijyada gaar ah.

4. LEA mas'uulka ka ah waxbarashada ardayga naafada ah ee lagu qorey meel gooni ah waa in la hubiyaa in ardayga uu helayao adeegyada waxbarashada jimcisiga ee ku haboon.

## III.M. TIKNOOLAJIYO GARGAAR (ASSISTIVE TECHNOLOGY) (§300.105).

1. LEA kasta waa in ay hubiyaan in qalabyada teknoolijiyada caawis ama adeegyada teknooliji caawiye, labadaba, waa in loo diyaariyaa ardayga qaba naafada haddii ay shuruud tahay oo ay qeyb ka tahay ardayga:

    a. Waxbarashada Gaarka ah;

    b. Adeegyada la xidhiidha; ama

    c. Taageerada iyo adeegyada sooraaca.

2. Marka mid-mid loo eeggo, isticmaalka qalabyada teknoolijiyada caawis ee iskuulka uu soo iibsaday iskuulka ardayga dhigto ama meesha kale waxaa looga baahan yahay haddii kooxda IEP ga ee ardayga ay go'aamiyaan in ardayga uu ubaahan yahay inuu helo qalabkan si uu FAPE uu uhelo.

## III.N. ADEEGYADA SANAD DUGSIYEEDKA LA FIDIYEY (ESY) (EXTENDED SCHOOL YEAR (ESY) SERVICES (§300.106).

1. *Adeegyada sanad dugsiyeed dheeraad ah* micnaheedu waa waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xiriira ee:

    a. Loo fidiyo ardayga naafada ah:

        (1) In ka baxsan sannad dugsiyeedka caadiga ah ee LEA;

        (2) Sida waafaqsaneyd IEP ardayga; iyo

        (3) Iyada oo aan wax qarash ah aysan ugu fadhin walidiinta ardayga; iyo

    b. Buuxiya heerarka USOE.

2. LEA kasta waa inay xaqiijiyaan in adeegyada sanad dugsiyeedka ee la dheereeyey loo helo sida daruuriga ah ee FAPE bixiso, oo waafaqsan Xeerarkan.

3. Sanad dugsiyeedka la dheereeyay waa in ardayga loo fidiyaa haddii kooxda ardayga IEP ay go'aamiso, iyadoo shaqi lagu saleynaayo, in adeegyada ay daruuri yihiin sida waafaqsan qodabka FAPE ee ardayga.

4. Hirgelinta shuruudaha qeybtan, LEA waxaa dhici karta inaysan:

    a. Xadidin adeegyada sanad dugsiyeedka la dheereyey qeyb gaar ah oo ay ugu talagalashay ardayga naafada ah; ama

b. Si aan midaysanayn u xadida nooca, cadada, ama mudada adeegyadan.

## III.O. ISKUULLADA DADWEYNAHA EE MADAXA BANNAAN IYO ARDAYDOODA (CHARTER SCHOOLS AND THEIR STUDENTS (§300.209).

1. Ardayda naafada ah ee jira seddex ilaa iyo 21 sano ee dhigta iskuullada dadweynaha ee madaxa bannaan oo waalidiintooda haysta xuquuqaha hoos yimaada Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarkan.

2. Haddii iskuulka dadweynaha madax bannaan uu yahay LEA ee deeq hela sida hoos timaada Qeybta B, iskuulkaas dadweynaha ayaa masuul ka ah in la hubiyo in dhammaan shuruudaha Qeybta B ee IDEA io kuwa Xeerarka la buuxiyo.

3. Haddii iskuula dadweynaha ee madaxa bannaan uusan ahayn LEA ee aan deeq helayn sida hoos timaada Qeybta B, ama iskuulka oo qeyb ka aha LEA ee hela deeq sida hoos timaada Qeybta B, SEA ayaa mas'uul ka ah in la hubiyo in shuruudaha Qeybta B iyo Xeerarkan la buuxiyo.

4. Iskuullada Dadwaynaha ee madaxa bannaan ee ah iskuullada dadwaynaha ee LEA, iyagoo sii wada Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarkan, LEA waa in ay:

   a. Ardayda naafada ba'an qaba ee dhigta iskuullada dadwaynaha ee madaxa bannaan isla sida ay LEA u dhigtaan ardayda naafada ah ee iskuulladooda kale, oo ay ku jiraan adeegyada ay bixiyaan ee kabka ah iyo adeegyada la xiriira ee ay ku qaataan iskuulka dadwaynaha ee madaxa bannaan ee isla sida sharciyada iyo ku dhaqanka LEA ee ay ku bixiso sida adeegyadan ay iskuulka ku bixiso iyo iskuullada dadwaynaha ee kale; iyo

   b. Fidiso deeq sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA ee iskuulladan madaxa bannaan.

      (1) Isla sida LEA ay deeq usiiso iskuullada dadwaynaha ee LEA, oo ay ku jirto qeybinta u dhigma ee ku salaysan ku qorista ardayda naafada ah; iyo

      (2) Isla markaa LEA ay ku qeybinayso deeqda Federaalka ee ay siinayno LEA kale ee isluullada dadwaynaha, isku si ahayn sharciga iskuulka dadwaynaha ee madaxa bannaan ee Gobolka.

   c. Haddii iskuulka dadwaynaha ee madaxa bannaan yahay iskuul LEA ah oo deeq hela sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarkan oo ay ku jirto iskuullada dadwaynaha ee kale:

      (1) LEA ayaa mas'uul ka ah hubinta ah in shuruudaha Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarkan la buuxiyo; iyo

(2) LEA waa in ay buuxisaa shuruudaha Xeerka III.O.4.a

## III.P. JAWIGA UGU XADIDAADA YAR (LRE) (LEAST RESTRICTIVE ENVIRONMENT) (§300.114).

1. LEA kasta waa inuu xaqiijiyaa in:

   a. Sida ugu balaaran ee ugu haboon, ardayda naafada ah, oo ay ku jiraan ardayda dhigata iskuullada dadweynaha ama iskuullada gaarka ama meelaha kale ee lagu xanaaneeyo, wax la barta ardayda aan naafada ahayn; iyo

   b. Fasalada gaarka ah, iskuullo gooni ah, ama laga saaro ardayda naafada ah ee waxbarashada caadiga ku jira kaliya haddii qaabka ama naafonimada ay ba'an tahay oo ka dhigaysa in fasalada caadiga ah oo la isticmaala taageerada iyo adeegyada sooraaca si guul ah aan loo gaarayn.

2. Qaabka gobolka deeq ubixiyo ma ahan in ay dhaliso bedellaad gef ku ah shuruudaha LRE ee Xeerarka III.P-S; iyo

   a. Gobolka ma ahan inuu isticmaalo qaabka deeq bixinta ee gobolka uu ku qeybinayo diiqaha oo salka looga dhigayo nooca meesha ee ardayga wax lagu baro ee dhalisa in ay ku guul daraysato in ardayga naafada ah ay u fidiso sida waafaqsan FAPE baahida gaarka ah ee ardayga, sida ku qeexan IEP ga ardayga.

## III.Q. MEELEYNTA BEDELLAADA EE JOOGTADA AH (CONTINUUM OF ALTERNATIVE PLACEMENTS) (§300.115).

1. LEA kasta waa in ay hubisaa in meeleynta bedellaada ee joogtada ah la heli karo si ay ubuuxiso baahida ardayda naafada ah ee qaata waxbarashada gaarka ah iyo adeeyada la xiriira.

2. Joogtada loo baahan yahay waa in ay:

   a. La raaciyo meeleynta bedellaada ah ee tilmaamaha soo socda:

      (1) Fasalada caadiga ah,

      (2) Fasalada gaarka ah,

      (3) Iskuullada gaarka ah,

      (4) Tilmaanta guriga, iyo

      (5) Tilmaanta isbitaalada iyo xarumaha; iyo

b. La sameeyo kutalagal kab ah ee adeegyada (sida qolka ilaha ama tilmaamaha la siiyo shaqaalaha la socda) ee loo fidiyo ee la socda meelaynta fasalada caadiga ah.

## III.R. MEELAYNTA (PLACEMENTS) (§300.116).

1. Marka la go'aaminayo meeleynta waxbarashada ee ardayga naafada ah, oo ay ku jiraan ardayda barbaradka ah ee naafada qaba, LEA kasta waa inuu xaqiijiyaa in:

   a. Go'aanka meeleyenta:

      (1) Waxaa gaaray kooxo shaqsiyaad ah, oo ay ku jiraan waalidka(iinta) iyo shaqsiyaad kale oo aqoon u leh ardayga, micnaha macluumaadka qiimeynta, iyo dalabyada meeleynta; iyo

      (2) Waxaa loo gaaraa sida waafaqsan qodobada kore ee LRE.

   b. Meeleynta ardayga:

      (1) Waxaa la go'aamiyaa sanadle;

      (2) Waxaa lagu saleeyaa IEP ga ardayga; iyo

      (3) Waan goob sida suurtogalka ah ugu dhow guriga ardayga;

   c. Aysanka ahayn IEP ga radayga naafada ah uu ubaahan yahay qabanqaabiyo kale, ardayga wax lagu baro iskuulka uu iyada/isaga ay dhigan la'hayd haddii uusan/aysan naafo ahayn;

   d. Marka la dooranayo LRE, tixgelinta waxaa la siyaa taabo-gal waxyeello oo suurtogal ah ee ardayga uga iman karta ama tayada adeegyada ee isaga ama iyada ay ubaahan tahay; iyo

   e. Ardayga naafada ah lagama saarayo waxbarashada da'da ku habon ee fasalada caadiga ah oo kaliya maadaama loo baahan yahay in wax laga bedello manhajka guud ee waxbarashada.

## III.S. KAALINTA WAALIDKA EE GO'AANNADA MEELEYNTA (PARENTAL INVOLVEMENT IN PLACEMENT DECISIONS) (§300.327 & §300.501).

1. LEA kasta waa in ay hubiyaan in waalidka(iinta) arday kasta ee naafonimo qaba ay yihiin xubno koox kasta ee go'aanno ka gaaraya meeleynta waxbarashada ee waalidiinta ardayga (Xeerka IV.B).

2. Hirgelinta shuruudan, LEA kasta waa in ay isticmaalaan hanaanadan loogu talagalay ka qeybgelinta waalidka ee meleynta go'aannada joogtada ah ee qaarka isticmaalaya ka qeybqaadashada waalidka ee kulmada EIP ga.

3. Haddii labada waalidba ay kulanka ka qeybqaadan karaan halkaasoo lagu gaarayo go'aan la xiriira meeleynta waxbarashada ee ardaygooda, LEA waa in ay isticmaashaa qaabab kale oo lagu hubinayo ka qeybgalkooda, oo uu ku jiro mid shaqsi ah ama telfoon la isla wada hadlayo, ama fiidiyow la isla wada hadlayo.

4. Koox ayaa go'aanka meeleynta gaari kara iyadoon waalidka(iinta) lug ku la'hayn haddii LEA aysan awoodin in ay heli waayaan waalidka(iinta) inuu ka soo qeybgalo go'aanka. Marka arrinka sidan yahay, LEA waa in ay hayaan diiwaangelin ah in ay isku dayeen si ay u hubiyaan kaalintooda ka qeybgalka.

## III.T. ADEEGYADA OGOLAANSHAHA WAALIDKA (PARENTAL CONSENT FOR SERVICES) (§300.300).

1. LEA waxay mas'uul ka tahay sameynta FAPE oo in ay udiyaariso ardayga qaba naafada waa inuu ogolaansho wargelin ka haysto waalidka(iinta) dhalay ardayga ka hor qodobka koowaad ee waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee ardayga.

2. LEA waa in ay dadaal suurtogal ah ku bixisa si ay ogolaansho wargelin ka haysto waalidka(iinta) dhalay ardayga ka hor qodobka koowaad ee waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee xaq uyeelashada ee ardayga naafada ah.

3. Haddii waalidka(iinta) dhalay ardayga ku guuldareysto inuu codsiga ka soo jawaabo, ama diido ogolaansho ah qodobka koowaad ee waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, LEA:

    a. Hanaanka uma isticmaali karto Qeybta IV ee Xeerarkan, oo ay ka midka yihiin hanaanka dhexdhexaadinta ama hanaanka hab-socodka sharciga oo suuban, si ay uhelaan heshiis ama amar ah in adeegyada ay dhici karto in ardayga loo fidiyo.

    b. Looma tixgelinayo in gef lagu sameeyo shuruudaha ee FAPE ay ardayda u diyaarinayso ku guuldareysiga ah in ardayga ay ufidiyaan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee LEA ay codsiga ogolaanshaha udalbanayno; iyo

    c. Looma baahna in la isugu yimaado kulanka kooxda IEP ama in IEP loo sameeyo ardayda u baahan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee ogolaanshaha sida kan loogu dalbanayo.

4. Haddii, wixii ka dambeeya bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, waalidka(iinta) dhalay ardayga ay ogolaanshaha kala noqdaan si qoraal ah in in ay sii socoto waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, LEA:

    a. Waxaa dhici kara in aysan sii socon in waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira loo fidiyo ardayga, laakin waa in ay keenaan

ogeysiis qoraal ah ka hor sida waafaqsan Qebta IV.D ee Xeerarkan ka hor inta aan la joojin bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira.

b. Hanaanka uma isticmaali karto Qeybta IV ee Xeerarkan, oo ay ka midka yihiin hanaanka dhexdhexaadinta ama hanaanka hab-socodka sharciga oo suuban, si ay uhelaan heshiis ama amar ah in adeegyada ay dhici karto in ardayga loo fidiyo.

c. Looma tixgelinayo in gef lagu sameeyo shuruudaha ee FAPE ay ardayda u diyaarinayso ku guuldareysiga ah in ardayga ay ufidiyaan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee LEA ay codsiga ogolaanshaha udalbanayno; iyo

d. Looma baahna in la isugu yimaado kulanka kooxda IEP ama in IEP loo sameeyo ardayda u baahan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee ogolaanshaha sida kan loogu dalbanayo.

5. *Ogolaansha* micnaheedu waa in waalidka uu fahmay in bixinta ogolaanshaha ay tahay mid iska-wax-u-qabso ah oo waalidkana laga doonayo oo waalidka mar alla marka uu doonnayo dib uu ula noqon karo (§300.9).

a. Haddii waalidka dib uu ula noqdo oggolaanshaha, dib ula noqoshadaas ma ahan mid dib-loogu-dhiggo (tusaale ahaan, dib uma saxeyso tallaabo dhacey ogolaanshaha ka dib idinka inta la bixiyay ka hor iyo idinka marka lagala noqdey ka dib.)

## III.U. GOOBAHA AAN AAN WAXBARASHADA LA XIRIIRIN (NONACADEMIC SETTINGS) (§300.117).

1. Fidinta ama qabanqaabinta bixinta adeegyada aan waxbarashada la xiriirin iyo adeegyada dheeraadka ah, oo ay ku jirto cuntada, saacadda biririfka, iyo adeegyada iyo ciyaaraha sida waafaqsan Xeerka III.V, LEA kasta waa in ay hubiyaan in arday kasta ee naafo ah uu ka qeybqaadanayo ardayga aan naafada ahayn ee adeegyada iyo ciyaaraha aan waxbarashada la xiriirin inta uga badan ee ku haboon ee buuxisa baahida ardaygaas.

2. LEA waa in ay hubisaa in arday kasta oo qaba naafonimo uu leeyahay taageerada iyo adeegyada sooraaca ay go'aamiyaan kooxda IEP ee ardayga ee ay ku haboon tahay oo ayna muhiim u tahay ardayga ka qeybqaadanaya goobaha aan waxbarashada la xiriirin.

## III.V. ADEEGYADA AAN WAXBARASHADA AHAYN NONACADEMIC SERVICES (§300.107).

1. LEA kasta waa in ay qaadaan tallaabo, oo ay ku jirto bixinta taageerada iyo adeegyada sooraaca sida ku haboon oo muhiimka u ah ardayga ay kooxda IEP u go'aamiyaan, si ardayga loogu fidiyo adeegyada waxbarashada aan la

xiriirin oo dheeraadka ah iyo ciyaaraha ayna ugu fidiyaan sida daruuriga ah oo ardayga naafada ah ugu saamaxayso inuu helo fursad usam oo uga qeybqaadanayo adeegyadan iyo ciyaarahan.

2. Adeegyada waxbarashada aan la xiriirin oo dheeraadka ah iyo ciyaaraha waxaa dhici karta in lagu daro adeegyada la talinta, ciyaaraha, gaadiidka, adeegyada caafimaadka, ciyaaraha baashaalka, kooxaha danaha guud ama naadiyada ay wakiilatay LEA, u gudbinta hay'adaha gargaarka u fidiya shaqsiyaadka naafada ah, iyo shaqada ardayda, oo ay ku jirto shaqo LEA iyo gargaar ka baxsan shaqada la heli karo.

## IV. DHAWRITAANKA NIDAAMKA (PROCEDURAL SAFEGUARDS): HANAANKA HABSAMI U SOCODKA SHARCI EE WAALIDIINTA IYO ARDAYDA (QEYBHOOSAADKA E EE IDEA) DUE PROCESS PROCEDURES FOR PARENTS AND STUDENTS (IDEA SUBPART E).

Isku si ah shuruudaha Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarkan, LEA kasta waa in ay dhidibada utaagaan, ay wadaan, oo hirgeliyaan Habraaca Badbaadada ee ardayda naafada ah iyo waalidiintooda.

### IV.A. FURSADDA WAALIDIINTA EE LAGU EEGAYO DIIWANADA IYO KA QEYBQAADASHADA KULAMADA (§300.501) (PARENTAL OPPORTUNITY TO EXAMINE RECORDS AND PARTICIPATE IN MEETINGS (§300.501)).

Waalidiinta dhalay ardayga naafada ah waa in la siiyaa fursad, sida waafaqsan Xeerarkan, fursad ay ku eegayaan oo ay dib ugu fiirinayaan dhammaan diiwaannada marka laga hadlayo aqoonsiga, qiimeynta, iyo meeleynta waxbarashada ee ardayga iyo qodobada FAPE ee ardayga.

### IV.B. KA QEYBGALKA WAALIDKA EE KULMADA (PARENT PARTICIPATION IN MEETINGS). (§300.501)

1. Waalidiinta dhalay ardayga naafada ah waa in la siiyaa fursad, sida waafaqsan Xeerarkan, fursad ay ku eegayaan oo ay dib ugu fiirinayaan dhammaan diiwaannada marka laga hadlayo aqoonsiga, qiimeynta, iyo meeleynta waxbarashada ee ardayga iyo qodobada FAPE ee ardayga. LEA kasta waa inay bixiyaan ogeysiis, barbar socda Xeerarkan, si loo xaqiijiyo waalidiinta dhalay ardayda naafada ah si ay uhelaan fursad ay kulamada uga soo qeybgalaan.

2. Kulanka kuma jiro wadahadallo aan jadwallaysnayn ama aan rasmi ahayn ee ku lug leh shaqaalaha LEA iyo wadahadallada looga arrinsanayo sida dariiqyada waxbarista, qorshaha casharka, ama bixinta adeegga isuduwaha. Sidoo kale kulanka kuma jiro howlaha diyaar-gareynta ee shaqaalaha LEA ay ku mashquulaan in ay sameeyaan qorshaynta ama jawaabcelinta qorshaynta waalidka ee laga wada munaaqishoon doono kulamada dambe ee waalidka.

3. LEA kasta waa in ay xaqiijiyaan in waalidka dhalay arday kasta oo naafo ah inuu xubin ka yahay koox kasta oo go'aan ka gaarta meeleynta waxbarashada ee waalidka ardayga, oo uu ku jirto ku wargelinta waaldiinta ee kulamada oo waqti ku filan ah si loo hubiyo in ay iyagu u helaan fursad ku filan oo ku soo xaadiraan iyo jadwallaynta kulamada ee waqti iyo saacad iyo goob ay kuwada heshiiyaan (§300.322(a)).

4. Ogeysiiska kulanka waa in lagu qoraa ulajeedka(dooyinka), waqtiga, iyo goobta kulanka lagu qaban doono iyo cida ka soo qeybgali doonta oo waalidka(iinta) ku wargeli xuquuqdooda ah in ay la iman karaan shaqsiyaad u leh aqoon iyo qabrid gaar ah oo ku saabsan ardayga (§300.322(b)).

5. Haddii labada waalidba ay kulanka ka qeybqaadan karaan halkaasoo lagu gaarayo go'aan la xiriira meeleynta waxbarashada ee ardaygooda, LEA waa in ay isticmaashaa qaabab kale oo lagu hubinayo ka qeybgalkooda, oo uu ku jiro mid shaqsi ah ama telfoon la isla wada hadlayo, ama fiidiyow la iskula wada hadlayo.

6. Koox ayaa go'aanka meeleynta gaari kara iyadoon waalidka(iinta) lug ku la'hayn haddii LEA aysan awoodin in ay heli waayaan waalidka(iinta) inuu ka soo qeybgalo go'aanka. Marka arrinka sidan yahay, LEA waa in ay hayaan diiwaangelin ah in ay isku dayeen si ay u hubiyaan kaalintooda ka qeybgalka.

## IV.C. QIIMAYN WAXBARASHO OO MADAX BANNAAN (INDEPENDENT EDUCATIONAL EVALUATION) (§300.502).(IEE)

1. Sharaxaadaha.

   a. *Qiimayn Waxbarasho oo madax bannaan* (IEE) micnaheedu waa qiimeyn ay sameeyaan imtixaanqaade xirfadle ah oo aannan u shaqeyn LEA mas'uulka ka ah waxbarashada ardayga wax la iska weydiinayo.

   b. *Qarashka dadwaynaha* micnaheedu waa LEA ayaa bixinaya qarashka buuxa ee qiimeynta ama xaqiijiya in qiimeynta haddii kale la fidiyo iyadoon wax qarash ah waalidka aan ugu fadhin.

2. LEA kasta waa in ay dhidabada u taagaan oo ay hirgeliyaan sharciyo iyo hanaan la xiriira qiimayn waxbarasho oo madax bannaan ee buuxin karta shuruudha Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarkan.

3. Shuruudahan soo socda waa in la wajahaa:

   a. Waalidiinta dhalay ardayga naafada ah uu leeyahay xuquuq uu la iman IEE ga ardayga iyadoo qarashka dadwaynaha ay bixinayaan haddii aysan ku raacanayn qiimeynta ay qaadeen LEA.

   b. LEA waa in ay waalidiinta u fidisaa, marka ay IEE soo codsadaan, macluumaad ku saabsan IEE waxaa dhici kartaa in ay la yimaadaan, iyo shuruudaha LEA ee quseeya IEEs.

   c. Haddii waalidka IEE soo dalbado iyadoo ay dadwaynaha qarashka bixinayaan, LEA waan in ay, iyaga oo aysan daahinayn, ama soo gudbiyo hanaanka hab-socodka cabashada dhegeysi lagu codsanayo si loo muujiyo in qiimeynta aysan haboonayn, ama la xaqiijiyo in IEE la fidiyo iyada oo qarashka dadwaynaha ay bixinayaan, aysan ka ahayn haddii LEA ay dhegeysiga ku soo bandhigto in qiimeynta ay waalidka qaadeen yahay mid aan buuxin shuruuda LEA. Haddii LEA ay soo gudbiso ogeysiis hanaanka hab-socodka cabashada oo ay ku codsanayaan dhegeysi iyo go'aankooda kama dambeyska oo ah qiimeynta LEA in ay tahay mid haboon, waalidka weli IEE ayuu xaq u

leeyahay, laakin qarashka dadwaynaha ma bixinayaan. Haddii waalidku uu IEE soo dalbado, LEA waxay waalidku weydisan karaan sababta isaga ama iyadu ay u diidan yihiin qiimeynta dadwaynaha. Hase-yeeshee, sharaxaadda waalidka waxaa dhici karta in aannan loo baahan oo LEA waxaa dhici karta in aysan soo daahin karin in ay IEE fidiyaan qarashka dadwaynaha ama dalbanaya dacwo qaadid waafaqsan nidaamka si ay udifaacaan qiimeynta dadwaynaha.

d. Waalidku wuxuu xaq uleeyahay hal IEE kaliya oo qarashka dadwaynaha bixinayaan markasta oo ay LEA qiimeyn qaban doonto ee waalidku ku diidan yahay.

e. Haddii waalidku IEE la yihiin oo qarash dadweyne yahay ama LEA la wadaagaya qiimeynta ay heleen oo garashka si gaar leh loo bixinayo, natiijooyinka qiimeynta waa in LEA ay tixgeliso, haddii ay shuruudaha LEA buuxinayso, go'aan kasta ee la gaaro ee marka laga hadlayo qodobka FAPE ee ardayga oo waxaa dhici karta in ay qolo kasta sida caddeyn ahaan ugu soo bandhigto hanaanka hab-socodka cabashada ee ardaygaas la xiriira.

f. Haddii sarkaalka dhegeysiga uu IEE dalbado sida iyadoo qeyb ka ah dheeysiga hanaanka hab-socodka cabashada, qarashka qiimeynta waa in ay noqotaa oo ay dadwaynaha bixiyaan.

g. Haddii qarashka ay IEE dadwaynaha bixinayaan, shuruudda hoos timaada ee qiimeynta lagu dalbanayo, oo ay ku jirto goobta qiimenta iyo xiraddaha imtixaan qaadaha, waa in ay ahaataa isla shuruuda ay LEA isticmaalayso goorta ay bilaabayso qiimeynta, ilaa iyo xadka shuruudahan ay la siman yihiin xuquuqda waalidka ee qiimayn waxbarasho oo madax bannaan.

h. Aysan ka ahayn shuruuda kor ku xusan, LEA waxaa dhici karta in ay shuruudo ama jadwal dheeraad ah ku soo rogto ee la xiriira in lala yimaado IEE oo ay qarashka dadwaynaha bixinayaan.

4. IEE lagu fuliyo qarashka LEA wuxuu noqon doonaa hantida LEA, oo gebi ahanatiisaba.

## IV.D. OGEYSIISKA QORAALKA HORE (WRITTEN PRIOR NOTICE) (§300.503).;

1. Ogeysiiska qoraalka hore waa in waqti suurtogal ah lagu siiyaa waalidiinta dhalay ardayga naafada LEA ka hor:

   a. Ay ka soo jeedinayso ama ay ka bedellayso aqoonsiga, qiimeynta, ama meeleynta waxbarashada ee ardayga ama qodobada FAPE ee ardayga; ama

b. Ay ku diidayso in soo jeediso ama ay ka bedellayso aqoonsiga, qiimeynta, ama meeleynta waxbarashada ee ardayga ama qodobada FAPE ee ardayga.

2. Ogeysiiska loo baahan yahay waa in la raaciyaa:

a. Sifada tallaabada ay LEA soo jeedisay ama ay diiday;

b. Sharaxaad ah sababta ay LEA usoo jeedinayso ama u diidayso in ay tallaabo qaado;

c. Sifada hanaanka qiimeyn kasta, qiimeyn, diiwaanka ama warbixinta ay LEA isticmaashay ee ay ku salaysay talaabooyinka ay soo jeedisay ama diiday;

d. Qoraal ah in waalidiinta dhalay ardayga naafada inuu ku dhowrsan yahay sida hoos timaada Habraaca Badbaadada ee Qeybta B ee IDEA iyo, haddii ogeysiiskan uusan ahayn udirida qiimeynta ee koowaad, micnaheedu yahay in nuqdi ka mid ah sifada Habraaca Badbaadada la heli karo;

e. Ilaha waalidiinta ee ay la xiriiri karaan si ay u helaan gargaarn ay ku fahmayaan qodobada Qeybta B ee IDEA.

f. Sifada dalabyada kale ee kooxda IEP ay tixgelyeen iyo sababaha loo diiday dalabyadan; iyo

g. Sifada saameynta kale oo la xiriira iskuulk ee ay LEA soo jeedisay ama u diiday.

3. Ogeysiiska waa in:

a. Lagu qoraa luqad ay wada fahmi karaan bulshada guud; iyo

b. Lagu bixiyaa luqadda dhaladka ee waalidka ama qaab kale ee la iskula xiriiro ee uu waalidku isticmaalo, aysan ka ahayn haddii ay iska caddahay in ay taasi qabsamayn.

(1) Haddii luqadda dhaladka ah ee waalidka ama qaab kale ee la iskula xiriiro aysan ahayn luqad qoran, LEA waa in ay qaadaa tallaabo ay ku xaqiijinayso in:

(a) Ogeysiiska af ahaan la tarjumo ama qaab kale oo waalidka luqaddiisa/eeda dhaladka ah ama qaab kale ee la iskula xiriiro loogu badello;

(b) Waalidku fahmayo ogeysiiska waxa ku qoran; iyo

(c) In ay jirto caddeymo qoraal ah oo ah in shuruudaha la buuxiyay.

## IV.E. OGEYSIIS Habraaca Badbaadada (PROCEDURAL SAFEGUARDS NOTICE) (§300.504).

1. Nuqdi ka mid ah Habraaca Badbaadada oo loo diyaariyay waalidka(iinta) dhalay ardayga naafada ah waa in waalidka(iinta) la siiyaa kaliya sanadkiiba hal jeer, aysan ka ahayn sidoo kale nuqdi waa in la siiyaa waalidka(iinta):

   a. Marka ugu horeyso ee loo diro ama waalidka ay qiimeyn soo codsadaan;

   b. Marka ugu horeyso ee la helo cabashada Gobolka ee koowaad ama hanaanka hab-socodka cabashada ee sanad dugsiyeedkaas; iyo

   c. Marka uu waalidka soo codsado.

2. LEA waxaa dhici karta in nuqdi ka mid ah ogeysiiska Habraaca Badbaadada ay boggooda internetka ay soo dhigaan haddii uu jiro bog.

3. Ogeysiiska Habraaca Badbaadada waa in ay la socotaa sharaxaad buuxda ee dhammaan Habraaca Badbaadada ee la xiriira:

   a. Qiimayn Waxbarasho oo Madaxbannaan;

   b. Ogeysiiska Qoraalka Hore;

   c. Ogolaanshaha waalidka;

   d. Helitaanka diiwaannada waxbarasho;

   e. Fursad lagu soo bandhiggo oo lagu xaliyo cabashooyinka iyada oo lo o maro hanaanka hab-socodka cabashada, oo ay ku jiro waqtigii cabashada la soo gudbin la'aa;

   f. Fursad ay LEA ku xalliso cabashada, iyo faraqa udhaxeeya hanaanka hab-socodka cabashada iyo nidaamyada cabashada Gobolka, oo ay ku jirto awoodda xukunka ee nidaam kasta, arrin kasta ee ay dhici karto in ay soo ifbaxdo, la soo gudbiyo iyo waqtiga go'aannada, iyo nidaamyada la quseeyo;

   g. Dhexdhexaadinta la heli karo;

   h. Meeleynta ardayga inta dhegeysiga habsami u socodka sharciga cabashada loogu go'aaminayo;

   i. Hanaanyada ardayda ku xukuman in loo bedello goob waxbarasho oo kumeelgaar ah;

j. Shuruudaha meeleynta aannan loo dhammayn ee ay waalidiinta dhalay ardayda ay ku qoraan iskuullo gaar ah oo ay dadwaynaha qarashka bixinayaan;

k. Dhegeysiga cabashooyinka habsami u socodka sharciga, oo ay ku jiro shuruudaha daah ka qaadista natiijooyinka qiimeynta iyo tallooyinka;

l. Rafcaannada heer Gobol;

m. Tallaabada maxalliga, oo ay la socoto waqtiga tallaabadan la qaadi la'haa; iyo

n. Qarashka qareenka.

4. Ogeysiiska loo baahan yahay waa in lagu soo qoraa luqad ay waalidka(iinta) wada fahmi karaan.

5. Waalidka dhalay ardayga naafada ah waxay dooran karaan in ogeysiiska loogu soo diro nidaam elegtaroonig ah (email), haddii LEA nidaam noocaas ay leedahay (§300.505).

## IV.F. OGOLAANSHAHA WAALIDKA (PARENTAL CONSENT) (§300.300).

1. Bixinta oggolaanshaha ee dhanka waalidka(iinta) waa mid iska-wax-u-qabso ah oo oo waalidka mar alla marka uu doonnayo dib uu ula noqon karo. Haddii waalidka dib uu ula noqdo oggolaanshaha, dib ula noqoshadaas ma ahan mid dib-loogu-dhiggo (tusaale ahaan, dib uma saxeyso tallaabo dhacey ogolaanshaha ka dib idinka inta la bixiyay ka hor iyo idinka marka lagala noqdey ka dib.)

2. Wargelinta ogolaanshaha waalidka oo qoraal ah waa in la helaa ka hor inta LEA aysan qabin bilowga qiimeynta ama dib u qiimeynta si loo ogaado haddii ardayga uu uqalmayo ama sii wadan karo inuu usii ahaado si arday naafo ah.

3. Ogolaanshaha waalidka ee qiimeynta koowaad waa in aannan loo micnayn sida ogolaansho koowaad ee bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira.

4. LEA waa in ay qaadaan dadaal suurtogal ah si loo helo ogolaansho lagu war-geliyey waalidka ee loogu talagalay qiimeynta hore ama dib u qiimeynta si loogu ogaamiyo haddii ardayga yahay arday naafo ah.

5. Qiimeynta koowaad kaliya, haddii ardayga uu ku jiro maganta Gobolka oo uusan la degnayn waalid(iinta) ardayga, LEA loogama baahna in ay waalidka kala yimaadaan ogolaansh wargelin ee qiimeynta hore si loo ogaado haddi ardayga yahay arday naafo ah haddii:

a. Inkastoo dadaallo suurtogal ah loo galay in loo sameeyo, LEA ma awoodi karto in ay gacanta-kudhigaan halka waalidka(iinta) ardayga ay joogaan;

b. Xuquuqda waalidka(iinta) ee ardayga laga joojiyay sida uu qabo sharciga Gobolka; ama

c. Xuquuqda waalidka(iinta) ee ay go'aamo waxbarasho ku gaaraan uu garsoore ka xayoobiyay sida uu qabo sharciga Gobolka oo ogolaansho qiimeynta hore la siiyay shaqsiga uu garsooraha magacaabay inuu matalo ardayga.

6. Haddii waalidka(iinta) arday lagu qorey iskuullada dadwaynaha ama u raadinaya in lagu qoro iskuullada dadwaynaha uusan keenin ogolaansho ah qiimeynta koowaad, ama ku guul dareysto inuu ka soo jawaabo codsiga ah inuu ogolaansho bixiyo, LEA waxaa dhici karta in ay, balse looguma baahna, in ay dabagalaan qiimeynta koowaad ee ardayga iyaga oo isticmaalaya habraaca badbaadada ama habsami u socodka sharciga ee Xeerarkan IV.G–Q.

7. Ogolaanshaha waalidka la wargeliyay ee dib u qiimeynta ma ahn in lala yimaada haddii LEA ay si cad ah u muujiyaan in:

   a. Dadaal suurtogal ah ay u gashay in ay hesho ogolaansha; iyo

   b. Waalidka ardayga kuu guul dareystey in ay ka soo jawaabaan.

8. Si loo buuxiyo dadaalada suurtogalka ah ee shuruudaha lagu raadinayo ogolaanshaha waalidka ee ku wargelinta ah, dadaalada noocan ah waa in la diiwaangeliyaa oo waxaa la raacin karaa diiwaangelinta telfoonka loo direy oo faahfaahsan ama la isku dayay iyo natiijooyinkii telfoonadii loo direy, nuqdooyinkii warqaddaha loo direy waalidiinta iyo jawaab kasta oo laga heley, iyo diiwaangelin faahfaahsan ee booqashooyinka lagu tagay waalidiinta gurigooda ama goobahooda shaqo iyo natiijooyinka booqashooyinkan.

9. Goorta la sameynayo qiimaynta maskaxda, LEA waxaa loo gudbinayaa shuruudaha ogolaanshaha waalidka ee UCA 53A-13-302 (Utah FERPA).

10. Adeegyada ogolaanshaha waalidka

   a. LEA waxay mas'uul ka tahay sameynta FAPE oo in ay udiyaariso ardayga qaba naafada waa inuu ogolaansho wargelin ka haysto waalidka dhalay ardayga ka hor qodobka koowaad ee waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee ardayga.

   b. LEA waa in ay dadaal suurtogal ah ku bixisa si ay ogolaansho wargelin ka haysto waalidka(iinta) dhalay ardayga ka hor qodobka koowaad ee

waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee xaq uyeelashada ee ardayga naafada ah.

c. Haddii waalidka(iinta) dhalay ardayga ku guuldareysto inuu codsiga ka soo jawaabo, ama diido ogolaansho ah qodobka koowaad ee waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, ama diido ogolaansha adeegyada qodobka koowaad, LEA:

(1) Waxaa dhici karta in aannan la isticmaalin hanaanka dhexdhexaadinta ama hanaanka hab-socodka sharciga oo suuban, ee Xeerkarka IV.H-Q si ay uhelaan heshiis ama amar ah in adeegyada ay dhici karto in ardayga loo fidiyo;

(2) Looma tixgelinayo in gef lagu sameeyo shuruudaha ee FAPE ay ardayda u diyaarinayso ku guuldareysiga ah in ardayga ay ufidiyaan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee LEA ay codsiga ogolaanshaha udalbanayno; iyo

(3) Loogama baahna kooxda IEP ay isugu yimaadaan kulan oo ay IEP ardayga ugu sameeyaan.

11. Shuruudaha ogolaanshaha kale.

a. Ogolaanshaha waalidka looma baahna ka hor inta:

(1) dib loo eegayo macluumaadka horey ay uhaysteen sida qeyb ka ah qiimeynta ama dib uqiimeynta; ama

(2) Maareynta imtixaan ama qiimeyn kale oo laga qaaday dhammaan ardayda aysan ka ahayn, ka hor inta aan laga qaadin imtixaankaas ama qiimeyntaas, ogolaanshaha looga baahnaa waalidiinta ee dhammaan ardayda oo dhan.

b. Waxaa dhici kara in LEA aysan isticmaali karin diidmada waalidka in uu ogolaado hal adeeg ama howl in waalidka ama ardayga loo diido adeeg kale, manfac, ama howlaha LEA,

12. Haddii waalidka ardayga ee guriga wax loogu dhigo ama dhigta iskuul gaar loo leeyahay oo ay waalidiinta geeyeen iyaga oo qarashka la baxaya ogolaansho ma u bixinayaan qiimeynta koowaad, ama waalidinta oo ku guuldareystey in ay ka soo jawaaban codsi ah in ay ogolaansho bixiyaan:

a. Waxaa dhici karta in LEA aysan isticmaalin tirtiraya hab-socodka sharciga oo suuban; iyo

b. LEA loogama baahan inay tixgeliso ardayga sida xaq u la'haanshaha waxbarasho gaar ah iyo adeegdyada la xiriira.

## IV.G. NIDAAMKA CABASHADA GOBOLKA (§300.151–153) (STATE COMPLAINT PROCEDURES

1. Xafiiska Waxbarashada ee Gobolka Utah (USOE) waxay qaadatay hanaan ay ku xalinayno cabasho kasta sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarka, oo ay ku jirto cabashada ay soo dirsadaan ururada ama shaqsiyaad gobolada kale. Cabashada waa in ay qoraal ahaataa kuna socotaa muraaqibka ama maamulka iskuulka dadwaynaha ee madaxa bannaan ee LEA lagu eedeeyey in gef ka dhacay, oo qolada cabashada soo dirsanaysa waa in ay nuqdi ka mid ah usoo gudbiyaan Agaasimaha Gobolka ee Waxbarashada Gaarka ah isla marka ay qolada cabashada ay LEA usoo dirsanayso. Haddii waalidka(iinta) aysan karayn in ay si qoraal ah usoo gudbiyaan, LEA ama USOE ayay la xiriiri karaan oo ay gargaar ka raadsan karaan.

2. Cabashada waa inay la socotaa kuwa soo socda:

   a. Qoraal ah in LEA ay gef ku sameysey shuruuda Qeybta B ee IDEA ama Xeerarkan.

   b. Xaqiiqooyinka qoraalka ku salaysan.

   c. Saxiixa iyo macluumaadka lagala xiriirayo qofka cabashada soo gudbiyay.

   d. Haddii gefka la isku eedaynayo ay la xiriirto arday gaar ah:

      (1) Magaca iyo cinwaanka uu ardayga degan yahay;

      (2) Magaca dugsiga halka ardayga uu dhigto;

      (3) Marka laga hadlayo arday hooy laawe ah, macluumaadka laga xiriirayo ee laga heli karo ardayga iyo magaca iskuulka halka ardayga uu dhigto;

      (4) Qaabka dhibaatada si ardayga ay uqabsatay, oo ay ku jirto xaqiiqooyinka la xiriira dhibaatada; iyo

      (5) Xalinta la soo jeediyay ee dhanka dhibaatada ilaa iyo inta laga ogyahay iyo inta qolada ay heli karto waqtiga cabashada ay soo gudbinaysay sida lagu qeexey IV.E.1.

3. Cabashada waa in ay eedeysaa gef dhacay in aan ka badnayn hal sanno ka hor taariikhda cabashada ay soo gaartey LEA, aysan ka ahayn mudo dheer ay suurtogal tahay maxaa yeeley gefka uu sii socdo ama qofka cabashada soo gudbinaya uu dalbanayo adeeg loo guddayo oo ah gefka dhacay in aan ka badnayn laba sannadood ka hor taariikhda cabashada ay LEA soo gaartay.

4. LEA waa in ay cabashadu ku xalisaa 30 maalmood gudahooda aysan ka ahayn haddii ay jiraan marxaladdo aan caadi ahayn ee jira (tusaale ahaan, daahitaan dhanka qofka cabashada soo gudbiyay inuu bixiyo macluumaad daruudi ah). Waqtiga lagu darey ma ahan inuu ka badnaado toban maalmood ee maalmaha kalandaariyaha. Inta lagu jiro mudada, LEA waa in ay:

   a. Sii wada baaritaan goobta ah oo madax bannaan, haddii LEA ay go'aamiso in baaritaanka noocan yahay mid daruuri ah.

   b. Qofka cabashada soo gudbiyay la siiyo fursad uu ku soo gudbiyo macluumaad dheeraad ah, mid af ah ama mid qoraal ah, oo ku saabsan eedeynta cabashada.

   c. Dib u eeg dhammaan macluumaadka quseeya oo go'aan ka gaar haddii LEA ay gef u geysatay shuruudaha Qeybta B ee IDEA ama Xeerarkan.

   d. Go'aan qoraal ah gaarsii qofka cabashada soo gudbiyay, iyadoo nuqdi loo gudbinayo Agaasimaha Gobolka ee Waxbarashada Gaarka ah oo ka hadlaysa eedeynta ku qornaynd cabashada oo ay ku qoran tahay:

      (1) Cadeymaha go'aanka iyo gunaanudka, iyo

      (2) Sababta ay LEA go'aanka kama dambayska u gaarrtay.

   e. Waqti dheeraad ah u ogolow oo hoos imanaya Xeerka IV.G.4.a kaliya haddii:

      (1) Uu jiro marxaladdo gaar ah ee la xiriira cabasho gaar ah; ama

      (2) Waalidka(iinta), shaqsiga, ama ururka iyo LEA lugta ku leh uu ku raacsan yahay in la dheerooyo waqtiga dhexdhexaadinta, ama lug ku la'haanshaha haddii ay jiraan qaab kale oo ka duwan oo lagu xalin karo dhibka taagan oo Gobolka ka jiro; iyo

   f. Go'aami nidaam taaba-galaya ee hirgelinta go'aankooda kama dambeyska ee LEA, haddii loo baahdo, oo uu ku jiro howlaha gargaarka farsamo, gorgortanka, iyo tallaabada lagu saxayo ee la isku waafaqayo.

   g. Qofka cabashada soo gudbiyay la socodsii qoraal ahaan xuquuqda rafcaan ka qaadashada go'aanka si ay USOE dib ugu eegto, iyo nidaamka loo marayo. Codsashada rafcaanka waa in Agaasimaha Gobolka ee Waxbarashada Gaarka ah soo gaartaa toban maalmood maalaha kalandarka ee la helay go'aankooda kama dambeyska LEA.

5. Nidaamka dib u eegista go'aankooda kama dambeyska LEA ee rafcaanka ku socda USOE waa inuu la mid ahaadaa sida kuwa kor lagu sharaxay. Inta lagu jiro maalmaha ka haray 60-ka maalmood ee maalmaha kalandarka ka dib

marka la helo codsiga qoraalka ah, USOE waa in ay dirtaa go'aan qoraal ah oo cabashada ku saabsan oo kama dambays ah.

6. Xalinta cabashada ee ay u aqoonsatay in ku guuldaraysiga ah in la bixiyo adeegyo ku haboon, USOE, iyadoo tiigsanaysa awood korjoogaha guud ee hoos imanaya Qeybta B ee IDEA, waa in ay wajahdaa:

    a. Sida dib loo dhexdhexaadiyo adeegyada la soo diiday, oo uu ku jiro, sida haboon, loogu abaalmariyo lacag soo celin ama hanaan kale oo lagu saxayo ee baahida ardayga.

    b. Qodobo mustaqbalka dhici kara adeegyada dhammaan ardayda naafada ah.

7. Haddii cabasho qoraal ah uu Gobolka soo gaaro kaasoo dacwo qaadid waafaqsan nidaamka qaban karo ee hoos yimaada Hanaanka Dacwo Qaadista Waafaqsan nidaamka ee Xeerarkan, ama ka kooban arrimo dhowr ah kaasoo mid ama in ka badan hal qeyb oo dhegeysiga ah, LEA (ama USOE haddii cabashada Gobolka ay rafcaan laga qaatay go'aanka LEA) waa in dhinac loo dhigaa qeyb kasta oo ka mid ah cabashadaas ee looga hadlayo dhegeysiga ilaa iyo gebagabayska. Arrin kasta ee dacwadda ku qoran oo aan qeyb ka ahayn dacwo qaadid waafaqsan nidaamka waa in lagu xaliyaa iyadoo la isticmaalayo waqti xadidan iyo hanaanka cabashada ee qeybtan ku sharaxan.

8. Haddi arrimo ay soo ifbaxaan oo cabasho la soo gudbiyo sida hoos timaada qeybtan oo horey loo go'aaminay dacwo qaadid waafaqsan nidaamka ee lugta isla qoladan, markaa go'aanka dhegeysiga dacwaddaas waa wax lagu heshiinayo. USOE waa in ay labada qoloba ay xaqiiqada ku wargelisaa. Cabasho Lea ku eedayneysa ku guuldareysiga in ay hirgeliso go'aan habsami u socodka sharci awgeed, inkastoo, waa in si toos ah loo diraa Agaasimaha Gobolka ee Waxbarashada Gaarka ah oo USOE ay xaliso.

9. Waalidiinta iyo shaqsiyaadka daneeya ee kale, oo uu ku jiro waalidka tababaranaya iyo xarumaha macluumaadka, xarumaha nolol iskufilnaanshaha, hay'addaha ilaalada iyo udoodaha, ururadaha xirfadleyaasha, iyo xarumaha kale ee haboon, waa in lala soo socodsiiyaa waxa ku saabsan nidaamyadan inta lagu jiro:

    a. Ogeysiis Nidaamka Badbaadada ee ay LEA fidiso.

    b. Soo bandhigyada iyo dhacdooyinka tababarada kale oo ay qabtaan shaqaalaha USOE oo gobolka oo dhan ah.

## IV.H. DHEXDHEXAADIN (§300.506).

1. LEA kasta waa in ay xaqiijisaa in nidaamyada dhidabada loo taagay in la hirgeliyo oo la sameeyo si qolooyinka oo dhan loogu ogolaado in ay soo

jeediyaan muran kasta ee lug ku leh arrimaha sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA, oo ay ku jirto arrimaha soo ifbaxa ka hor inta aan la soo gudbin cabashada dacwadda hab-socodka, si loogu xaliyo iyada oo loo marayo hanaanka dhexdhexaadinta.

2. Hanaanka waa in hubiyaa in qaabka dhehdhehaadinta ayo:

   a. Qeybta qolooyinkana waa mid iska-wax-u-qabso u ah;

   b. Ma ahan mid loo isticmaalayo in loo diido ama laga daahiyo waalidka xuquuqdiisa dhegeysiga ee cabashada dacwadda hab-socodka waalidka, ama loo diido xuquuq kasta oo ay siinayso sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA; iyo

   c. Waxaa qabanaya dhexdhexaadiye uqalma oo aan kala soocnoon la'hayn oo utbabaran tababaha dhexdhexaadinta oo taaba-galaya.

3. LEA waxaa dhici karta in ay ufidiyaan oo dhidabada u taagaan nidaam ay waalidiinta iyo iskuullada doortay in aysan isticmaalin hanaanka dhexdhexaadinta, fursad ay kula kulmaan, waqti iyo goob waalidiinta sahal ay u gaari karaan, qolada aan danaynaynin ee heshiiska kula jirta kuwa ka bedellan ee dhexdhexaadinaya, ama xarunta macluumaadka iyo tababarka waalidka ama xarunta ila jaaliyadda waalidka ee Gobolka dhexdiisa; oo manfacyada sharaxi kara, oo ku dhiirigelin kara isticmaalka, hanaanka dhexdhexaadinta ee waalidka.

4. ESOE waxay haysaa liis dhexdhexaadiyayaal khibrad leh oo aqoon u leh sharciga iyo xeerarka la xidhiidha bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xidhiidha

5. ESOE ayaa dhexdhexaadiyayaalka u doorta qaab joogto ah, oo wareeg ah, oo aan kala sooc la'hayn.

6. USOE ayaa qabta qarashka hanaanka dhexdhexaadinta, oo ay ku jirto qarashka kulanka qeybtan ku qeexan.

7. Kulan kasta oo ka mid ah hanaanka dhexdhexaadinta waa in la qorsheeyaa iyada oo aan la habsaamin waana in lagu qabtaa meel ku haboon dhamaan dhinacyada.

8. Haddi dhinacyada ay muranka ku xaliyaan iyagoo umaraya hanaanka dhexdhexaadinta, dhinacyad waa in ay isla galaan heshiis sharci ah oo:

   a. Ku qoran dhammaan dhexdhexaadinta iyo dhammaan wadahadalka dhacay inta lagu jirey hanaanka dhexdhexaadinta ay noqon doonto mid qarsoodi ah oo aannan loo isticmaali karin sida caddeymo haddii ay dhacdo dhagaysi nidaam dacwad kale ama tallaabo sharci ah ee ka soo ifbaxay murankaas; iyo

b. Waxaa saxeexay laba waalidba iyo wakiilka LEA ee leh awoodda uu balan u gali karo hay'adda.

9. Qoraal ah, heshiis dhexdhexaadin oo saxiixan oo hoos yimaada baragaraafkan waxaa fulinaya maxkamadda Gobol kasta oo awood sharci u leh ama ah maxkamadda degmada ee Maraykanka.

10. Wadahadalo dhaca inta lagu jiro hanaanka dhexdhexaadinta waa inuu ahaa mid qarsoodi ah oo looma isticmaali karo sida caddeyn oo raaca dhegeysiga habsami u socodka sharciga ama nidaam geedisocodka maxalliga ee maxkamad Federaalka kasta ama maxkamad Gobol kasta.

11. Shaqsi dhexdhexaadiye ah:

    a. Ma noqon karo shaqaale ushaqeeya USOE ama LEA ee lug ku leh waxbarasho ama daryeelka caruurta; iyo

    b. Ma ahan inuu leeyahay wax danno shaqsi ama xirfad ee ka soo horjeeda hadafka qofkaas.

12. Qof haddii kale uqalma sida dhexdhexaadiye oo aan ushaqeyn LEA ama USOE oo kaliya maxaa yeeley isaga ama iyada ay hay'adda siisey mushahar ah inuu dhexdhexaadiyenimo qabto.

## IV.I. SOO GUDBINTA CABASHADA DACWADDA HABSAMAMIGA (FILING A DUE PROCESS COMPLAINT) (§300.507).

1. Udoodida iyo wakiilka sharciga.

    a. Shaqsiyaad leh qabiirnimo gaar ah, oo ay ku jiraan udoode, ayaa dhici karta inay caawiyaan ama ay soo usoo weheliyaan dhegeysiga dacwadda habsamiga.

    b. Dhinacyada waxay:

        (1) Matali kara qareen awood uleh inuu sharciga ku shaqeysto gobolka Utah; ama

        (2) Iyaga ayaa ismatali kara, taasoo sidoo kale loogu yeero isdifaac shaqsi, (CFT 300.512(b)(a)(1), Xeerarka Qareennada Utah 14-102-111, 14-802(c (8)).

2. Habsocodka sharciga oo suuban waa inuu soo eedeeyaa gef dhacay in aan ka badnayn laba sannadood ka hor taariikhda waalidka ama LEA oggaa ama la doonayay inuu ogaado tallaabada eeda oo salka u ah cabashada dacwadda habsocodka, aysan ka ahayn:

a. Haddii waalidka laga hor istaagay inuu soo gudbiyo cabashada dacwadda habsocodka taasoo ay ugu wacnayn iyadoo si gaar ah aysan umatalin LEA oo la xalin la'haa dhibaatada keentay oo sal loogu dhigo cabashada dacwadda habsami usocodka; ama

b. LEA ayaa la hartay macluumaad ku socday waalidka(iinta) ee looga baahnaa sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA oo ahayn in waalidka(iinta) la siiyo.

3. LEA waa in ay la socodsiisaa waalidka caawinaad xagga sharciga ah oo bilaash ah ama qarash yar iyo adeegyo quseeya ee kale ee aaggaa laga heli karo haddii:

a. Waalidka(iinta) ay macluumaadkaas soo dalbadaan; ama

b. Waalidka(iinta) ama LEA ay soo dalbadaan dhegeysiga sida hoos timaada qeybtan.

## IV.J. DACWADDA HABSOCODKA SHARCIGA SUUBAN (DUE PROCESS COMPLAINT (§300.508).)

1. LEA waa in ay leedahay hanaan ubaahan in dhinac kasta, ama qareenka matalaya dhinaca kale, in dhinaca kale ay ufidiyaan cabashada dacwadda habsami usocodka (kaasoo looga baahan yahay in ay qarsoodi ahaato).

2. Qoloda soo gudbinaysa habsocodka sharciga suuban waa in nuqdi ay dacwadda habsocodka sharciga suuban ay USOE usoo dirtaa.

3. Hab-socodka sharciga oo suuban ee ashtakada waa in la socotaa:

a. Magaca ardayga;

b. Magaca iyo cinwaanka uu ardayga degan yahay;

c. Magaca dugsiga halka ardayga uu dhigto;

d. Marka laga hadlayo arday hooy laawe ah, macluumaadka laga xiriirayo ee laga heli karo ardayga iyo magaca iskuulka halka ardayga uu dhigto;

e. Sifada ah qaabka dhibaatada ardayga ee la xiriirta diidmada bilowga ama isbadelka la qorsheeyay, oo uu ku jiro xaqiiqooyinka la xiriira dhibaatada; iyo

f. Xalinta la soo jeediyay ee hibaatada ilaa iyo xad iyo qolada waqtigaas la heli karo.

4. Ma jirto qolo loo qabanayo dhegeysi ah cabashada dacwadda habsocodka ilaa qoladda, ama qareenka qolada matala, ay ka soo gudbiyaan cabashada dacwadda habsocodka oo buuxisa shuruudaha kor ku xusan.

5. Cabashada dacwadda habsocodka qeybtan looga baahan yahay waa in loo arkaa in ay ku filan tahay aysan ka ahayn haddii qolo heshey cabashada dacwadda habsocodka ay ku soo wargeliso sarkaalka dhegeysiga iyo qolada kale iyadoo qoraal ah, 15 maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta la heley cabashada dacwadda habsocodk, oo qoloda heshay ay aaminsan tahay in cabashada dacwadda habsocodka aysan buuxinayn shuruudihii loo qabtay.

   a. Shan maalmood ee maalmaha ogeysiiska la heley gudahood, sarkaalka dhegeysiga waa in uu go'aan ka gaaraa wajiga cabashada dacwadda habsocodka in ay shuruudaha buuxisay, oo isla markiiba ay ku wargelisey dhinacyada iyadoo qoraal ah ee go'aanka.

   b. Qolo ayaa waxay badelli kartaa cabashada dacwadda habsocodka kaliya haddii:

      (1) Qolada kale qoraal ahaan waxay qiraysaa badelka oo waxaa la siiyay fursad laga xaliyo cabashada dacwadda habsocodka iyadoo loo marayo fadhiga xalinta, ama

      (2) Sarkaalka dhageysiga codsigii wuu aqbalayaa, aysan ka ahayn in sarkaalka dhegeysiga ay dhici karto inuu codsiga aqbalo kale in la badello waqti kasta aysan ka dambayn shan maalmood gudahooda ka hor inta aysan bilaabin dacwo qaadid waafaqsan nidaamka.

   c. Haddii qolo ay soo gudbiso isbadelka cabashada dacwadda habsocodka, waqtiga loo qabto fadhiga xalinta iyo waqtiga lagu xalinayo cabashada mar kale waxay bilaabmaysaa waqti lagu soo gudbiyo cabashada dacwadda hab-socodka ee la badelley.

6. Haddii LEA aysan soo dirin ogeysiiska qoraalka hore aysan usoo dirin waalidka oo ku saabsan arinka dacwada ee ay ku qoran tahay cabashada dacwadda habsocodka, LEA waa in, toban maalmood gudahood laga bilaabo maalinta ay heshey cabashada dacwadda hab-socodka, ay waalidka u dirtaa jawaab ay ku qoran tahay:

   a. Sharaxaadayo sababta LEA ay usoo jeedisay ama udiiday in ay qaado arrinka ka soo ifbaxday cabashada dacwadda habsocodka.

   b. Sharaxaad ikhtiyaarada kale ee kooxda IEP tixgelyeen iyo sababaha loo diiday sababahan;

   c. Sifada hanaanka qiimeyn kasta, qiimeyn, diiwaanka ama warbixinta ay LEA isticmaashay ee ay ku salaysay talaabooyinka ay soo jeedisay ama diiday; iyo

d. Sifada saameynta kale ee la xiriira iskuulk oo ay LEA soo jeedisay ama u diiday.

7. Haddii LEA aysan ogeysiis qoraal ah ee hore u dirin waalidka kaasoo kusaabsan arrinkan ee cabashada dacwadda habsocodka ilaa laga helayo cabashada dacwadda habsocodka, LEA waxaa dhici karta in ay weli dhihi karaan in cabashada dacwadda habsocodka ee waalidka loo direy aysan ahayn mid ku filan, halka ay haboon tahay.

8. Qolada heleysa cabashada dacwadda habsocodka waa in ay, toban maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta ay hesho cabashada dacwadda habsocodka, qolada kale u dir jawaab si gaar ah u wajahaysa arrinka ka soo ifbaxay cabashada dacwadda habsocodka.

## IV.K. FOORMAMKA TUSMUDA (MODEL FORMS) (§300.509).

USOE waxay soo saartey foormam tusmo ah oo waaldiinta ka gargaarayo in ay Gobolka cabasho usoo diraan, cabasho dacwo qaadid waafaqsan nidaamka, iyo dhexdhexaadin ku codsanayaan. Foormamka waxaa laga heli karaa bogga internetka ee Utah State Office of Education Xafiiska Waxbarashada ee Gobolka Utah (Utah State Office of Education ) oo H http://www.schools.utah.gov. Dhinacyada loogama baahna in ay foormamka tusamada ee Gobolka. Waalidiinta, hay'addaha shacabka, iyo dhinacyada waxay isticmaali karaa foormka tusmada Gobolka ee ku haboon ama foorm kale ama dokumenti kale, mar haddii dokument ama foomka la soo isticmaalo uu buuxinayo, sida ku haboon, shuruudaha looga baahan yahay soo gudbinta cabashada dacawadda habsocodka ama shuruudaha soo godbinta cabashada Gobolka.

## IV.L. HANAANKA QARAARKA (RESOLUTION PROCESS) (§300.510).

1. 15 maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta ogeysiiska cabashada dacwadda hbsocodka uu waalidka haley, iyo ka hor inta aan la bilaabin dhagaysi dacwadda habsocodka, LEA waa in ay kulanka la wadaa waalidiinta iyo xubanaha ay quseyso ama xubnaha kooxda IEP oo aqoon gaar leh ka haya xaqiiqooyinka lagu sheegey cabashada dacwadda habsocodka kaasoo:

   a. Ay ku jiraan wakiilada LEA oo awood u leh go'aan ka gaaridda iyagoo matalaya hay'addaas, iyo

   b. Ma dhici karto inuu la socdo qareenka LEA aysan ka ahayn haddii waalidka uu qareen la socdo.

2. Ulajeedda kulanka waa in waalidka(iinta) dhalay ardayga ay ka munaaqishoodaan cabashada dacwadda habsocodka iyo xaqiiqooyinka qaabeeya bu'da cabashada dacwadda habsocodka, si LEA ay u hesho fursad ay ku xalinneyso muranka kaasoo sal u ah cabashada dacwadda habsocodka.

3. Fadhiga xalinta ma ahan in la qabto haddii waalidka(iinta) iyo LEA ay qoraal ahaan isku raacaan in ay ka tanaasulaan kulanka, ama waalidka(iinta) iyo LEA ay isku raacaan in ay isticmaalaan nidaamka dhexdhexaadinta.

4. Waalidka(iinta) iyo LEA ayaa go'aaminaya xubnaha quseeya ee kooxda IEP in ay kulanka soo xaadiraan.

5. Haddii LEA aysan cabashada dacwadda habsocodka ku xalin mid farax-gelisa waalidka(iinta) 30 maalmood gudahood ka inta lagu jiro waqtiga la heley cabashada dacwadda habsocodka, waxaa dhici kara in la qabto dacwo qaadid waafaqsan nidaamka. Waqtiga la soo saari la'haa go'aankooda kama dambeyska wuxuu bilaabmayaa marka ay 30 maalmood dhammaato.

6. Aysan ka ahayn halka ay dhinacyada ay si wadajir ah ay ugu tanaasuleen hanaanka dhexdhexaadinta ama ay dhexdhexaadin isticmaalaan, waalidka haddii uu ku guuldareyto inuusan soo gudbin cabashada dacwadda hab-socodka ee uu ugu qeybgali la'haa waqtiga kulanka dhexdhexaadinta dib ayuu udhici doonaa ilaa laga qabto kulanka dacwo qaadid waafaqsan nidaamka.

7. Haddii LEA aysan awoodin in ay hesho ka soo qaybgalka waalidka ee kulanka xalinta ka dib marka dhowr jeer isku dayeen (oo ayna diiwaangeliyeen) LEA waxaa dhici karta, gabagada mudada 30 maalmood, codsiga sarkaalka dhegeysiga uu ku tuurayo kiiska waalidka ee cabashada dacwadda hab-socodka.

8. Haddii LEA ay ku guuldaraysto in la qabto kulanka dhexdhexadinta 15 maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta ay heleen ogeysiiska waalidka ee cabashada dacwadda hab-socodka ama ku guuldaraysto in ay ka qeybgalaan kulanka dhexdhexaadinta, waalidka(iinta) waxaa dhici karta inuu sarkaalka dhegeysiga weydiisto dhexgal lagu bilaabayo waqtiga dacwo qaadid waafaqsan nidaamka.

9. Waqtiga 45 maalmood ee dacwo qaadid waafaqsan nidaamka wuxuu bilaabmaaa wixii ka dambeey mid ka mid ah dhacdooyinkan ka dib:

    a. Labada dhinacba si qoraal ah ayaa waxay isku raaceen in ay ka tanaasulaan kulanka dhexdhexaadinta;

    b. Ka dib marka uu bilowdo dhexdhexaadinta ama kulanka xalinta, laakiin ka hor, laakin dhammaadka 30 ka maalin ka hor, dhinacyada waxay qoraal ahaan ku heshiiyeen in uusan suurtogal ahayn wax heshiis ah;

    c. Haddii labada dhinacyo ay si qoraal ah ku heshiiyaan in ay sii wadaan dhexdhexadinta dhammaadka 30 maalmood ee mudada qaraarka, laakin marka dambana waalidka ama LEA ay ka gaabsadeen hanaanka dhexdhexaadinta.

10. Haddii murankii wax xal ah laga gaaray inta kulanka uu socday, dhinacyada waa in ay sameystaan heshiis sharci ah oo ay labada dhinacba waalidka iyo wakiilka LEA awoodda sharci u leh ay saxiixayaan LEA ay fulinayso iyo kaasoo lagu fulin karo maxkamad Gobol kasta oo awood sharci u leh ama maxkamadda deegaanka Mareykanka.

11. Haddii dhinacyada ayxal heshiis ah ku gaaraan, qolo ayaa diidi karta heshiska inta lagu jiro seddex maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta xalka heshiiska la gaaray.

## IV.M. DACWO QAADID WAAFAQSAN NIDAAM OO AAN KALA SOOCNAYN (§300.511) (IMPARTIAL DUE PROCESS HEARING).

1. Goor kasta oo cabashada dacwadda la soo gudbiyo, waalidiinta ama LEA lugta ku leh muranka waa in la siiyaa fursad dacwo qaadid waafaqsan nidaam oo aan kala soocnayn.

2. Dacwo qaadista waafaqsan nidaam oo aan kala soocnayn waa in USOE ay qabtaan. Agaasimaha ESOE ee Waxbarashada Gaarka ah ama qofka umagacaaban waa inuu udiraa sarkaal dhegeysi aan kala soocnoon lahayn oo si wareeg ah loo xulayo, iyo sida waafaqsan nidaamka ESOE.

3. Ugu yaraan, sarkaalka dhegeysiga waa:

    a. Inuusan ahayn shaqaale ushaqeeya USOE ama LEA ee lug ku leh waxbarasho ama daryeelka caruurta; iyo

    b. Inuusan ahayn shaqsi ama xirfadle wata dano gaar ah oo isqilaafaya ee ka soo horjeeda hadafka shaqsigaas;

    c. Waa inuu leehay aqoon, iyo karti uu garto, qodobada Qeybta B ee IDEA, xeerarka Federaalka iyo Gobolka ee quseeya Qeybta B ee IDEA, iyo tarjumaada sharci ee Qeybta B ee IDEA ee maxkamaddaha Federaalka iyo tan Gobolka;

    d. Waa inuu leeyahay aqoon iyo karti uu ku qabto dhegeysi sida waafaqsaneyd sharciga oo haboon, ee heerka ku dhaqanka sharciga; iyo

    e. Waa inuu leeyahay aqoon iyo karti uu go'aan ku gaaro oo uuna qoro sida waafaqsan sharciga oo haboon, ee heerka ku dhaqanka sharciga.

4. Shaqsi haddii kale uqalma inuu qabto dhegeysi oo shaqsiga ma noqon karo shaqaale hay'adda kaliya maxaa yeeley isaga ama iyada hay'adda ayaa mushar usiisa inuu ahaado sarkaalka dhegeysiga.

5. Qolada codsanaysa dacwo qaadid waafaqsan nidaamka dhegeysiga dacwadda inta ay socoto ma soo qaadan karaan arin aan horey lagu soo

qaadin cabashada dacwadda, aysan ka ahayn haddii dhinaca kale ay ku heshiiyaan mooyee.

6. Waalidka ama LEA waa in ay cabashada dacwadda ku soo codsadaan dhegeysi aan kala soocnaan inta lagu jiro laba sannadood laga bilaabo taariikhda waalidka ama LEA ay ogaatey ama la doonayay in ay ka warhayso waxyaabo ku saabsan tallaabada eedeynta oo bu'da u ah cabashada dacwadda ee la soo gudbiyay.

7. Mudada wixii ka reebban. Mudada lagu xusey Xeerka IV.M.6 ma quseeyo waalidka haddii waalidku laga horistaagay inay soo gudbiyo cabashada dacwadda habsami ah oo ay ku timid:

    a. Oo ay ugu wacnayd iyadoo si gaar ah aysan umatalin LEA oo la xalin la'haa dhibaatada keentay oo sal loogu dhigo cabashada dacwadda habsami usocodka; ama

    b. LEA ayaa la hartay macluumaad ku socday waalidka ee looga baahnaa in waalidka la siiyo.

8. USOE waa in ay ka warqabtaa dhammaan dhegeysiga habsami usocodka dacwaddaha si loo xaqiijiyo in la dhowro nidaamka la iska doonayo.

## IV.N. XUQUUQDA DHEGEYSIGA (HEARING RIGHTS (§300.512).

1. Qolo kasta dhegeysiga dacwadda ama rafcaanka waxay xaq u leedahay in:

    a. Wehel ay la socdaan oo la taliso qareen iyo shaqsiyaad aqoon gaar uleh ama u tababarn marka laga hadlayo dhibaatooyinka ardayda naafada;

    b. Ay soo bandhigtaan caddeyn iyo laga horkeeno, su'aallo weydiistaan, oo dalbada in marqaatiyaal la keenno;

    c. Mamnuuco wax caddeyn ah la horkeenno kulanka dhegeysiga dacwadda oo aan loo sheegin qolada kale ugu yaraan shan maalmood ee maalmaha ganacsiga ka hor inta aan dhegeysiga la qaba;

    d. Lala yimaado qoraal, ama haddii ay waalidiinta doortaan diiwaangelin afka laga yeero, elekroonig ah oo la horkeeno dhegeysiga, iyo

    e. La helo qoraal, ama haddii ay waaldiinta doortaan caddeynta xaqiiqadaha iyo go'aamada oo elektorooonig ah.

2. Ugu yaraan shan maalmood oo ah maalmaha ganacsiga ka hor inta aannan la qaban dhegeysiga, qolo kasta waa in ay shaacisaa dhammaan dhinac kasta qiimeyn kasta ee ay dhamaysitireen taariikhdaas iyo tallooyinkii ay soo jeediyeen oo ku saleysan qiimeynta ay bixisey oo ay qolada kale ay doonayso in ay dhegeysiga u isticmaasho.

3. Sarkaalka dhegeysiga ayaa waxaa dhici karta inuu diido in qol kasta ay soo bandhigto qiimeynta talosiinta quseeya oo aannan horey shan maalmood ka hor loo soo shaacbixin in dhegeysiga lagu soo bandhiggo iyadoo aan qolada kale ogolaansho aan laga haysan.

4. Waalidiinta lugta ku leh dhegeysiga waa in la siiyaa xuquuq ah:

   a. Inuu joogo ardayga dacwaddu khusayo;

   b. Shacabka in loo furo dhugunsiga; iyo

   c. In la haayo diiwangelinta dhegeysiga iyo cadeemooyinka dacwadda iyo go'aammada waalidiinta lagu siiyo iyaga oo aannan wax qarash ah ugu fadhin.

## IV.O. GO'AANNADA DHEGEYSIGA (HEARING DECISIONS) (§300.513).

1. Sarkaalka dhegeysiga go'aankiisa oo ah haddii ardayga uu heley FAPE iyo in kale waa in ay ku salaysnaataa

2. Arimaha quseeya eedka gefka la gaystey, sarkaalka dhegeysiga ayaa waxaa dhici karta inuu ogaado in ardayda uusan helin FAPE kaliya haddii nidaamka loo maray ahaa mid aan filnayn:

   a. Xuquuqda ardayga ee FAPE horistgaagay;

   b. Si aad ah u horistaagay fursaddaha waalidka ee ugu qeybqaadan la'haa hanaanka go'aan ka gaaridda ee quseeya qodobada FAPE ee ardayga waalidka; ama

   c. Sababay xayuubin ah manfaca waxbarashada.

3. Ma jirto qodob ku jira Xeerka IV.N.2 oo loo micnaynayo in laga saaro sarkaalka dhegeysiga in LEA ku amro in ay addeecaan shuruudaha nidaamka.

4. Waalidka wuxuu xaq u leeyahay inuu soo dirsado cabashada dacwadda hab-socodka oo gooni ah oo ka duwan arinka cabashada dacwadda horey usoo dirsaday.

5. USOE, ka dib marka la tirtiro macluumaad shaqsiga caddeynaya ee kasta, waa:

   a. In xaqiiqahan iyo go'aannada ka soo baxay cabashada dacwadda habsocodka waa in loo gudbiyaa Guddi Kooxda La tashiga ee Waxbarashada Gaarka ee Utah.

   b. In go'aannada iyo xaqiiqooyinka dadwaynaha loo bandhigaa.

## IV.P. GO'AANKA KAMA DAMBAYSKA (FINALITY OF DECISION) (§300.514).

Go'aanka ka soo baxa dhegeysiga la qabtay waa kama dambays, aysan ka ahayn haddii ay jirto qolo rafcaan dacwad madani ah uga qaadanaysa go'aanka dhegeysiga.

## IV.Q. NIDAAMYADA FULINTA GOBOLKA (§300.537 (STATE ENFORCEMENT MECHANISMS)

Ayadoo ay taasi jirto qeybaha fulinta sharciga oo heshiis qoraal ah la gaaro kaasoo ku timid dhexdhexaadin ama fadhiga xalinta, ma jirto wax horistaagayo in SEA ay isticmaasho nidaamyo kale oo doonayo inuu fuliyo heshiiskaas, haddii isticmaalka nidaamyadan aysan ahayn khasab oo aysan dib u dhigayn ama udiidayn qolo xaq u leh in ay raadsato heshiiis qoraal ah in lagu fuliyo maxkamadda Gobolka oo awood u leh sharciga ama maxkamadda degmada ee Mareykanka.

## IV.R. JADWALKA IYO FUDUDAYNTA DHEGEYSIYADA (§300.515) (TIMELINES AND CONVENIENCE OF HEARINGS).

1. USOE waa in ay xaqiijisaa in aysan ka yaraanin 45 maalmood ee maalmaha kalandaariyaha wixii ka dambeeya xalinga uu dhacayo ee 30 maalmood ee maalmaha kalandaariyaha ee mudada xalinta, ama waqtiga loo qabtay oo ay dhalisey qaabka qaraarka, (1) go'aan kama dambays lagu gaarey dhegeysiga, iyo (2) nuqdi ah go'aanka loo wada direy dhinacyada.

2. Sarkaalka dhegeysiga waxaa dhici karta inuu ogolaado in waqti gaar ah lagu daro haddii ay dhinacyadu soo codsadaan.

3. Dhegeysi kasta iyo dib eegid kasta ee quseeya dooda afka ah waa in la qabtaa waqti iyo goob si sahal ah u suurti gali karta waalidiinta iyo ardayga ay quseyso.

## IV.S. DACWAD MADANI (CIVIL ACTION) (§300.516).

1. Qolo kasta oo ka xumaata xaqiiqooyinka iyo go'aannada oo aannan la'hayn xuquuq rafcaan uu ku qaato, iyo qolo kasta oo ka xumaatay xaqiiqooyinka iyo go'aannada, wuxuu xaq u leeyahay inuu soo dirsado dacwad madani ah oo a xiriirta ogeysiis cabasho isagoo soo dalbanaya dhagaysi nidaam dacwad. Rafcaanka waxaa loo dirsan karaa maxmadda kasta oo Gobolka ku taala oo awood sharci u leh ama maxkamadda degmada ee Mareykanka iyadoon jirin wax dood ah laga keeni karo.

2. Dacwad madani waxaa loo gudbin karaa maxkamad Gobol ama Federaal midkood; haddii rafcaan loo dirsado maxkamad Gobol, rafcaanka waa in la soo dirsadaa 30 maalmood gudabood laga bilaabo taariikhda go'aanka dhegeysiga dacwadda. Maxmad Federaal ah waxaa dhici karto in waqtiga la mid yahay (UCA 53A-15-305(6)).

3. Dacwad kasta oo madani ah, maxkamadda waxay soo gaari doontaa diiwaangelinta dacwadda; dhicyada ay ka dhegeysan doonaan caddeymo dheeraad ah; iyo, go'aanka lagu saleeyay muhiimadda cadddeynta, in ay maxkamadda bixiso go'aan haboon.

4. Maxkamadda degmada ee Mareykanka waxay sharci uleedahay dacwaddaha la soo gaarsiiyo sida hoos timaada Habraaca Badbaadada ee Qeybta B ee IDEA iyadoon loo eegeyn caddada dooda ka taagan.

5. Ma jirto wax qeybtan ee reebeysa ama xadidaysa xuquuq, hanaan, iyo wax ku qoran Dastuurka, Xeerka Amerikaanka La'xaadka La' ee 1990, Tilte V ee ee Xeerka Baxnaanista ee 1973, ama sharciyada kale ee Federaalka kasoo ilaaliya xuquuqda ardayda naafada ah, aanan ka ahayn ka hor inta aan la soo gudbin dacwada madaniga ah oo hoos timaada sharciyadan lagu raadinayo nafis kaasoo sidoo kale la heli karo oo hoos timaada Habraaca Badbaadada ee Qeybta B ee IDEA, nidaamyada waa in ay dhammaadaan ilaa xadka sida looga baahan yahay tallaabada la hoos keenay Qebta 615 ee IDEA.

## IV.T. QARASHKA QAREENKA (ATTORNEYS' FEES) (§300.517).

1. Talaabo kasta ama nidaam kasta oo la hoos keena Habraaca Badbaadada ee Qeybta B ee IDEA, maxkamadda, go'aankeeda, waxaa dhici karta qarashka qareenka ay ku abaal-mariso sida iyadoo ay qeyb ka tahay qarashaadka:

   a. Kooxda guuleysata oo ah waalidka dhalay ardayda naafada ah;

   b. Kooxda guulaysata ee SEA ama LEA oo lidka ku ah qareenka waalidka ee cabashada soo gudbiyay ama talaabo kale ee xigay kaa soo ah mid si dheel-dheel ah, aan-macquul ahayn, ama wax aan aassaas la'ahayn, ama lid ku ah qareenka waalidka oo sii watay dacwaddii ka dib markii dacwo oogidii ay si cad ah u noqotey mid dheel-dheel ah, aan macquul ahayn, ama ama wax aan aassaas ah la'hayn; ama

   c. Kooxda guulaysata ee SEA ama LEA oo lidka ku ah qareenka waalidka, haddii waalidka codsado dhegeysi dacwad qaadid ama talaabo xiga la soo bandhigay oo aan ulajeedo aan habooneyn, sida kadeedis, oo sababtay daahitaan aan loo baahnayn, ama si iyada oo aan loo baahnayn hoos udhigta qarashka dacwada.

2. Miisaaniyadda hoos timaada Qeybta B ee IDEA lama isticmaali karo in lagu bixiyo qarashka qareenka ama qarashyada koox la xiriira talaabo kasta ama talaabo sharci ah kasta. Waxaa dhici karta in LEA ay isticmaasho miisaaniyadda hoos timaada Qeybta B ee IDEA ee ay ku qabanayso talaabo ama talaabo sharci oo hoos timaada Habraaca Badbaadada ee Qeybta B ee IDEA.

3. Maxkamadda oo qarash caqli gal ah oo isku si ahayn ku abaal marinaysa kuwa soo socda:

a. Qarashka lagu abaalmariyo waa inuu ku salaysnaadaa sicirka ka jira jaaliyadda ee talaabada ama talaabada sharciga ka soo ifbaxay ee nooca iyo tayada adeegyada la bixiyay.

b. Mi jirto gunno beeso ama dhoor ayaa la isticmaalee si liin hisaabo beesida abaal-marin ahaan lin biyaw.

c. Qarashka qareenka waxaa dhici karta in aan lagu abaalmarin, iyo qarashyada la xiriira waxaa dhici karta in aan dib loogu celin, talaabo kasta ama talaabo sharci kasta oo ah adeegyada la qabtay ee xigey waqtigii waalidka lala galay heshiiska maslaxada haddii:

(1) Qadimaada la sameeyey isla waqtiga lagu sheegay Xeerka 68 ee Xeerarka Federaalka ee Dacwadda Madaniga ah ama, goorta dib u fiirinta dacawada, waqti kasta oo ka badan 10 maalmood kahor intaanay dacwadu bilaabmin;

(2) Qadimaada toban maalmood laguma ogolaan; iyo

(3) Maxkamadda ama sarkaalka dhagaysiga maamulka ayaa ogaaday in kama manfaca ay waalidka(iinta) kama dambaystii ay heleen uusan ahayn mid ka wanaagsan maslaxadii waalidka(iinta) horey ay uheleen.

4. Waxaa dhici karta in qarashka qareenka ee la xiriira kulan kasta ee kooxda IEP aan lagu abaalmarin aan ka ahayn haddii qabashada kulanka la qabtay uu ku yimid talaabo sharci maalmul ama talaabo sharci, ama go'aanka Gobolka, dhexdhexaadin hoos timaada §300.506.

5. Fadhiga xalinta ma ahan in loo tixgeliyo qabashada kulanka la qabtay oo ku yimid maamulka dhegeysiga ama talaabada sharciga; ama dhegeysi maamul ama talaabo sharci oo ulajeedkiisu ahaa qarashka qareenka ee qeybtan.

6. Abaalmarinta qarashka qareenka iyo qarashyada la xiriira waxaa dhici karta in la siiyo waalidka oo ah kooxda guulaysatay oo ay ubadan tahay si sharci ah udiiday maslaxada loo soo jeediyay.

7. Maxkamadda hoos ayay udhigaysaa, sida waafaqsan, cadada qarashka qareenka ee lagu abaal mariyay, haddii maxkamadda ay ku amarto:

a. In waalidka(iinta), ama qareenka waalidka, uu muddada talaabada ama dacwadda socotay, sabab la’aan u daahiyay xalinta kama danbayska ah ee khilaafka;

b. Cadada qarashka qareenka ee lagu abaalmariyay si xad dhaaf ah uga badan yahay lacagta saacadda ee lagu bixiyo adeegyo la mid ah oo suurtogal ah oo udhigma xirfadda, sucmadda, iyo qibradda uu qareenka leeyahay;

c. Waqtiga la geliyay iyo adeegyada sharciga ee la bixiyey oo loo arko inay xaddhaaf yihiin marka loo eego nooca ficilka ama dacwadda; ama

d. Qareenka matalaya waalidka LEA ma siin macluumaad ku haboon ee ogeysiiska dalbaka hab-socodka sharciga oo suubun.

8. Xeerarka kore ee quseeya qarashka qareenka ma lagu dabaqi karo ficil kasta ama dacwad kasta haddii maxkamadda ay ogaato in LEA ay si suurtogal ahayn waqti ugu dartay in maslax kama dambays ah laga gaaro ficilka ama dacwadda ama ay jirtay gef lagu sameeyey Nidaamka Badbaadada ee Qeybta B ee IDEA.

## IV.U. XAALADDA ARDAYGA INTA AY DACWADDA SOCOTAY (STUDENT'S STATUS DURING PROCEEDINGS) (§300.518).

1. Inta ay socoto dacwad kasta ama dacwad sharci ah oo kasta ee quseeya codsiga dhagaysi nidaamka sharciga, aysan ka ahayn LEA iyo waalidka(iinta) dhalay ardayga ay isku raacaan haddii kale, ardayga lugta ku leh cabashada waa inuu ku sii jiraa barta uu/ama ay iminka wax ku barato.

2. Haddii cabashada ay ku lug leedahay arjiga hore ee iskuulka dadwaynaha, ardayga, iyada oo ogolaansho laga haysto waalidka(iinta), waa in la geeyaa iskuulka dadwaynaha ilaa iyo ay dacwadda ka dhammaanayso.

3. Haddii go'aanka sarkaalka dhegeysiga ee qabtay dhegeysiga dacwada habsocodka ee USOE uu ku raacsan yahay waalidka(iinta) in bedellaada meelaynta ay haboontahay, meeleyntaas waa in lala dhaqmaa sida heshiis dhexmaray LEA iyo waalidka(iinta).

## IV.V. WAALID KORINAYA ILMO AANU DHALIN (SURROGATE PARENTS) (§300.519).

1. LEA kasta waa in ay hubiyaan in xuquuqda ardayga la dhowro goorta:

   a. Aan waalidka la garanayn;

   b. LEA, ka dib marka ay dadaal suurtogal ah ugasho, aysan haleeli karin waalidka;

   c. Ardayga uu ku jiro maganta gobolka sida hoos timaada sharciga gobolkaas; ama

   d. Marka ilmahu yahay cidlaawe dhalinyar ah.

2. Waajibaadyada LEA waxaa ka mid ah in lagu qoro qof mata oo waalid unoqda. Tani waa in ay ka mid noqotaa hannaan lagu ogaanayo haddii ardayga uu ubaahan yahay waalid badela oo u noqoda waalidka ardayga mata.

3. Marka laga hadlayo ardayga maganta Gobolka ku jiro, waxaa dhici karta in garsooraha uu waalid kumeelgaar ah umagacaabo oo la socda kiiska ardayga, haddii qofka loo magacaabayo shuruudihii ka soo baxa.

4. Waxaa dhici karta in LEA ay waalid kumeel gaar ah udoorto sida hoos timaada sharciga Gobolka.

5. LEA waa in ay hubisaa in shaqsiga loo doortay inuu waalid unoqdo:

    a. Inuusan ahayn shaqaale ushaqeeya USOE ama LEA ee lug ku leh waxbarasho ama daryeelka ardayga;

    b. Aan lahayn dano shaqsi iyo kuwo mihnadeed oo khilaafaya danta ardayga uu isaga/iyada uu metelayo; iyo

    c. Aqoon iyo xirfad uleh taasoo hubanaysa matalaad in ku filan ee ardayga.

6. Haddii kale qof uqalma inuu noqdo waalid korsada waa inuusan ahayn shaqaale ushaqeeya LEA maxaa yeeley isaga ama iyada oo mushahar ka hela LEA kaasoo ay waalidka ugu adeegga.

7. Marka laga hadlayo ardayga aannan lala socon oo ah dhalinyaro cidlaawe, qof lala xiriirayo haddii ay xaalad deg deg ah dhacaan sida shaqaale haboon oo guriga jooga, guriga kumeel gaarka ah, barnaamijyada isku filnaansho kunoolaashaha, iyo barnaamijyada ololaha wadooyinka oo si ku meel gaar ahaan loo magacaabo inuu waalid u dhoqdo ilaa laga helayo waalid korsada oo loo magacaabo oo u dhoqda oo ka soo baxa dhammaan shuruudaha.

8. Waalidka korsanaya wuxuu ardayga umatali karaa dhamaan arrimaha quseeya ardayga ee aqoonsiga, qiimeynta, iyo meeleynta waxbarashada ee ardayga, iyo qodobada FAPE ee ardayga.

9. USOE waa in ay gashaa dadaal suurtogal ah si loo hubiyo waajibaadka waalidka kumeel gaarka ah in aysan ka badnaan 30 maalmood ka dib marka LEA ay go'aamiso in ardayga uu ubaahan yahay waalid ku meelgaar ah.

## IV.W. KA WAREEJINTA XUQUUQDA WAALIDNIMADA MARKA LA GAARO DA'DA QAANGAARKA (TRANSFER OF PARENTAL RIGHTS AT AGE OF MAJORITY) (§300.520).

1. USOE waxay ubaahan tahay goorta ardayga naafada ah uu gaaro da'da qaangaarka sida hoos timaada sharciga Gobolka (18 jir) kaasoo ay quseyso dhammaan ardayda oo dhan (aannan ka ahayn ardayda naafada ah oo la go'aamiyay in ay laxaad la'hayn sida hoos timaada sharciga Gobolka):

    a. LEA waa in ay bixisaa ogeysiis kale ee ay ubaahan tahay Qeybta B ee IDEA ee shaqsiga iyo waalidka(iinta) labadaba; iyo

b. Dhammaan xuquuqaha kale ee waalidiinta uu siinayo sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA ardayga siinayo;

c. Dhammaan xuquuqaha la siiyay waalidka sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA ardayga ee uu siinayo ardayga ku xiran xabisan halka dhalinta yar ama qaangaarka, xabsiyadda asluubta ee Gobolka ama maxalliga; iyo

d. Goor kasta gobolka uu xuquuq wareejiyo, LEA waa in ay ku wargelisaa shaqsiga iyo waalidiinta xuquuqda ku wareejinta.

## IV.X. ASTURAADDA (CONFIDENTIALITY) (§300.610).

USOE iyo LEA waxay qaadayaan talaabo ku haboon si ay uhubiyaan ilaalinta iyo asturaadda macluumaad shaqsi ahaan sheegaya, xog, iyo diiwaangelin la ururiyay ama ay hayso USOE iyo LEA sida waafaqsan Qeybta B ee IDEA.

1. Sharaxaadaha (§300.611).

   Sida loo isticmaalay Habraaca Badbaadada:

   a. *Baabiinaya* micnaheedu waa baabi’in ama ka saarid macluumaad shaqsi oo ah wax caddeynaya xogta si markaa macluumaadka aysan u noqon wax shaqsiga caddeynaya.

   b. *Diiwangelinta Waxbarashada* micnaheedu waa nooca diiwangelinta ee lagu sheegey oo hoos timaada sharaxaada "diiwaagnelinta waxbarshada" ee 34 CFR 99, hirgelinta xeerarka Xeerka Xuquuqda iyo Sirta Waxbarashada Qoyska ee 1974, 20 USC 1232g (FERPA).

   c. *Hay'adda ka qeybqaadanaya* macnaheedu waxaa weeyi hay’ad ama mac-had kasta oo ururiya, haya, ama isticmaala macluumaad la shaqsiyan loo aqoonsan karo, ama laga helo macluumaad iyadoo la raacayo qaybta B ee IDEA.

2. Ogeysiis ku socda waalidiinta (§300.612).

   a. USOE iyo LEA waa in ay siiyaan ogeysiis ku filan oo ay si buuxda waalidiinta ku wargelinayaan, oo ay ku jirto:

      (1) Sifada xadka in ogeysiiska lagu bixiyo luqadda dhaladka ah ee jaaliyaddaha kale duwan oo Gobolka deggan;

      (2) Sifada macluumaadka sheegi kara aqoonsiga ardayga in la dhowro, noocyada macluumaad ee la raadinayo, qaabka ay USOE udoonayso in ay u isticmaasho ururinteeda macluumaadka (oo uu ku jiro ilaha uu ka yimid cida loo ururinayo), iyo isticmaalka loo sameeyey macluumaadka;

(3) Shuruucda iyo hanaanka oo kooban ee LEA laga doonayo in ay raacaan kaasoo ku quseeya xareynta, daah ka qaadista in la siiyo qolo seddexaad, sii haynta, iyo baabi’inta macluumaad shaqsiga caddeynaya; iyo

(4) Sifada dhammaan xuquuqda waalidiinta iyo ardayda ee quseeya macluumaadkan, oo ay ku jiraan xuquuqda hoos timaada FERPA.

3. Wax caddeymo oo sheegaya shaqsiga, goobta, ama howlgalka qiimeynta, ogeysiiska waa in la daabacaa ama lagu shaaciyaa jaraa'idka ama warbaahin kale, ama labadaba, kaasoo si baahsan waalidiinta ku wargelin kara ilaa iyo Gobolka iyo howlaha LEA.

4. Helitaanka xuquuqda (Access rights) (§300.613).

a. LEA kasta waa in waalidiinta ay ogolaataa inay baaraan oo ay muraajico ku sameeyaan diiwaangelin waxbarasho kasta ee la xiriira ardaydooda ee ay ururiyeen, ay hayaan, ama ay LEA isticmaashey. LEA waa in ay fuliyaan codsiga iyagoon daahitaan aan daruuri ahayn jirin iyo ka hor kulan kasta oo IEP ku saabsan, ama dhegeysi, ama fadhi xal, oo ma ahan in ay ka badnaato 45 maalmood ka dib marka codsiga la sameeyo.

b. Xuquuq aad ku baarayso oo aad muraajico ugu samaynayso diiwaangelinta waxbarashada ee hoos timaada qeybtan waxaa ka mid ah:

(1) Xuquuq loogu jawaabayo LEA in si caqli gal ah ay usoo dalbato sharaxaad iyo tarjumaan ah diiwaangelinta;

(2) Xuquuq loogu soo dalbado in LEA ay bixiyo nuqdooyinka diiwaangelinta ay ku jirto ee macluumaad haddii lagu guul dareysto in la fidiyo nuqdooyinkan ay si dhaqan gal uga hortageyso in waalidiinta ay isticmaalaan xuquuqda ah in ay baaraan oo ay dib muraajico ugu sameeyaa diiwaangelinta; iyo

(3) Xuquuda waalidka oo ku keensado qof matala oo u baara oo muraajico diiwaangelinta ugu sameeyo.

c. LEA waxay uqaadan kartaa in waalidka(iinta) ay awood uleeyihiin in ay diiwaangelinta baaraan oo ay muraajico ku sameeyaan diiwaangelinta quseysa ardaygiisa/eeda aysan ka ahayn in LEA lagula taliyay in waalidka(iinta) aysan amar u lahayn sida hoos timaada sharciga Gobolka ee quseeya arrimaha awoodda ee sida mas'uul ka ahaanshaha, kala duwanaanta, iyo furitaanka.

5. Helitaanka diiwangelinta (Record of access) (§300.614).

   LEA kasta waa in ay xifdisaa diiwaangelinta dhinacyada iyada oo la siinayo in ay hesho diiwaangelinta macluumaadka la ururiyay, la hayo, ama la isticmaalay Qeybta B ee IDEA (aysan ka ahayn helitaanka waalidiinta iyo shaqaalaha amarka u haysta ee LEA), oo ay ku jirto magaca qoloda, taariikhda helista la siiyay, iyo ulajeedada loo isticmaalayo ee qolada amarka loo siiyay in ay diiwaangelinta ay isticmaalaan.

6. Diiwaangelinnada in ka badan hal arday (§300.615).

   Haddii diiwaangelin waxbarasho kasta oo ay ku jirto macluumaad in ka badan hal arday, waalidiinta dhalay ardaydan waxay xaq u leeyihiin in ay baaraan oo ay muraajico ku sameeyeen macluumaadka kaliya ee la xiriira ardaygooda ama in lagu wargeliyo macluumaad kasta.

7. Liiska noocyada iyo meelaha macluumaadka (§300.616).

   Marka la soo dalbado, LEA waa in ay waalidiinta siisaa liistiga ah noocyada iyo goobaha diiwaangelinta waxbarashada laga ururiyay, lagu hayo, ama ay LEA u isticmaasho.

8. Ujrooynka (§300.617).

   a. USOE iyo LEA kasta waxaa dhici karta in ay nuqdooyinka diiwaangelinta ee loo sameynayo waalidiinta ay ku soo dalacdo sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA haddii ujrada aysan si dhaqan gal ah uga hortagayn waalidiinta in ay isticmaalaan xuquuqdooda ah in ay ku baaraan oo ay diiwaangelinta muraajico ku sameeyaan.

   b. USOE iyo LEA baaritaanka ama helitaanka macluumaadka ujro kuma soo dalaci karaan sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA.

9. Bedelaadda diiwaangelinta ku timaada codsiga waalidka (§300.618).

   a. Waalidka rumeysan in macluumadka ku qoran diiwaangelinta waxbarashada ee la ururiyay, la hayo, ama la isticmaalay sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA aysan sax ahayn ama marin-habaabin ah ama gef ku tahay waxa qarsoodiga u ah ama xuquuqda kale ee ardayga waxaa dhici karta in LEA ay codsato in ay macluumaadka sii hayso si macluumaadka loo badelo.

   b. LEA waa in ay go'aamisaa haddii macluumaadka wax laga badeli la'haa sida waafaqsan codsiga ilaa iyo in suurtogal ah ee mudo go'an laga bilaabo marka codsiga la helo.

c. Haddii LEA ay go'aamiso in ay diido in macluumaadka wax laga badelo sida waafaqsan codsiga, waa in waalidka ay ku wargeliyaan diidmada oo ay waalidka(iinta) kula taliyaan xuquuqda marka dhegeysiga arrinkan.

10. Fursadda dhegeysiga (§300.619).

LEA waa in ay, marka la soo dalbado, ay fursad u siisaa marka dhegeysiga lagula loolamo macluumaadka diiwaangelinta waxbarasho si loo xaqiijiyo in aysan ahayn sax, marin-habaabiya, ama haddii kale gef ku ah waxa qarsoodiga ah ama xuquuqda kale ee ardayga.

11. Natiijada dhageysiga (Result of hearing)(§300.620).

a. Haddii, natiijida darteed, waqtiga dhegeysiga, LEA ay go'aamiso in macluumaadka aan sax ahayn, marin-habaabin ah ama haddii kale gef ku ah waxa qarsoodiga ah ama xuquuqda ardayga ee kale, waa in macluumaadka lagu bedelaa sida waafaqsan oo waalidka(iinta) si qoraal ah lagu wargeliyaa.

b. Haddii, dhegeysiga awgeed, LEA go'aamiso in macluumaadka uusan sax ahayn, marin-habaabin leh, ama haddii kale gef ku ah waxa qarsoodiga u ah ama xuquuqda kale ee ardayga, waa in ay waalidka(iinta) ku wargeliyaan xuquuqda in diiwaangelinta la geliyo oo laga hayo qoraalka ardayga ee looga faaloonayo macluumaadka ama sabab kasta loo gun-dhigto in lagu raaciwaayo go'aanka LEA.

c. Sharaxaad kasta oo la geliyo diiwaangelinta ardayga ee qeybtan hoos timaada:

(1) In lagu hayo LEA sida ayadoo qeyb ka ah diiwaangelinta ardayga ilaa iyo diiwaangelinta ama qeybta la sheegtay oo ay LEA hayso; iyo

(2) Haddii diiwaangelinta ardayga ama qeybta la sheegtay ay LEA qolo kasta ushaac bixiso, sharaxaadda waa in sidoo kale loo sheegaa qolada kale.

12. Hanaanka Dhageysiga (Hearing procedures) (§300.621).

Dhegeysi loolan ku ah diiwaangelinta waxbarashada waa in la qabtaa sida waafaqsan nidaamka hoos yimaada 34 CFR 99.22 sida hoos ku qeexan. Ugu yaraan, nidaamka dhegeysiga ee LEA waa inuu waafaqsanaadaa shuruudaha soo socda:

a. Dhegeysiga waa in lagu qabtaa waqti macquul oo suurtogal ah ka dib marka LEA ay hesho codsiga, iyo waalidka(iinta) dhalay ardayga ama ardayga 18 jirka ah ama ka weyn ogeysiiska ku helaa taariikhda, goobta, iyo saacadda la qabanayo dhegeysiga ay waqti hore oo suurtogal ah ku helaan.

b. Dhegeysiga waxaa dhici karta in ay qabtaan qolo kasta, oo ay ku jiraan sarkaal LEA ah, oo aan dano toos ah ku la'hayn natiijada dhegeysiga ka soo baxda.

c. Waalidka(iinta) dhalay ardayga ama ardayga 18 jirka ah ama ka wayn waa la siiyaa fursad buuxda oo caddaalad ah oo ku soo bandhigo caddeymaha quseeya arrinka soo ifbaxay oo waxaa caawin kara ama matali kara shaqsiyaad dalabkiisa/ooda ah isaga/iyada oo qarashka iska bixinaya, oo uu ku jiro qareen.

d. LEA waa in ay go'aankeeda gaartaa si qoraal ah mudo macluumaal ah ku gaartaa ka dib marka la soo gabagabeeyo dhegeysiga.

e. Go'aanka LEA waa inuu ku saleysnaadaa oo kaliya caddeymaha lagu soo bandhigo dhegeysiga, oo waa inuu ku jiraa caddeymaha iyo sababababa go'aanka oo kooban.

13. Ogolaansho (Consent) (§300.622).

a. Aannan ka ahayn wixii lagu shaaciyay ee ka soo baxay ee la soo xigtay iyo talaabada fulinta sharciyada iyo mas'uuliyiinta sharciga**,** kaasoo ogolaanshaha waalidka aannan loo baahnayn sida waafaqsan 34 CFR 99, ogolaanshaha waalidka waa in la helaa ka hor inta aan macluumaadka shaqsi ahaan caddeynaya:

(1) Aan shaacin qof kale oo aan ka ahayn sarkaalada hay'addaha ka soo qeybqaatay ee ururiya ama isticmaala macluumaadka sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA, ama

(2) Ee loo isticmaalo ulajeed kale oo aan ka ahayn kulan buuxiya Qeybta B ee IDEA.

b. Waxaa dhici karta in LEA aysan macluumaadka ku jira diiwaangelinta waxbarashada siin hay'addaha ka qeybqaata iyadoon waalidka ogolaansho laga hayn aannan ka ahayn haddii ay ku amarto sida waafaqsan 34 CFR 99.31 iyo 99.34 (FERPA):

(1) Xeerka 34 CFR 99.31 LEA wuxuu u fasaxayaa inay shaaciso macluumaadka shaqsi caddeynaya ee ku qoran diiwaangelinta waxbarashada ardayda iyadoon ogolaansho qoraal ah ka hayn waalidka(iinta) dhalay ardayga ama ardayga 18 jira ah ama ka weyn, haddii shaacbinta ay:

(a) Ku socoto saraakiisha iskuullada kale, oo ay ku jiraan maclimiinta LEA ku jira oo ay LEA u go'aamisay in ay dano waxbarasho la aqoonsan karo u hayaan.

(b) Ku socota saraakiil kale oo ka socota iskuul ama iskuul kale halkaasoo ardayga u doonayo ama ku rajo weynyahay inuu iskuqoro, waxay ku xiran tahay shuruudaha ku qoran ee uu dhiggo 34 CFR 99.34 ee hoose.

(2) Xeerka 34 CFR 99.34 wuxuu LEA ka doonayaa in ay wareejiso diiwaangelinta aradyga iyada oo loo hiigsanyo 34 CFR 99.34 ee kor waa in ay u galaan dadaal suurtogal ah oo ay waalidka dhalay ardayga ama ardayga 18 jirka ah ama ka weyn ay ku wargelinayaan ku wareejinta diiwaangelinta cinwaanka ugu dambeeyey ee waalidkaama ardayga 18 jirka ah ama ka weyn ee laga hayo, aysan ka ahayn haddii LEA aysan ahayn in ay bixiyaan ogeysiis dheeraad ah oo ku saabsan ku wareejinta diiwaangelinta goorta:

(a) U wareejinta ay bilaabeen waalidka(iinta) ama ardayga 18 jir ah ama ka weyn ee LEA u dirita.

(b) LEA waxaa ka mid ah ogeysiiska sanadlaha ah ee Habraaca Badbaadada, oo ay tahay sharciga LEA in diiwaangelinta waxbarashada loo diro iskuulka soo codsada ee iskuulka ardayga uu doonayo inuu isku qoro.

c. LEA ay hesho macluumaadka shaqsiga cadeeya oo ay ka hesho hay'adda waxbarashada ee ka kale ama iskuul waxaa dhici kara shaac bixin dheeraad oo ah in LEA ay bixiso iyadoon hayn ogolaansho qoraal oo dheeraad ah oo ka timaada waalidka(iinta) ama ardayga 18 jir ama ka weyn haddii xaaladdaha 34 CFR 99.31 iyo 99.34 ee kor lagu soo xusey la soo buuxiyo, oo haddii hay'adda waxbarashada ku wargelinayso qolada shaacbixinta loo sameynayo ee shuruudahan la xiira.

d. Haddii waalidka(iinta) oo uu diido ogolaansho ah in la bixiyo macluumaad shaqsiga caddeynaha oo la siinayo qolo seddexaad, markaa qolodaas waxaa dhici karta in ay sii wado sida uu qaanuunka uu qabo dadaalka in la helo macluumaadka la doonayo.

**Xuasuusow:** Sida lagu amray 34 CFR 99.31 (FERPA), LEA ga Utah waxaa ku jira ogeysiiska Habraaca Badbaadada ee sanadlaha in ay taasi tahay sharcigooda in ay siidiraan diiwaangelinta waxbarashada ee ardayga naafada ah iyadoon ogolaansho laga hayn waaldiinta ama ogeysiis sarkaal ka socoda iskuul kale ama iskuulka degmada ee uu ardayga raadinyo ama qorshaynayo inuu isku qoro.

14. Ilaalin (Safeguards) (§300.623).

a. LEA kasta waa in ay dhowrtaa sirta macluumaadka shaqsiga u gaarka ah ee la ururiyay, u kaydsan, la shaaciyay, iyo marka la baabiinayo.

b. Hal mas’uul oo ka tirsan iskuulka degmada waa in mas’uuliyaddaas uu qaado taasoo ah in hubiyo macluumaadkaas shaqsiga caddeeya.

c. Dhammaan dadka ururiya ama isticmaalaya macluumaadka shaqsiga cadeeya waa in la siiyaa tababar ama tilmaan ku saabsan sharciyada Gobolka iyo hanaanka ku saabsan arimaha sirta ah ee hoos yimaada qeybtan iyo 34 CFR 99.

d. LEA kasta waa in ay hayaan, ardayda ay wax baraan, magacayada iminka ku qoran iyo meelaha shaqaalaha LEA ay kakala shaqeeyaan oo ay dhici karto in ay heli karaan macluumaadka shaqsiga caddeeya ee ardayga naafada ah ku saabsan.

15. Baabi'inta Macluumaadka (Destruction of information) (§300.624).

a. LEA waa in ay ku wargelisaa waalidka(iinta) ama ardayga 18 jirka ah ama ka weyn goorta macluumaadka shaqsiga caddeynaya la ururiyo, la hayo, ama la isticmaalo sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA aan intaa in ka badan loo baahnayn si ardayga loo siiyo adeegyada waxbarashada.

b. Macluumaadka aannan intaa in ka badan loo baahnayn waa in la baabi'iyaa goorta ay waalidiinta ama ardayga 18 jirka ah ama ka weyn soo dalbadaan. Si kastaba ha ahaatee, degmadu ama hay’addu waa inay haysaa diiwaan rasmi ah oo ku qoran magaca ardayga, ciwaanka, lambarka tilifoonka, fasalka uu/ay dhigato, habsanka, xiisadaha la qaatay, heerka darajada la dhameeyay iyo sanadka la dhameeyay ee bilaa xuduudka ah

c. Diiwaangelinta ardayga ee kasta waxaa loo qaadan karaa "inaanan loo baahnayn in adeegyo waxbarasho lagu bixiyo" oo seddex sanno ka dib ayaa la baabi'in karaa ka dib marka ardayga uu qalinjebiyo ama seddex sanno ka dib marka ardayga uu 22 jirsado.

16. Xuquuqda Ardayga (Students’ rights) (§300.625).

a. Xuquuqda waxa qarsoodiga u ah ee waalidka(iinta) ardayga ayaa lagu wareejinta doonaa mar haddii ardayga 18 jir gaaro, haddii ardayga maxkamadda ku dhawaaqin inuu yahay qof naafo ah.

b. Sida hoos timaada xeerarka FERPA ee 34 CFR 99.5(a), xuquuqda waalidka ee quseysa diiwaangelinta waxbarashada ardayga ayaa lagu warajeeniyaa mar haddii ardayga 18 jirsado.

c. Maxaa yeeley xuquuqda la uu siiyay sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA ardayga ayaa lagu wareejinayaa mar haddii ardayga uu 18 jirsado, xuquuqda quseysa diiwaangelinta waxbarashada ayaa sidoo kale ardayga lagu wareejinayaa. Hase-yeeshee, LEA waa in ay bixisaa

ogeysiis kasta ee uu aaga baahan yahay sida hoos timaada Qodobka 615 ee Qeybta B ee IDEA ee ardayga iyo waalidka(iinta).

17. Fulin (Enforcement) (§300.626).

    Shuruudaha asturaada sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA oo dib loo eegay oona la ansaxiyay sida hoos timaada hanaanka xaq u yeelashada ee LEA.

18. Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka waxay isticmaalaan macluumaad shaqsiga caddeynaya (§300.627).

    Haddii Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka ama wakiillada mas'uulka u ah waxay ururiyaan macluumaad shaqsiga caddeynaya oo kasta ee quseeya ardayda naafada ah kaasoo oo aan quseyn Xeerka Asturaada ee 1974, 5 USC 552a, Xog-hayaha Waxbarashada (Xog-haye ayaa halkan loogu yeerayaa) wuxuu ku dabaqayaa qodobka sharciga Federaalka, iyo xeerarka la fulinayo qeybahan 34 CFR 5b.

# V. HANAANKA AADAABTA. (§300.530)

## V.A. HANAANKA AADAABTA EE ARDAYDA NAAFADA AH (DISCIPLINE PROCEDURES FOR STUDENTS WITH DISABILITIES)

Isku si ah shuruudaha Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarkan, LEA kasta waa in ay dhidibada utaagaan, ay wadaan, oo hirgeliyaan Nidaamka Badbaadada ee ardayda naafada ah iyo waalidiintooda.

## V.B. AWOODDA SHAQAALAHA ISKUULKA (AUTHORITY OF SCHOOL PERSONNEL).

1. Shaqaalaha iskuulka waxaa dhici karta in ay tixgeliyaan marxaladdo gaar ah oo kiis-ilaa-kiis ku salaysan goorta la go'aaminayo bedellaada meelaynta, ee isku si ah shuruudaha kale ee qeybtan, waa mid ku haboon ardayga naafada ah ee gef ka gala xeerka aqlaaqda ardayga.

2. Shaqaalaha iskuulka waxaa dhici karta in ay aradyga naafada ah ee gef ka gala xeerka aqlaaqda ardayga inta uu ku jiro meeleynta iminka ee ku haboon ee goob bedel waxbarasho kumeelgaar ah, goob kale, ama la ceyriyo, in aan ka badnayn toban maalmood ee maalmaha iskuulka ee isku xigxigga (ilaa iyo xadka kuwa ka bedellan ee lagu dabaqo ardayga aan naafada ahayn), iyo ka saarid dheeraad ah in aan ka badnayn toban maalmood ee maalmaha iskuulka ee isku xigxigga ee isla sanad dugsiyeedka ee dhacdooyin kale oo dhaqan fool-xun, mar haddii ka saaristan aysan udhigmin bedellaada meelaynta.

3. Ka dib marka ardayga naafada ah laga soo saaro meelaynta uu isaga/iyada ay imanka ku jiraan in ka badan toban maalmood ee maalmaha isla sanad dugsiyeedka, inta lagu jiro maalmo isku xigxigga ee ka soo saarista LEA waa in ay fidisaa adeegyada ilaa iyo xadka looga baahan yahay.

4. Marka si edbin ahna looga bedello meeleynta oo in ka badan toban maalmood ee maalmaha isku xigxigga, haddii aqlaaqda soo ifbixisay gefka xeerka iskuulka la go'aamiyo ay tahay mid ku timid naafada ardayga, shaqaalaha iskuulka waxay ku dabaqi karaan nidaamka quseeya ee edbinta ardayda naafada ah ee isku si ah iyo isla waqti mar haddii nidaamka lagu dabaqayo ardayda aan naafada ahayn, aysan ka ahayn toban maalmood ka dib marka ardayga loo bedello meeleynta, LEA waa in ay ardayga adeegyo ufidisaa.

## V.C. ADEEGYO (SERVICES).

1. Ardayga naafada ah ee laga saarey meeleynt iminka waa in:

    a. Sii wadaa helitaanka adeegyada waxbarasho si uu ardayga u sii wado kaqaybgalka manhajka waxbarashada guud, inkasta ay tahay meel kale, iyo horumarintiisa gaadhitaanka himilada u dhigan barnaamijkiisa waxbarashada ee ku qoran IEP ga ardayga; iyo

b. Sida haboon, ardaygu waa inuu helaa qiimaynta waxqabadka dabeecadda iyo adeegyada dhexgalka aadaabta iyo wax baddellaadda ee loogu talagalay in ay wajahdo dabeecadda

2. Adeegyada waxaa dhici karta in loo fidiyo goob bedel waxbarasho kumeelgaar ah.

3. LEA waxa kaliya looga baahan yahay in ay fidiso adeegyo inta lagu jiro mudada ka saaritaanka ardayga naafada ah ee laga saaray meeleynta uu/ay iminka ku jirto ilaa iyo toban maalmood ee maalmaha iskuulka ama in ka yar sanad dugsiyeedkaas, haddii ay adeegyo u fidinayso ardayga aan naafada ah kaasoo arimo sidoo kale looga saaray.

4. Ka dib marka laga saaro ardayga naafada ah meelaynta uu/ay iminka ku jirto ilaa iyo toban maalmood ee maalmaha iskuulka isla sanad dugsiyeedka, haddii ka saarista iminka aysan ka badnayn toban maalmood ee maalmaha iskuulka ee isku xigxigga oo aysan ahayn bedellaada meelaynta, shaqaalaha iskuulka, isaga oo ugu yaraan la tashanaya mid ka mid ah macalimiinta ardayga, go'aaminayaa ilaa iyo xadka adeegyada loo baahan yahay, si markaa si ardayga karti loogu siiyo inuu sii wato ka qeybgalka manhaj guud ee waxbarasho, in kastoo meel kale, iyo horumarka ku aadan inuu ka soo baxo himilooyinka ku qoran IEP ga ardayga.

5. Haddii ka saarista ay tahay bedellaada meelaynta, kooxda IEP ga ardayga ayaa go'aaminaya adeegyada ku haboon ee loo fidinayo inta uu maqan yahay.

## V.D. BEDELLAADA MEELAYNTA OO UGA SAARIS EDBIN AWGEED (CHANGE OF PLACEMENT DUE TO DISCIPLINARY REMOVALS) (§300.536).

1. Ulajeedka ka saarista ardayga naafada ah oo looga saarayo meeleynta waxbarashada ee iminka ku jira, bedellaada meelaynta ayaa dhacaya haddii:

   a. Kasaaritaan ka badan 10 maalmood oo ah maalmaha iskuulka oo isku xigxigga isla sannad dugsiyeed ah, ama

   b. Ardayga oo helay ka-saaritaano xiriirsan taas oo muujinaysa taxane:

      (1) Waayo taxanaha ka-saaritaan ayaa waxay isku noqon karaan in ka badan 10 maalmood ee maalaha dugs ee sannad dugsiyeedkii;

      (2) Waayo aqlaaqda ardayga ayaa ah mid aad ugu badan oo u eg waxyaabo uu horey usameeyey ee dhalisay in dhowr jeer looga saaro; iyo

      (3) Waayo waxyaabaha ay ka midka yihiin muddada ka-saaritaan kasta, isugaynta waqtiga ardayga laga saaray, iyo isudhawaanshaha ka-saaritaanada ee midba mida kale.

2. LEA ayaa kiis-ka-kiis u go'aaminaysa kaasoo lagu saleynayo haddii ka saarista ay taxane tahay oo udhigma bedellaada meelaynta. Go'aamintan waxaa lagu dabaqayaa in dib loo eego iyada oo loo marayo habsami u socodka sharci iyo dacwad maxkamad.

## V.E. SOO-DAAHIRISTA GO'AANKA (MANIFESTATION DETERMINATION) (§300.530)

1. Toban maalmood ee maalmaha iskuulka dhexdeed go'aan kasta ee lagu badelayo meeleynta ardayga naafada ah maxaa yeeley gef kasta oo xeerka aqlaaqda ardayga, LEA, waalidka, iyo xubnayaasha ay quseyso ee kooxda IEP ga ardayga (sida ay go'aamiyo waalidka iyo LEA) waa in ay dib u eegaan dhammaan macluumaadka quseeya ee ku dhex jira feelka ardayga, oo uu ku jiro IEP ga ardayga, macalin kasta wixii uu arkay, iyo macluumaad kasta ee quseeya ee uu fidiyay waalidka si ay u go'aamiyaan:

   a. Haddii aqlaaqda la isweydiinayo ku timid, ama xiriir toos ah iyo wax-ku-ool la leh, ardayga naafada ah; ama

   b. Haddii aqlaaqda la isweydiinayo ay tahay mid toos ah ugu wacan ku guuldaraysiga LEA oo ah in ay hirgeliso oo ay ku darto IEP.

2. Aqlaaqada waa in la go'aamiyaa in ay ku timid naafada ardayga haddii LEA, waalidka, iyo xubnaha quseeya kooxda IEP ee ardayga in ficilka la sameeyey ay sababtay ama ay si toos ah xiriiri la leedahay ku guuldarysiga LEA in ay hirgeliso oo ku darto IEP.

3. Haddii LEA, waalidka, iyo xubnaha quseeya ee kooxda IEP ga ardayga ay go'aaminayso in falka la sameey oo xiriir toos ah la leeyahay ku guuldaraysiga LEA in ay hirgeliso oo ku darto IEP, LEA waa in ay tallaabo deg degga ah qaadaa si loo howlgeliyo wixii maqan.

4. Haddii LEA, waalidka(iinta), iyo xubanaha quseeya ee kooxda IEP ay go'aaminayso in falka la sameeyey ay ugu wacan tahay naafada ardayga, kooxda IEP waa in:

   a. Midkood:

      (1) Ay qabataa qiimaynta waxqabadka aqlaaqda (FUBA), aysan ka ahayn haddii ay LEA qabatay qiimeynta waxqabadka dabeecadda ka hor inta falka keenay medelaada meeleynta inta ay qabsoomin, oo lagu hirgeliyay qorshaha dhexgalka aqlaaqda (BIP) ee ardayga; ama

      (2) Haddii qorshaha dhexgalka aqlaaqda horey loo sameeyey, oo dib u eegey qorshaha dhexgalka aqlaaqda, oo la bedello, sida daruuriga ah, si loo wajaho aqlaaqda; iyo

b. Aysan ka ahayn falka la sameeyey ee hoos timaada marxaladdaha gaarka ah ee ku qoran Xeerka V.E.5, ardayga ku celi meelaynta ee barta ardayga laga soo saaray, aysan ka ahayn waalidka iyo LEA ay isku raacaan in bedellaada meelaynta la sameeyo taasoo qeyb ka ah dib u habeynta qorshaha dhexgalka aqlaaqda.

5. Marxaladdaha gaarka ah.

Shaqaalaha iskuulka waxaa dhici kara in laga saaro ardayda loo bedello goob waxbarasho oo kumeelgaar ah in aan ka badnayn 45 maalmood ee maalmaha iskuulka iyadoon la eegeyn haddii aqlaaqda la go'aamiyay in ay tahay wax ugu wacan naafada ardayga, haddii ardayga:

a. Iskuulka uqaato ama ku haysto hub, meel dugsigu k amid ah, ama geeyo ama ciyaaraha iskuulka lagu qabto sida hoos timaada awoodda sharci ee LEA;

b. Si ulukac ah u haysto ama isticmaalo daroogo, ama iibiyo ama la wareego iibinta muqaadaraadka, inta lagu jiro iskuulka, goobaha iskuulka, ama howlaha iskuulka sida hoos timaada awoodda sharci ee LEA, ama

c. Sababay dhaawac jir oo halis ah oo qof kale inta uu joogo iskuulka, goobaha iskuulka, ama howlaha uu iskuulka soo abaabulo sida hoos timaada sharciga LEA.

d. Sharaxaadaha.

Ulajeedka qeybtan, sharaxaadyadan soo socda ayaa lagu dabaqayaa:

(1) *Muqaadaraadka* micnaheedu waa sida daroogada ama walxaha kale oo xigmaysan oo aan la qeybin karin iyadoon takhtar soo qorin, sida ku qoran jadwalka I, II, III, IV, ama V ee qeybta 202(c) ee Xeerka Muqaadaraadka Xigmaysan (21USC 812(c)).

(2) *Daroogo sharci daro ah* micnaheedu darooga la xigmeysan laakin oo kuma jirto daroogo la xigmeeyey, la haysto, ama la isticmaalay iyada oo uu kormeerayo qof haysta shati xifadle daryeel caafimaad ama mid si sharci ah u haysta ama isticmaalay sida hoos timaada Xeerka Walxaha la Xigmeeyay ama hoos yimaada qodob kale oo kasta oo ka mid qodobada sharciga Federaalka (21 USC 812).

(3) *Dhaawac jir oo halis ah* micnaheedu waa dhaawac jir oo la socda halis dhimasho ku dhowaad, xanuun jir oo daran, muqaalka qofka badalay, ama keentey in xubnaha jirka waxqabka joojiyo ama go', ama unug, ama maskaxda (18 USC 1365). Dhaawac jir oo halis ah kuma jiro jeex, xoqid, daqar, gubasho, waji badelma, xanuun jir, ama

dhinnaansho waxqabadka jirka, unuga ama maskaxda kaasoo ku meel gaar ah (20 USC 1365).

(4) *Hub* micnaheedu waa hub, qalab, alaab, walxo, ama wax laga dhigayo ama loo ekeysiinayo, kaasoo loo isticmaalo ama diyaar u ah, sababi kara dhimasho ama dhaawac jir oo halis ah, aysan ka ahayn in kalmadahan aysan ku jirin mindida jeebka oo leh af ka yar 2.5 inji (18 USC 930).

## V.F. OGEYSIIS DHOORISTA NIDAAMKA.

Taariikhda go'aanka la gaaray oo ah ka saarista loo sameeyo ee udhigma bedellaada meelaynta ardayga qaba naafada ah maxaa yeeley gefka lagu sameeyey xeerka aqlaaqda ardayga, LEA waa in ay ku wargelisaa waalidiinta in go'aankaas la gaaray, oo in waalidiinta la siiyay ogeysiiska Dhoorista Nidaamka.

## V.G. GO'AAMINTA GOOBTA (DETERMINATION OF SETTING) (§300.531).

Kooxda IEP ee ardayda ayaa go'aaminaya goob bedel waxbarasho kumeelgaar ah in adeegyo lagu siiyo haddii aqlaaqda keentay in ardayga looga saaro ay tahay wax aan keenin naafada ardayga, ka saarista waxay udhigantaa bedellaada meelayn, ama aqlaaqda waxay hoos tagtaa marxaladdaha gaarka ah ee V.E.

## V.H. RAFCAANNADA WAALIDKA AMA LEA (§300.532).

1. Waalidka(iinta) dhalay ardayga naafada ah ee aan ku raacsanayn go'aan kasta oo ku saabsan meeleynta, ama go'aanka muuqda, ama LEA ay aaminsan tahay in lagu sii hayo meeleynta iminka ee ardayga ayaa u badan in ay dhalisay dhaawaca ardayga ama kuwa kale, go'aanka rafcaan ayay ka qaadan karaan iyada oo dhegeysi dalbanaya. Dhegeysiga waxaa la dalban karaa iyada oo la soo dirsado cabasho dacwo qaadid waafaqsan nidaamka.

2. Awoodda sarkaalka dhegeysiga.

   a. Sarkaalka dhegeysiga ee dacwad qaadida uu maqlo, oo go'aamiyo dacwada rafcaanka.

   b. Go'aan ka gaarida, sarkaalka dhegeysiga waxaa dhici karta:

      (1) In ardayga naafada ah lagu celiyo goobtii ardayga laga soo wareejiyay haddii sarkaalka dhegeysiga go'aamiyo in ka saarista ahaa gef hanaanka edbinta ee hoos yimaada Qeybta B ee IDEA ama Xeerarkan ama in aqlaaqda ardayga ay tahay wax ku timid naafada ardayga; ama

      (2) Amar in ardayga naafada ah goobta laga bedello oo loo gudbiyo goob ku meelgaar ah ee goob bedel waxbarashwao kumeelgaar ah

in aan ka badnayn 45 maalmood ee maalmaha iskuulka haddii sarkaalka dhegeysiga go'aamiyo in ku haynta meeleynta iminka uu ardayga ku jiro ay dhalin karto in ardayga uu ardayga kale ama dadka kale waxyeello ugeysto.

c. Nidaamka rafcaanka waxaa dhici karta in la soo celiyo haddii LEA ay aaminsan tahay haddii ardayga lagu celiyo meeshii hore ay u badan tahay in ay dhaliso ama ardayga kale u keento dhaawac.

3. Dacwo qaadid waafaqsan nidaamka deg-deg ah.

a. Goor kasta oo dhegeysi dacwad ay soo dalbadaan, waalidiinta ama LEA oo lug ku leh muran waa in la siiyaa fursad ay ku soo bandhigaan dacwo qaadid waafaqsan nidaam oo aan kala soocnayn.

b. LEA ayaa mas'uul ka ah qabanqaabada dacwo qaadida waafaqsan nidaamka deg-degga ee USOE, oo la doonayo inuu dhaco 20 maalmood ee maalmaha iskuulka laga bilaabo taariikhda cabashada la heley oo dhegeysiga la soo gudbiyay. Sarkaalka dhegeysiga waa in ay go'aamiyaan toban maalmood gudahooda ee maalmaha iskuulka dhegeysiga dacwadda ka dib.

c. Aysan ka ahayn haddii waalidka(iinta) iyo LEA aysan isku raacin qoraal ahaan in ay ka tanaasulaan fadhiga xalinta, ama ay ku heshiiyaan in ay dhexdhexaadin isticmaalaan:

(1) Kulanka xalinta waa in ay dhacdaa todoba maalmood gudahood laga bilaabo maalinta la heley ogeysiiska cabashada nidaamka dacwada; iyo

(2) Dhegeysiga habsami usocodka waxaa dhici karta in ay sii socoto aysan ka ahayn haddii arrinka lagu xaliyo iyadoo labada dhinacba lagu qancinayo 15 maalmood gudahood laga bilaabo maalinta la heley cabashada nidaamka dacwad qaadida.

d. Go'aanka dhegeysiga ee habsocodka sharciga ee deg-degga ah oo rafcaan laga qaadan karo.

## V.I. MEELEYNTA INTA RAFCAANKA LA QAADANAYO (PLACEMENT DURING APPEALS) (§300.533).

Goorta waalidka ama LEA uu rafcaan uu qaato, ardaygu waa in lagu sii hayaa iskuulka waxbarashada ee loo badeley oo ku meelgaarka ah ilaa go'aan uu ka gaarayo sarkaalka dhegeysiga ama ilaa ay ka dhacayso waqtiga loo qabtay, midka soo hormara, aysan ka ahayn haddii waalidka(iinta) iyo SEA ama LEA ay ku heshiiyaan mooyee.

## V.J. DHOWRISTA ARDAYDA AAN WELI LOO GO'AAMIN XAQ U YEELASHADA WAXBARASHO GAAR AH IYO ADEEGDYADA LA XIRIIRA (PROTECTIONS FOR STUDENTS NOT DETERMINED ELIGIBLE FOR SPECIAL EDUCATION AND RELATED SERVICES (§300.534).

1. Arday aan weli la go'aamin inuu xaq u leeyahay waxbarasho gaar ah iyo adeegdyada la xiriira sida hoos tagta Qeybta B ee IDEA, oo lug kula jira aqlaaq gef ku ah xeerka aqlaaqda ardayda, waxaa dhici karta in ay ku adkeystaan dhowris kasta oo la fidiyo oo tan qayb ka ah haddii LEA ay ogaan u leedahay in ardayga ahaa arday naafo ah ka ah inta ficilka dhacay oo loo edbiyay.

2. LEA waa in loo qiyaasaa in ay ogaan u lahayd in ardayga yahay arday naafo ah haddii, ka hor inta aysan dhicin ficilka ardayga loo edbiyay:

   a. Waalidka(iinta) dhalay ardayga waxay soo gudbiyeen welwel qoraal ah si qoraal ah ay ugu soo gudbiyaan shaqaalaha maamulka ama korjoogayaasha LEA ee ku haboon, ama ardayga macalinkiisa, in ardayga uu ubahaan yahay waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xiriira;

   b. Waalidka(iinta) dhalay ardayda waxay dalbadeen qiimeyn in ardaygooda lagu sameeyo; ama

   c. Ardayga macalinkiisa, ama shaqaalaha kale ee LEA, waxay soo gudbiyeen welwel gaar ah oo ku saabsan aqlaaqda soo noqnoqashada ee ardayga uu la yimid tahay ee uu soo jeediyay agaasimaha waxbarashada gaarka ee LEA ama horjoogaha shaqaalaha LEA.

3. LEA looma qiyaasayo in ogaal ay u hayaan in ardayga yahay arday leh naafo haddii:

   a. Waalid(iinta) dhalay ardayga:

      (1) Ma ogolaan in ardayga qiimeyn lagu sameeyo; ama

      (2) Diiday adeegyada hoos yimaada qeybtan; ama

   b. Ardayga waa la qiimeeyay sida waafaqsan oo waxaa la go'aamiyay inuusan ahayn arday naafo ah sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA.

4. Haddii LEA aysan wax ogaal ah ulahayn in ardaygu yahay arday naafo ah ka hor inta aan laga qaadan talaabada edbinta, aradyga waxaa dhici karta in laga qaado talaabo edbin ah sida ardayda aan naafada ahayn ee gacanta lagala aqlaaqa noocaas ah ee udhigma.

   a. Haddii codsiga qiimeynta la soo gudbiyo inta lagu jiro waqtiga ardayga laga qaadayo talaabada edbinta, qiimeynta waa in la qabtaa qaab deg-degsiimo ah.

(1) Ilaa inta qiimayntu dhamaanayso, ilmahaagu wuxu “sii joogi” doonaa meelayn waxbarsho ay magacaabaan xafiiska dugsigu, oo ay ka mid noqon karaan eryitaan, catritaan aan lahayn adeegyo waxbarasho**.**

(2) Haddii ardayga la go'aamio inuu yahay arday naafo ah, iyada oo la tixgelinayo macluumaadka laga heley qiimeynta ay sameysey LEA iyo macluumaadka ay bixiyeen waalidiinta, LEA waa in ay fidisaa waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira.

## V.K. KU WAREEJINTA IYO TALAABADA SHARCI FULINTA IYO MAS'UULIYIINTA SHARCIGA (REFERRAL TO AND ACTION BY LAW ENFORCEMENT AND JUDICIAL AUTHORITIES) (§300.535).

1. Ma jiro wax ku qoran Qeybta B ee IDEA oo mamnuucaysa in LEA ay sheegto dembi uu galabsaday arday naafo ah oo usheegto mas'uuliyiinta ku haboon ama ka reebaya sharci fulinta Gobolka iyo mas'uuliyiinta sharciga in ay isticmaalaan awoodooda la xiriirta ardayga sharciga Gobolka iyo kan Federaalka ee dambi uu galay arday naafo ah.

2. Wareejin diiwaangelin

   a. Warbixinta dembiga uu galay ardayga naafada ah waa in ay hubisaa in nuqdooyinka diiwaagelinta ardayga waxbarashada gaarka ah iyo aqlaaqda ee ardayga la soo wareejiyo si ay u tixgeliyaan mas'uuliyiinta ku haboon ee LEA ay dembiga ugu warbixinayso.

   b. Warbixinta LEA ee dembiga ay soo gudbinayso sida hoos timaada qeybtan ayaa soo wareejinaya nuqdooyinka diiwaangelinta waxbarashada gaarka ah iyo aqaaqlada ardayga kaliya haddii soo gudbintooda fasax looga haysto Xeerka Xuquuqda iyo Sirta Waxbarashada Qoyska.

# VI. ARDAYDA NAAFADA AH EE GOOBAHA KALE.

## VI.A. MEELEYNTA LEA EE ISKUULKA GAARKA AH (PRIVATE SCHOOL PLACEMENTS BY LEAs (§300.325).

1. Qorista IEP ga.

   a. Ka hor inta LEA aysan meeleyn ardayga naafada ah, ama aysan ardayga u gudbin, iskuul gaar loo leeyahay ama goob, LEA waa in ay bilowdaa oo ay qabataa kulanka IEP ardayga loogu sameyn la'haa sida waafaqsan Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarkan.

   b. LEA waa in ay hubisaa in wakiil ka socoda iskuulka gaarka ah ama goobta kale ay kulanka ka soo qeybgalaan. Haddii wakiilka uusan ka soo qeybgali karin, LEA waa in ay hubisaa in qaabab kale oo lagu hubinayo ka soo qeybgalka iskuulka gaarka ah ama goobta kale, oo ay ku jiro shaqsiga ama lagu qabto dhanka telfoonka.

2. Dib u eegista iyo dib u sixida IEP ga.

   a. Ka dib marka ardayga naafada ah lagu qoro iskuulka gaarka loo leeyahay ama goob kale, kulamo kasta oo dib loogu eegayo oo lagu saxayo IEP ga ardayga waa in ay bilaabaan oo ay qabtaan iskuulka gaarka loo leeyahay ama goobta kale iyadoo LEA ay go'aaminayso.

   b. Haddii iskuulka gaarka loo leeyahay ama goobta kale ay bilowdo oo ay qabtaan kulamada, LEA waa in ay hubisaa in waalidiinta iyo wakiilada LEA:

      (1) Ay lug ku leeyihiin go'aan kasta oo ku saabsan IEP ga ardayga; iyo

      (2) Waa in ay ku raacaan isbadellada qorasho kasta ee IEP ka hor inta isbadelladan aan la hirgelinin.

3. Xitaa haddii iskuullada gaarka loo leeyahay ama goobta kale ay hirgeliso IEP ga ardayga, u hoggaansanaanta mas'uuliyaddan waxay laga doonayaa oo iska leh LEA iyo USOE.

4. Meelaynta la deggan yahay (Residential placement) (§300.104).

   Haddii in lagu qoro barnaamijyada meelaha la deggan yahay ama meelaha shacabka ay daruuri u tahay in waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xiriira si loogu fidiyo ardayga naafada ah, barnaamijyada, oo ay ku jiraan daryeelka aan daweynta ahayn iyo qol iyo guri, waa in ay wax lacag ah ugu fidhin waalidiinta dhalay ardayga.

5. Ardayda Naafada ah ee Iskuullada Gaarka ah ay ku Qoraan ama ay ku Wareejiyaan Hay'addaha Bulshada (§300.145–147).

a. Kaliya waa ardayda naafada ah kuwaasoo ama lagu qorey ama ay hay'addaha bulshada ku wareejiyay iskuulka gaarka ah ama goobo kale sida marka loogu fidiyo waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xiriira, USOE waa in ay:

(1) Hubisaa in ardayga naafada ah ee lagu qorey ama lagu wareejiyay iskuulka gaarka ah ama goobta ay hay'addaha bulshada ku wareejiyay ama ku qortay:

(a) Waxaa la fidiyaa waxbarashada gaarka ah iyo adeegdyada la xiriira:

(i) Sida waafaqsan IEP ga ka soo baxa shuruudaha ku qoran Xeerka III.H; iyo

(ii) Iyada oo aan waalidiinta wax qarash ah ugu fadhin;

(b) Waxay fidiyeen waxbarasho buuxisa heerarka quseea waxbarashada ay fidiyaan USOE iyo LEA oo ay ku jiraan shuruudaha Xeerarkan; iyo

(c) Wuxuu leeyahay dhammaan xuquuqaha arday naafo ah oo adeeg loogu fidiyo hay'ad shacab.

6. USOE waa in:

a. La socotaa addeecista ayadoo loo marayo hanaannada sida warbixin qoraal ah, goobta oo lagu booqdo, iyo waalidka laga wareysto;

b. Nuqdooyinka quseeya ee heerarka lagu baahiyo iskuulka gaarka loo leeyahay iyo goobaha kale halka ay hay'adda buslashada ee ardayga naafada ah lagu wareejiyey ama lagu qorey; iyo

c. Fursad loo fidiyo iskuulladan gaarka ah iyo goobaha kale in ay ka soo qeybgalaan sameynta iyo dib u eegista heerarka Gobolka ee iyaga quseeya.

## VI.B. ARDAYDA NAAFADA AH OO WAALIDIINTOODA AY KU QOREEN ISKUULLADA GAARKA AH GOORTA FAPE AANNAN LA ISKU HAYSAN (MEELEYN AAN LOO DHAMMAYN) (STUDENTS WITH DISABILITIES ENROLLED BY THEIR PARENTS IN PRIVATE SCHOOLS WHEN FAPE IS NOT AT ISSUE (UNILATERAL PLACEMENT)) (§300.130).

Ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay micnaheedu waa ardayda naafada ah oo ay waalidiintoodu ku qoreen iskuullo gaar ah, oo ay ku jiraan iskuul diimeed, ama goobo buuxiyo dugsiga hoose ama dugsiga sare sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA.

1. Qeexista

   a. *Dugsi Hoose* micnaheedu waa xarun waxbarasho oo aan faa’ido raadis ahayn ama iskuul guri, oo uu ku jiro iskuullada dugsiga hoose ee dadwaynaha oo sida gaarka ah loo maamulo, ee ardayda u fidiya waxbarasho hoose, sida uu go'aamiyay ee hoos timaada sharciga Gobolka(§300.13).

   b. *Dugsiga sare* micnaheedu waa iskuul aan faa’ido raadis ahayn ama iskuul la degan yahay, oo uu ku jiro iskuullada sare ee dadwaynaha oo madax banaan, ee bixiya waxbarasho dugsi sare, sida uu go'aamiyay oo hoos timaada sharciga Gobolka, aysan ka ahayn inuusan bixin waxbarasho ka baxsan fasalka 12(§300.36).

2. Ubad Helidda ku aaddan Ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay. (§300.131)

   a. LEA kasta waa inuu helaa, magacaabaa, oo uu qiimeeyaa dhammaan ardayda naafada ah ee ay waalidiintoodu ku qoreen iskuulkada gaarka ah, oo uu ku jiro iskuul diimeed, dugsiyada hoose iyo dugsiyadaha sare ee ku yaalla degmo dugsiyeedka ay LEA u adeegto.

   b. Hanaanka Ubad Helidda waa in la sameeyaa iyada oo la hubsanaya:

      (1) Kaqeybgalka loo siman yahay ee waalidiinta ardaydooda geliyay iskuullada gaarka ah; iyo

      (2) Xisaabta saxda ah ee ardaydan.

   c. LEA waa in ay la wareegto howlaha la midka ah ee howlaha ay la wareegtay ardayda iskuulka dadweynaha ee LEA.

   d. Qarashka wadista shuruudaha Ubad Helidda ee qeybtan, oo ay ku jiraan shaqsiyaadka qiimeynta, looma tixgelin karo in ay go'aamiyaan haddii LEA ay ka soo baxday waajibaadkeeda oo hoos yimaada wadaagida miisaaniyadda la qarashgareeyo sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA si adeeg loogu fidiyo waalidinta iskulka ay geliyeen ardayda gaarka ah.

   e. Hanaanka Ubad Helidda waa in lagu dhameystiraa waqti u dhigma sida ardayda dhigta iskuullada dadwaynaha ee LEA.

   f. LEA kasta halkaasoo gaar ah, oo uu ku jiro iskuul diimeed, dugsi hoose iyo dugsi sare waa in iyaga la helaa, inta lagu gudi jiro shuruudaha Ubad Helidda ee qeybtan, oo ay ku jiraan waalidiinta geeya ardaydooda iskuulo gaar ah ee ardayda deggan gobolk aanan ka ahayn gobolka iskuulka gaarka ah ee ay iyagu dhigtaan uu ku yaallo.

3. Shuruudaha aassaasiga ah ee qodobka adeegyada ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay(§300.132).

   a. Ilaa iyo xadka isku si la ah tirada iyo gobta ardayda naafada ah oo waalidiintooda ku qorey iskuullada gaarka loo leeyahay, oo uu ku jiro iskuul diimeed, iskuullada hoose iyo iskuullada dhaxe ee ku yaalla degmo dugsiyeedka u adeegga LEA, qodobka ayaa laga sameeyey ka qeybgalka ardaydan ee barnaamij caawiya ama qaban doono sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA iyada oo loo fidinayo waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xiriira, oo uu ku jiraan adeegyo toos ah.

   b. LEA waa in ay qortaa oo ay hirgelisaa qorsho adeegyo oo loogu talalgay arday kasta oo naafo ah oo dhigta iskuullada gaarka loo leeyahay oo ay LEA u cayintay kaasoo iskuulka gaarka ah uu ku yaallo inuu helo waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xiriira.

   c. LEA kasta waa in ay sii haysaa diiwaangelinteeda, oo ayna USOE u fidisaa, macluumaadka soo socda ee la xiriira waalidka ardaydooda ku qorey iskuullada gaarka loo leeyahay:

      (1) Tirada ardayda ee la qiimeeyey;

      (2) Tirada ardayda ee la go'aamiyay in ay yihiin arday naafo ah; iyo

      (3) tirada arday ee loo adeegayo.

4. Qarashka (Expenditures) (§300.133).

   a. LEA kasta waa in ay qarashgaraysaa kuwa soo socda marka ay fidinayso waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira (oo ay ku jiraan adeegyada tooska ah) oo ay u fidinayaan ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay:

      (1) Ee ardayda da'doodu udhaxayso 3 ilaa 21 jir, cadad la mid ah qeybta LEA ee isu-geyn deeqhoosaad sida hoos timaada Qeybta 611(f) Qeybta B ee IDEA maadaama tirada iskuullada gaarka ah oo dhigta ardayda naafada ah ee ay da'doodu udhaxayso 3 ilaa 21 jir oo ay waalidiintoodu ku qoreen iskuullada gaarka ah, oo uu ku jiro iskuul diimeed, iskuullada hoose iyo iskuullada dhaxe ee ku yaalla degmo dugsiyeedka ay LEA u adeegto, ay tahay isu-geyn tirada ardayda naafada ah ee xadkooda awoodda sharciga ee kuwa ay da'doodu udhaxayso 3 ilaa iyo 21.

      (2) Ardayda ay da'doodu udhaxayso seddex jir ilaa iyo shan jir, tirada kaasoo la mid ahqeybta LEA ee isu-geyn deeqhoosaad sida hoos timaada Qeybta 619(g) ee Qeybta B ee IDEA maadaama tirada ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay oo ay da'doodu udhaxayso seddex ilaa iyo shan jir ee ay

waalidiintoodu ku qoreen iskuullo gaar loo leeyahay, oo ay ku jiraan iskuul diimeed, iskuullada hoose oo ku yaalla degmo dugsiyeedka ay LEA u adeegto, waa tirada guud ee ardayda naafada ah ee xadkooda awoodda sharciga ee kuwa ay da'doodu udhaxeyso seddex ilaa iyo shan.

(a) Ardayda ay da'doodu udhaxayso seddex ilaa iyo shan waxaa loo tixgeliyaa in ay yihiin ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay oo ay ku qoreen waalidiintooda iskuullo gaar ah, oo ku jira iskuul diimeed, iskuullada hoose, haddii lagu qorey iskuulka-barbaradka oo gaar loo leeyahay oo qeyb ka ah iskuulka hoose oo gaarka loo leeyahay.

(3) Haddii LEA aysan adeegyada qeybsamaya u balaarin dhammaan deeqaha looga baahan yahay kama dambays dhammaadka sannad xisaabeedka kaasoo Golaha ummadda (Congress) miisaaniyadda qeybiyay, LEA waxaa ku waajib ah in miisaaniyadda u soo hartay waxbarashada gaarka ah iyo adeegdyada la xiriira (oo ay ku jiraan adeegyada tooska ah) ee ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay inta lagu jiro mudada ku wareejinta ee hal sanno oo dheeraad ah.

b. Xisaabinta cadada la kala qeybinayo ee miisaaniyadda Federaalka waa in loo fidiyaa ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay, LEA, waqti ka dib iyo la tasho wax ku ool ah ka eh oo lala yeellanayo wakiillada ka socda iskuullada gaarka ah, waa in la qabtaa hanaan taxadar-badan oo dhammaystiran ee Ubad Helidda si loo go'aamiyo tirada waalidiinta ardaydooda naafada ah ku qortey iskuullada gaarka loo leeyahay ee ku yaalla LEA.

c. Xisaabta sanadlaha ee tirada ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay.

(1) LEA kasta waa in:

(a) Waqti ku filan iyo wadatashi wax ku ool leh ka dib oo ay la yeeshaan wakiillada ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay, go'aamiya tirada ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay ee dhigta iskuullada gaarka loo leeyahay ee ku yaalla LEA; iyo

(b) La hubiyo in xisaabta la sameeyey taariikhda u dhaxaysa 1 Oktoobar ilaa iyo 1 Disembar, mid dhamaystiran, sanad kasta.

(2) Xisaabta waa in loo isticmaalaa si loo go'aamiyo cadada LEA laga doonayo in ay qarashgarayso oo ay ku bixiso waxbarashada gaarka

ah iyo adeegyada la xiriira oo ay siiso ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay ee sannad xisaabeedka xig-xigga.

d. Miisaaniyadda Gobolka iyo tan maxalliga ayaa dhici karta in lagu kabo oo marna ma badelli karto cadada loogu talagalay ee miisaniyadda Federaalka ee loogu baahnaa in lagu balaariyo ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay.

5. La tashi (§300.134).

Si loo hubiyo in la helo waqti ku filan iyo wadatashi wax ku ool leh, LEA waa in ay kala tashataa wakiillada iskuulka gaarka h iyo wakiillada waalidiinta ee ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay inta lagu jiro qabanqaabada iyo qorista waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee loogu talalgay ardayda ee la xiriira kuwa soo socda:

a. Hanaanka Ubad Helidda, oo ay ku jirto:

(1) Sida ardayda ay waalidiintooda ku qoreen iskuulka gaarka ah ee loogu tuhunsan yahay in ay naafo yihiin ay uga qaybqaadan karaan sinnaanta; iyo

(2) Sida waalidiinta, macalimiinta, iyo mas'uuliyiinta iskuulka loola socodsiin doono hanaanka.

b. Go'aanka qeybta saami galka miisaaniyadda Federaalka ee loogu talagalay in loogu adeego ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay, oo ay ku jirto go'aaminta sida qeybta saami galka miisaaniyaddan loo xisaabi doono

c.

d. .

e. Hanaanka wadatashiga ee u dhaxeeya LEA, mas'uuliyiinta iskuulka gaarka ah, iyo wakiilada waalidiinta ee ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay, oo ay ku jiraan sida hanaanka uu ushaqeyn doono inta lagu jiro sanad dugsiyeedka si loo hubiyo in waalidiinta ardaydadooda naafada ah ku meeleeyey kuwaasoo la aqoonsaday iyada oo loo maray hanaanka Ubad Helidda si wax ku ool ahna uga qeyb qaata waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira.

f. Sidee, halkee, iyo kuma ayaa ufidinaya waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay, oo ay ku jiro wadahadal ah:

(1) Noocyada adeegga, oo ku jiro adeegyada tooska ah iyo aalada bixinta ee adeegga isbadella; iyo

(2) Sidee ayaa loogu qeybin doonaa waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira hadii miisaaniyadda aysan ku filnayn in ay loogu adeeggo waalidiinta ardaydooda ku qorey iskuullada gaarka loo leeyahay; oo

(3) Sidee oo goormee ayaa go'aamaddan la gaari doonaa;

g. Sidee, haddii LEA aysan ku raacin aragtida mas'uuliyiinta iskuulka ee ku aadan bixinta adeegyada ama noocyo adeegyo (si toos ah loo bixiyo ama heshis ha loo marsiiyo), LEA ayaa mas'uuliyiinta iskuulka u fidin doonta sharaxaad qoraal ah ee sababta ay LEA u dooratay in aysan adeegyada u bixin si toos ah ama aysan heshis u marsiin.

6. Qoraal xaqiijis (§300.135).

a. Goorta wadatashi wax ku ool leh oo waqti ku filan leh uu qabsoomo, LEA waa in ay heshaa qoraal xaqiijis ah oo ay saxiixeen wakiillo ka socda iskuullada gaarka ah ee ka qeybgalaya.

b. Haddii wakiillada aysan bixin wax xaqiijis ah inta lagu jiro mudo caqli gal ah gudahood, LEA waa in ay dokumentiga hanaanka wadatashiga ay USOE u gudbisaa.

7. Uhogaansanaan (§300.136).

a. Madaxa iskuulka gaarka loo leeyahay wuxuu xaq u leeyahay inuu ESOE cabasho usoo gudbiyo in LEA:

(1) Aysan isku mashquulin wadatashi wax ku ool leh oo waqti ku filan leh; ama

(2) Aysan tixgelin aragtidii madaxda iskuulka gaarka loo leeyahay.

b. Hanaanka.

(1) Haddii madaxa iskuulka ay jecel yihin in ay soo gudbiyaan cabasho, madaxa waa in uu USOE usoo gudbiyaa bu'da oofin la’aanta ay LEA gashay ee quseeya iskuulka gaark ah ee qodabada qeybtan; iyo

(2) LEA waa in dokumentiyada ku haboon ku wareejisaa USOE.

(3) Haddii madaxa iskuulka gaarka ah ku qanci waayo go'aanka USOE, madaxa wuxuu cabasho usoo dirsan karaa Xog-hayaha isagoo siinaya macluumaadka oofin la’aanta ee kor ku qeexan; oo USOE waa in ay dokumentiyada haboon Xog-hayaha ku wareejisaa.

8. Adeegyada caddaaladda ee la go'aamiyay (Equitable services determined) (§300.137).

   a. Ma jirto waalid ku qorey arday naafo ah oo leh xuquuq shaqsi oo ku helo qaar ama dhammaan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee arday heli kara haddii uu ku qornaan la'haa iskuulda dadweynaha.

   b. Go'aamada ku saabsan adeegyada loo fidin doono ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay waa in lagu sameeyaa sida waafaqsan shuruudaha la tashiga iyo qeybta saami galka.

   c. LEA waa in ay gaartaa go'aanka kama dambeyska ah ee marka laga hadlayo adeegyada loo baahan yahay in la siiyo ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay.

   d. Haddii ardayga naafada ah waalidiintiisa ay ku qoraan iskuul diimeed ama iskuul kale oo gaar loo leeyahay oo waxay LEA siindoontaa waxbarashada gaarka ah ama adeegyada la xiriira, LEA waa:

      (1) Waa in ay bilaabaan oo ay qabtaan kulamo lagu sameynayo, dib loogu eegayo, oo dib loogu saxayo qorshaha adeegyada ardayga; iyo

      (2) Waa in ay hubisaa in wakiil ka socoda iskuulka gaarka ah ama goobta kale ay kulanka ka soo qeybgalaan. Haddii wakiilada aysan soo xaadiri karin, LEA waa in ay isticmashaa qaabab kale oo ay ku hubinayaan ka soo qeybgal ay iskuul diimeedka kale ama iskuullada gaar kale, oo ay ku jiraan ka soo qeybgal shaqsi ama dhanka telfoonka la soo galo.

9. Adeegyada caddaalada ee fidiyay (Equitable services provided) (§300.138).

   a. Adeegyada loo fidiyay ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay waa in lagu bixiyaa kulanka shaqaalaha isku heerarna ahaa sida shaqaalaha adeegyada ka fidiya iskuullada dadwaynaha, aysan ka ahayn macalamiinta iskuulka hoose ee gaarka ah iyo macalimiinta iskuulka sare ee adeegyada caddaalada u fidiya ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay ma ahan in ay ka soo baxaan shuruudaha macalimiinta dhiga waxbarashada gaarka ah ee looga baahan yahay.

   b. Ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay waxaa dhici karta inay helaan adeegyo cadad ahaan ka duwan kuwa ardayda naafada ah ee dhigta dugsiyada dadwaynaha ay helaan.

   c. Adeegyada la fidiyo sida waafaqsan qorshaha adeegyada.

(1) Waalid kasta oo iskuul gaar ah ku meeleeya ardayda naafada ah ee loo loo cayimay inuu helo adeegyada waa in loo siiyaa qorsho adeegyo oo sharaxaya waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee gaarkah oo ah in LEA ay ardayda u fidin doonto adeegyo ay LEA go'aamisay ay adeegyada ay ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay ay ka helayaan.

(2) Qorshaha adeegyada waa in, ilaa iyo xadka ku haboon:

(a) In ay soo buuxiso isla shuruudahii IEP ga, oo ay ku jiraan helida iyo horumarka manhajka guud, ama ardayda ay da'doodu udhaxayso seddex ilaa iyo shan, oo ay ku jiraan helitaan iyo horumar howlo ku haboon oo da'doodu ku haboon, marka laga hadlayo adeegyada la siiyo; iyo

(b) Si joogto ah loogu sameeyo, dib loogu eego, oo dib loogu saxo qodobada Xeerka III.H ee IEP la xiriira.

d. Adeegyada qodobada caddaaladda

(1) Adeegyada la doonayo inuu bixiyo:

(a) Shaqaalaha LEA; ama

(b) Iyadoo LEA ay heshiis usoo marinayo shaqsi, urur, hay'ad, ama shirkad kale.

(2) Waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee loo fidiyo ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay, oo ay ku jiraan walxaha iyo qalabka, waa in ay ahaataa wax aan diin shaqo ku la'hayn, dhexdhexaad ah, oo aan aan diin ku saabsayn.

10. Goobta adeegyada iyo gaadiidka (Location of services and transportation) (§300.139).

a. Adeegyada ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay waxaa lagu siinayaa goob gaar loo leeyahay, oo ay ku jirto iskuul diimeed, ee sharciga la siman.

b. Gaadiidka.

(1) Haddii aydaruuri tahay oo ardayga uu ka faa'ideysanayo ama ka qeybqaadashada adeegyada loo fidiyo ee qeybtan, waalidiinta iskuullada gaarka ah ku qora ardaygooda naafada ah waa in loo fidiyaa gaadiid:

(a) Ka soo qaada ardayga iskuulkiisa ama ardayga gurigiisa ilaa goob aan ka ahayn iskuulka gaarka ah; iyo

(b) Ka soo qaada goobta adeegga ilaa iyo iskuulka gaarka ah, ama ardayga gurigiisa, waxay ku xiran tahay waqtiyada adeegga.

(2) LEA loogama baahna in ay bixiso adeeg gaadiid oo ay siiso in ardayga looga soo qaado iskuulka oo iskuulka gaarka ah geynaya.

(3) Qarashka gaadiidka waxaa dhici karta in lagu daro oo lagu xisaabiyo oo waxay ku xiran tahay haddii LEA ay ka soo baxday shuruudaha wadaagista saami galka qarashka.

11. Cabashada habsocodka sharci loo maro iyo cabashooyinka Gobolka (§300.140).

a. Habsocodka sharciga ma quseeyo, aysan ka ahayn Ubad Helidda.

(1) Aysan ka ahayn sida ku qoran Xeerka VI.B.10.b, hanaanka cabashooyinka Gobolka iyo habsocodka dhegeysiga codsiyada ma quseyso cabashoyinka ah in LEA ay ku guuldaraysatay inay ka soo baxdo shuruudaha Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarkan, oo uu ku jiro qodabka adeeggaha ku qoran qorshaha adeegyada ardayga.

b. Cabashada Ubad Heliddda waa in LEA loo gudbiyaa halka iskuulka gaarka uu ku yaallo.

(1) Hanaanada cabashada Gobolka iyo codsiyada nidaamka dhegeysiga waxay quseysaa cabashooyinka ah in LEA ay ku guuldaraysatay in ay buuxiso shuruudaha Ubad Helidda ee Qeybta B ee IDEAiyo Xeerarkan.

(2) Cabasho nidaad habsocod kasta ee ku saabsan shuruudaha Ubad Helidda (sida ku qeexan Xeer VI.B.10.b(1)) waa in laga soo LEA ga ku dhextaala iskuulka gaarka ah, oo nuqdana waa in USOE loo soo gudbiyaa.

12. Cabashada Gobolka.

(1) Cabasho kasta oo ah in LEA ay ku guuldaraysatay in ay buuxiso shuruudaha qodobada adeegyada, qarashka, qoraal xaqiijiska, go'aanka caddaaladda adeegyada, adeegyada goobta, nidaamka sharciga iyo cabashooyinka Gobolka, miisaaniyadda in aysan ka faa'idaysan iskuullada gaarka loo leeyahay, shaqaalaha isticmaalan, fasallo gooni ah waa mamnuuc, iyo isticmaalka hantida, qalabka, iyo agabyada waa in la soo gudbiyaa sida waafaqsan nidaamyada cabashada Gobolka ee ku qeexan Xeerka IV.G.

(2) Cabasho uu soo gudbiyay mas'uulka iskuulka gaarka ah iyadoo ay hoos timaad wadatashi wax ku ool leh oo waqti ku filan, ama la doonayo in loo texgeliyo aragtida shuruudaha mas'uulka iskuulka gaarka ah waa laga soo gudbiyaa USOE sida waafaqsan hanaanka ku qoran Xeerka VI.B.6.b.

13. Shuruudaha ah in miisaaniyadda aysan ka faa'idaysan karin iskuulka gaarka ah (§300.141).

    a. LEA ayaa waxaa dhici karta in ay isticmaasho miisaaniyadda la fidiyay oo hoos timaad Qeybaha 611 ama 619 ee IDEA si loogu maalgeliyo cashar bixin heerka jira ee iskuulka gaarka ama haddii kale ay ka faa'idaystaan iskuulka gaarka loo leeyahay.

    b. LEA waa in ay miisaaniyadda la siiyay u isticmaashaa sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA si ay ubuuxiso baahida waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay, laakin oo kulamada ma ahan:

        (1) Baahida iskuulka gaarka ah; ama

        (2) Baahida guud ee ardayga lagu qorey iskuulka gaarka ah.

14. Isticmaalka shaqsiga (§300.142).

    a. LEA waxaa dhici karta inay isticmaasho miisaaniyadda hoos yimaada Qeybta 611 iyo 619 ee IDEA si shaqaalaha iskuullada dadwaynaha loogu diyaariyo meelaha aan ka ahayn xarumaha dadweynaha:

        (1) Ilaa iyo xadka daruuriga ah si loo fidiyo adeegyada ku qoran qorshayaasha adeegga ee ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay; iyo

        (2) Haddii adeegyadan aysan caado ahaan lagu bixin iskuullada gaarka ah.

    b. LEA waxaa dhici karta in ay isticmaasho miisaaniyadda hoos yimaada Qeybaha 611 iyo 619 ee IDEA si loogu bixiyo adeegyada shaqaalaha iskuulka gaarka ah si ay ubixiyaaan adeegyada ku qoran qorshayaasha adeegga ee ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey iskuullo gaar loo leeyahay haddii:

        (1) Shaqaalaha wuxuu adeegyada qabanayaa wixii ka baxsan saacaddahahiisa/eeda caadiga; oo

        (2) Shaqaalaha wuxuu qabanayaa adeegyada isagoo hoos imanaya kormeerka iyo xigmaynta dadweynaha.

15. Fasallo gooni ah waa mamnuuc (§300.143).

    LEA waxaa dhici karta in miisaaniyadda ay hayso aysan u isticmaalin sida hoos timaada Qeybta 611 ama 619 ee IDEA aysan u isticmaalin fasallada sida gooniga loo soo abuubulay oo salka u ah iskuulka lagu qorey ama diinta ardayda haddii:

    a. Fasallada ay isku meel ku yaalliin; oo

    b. Fasallada ay ku jiraan arday lagu qorey iskuullada dadweynaha iyo ardayda lagu qorey iskuullada gaarka loo leeyahay.

16. Hanti, qalab, iyo agabyada (§300.144).

    a. LEA waa in ay xigmeysaa oo ay maamushaa miiysaaniyadda loo isticmaalay in lagu bixiyo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, oo ay milkeysaa oo ay maamushaa alaabta, qalabka, iyo hantida lagu soo iibiyay miisaaniyaddan si loogu isticmaalo oo ulajeedkoodu ahaa in IDEA lagu bixiyo.

    b. LEA waxaa dhici karta in ay qalabka iyo agabyada ay dhigaan iskuulka gaarka ah inta lagu jiro mudada loo baahan yahay ee barnaamijka Qeybta B.

    c. LEA waa in ay hubisaa in qalabka iyo agabyada iskuulka gaarka loo leeyahay la geeyay:

        (1) Loo isticmaalo oo kaliya ulajeedka hoos yimaado Qeybta B; oo

        (2) Laga qaadi karo iskuulka gaarka ah iyadoon wax isbadel ah lagu samayn xarunta iskuulka gaarka ah.

    d. LEA waa in ay iskuulka gaarka loo leeyahay ka soo qaadaa qalabka iyo agabyada haddii:

        (1) Qalabka iyo agabyada aysan intaa in ka badan loogu baahnayn sida hoos timaado Qeybta B; ama

        (2) Ka soo qaadista waa daruuri si looga fogaado isticmaal aan la fasaxin ee qalabka iyo agabyada oo aanan ka ahayn ulajeedaka Qeybta B.

    e. Ma jireyso miisaaniyad hoos tagaysa Qeybta B ee IDEA oo loo isticmaali karo dayactir, dib uhagaajin iska yar, ama dhismo xarumo iskuul oo gaar loo leeyahay.

## VI.C. ARDAYDA NAAFADA AH OO AY WAALIDIINTOODA KU QOREEN ISKUULLADA GAARKA AH LOO LEEYAHAY GOORTA FAPE AANNAN LA ISKU HAYSAN (STUDENTS WITH DISABILITIES ENROLLED BY THEIR PARENTS IN PRIVATE SCHOOLS WHEN FAPE IS AT ISSUE (§300.148)

1. LEA loogama baahna in ay bixiso qarashka waxbarshada, oo ay ku jiraan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, in ay siiso ardayga naafada ah ee ku jira iskuulka gaarka ah ama xarunta haddii LEA ay FAPE udiyaarisay ardayga iyo waalidka(iinta) ay doorteen in ardayga ay ku qoraan iskuul gaar ah ama xarun. Si kastaba ha noqotee, LEA waa in ay ardaygaas ku dartaa ardayda baahidooda sida joogtada ah loogu wajahay sida hoos timaada Xeerka VI.B.

2. Heshiisdaro udhaxeeya waalidka(iinta) iyo LEA ee ku saabsan diyaarinta barnaamij ardayga ku haboon, iyo su'aasha lacag soo celinta, waa arrin ah cabashada Gobolka oo hanaanka habsami socodka sharciga wuxuu hoos tagayaa Xeerka IV.G.

3. Haddii waalidka(iinta) dhalay ardayga naafada ah, kaasoo horey u heley waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ayada oo la hoostagayo LEA, ardayga ku qorey iskuul-barbarad oo gaarah, dugsi hoose, ama dugsi sare iyadoon wax ogolaanshaha aan laga haysan ama aysan soo dirsan LEA, maxkamadda ama sarkaalka dhegeysiga waxaa dhici karta inuu LEA uga baahdo in ay waalidka(iinta) dib loo siiyo qarashkii kaga baxay ku qorida haddii maxkamadda ama sarkaalka dhegeysiga uu ogaado in LEA aysan FAPE u diyaarin ardaygda waqtigii la doonayay ka hor inta aan ardayga lagu qorin oo meeleynta iskuulka gaarka ah ay haboonayd. Waalidka oo ardaygiisa ku qorey ayaa waxaa dhici karta in sarkaalka dhegeysiga ama maxkamadda ay u arkto in ay wax haboon ahayn xitaa haddii aysan ka soo bixin heerarka Gobolka ee quseeya waxbarshada ay bixisay USOE iyo LEA ba.

4. Qarashka lacag soo celinta waxaa dhici karta in la yareeyo ama la diido haddii:

   a. Kulankii kooxda IEP ee ugu dambeeyey ee ay waalidka(iinta) ay soo xaadireen ka hor inta ardaygooda aan laga saarin iskuullada dadweynaha, waalidka(iinta) aysan kooxda IEP ku soo wargelin in ay diidsan yihiin meeleynta ay LEA soo jeedisay oo ah in FAPE ardaygooda la siinayo, oo ay ku jirto iyagoo sheegayo wewelka iyo damacooda oo ah in ardaygooda ay ku qorayaan iskuul gaar ah oo ay dadweynahana qarashka bixin doonaan; ama

   b. Ugu yaraan toban maalmood (oo ay ku jirto feestooyinka ku soo beegmaya maalmaha ganacsiga) ka hor inta ardayga aan laga saarin iskuullada dadweynaha, waalidka(iinta) ma bixin ogeysiis qoraal ah oo ma siin LEA sida macluumadka ku qeexan Xeerka VI.C.4.a;

c. Ka hor inta waalidka(iinta) aysan ka saarin ardayga iskuulka dadweynaha, LEA waalidka(iinta) way ku wargelisay, iyadoo u dirtay ogeysiiska qoraalka hore ee loogu baahnaa ulajeedkeeda oo ah in ardayga la qiimeeyo (oo ay ku jirto qoraal ah ulajeedka qiimeyta ku haboon oona soortugalka ah), balse waalidka(iinta) ardaygooda uma soo diyaarin in qiimeynta lagu sameeyo; ama

d. Go'aanka sharciga ee sida suurtogalnimada marka laga hadlayo talaabada ay waalidka(iinta) qaadeen.

5. Iyadoo ay jirta shuruudaha ah in waalidka(iinta) laga doonayay in ay ogeysiis siiyaan LEA ka hor inta ay ubadkooda ka saarin, qarashka lacag soo celinta:

a. Ma ahan in la yareeyo ama la diido ku guuldareysi ah ogeysiis bixin la'haan haddii:

(1) Iskuulka uu waalidka(iinta) ka horjoogsaday in ay ogeysiiska keenaan;

(2) Waalidka(iinta) ma helin ogeysiiska qoraalka hore ee hoos yimaada shuruuda ku qoran Xeerarka VI.C.4.a-b; ama

(3) Uhogaansanaanta shuruudaha ogeysiiska sida ku qoran Xeerarka VI.C.4.a-b waxay ubadannayd in ay dhaliso waxyeello dhanka jirka in ardayga ay ukeento; oo

b. Waxaa suurto gal ahaa, ayadoo maxkamadda ama sarkaalka dhegeysiga uu ogyahay, in aan la yareyn ama la diidin ku guuldareysiga ah in waalidinta aysan bixin ogeysiiskan haddii:

(1) Waalidka(iinta) ma ah kuwa wax qori ama aqrin kara ama af Ingiriis wax kuma qori karaan; ama

(2) Uhogaansanaanta Xeerka VI.C.4.a-b waxay ubadan tahay in ardayga ay ukeento waxyeello daran oo dhanka niyadda ah.

## VI.D. ARDAYDA NAAFADA AH EE LAGU QOREY ISKUULKA GURIGA (STUDENTS WITH DISABILITIES ENROLLED IN HOME SCHOOL).

1. LEA ayaa mas'uul ka ah goobta, aqoonsiga, iyo qiimeynta xaq u yeelashada ardayda guriga wax loogu dhiggo iyo xuduudahooda.

2. Ardayga guriga wax loogu dhiggo waa inuu soo buuxiyaa shuruudaha xaq u yeelashada ee ardayda naafada ah sida waafaqsan Xeerarka II.D-H, oo ay ku jiraan dokumeniyada, isticmaalka hanaanka la barbardhigo ee kuwa looga baahan yahay in ay soo caddeeyaan ardayda dhigata iskuullada dadweynaha ee xaqa u lah.

3. Haddii waalidka ardayga ee guriga wax loogu dhiggo ama dhigta iskuul gaar loo leeyahay oo ay waalidiinta geeyeen iyaga oo qarashka la baxaya ogolaansho ma u bixinayaan qiimeynta koowaad, ama waalidinta oo ku guuldareystey in ay ka soo jawaaban codsi ah in ay ogolaansho bixiyaan (§300.300):

    a. Waxaa dhici karta in LEA aysan isticmaalin tirtiraya hab-socodka sharciga oo suuban; iyo

    b. Oo LEA looguma baahna in ay texgeliyaan ardayda in ay yihiin arday xaq u leh waxbarasho gaar ah iyo adeegdyada.

4. Ardayda waqti buuxa guriga wax loogu dhiggo.

    Ma jirto waalid ku qorey arday naafo ah oo leh xuquuq shaqsi oo ku helo qaar ama dhammaan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee arday heli kara haddii uu ku qornaan la'haa iskuulda dadweynaha.

5. LEA waa in ay gaartaa go'aanka kama dambeyska ah ee marka laga hadlayo adeegyada loo baahan yahay in la siiyo ardayda naafada ah oo waalidka ku meeleeyey ee guriga wax loogu dhiggo.

6. LEA waxaa dhici karta ay qorsho adeegyo (services plan (SP) ay udejiso ardayda naafada ah oo ah ardayda guriga wax loogu dhiggo ee xaqa u leh waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarkan. Qorshaha adeegyada waa in ay ku qeexan yihiin waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, haddii ay jiraan, in LEA ay ardayga siin doonto, oo looga baahan yahay, ilaa xadka ku haboon:

    a. Ka soo baxdo shuruudaha ku qoran IEP marka laga hadlayo adeegyada la bixiyo; iyo

    b. Si joogto ah loogu sameeyo, dib loogu eego, oo dib loogu saxo qodobada Xeerka III.H ee IEP la xiriira.

7. LEA waa in ay go'aamisaa halka iyo goorta adeegyada ku qoran qorshaha adeegyada la bixin doono.

8. Laba iskuqoridda.

    Ardayda naafada ah ee guriga iyo iskuulka dadweynaha wax loogu dhiggo waxaa lagu magacaabaa inuu yahay ardayda laba mele ku qoran (UCA 53-A-11–102.5) oo wuxuu xaq uleeyahay in loogu adeeggo sida hoos timaada IEP ee qeybta iskuulka maalintii ee ardayga ku qoran iskuulka dadweynaha.

9. Iskuullada guriga ma buuxiyaan micnaha iskuullada gaarka ah loo leeyahay. (Warqad ka socota Xafiiska Qareenka Guud ee Gobolka Utah oo ay ku socoto Muraaqibka Gobolka ee Casharbixinta Dadweynaha, 14 Fibraayo, 1997.)

## VI.E. KU HABOONNAANTA QEYBTA B EE IDEA EE KU AADAN HAY'ADDAHA GOBOLKA IYO KUWA MAXALLIGA (APPLICABILITY OF PART B OF THE IDEA TO STATE AND LOCAL AGENCIES (§300.2).

1. Qodobada Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarkan:

   a. Waxay quseysaa dhammaan qeybhoosaadyada siyaasaddeed ee Gobolka ee lugta ku leh waxbarashada ardayda naafada ah, oo ay ku jiraan:

      (1) Hay'adda Waxbarashada ee Gobolka (SEA/USOE).

      (2) Hay'addaha Waxbarashada Maxalliga (LEAs), iyo iskuullada dadweynaha ee madaxa bannaan oo haddii kale aanan ku jirin sida LEAs oo aysanna ahayn iskuu LEA ah.

      (3) Hay'addaha Gobolka ee Kale iyo iskuullada (sida Waaxda Adeegyada Bulshada yo iskuullada Gobolka ee loogu talagalay ardayda dhegoolayaasha ama ardayda indhoolayaasha).

      (4) Xarumaha xabsiyadda dhalinta yar iyo kuwa qaangaarka ee maxalliga iyo kan Gobolka ahbaa; oo

   b. Waa waa kuwa heshiis kula jira hay'ad dadweyne ee aan waxbarasho qaabilsanayn iyo kuwa waxbarasho qaabilsan ee Gobolka ka jira kuwaasoo fidiya waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira oo siiya ardayda naafada ah, iyadoon loo eegeyn in haddii hay'addaas ay miisaaniyad hesho iyo in kale sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA.

## VI.F. MAS'UULIYADDAHA USOE KA SAARAN ARDAYDA NAAFADA AH EE KU JIRA XARUMAHA IYO MEELAHA GAARKA AH (USOE RESPONSIBILITIES FOR STUDENTS WITH DISABILITIES IN PRIVATE INSTITUTIONS AND FACILITIES) (§300.118).

1. USOE waa in ay xaqiijisaa in shuruudaha LRE ee hoos yimaada Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarkan sida ugu haboon loo hirgeliyo, oo ay ku jirto, haddii ay daruuri tahay, in qabanqaabo lagu sameeyo xarumaha gaarka ah ama kan dadweynaha (sida heshiis qoraal oo rasmi ah ama hirgelinta hanaan gaar ah)

2. Mas'uuliyadda USOE ee kormeer guud (§300.149).

   a. USOE ayaa mas'uul ka ah in ay xaqiijiso:

      (1) In shuruudaha hoos yimaada Qeybta B ee IDEA la fuliyo; iyo

      (2) In barnaamij kasta oo waxbarasho oo loogu talagalay ardayda naafada ah ee Gobolka dhexdiisa laga maamulo, oo uu ku jiro barnaamij kasta uu maamulo Gobal kale ama hay'ad maxalli kale:

(a) Oo ay hoos timaado kormeerka guud ee shaqsiyaadka mas'uulka ka ah barnaamijyada waxbarashada ee loogu talagalay ardayda naafada ah ee ku jira USOE; iyo

(b) Ay buuxiso heerarka waxbarashada ee USOE.

b. Qeybta B ee IDEA ma xadidayso mas'uuliyadda ay hay'addahan aysan ka ahayn hay'addaha waxbarashada ee bixiya ama bixiya qaar ama dhammaan qarashka FAPE ee la siiyo ardayda naafada ah ee Gobolka deggan.

c. Guddoomiyaha gobolka (ama shaqsi kale iyadoo la hiigsanyo sharciga Gobolka) ayaa wakaalad kasta oo dadweyne ee Gobolka ka jirta ku wareejin kara mas'uuliyadda ah in la xaqiijiyo in shuruudahah ku qoran Qeybta B ee IDEA laga soo baxo marka laga hadlayo ardayda naafada ah kuwa lagu helay dembi sida qof qaangaar ah sida hoos timaada sharciga Gobolka oona ku xiran xabsiyadda qaangaarka ah (§300.149).

## VI.G. FAPE QAABABKA IYO SIDA AY UBIXISO XARUMAHA LA DEGAN YAHAY (METHODS AND PAYMENT FOR FAPE IN RESIDENTIAL FACILITIES) (§300.103).

1. Gobol kasta waxaa dhici karta in gobol kasta isticmaallo illo taageero kastasta illo gaar ah, mid maxalli, iyo illaha Federaalka ee ay ka heli karaan Gobolka dhexdiisa si ay ubuuxiyaan shuruudaha hoos yimaada Qeybta B ee IDEA. Tusaale ahaan, haddii ay daruuri tahay in ardayga naafada ah lagu qoro xarun la degan yahay, Gobolka wuxuu isticmaali karaa heshiisyo wadajir ah oo udhaxeeya hay'addaha lugta ku leh in ay wadaagaan qarashka meeleynta.

2. Ma jirto meel qeybtan ah oo cayimaysa ama qolada seddexaad ka qafiifinaysa waajibaadka looga baahnaa in ay fidiso ama bixiyo adeegyada loo fidin la'haa ardayga naafada ah.

3. USOE waa in ay xaqiijisaa in aysan dhicin doonin wax dib u dhaca ah oo ku yimaada hirgelinta IEP ga ardayda, oo ay ku jirto marka ay jirto isha bixin la'hayd oo fidin la'hayd ama bixin la'hayd waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee la siinayo ardayga sida loo go'aamiyay.

## VI.H. ARDAYGA NAAFADA AH EE LAGU HELO DAMBI SIDA QOF QAANGAAR AH OONA LAGU XIRO XABSIYADDA DADKA QAANGAARKA AH (STUDENTS WITH DISABILITIES CONVICTED AS ADULTS AND INCARCERATED IN ADULT PRISONS) (§300.324).

1. Waajibaadka ah in FAPE ay diyaariso, oo ku jiraan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarkan, oo ay quseyso dhammaan ardayda naafada ah oo ay da'doodu udhaxayso 18 ilaa iyo 21 jir ee lagu xirey xabsiyadda dadka qaangaarka ah, aysan ka ahayn:

a. Shuruudaha la xiriira ka qeybqaadashada ardayda naafada ah ee ku jira qiimeynta Gobolka iyo degmo ahaan.

b. Shuruudaha la xiriira qorshaha ka gudubka iyo adeegyada kalaguurka marka laga hadlayo ardayda sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA xaq u la'haanshahoodu uu dhammaan doono, maxaa yeeley da'dooda, ka hor inta aan xabsiga laga sii dayn iyadoo loo tixgelinayo xukunkooda iyo xaq u la'haanshaha in waqti hore la sii daayo.

2. Kooxda IEP ee ardayda naafada ah ee lagu helo dambi sida qof qaangaar ah sida hoos timaada sharciga Gobolka oo lagu xiro xabsiga dadka qaangaarka ah waa loo bedeli karaa ardayga IEP ama meeleynta haddii Gobolka uu niyad wanaag dhanka amniga ka muujiso ama ay ku qasabtay danaha edbinta oo haddii kale aan la qaabili karin. Shuruudaha IEP iyo LRE ma quseyso marka laga hadlayo sida baddellaadan.

# VII. KA GUDUBKA (TRANSITIONS).

## VII.A. KA GUDUBKA QEYBTA C ILAA QEYBTA B EE IDEA (TRANSITION FROM PART C TO PART B OF THE IDEA).

1. Bilowga sanad dugsiyeed kasta, LEA kasta waa in ay howl gelisaa, arday kasta oo qaba naafonimo ilaa iyo xadka awoodda sharciga, IEP loogu talagalay ardayda ay da'doodu udhaxeyso seddex ilaa iyo shan jir (§300.323).

2. USOE iyo LEA waa in ay in howlgeliyaan shuruucda iyo hanaan lagu xaqiijinayo in (§300.124):

    a. Ardayda ka qeybqaadanaysa barnaamijyada dhexgalka hore la caawiyo sida hoos timaada Qeybta C ee IDEA, iyo kuwa ka qeybqaadanaya barnaamijyada iskuulka barbaradka la caawiyo sida hoos timaad Qeybta B ee IDEA, in ay ula kulmaan ka gudub degan oo wax-tar u leh barnaamijyada iskuulka barbaradka;

    b. Xaq uyeelashada ardayga dhalashadiisa seddex jirka, LEA waa in ay xaqiijisaa in in IEP loo sameeyo oona loo hirgeliyo ardayga;

    c. Haddii ardayga seddexdiisa sano ugasho sanad dugsiyeedka ka dib,LEA waa in ay xaqiijisaa in IEP loo sameeyay, iyo in ardayga kooxdiisa IEP ay go'aamiyaan taariikhda sanad dugsiyeedka xigga ee goorta adeegyda hoos imaanaya IEP ay bilaaban doonnaan, aysan ka ahayn haddii kooxda IEP ay go'aamiso in adeegyada sanad dugsiyeedka la dheereeyo loo baahan yahay in ka baxsan mudada sanad dugsiyeedka; iyo

    d. LEA kasta oo ay saameyso wuxuu ka qeybqaadan doonaa qorshaynta ka gudubka oo ay qabanqaabisay hay'adda loo cayimay in ay hogaamiso sida hoos timaada Qeybta C.

3. IEP usameynta arday naafo ah ee jira seddex ilaa shan ama, LEA uu go'aamiyo, ardayga laba sanno jirka ah ee naafada ah oo seddex sanno u galayso inta sanad dugsiyeedka lagu jiro, kooxda IEP waa in ay tixgelisaa waxa ku qoran Qorshaha Adeegga Qoyska ee Shaqsiyeed (IFSP) ee ku qoran bayaanka iyo qeybta kor u qaadaysa diyaarinta iskuulka oo raacinaysa xirfaddaha aqriska, luqadda, iyo xisaabta (§300.323).

4. Marka laga hadlayo ardayga oo horey loogu adeeggay sida hoos timaad Qeybta C ee IDEA, casuumaad la isugu yeerayo kulanka IEP ee koowaad waa in, marka ay waalidiinta soo codsadaan, loo diraa Qeybta C isuduwaha adeegga ama wakiillada nidaamka Qeybta C si looga caawiyo adeeg ka gudub oo wanaagsan (§300.321).

## VII.B. ADEEGYADA KA GUDUBKA—ISKUUL ILAA ISKUULKA WIXII KA DAMBEEYA (TRANSITION SERVICES—SCHOOL TO POST-SCHOOL).

1. Ulajeeddo (§300.1).

   Si loo hubiyo in dhammaan ardayda naafada ah ay uhelaan waxbarasho dadweyne oo bilaash ah oo ku haboon ee xoogga lagu saarayo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee loogu talalgay in ay buuxiso baahida gaarka ah oo ayna udiyaariso waxbarasho dheeraad, shaqo, iyo nolol isku filnaansho.

2. Sharaxaadaha (§300.43).

   a. *Adeegyada kalaguurka* micnaheedu waa howlo la isku soo dabarariday oo loogu talagalay ardayda naafada ah ee:

      (1) Waxaa loogu talagay in ay udhaxeyso natiijooyinka hanaanka, ahmidda la saaro hagaajinta akadeemiyadda iyo guusha howsha ardayga leh naafada in ay u fududeyso dhaqdhaqaaqa ardayga iskuulka ilaa howlaha iskuulka ka dib, oo ay ku jiraan waxbarashada iskuulka ka dib, waxbarasho xirfadeed, shaqada midaysan (oo ay ku jirto taageerada shaqada), waxbarashada ardayga qaangaarka ah ee socota, adeegyada qaangaarka, nolosha madaxbanaan, ama ka qeybgelinta jaaliyadda;

      (2) Waxaa sal loogu dhigayaa baahida shaqsiga ardayga, iyadoo xisaabta lagu darayo kartida, dooqa iyo danaha ardayga; oo ay ku jiraan:

         (a) Waxbaris;

         (b) Adeegyada la xidhiidha;

         (c) Waayo aragnimada bulshada;

         (d) U sameynta bartilmaameedyo shaqo iyo isku filnaansho nolol iskuulka marka uu dhammaado; iyo

         (e) Haddii ay haboon tahay, uu hantiyo xirfaddo nolol maalmeed iyo qodo qiimayn shaqaalayn oo shaqaynaysa

   b. Adeegyada ka gudubka ee loogu talalgay ardayda naafada ah ayaa waxaa dhici karta in ay tahay waxbarashada gaarka ah, haddii loo fidiyo waxbarashada sida gaarka loo habeeyey, ama adeegyada la xiriirta, haddii loo baahdo in ay ardayga naafada ah ka caawiso inuu ka faa'ideysto waxbarashada gaarka ah.

3. Ka qeybqaadashada waalidka (§300.322).

   Ardayga naafada ah looga bilaabo in aan ka yarayn IEP uga horeeyey ee taabo-galaysa goorta ardayga uu 16 jirsado (sida kulan IEP ee la qabtay goorta ardaygu uu 15 sanno jirsado), ama ka yar haddii ay kooxda IEP go'aamiso inay ku haboon tahay, sidoo kale ogeysiiska waa :

   a. In ulajeedka kulanka uu noqon doono in lagu tixgeliyo himilooyinka dugsiga sare ka dib iyo adeegyada loo bedelli doono ardayga; iyo

   b. In LEA ay casuumi doonto ardayga; iyo

   c. In lagu caddeeyo hay'ad kale oo kasta oo lagu casuumi karo, iyadoo waalidka idin laga haysto ama ardayga 18 jir yahay ama ka weyn yahay, in ay wakiil soo dirsadaan.

4. Kooxda IEP (§300.321).

   Kulanka kooxda IEP oo ay ku jiraan sida ulajeedka u sameynta qorsho ka guuritaan:

   a. LEA waa in ay casuuntaa ardayga naafada qaaba inuu soo xadir kulanka IEP haddii ulajeedada kulanka kooxda IEP ay tahay in laga baaraandeggo himilooyinka dugsiga sare ka dib ee ardagyga iyo adeegyada ka gudubka ee loo baahnaan doono ee ardayga ka caawinaya inuu himilooyinkan gaaro.

   b. Haddii ardayga uusan kulanka IEP ga soo xaadirin, LEA waa in ay qaadaa tallaabo kale oo ay ku xaqiijinayso in ardayga waxyaaba oo duurbiddayo iyo waxyaabaha uu xiisaynayo loo tixgeliyo.

   c. Ilaa iyo inta ku haboon, oo idinna laga haysto waalidiinta ama ardayga gaaray da'da 18 sanno jir ama ka weyn, LEA waa in ay casuuntaa wakiil ka socda hay'adda ka qeybqaadanaysa oo ay ubadan tahay in ay mas'uul ka tahay in ay fidiso ama ay bixiso adeegyada loo wareejinayo.

5. Sharaxaada IEP (§300.320(b)).

   a. Adeegyada kalaguurka laga bilaabo in aan ka yarayn IEP uga horeeyey ee taabo-galaysa goorta ardayga uu 16 jirsado (sida kulan IEP ee la qabtay goorta ardaygu uu 15 sanno jirsado), ama ka yar haddii ay kooxda IEP go'aamiso inay ku haboon tahay, iyo markaas ka dibna sanadle ahana loo cusboonaysiin doono, IEP waa inuu ku jiraa:

      (1) Himilooyin cabbir ee dugsiga sare ka dib, oo uu ku jiro himilooyinka akadeemigga iyo waxqabsiga, iyada oo lagu salaysanayo da'da-ku haboon qiimeynta bedellaada ee la xiriira tababar ama waxbarasho,

shaqo, iyo, halka ay ku haboontahay, xirfaddaha isku filnaanshaha nololeed;

(2) Adeegyada ubedelashada oo ay ku jiraan koorsooyinku la qaatay, ee loo baahan yahay si ardayga loogu taageero inuu gaaro hadafyada dugsiga sare ka dib.

6. Xuquuqda bedellida ee xiliga qaangaarka(§300.320(c) & §300.520).

a. Bilaabanaya mudo aan ka yarayn hal sano ka hor marka ardayga uu gaaro da'da qaangaarka (18 jir), IEP ga waa in ay la socotaa qoraalka ah in ardayga iyo waalidiinta ardayga lagu wargeliyay xuquuqda ardayga sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA oo ku wareejin doona ardayga marka uu gaaro da'da qaangaarka (aysan ka ahayn arday naafo ah oo ay maxkamadda go'aamisay inuu naafo yahay). Xuquuqdan waxaa ka mid ah:

(1) Ardayga qaangaar ah wuxuu xaq uleeyahay inuu/inay ansaxiso meeleynta waxbarashada iyo Barnaamijka Shakhsiyadeed ee Waxbarasho (IEP) iyadoon wax caawinaad ah ka helin waalidiinta, qoyska, ama udoodaha gaarka ah.

(2) Ardayga qaangaarka ah wuxuu xaq u leeyahay inuu waalidiinta, qoyska, ama udoodaha gaarka ah u ogolaado inay caawiyaan haddii isaga/iyada ay doonayaan.

b. LEA waa in ay bixisaa ogeysiis kasta sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarka dhinaca ardayga iyo waalidiinta (§300.520).

c. Dhammaan xuquuqaha kale ee waalidiinta uu siinayo sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA ardayga siinayo.

d. Dhammaan xuquuqaha la siiyay waalidka sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA ardayga ee uu siinayo ardayga ku xiran xabisan halka dhalinta yar ama qaangaarka, xabsiyadda asluubta ee Gobolka ama maxalliga.

7. Joojinta xaq u yeelashada sida bedellaada meelaynta (§300.305).

a. Qiiimeynta la isagama baahna ka hor inta ardayga aan laga joojin xaq u yeelashada sida hoos timaada qeybtan oo sababtay ka qallan-jebinta dugsiga sare ee shahaado dugsi sare oo caadi ah looga baxo, ama sababtay inuu dhaafay da'da xaq u yeelashada FAPE sida hoos timaada sharciga Utah.

b. Ardayga xaq u yeelashadiisa ay uga joogsatay sabab la xiriirta ka qallan-jebinta dugsiga sare ee shahaadada dugsiga sare ee caaadiga ama ay ku weynaatay da'da xaq u yeelashada FAPE sida hoos timaada sharciga Utah, LEA waa in ay ardayga ay u fidisaa qoraal oo kooban oo ah

waxqabadka guusha ardayga iyo howsha waxqabakda ardayga, ee ay ku jiri karto talosiin sida ardayga looga caawiyo in ardayga uu ka soo baxo hadafyada dugsiga sare ka dib.

8. Ku guuldareysiga in la buuxiyo bartilmaameedyada ka gudubka (§300.324).

   a. Haddii ay hay'ad ka soo qeybqaadanayso, ee aan ahayn LEA, ay ku guuldareysato in ay bixiso adeegyada loo gudbin doono ardayga ee IEP kor ku xusan, LEA waa in dib la isugu yimaadaa kulanka IEP si loo caddeeyo tabo ka duwan ee lagu buuxinayo hadafyada ka gudubka ee ardayga kaasoo lagu qorey IEP ardayga.

   b. Qeybtan ma jirto hay'ad ka qeybqaadanaysa oo ay loo qafiifinayo, oo ay ku jiraan hay'adda dhaqan-celinta mihno ee Gobolka, mas'uuliyad ay ku fidiyaan ama ay ku bixiyaan adeeg kasta oo u gudbin ah ee hay'adda oo ay haddii kale ufidin la'hayad ardayga naafada ah ee soo buuxiya shuruudaha xaq uyeelashada ee LEA (§300.324).

   c. Haddii hay'ad kasta oo dadweyne aysan ka ahayn hay'ad waxbarasho oo haddii kale waajib ku ah sida hoos timaada sharciga Gobolka ama kan Federaalka, ama ku qoran mas'uuliyadda sida hoos timaada heshiiska sharciga Gobolka ama gobollo, in ay fidiso ama ay bixiso adeeg kasta oo sidoo kale loo tixgelinayo inuu yahay adeeg waxbarasho gaar ah ama adeegyada la xiriira sida, balse kuma koobna oo kaliya, adeegyada la xiriira qalabyada teknoolijiyada caawis, qalabyada teknoolijiyada caawis, adeegyada la xiriira, Taageerada iyo adeegyada sooraaca, adeegyada ka gudubka oo daruuriga u ah si ay FAPE ugu xajiso in ardayga naafada ah ee Gobolka, hay'adda dadweynaha waa in ay ka soo baxdaa waajibaadkaas ama mas'uuliyaddaas, si toos ah ama iyada oo qandaraas ku bixinaysa ama samaysa qabanqaabo kale ama heshiis la gasha hay'ad gobol kale.

   d. Haddii hay'ad dadweyne oo aan ka ahayn hay'adda waxbarashada ay ku guuldareysato in ay fidiso ama bixiso waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, LEA waa in adeegyadaas ay ardayga waqtigiisa ugu fidisaa ama ay bixisaa. LEA waxaa ay awood uleedahay in ay weydiisato in lacagta dib loogu soo celiyo adeegyada ay uqabatay hay'adda dadweynaha ee aan waxbarashada qaabilsanayn ee ku guuldaraysatay in ay adeegyadan fidiso ama ay bixiso oo waa in hay'addaas ay LEA dib ugu soo celisaa sida waafaqsan shuruudaha heshiiska hay'addaha (§300.154).

9. Ardayda naafada ah ee ku jira xabsiyadda dadka qaangaarka ah (§300.324).

   a. Shuruudaha la xiriira qorshaha ka gudubka iyo adeegyada kalaguurka marka laga hadlayo ardayda sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA xaq u la'haanshahoodu uu dhammaan doono, maxaa yeeley da'dooda, ka hor

inta aan xabsiga laga sii dayn xabsiyada iyadoo loo tixgelinayo xukunkooda iyo xaq u la'haanshaha in waqti hore la sii daayo.

b. Waajibaadka ah in FAPE laga dhigo mid ay uhesho dhammaan ardayda naafada ah ma quseyso marka laga hadlayo ardayda ay da'doodu udhaxayso 18 ilaa yo 21 jir ilaa iyo sharciga Gobolka ugama baahna in waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA loo fidiyo ardayda naafada ah oo, halkii ugu dambeysey ee ay dhiganayeen ka hor inta aannan lagu xerin xabsiga (§300.102):

(1) Horeyba looma aqoonsanayn in ay yihiin arday naafo ah; oo

(2) Horeyba uma haysan IEP sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA.

c. Ka baxsanaanta ma quseyso ardayda naafada ah, oo ay da'doodu udhaxeyso 18 ilaa iyo 21 jir, kuwaasoo:

(1) La aqoonsaday in ay yihiin arday qaba naafo oona halay adeegyo sida waafaqan oo hoos timaada IEP, balse iskuulka ka tagay ka hor inta aannan la xiriin; ama

(2) IEP kuma haysan goobta ugu dambeysey ee uu wax ku baranayay, basle waxaa loo aqoonsaday inuu yahay arday naafo ah.

## VII.C. QALLAN-JEBINTA.

1. Waajibaadka ah in LEA laga dhigo mid ay uhesho dhammaan ardayda naafada ah ma quseyso marka laga hadlayao ardayda naafada ah ee dugsiga sare uga qalinjebiyay shahaadada dugsiga sare ee caadiga ah(§300.102(a)(3)(i)).

a. Ka reeban sida uu dhigayo Xeerka VII.C.1 ma quseeyo ardayda ka qalinjebiysay dugsiga sare balse aan la siin shahaadada dugsiga sare ee caadiga ah (§300.102(a)(3)(ii)).

b. Ka qallan-jebinta dugsiga sare oo shahaadada dugsiga sare oo caadiga ah laga soo qaato waxay u taagan tahay isbadel meeleyn, oo ay uga baahan tahay ogeysiiska qoraalka hore(§300.102(a)(3)(ii)).

(1) Ogeysiiska qoraalka hore waa inuu ka koobnaadaa dhammaan shuruudaha ku yaalla Xeerk IV.D, oo ay ku jiraan waqti ku filan caqli gal ah ka hor inta LEA aysan soo jeedin in ay joojiso xaq u yeelashada ardayda sida hoos timaada IDEA iyaga oo ardayga siinayoa shahaado (§300.503).

c. Kalmada "shahaadada dugsiga sare oo caadi ah" kuma jirto shahaado ka bedellan oo aysan si buuxda aanan udhigmin heerarka

akadeemiyadda Gobolka, sida shahaado ama imtixaanka horumarka waxbarashada guud (GED) (§300.102(a)(3)(iv)).

2. Kooxda IEP waxaa dhici karta in ay bedesho shuruudaha qallan-jebinta oo waa in ay IEP ga ku qortaa qaabka iyo xadka bedellaada, ku bedellaada, iyo/ama ka dhaafista lagu sameeyo si loo buuxiyo baahida ardayga naafada ah.

3. Kooxda IEP waa in ay raadraacdaa *Tilmaamaha Qallan-jebinta Waxbarashada Gaarka ah ee USOE*si loo helo macluumaad dheeraad ah.

## VII.D. KOOXDA LA TASHIGA EE WAXBARASHADA GAARKA AH E UTAH (UTAH SPECIAL EDUCATION ADVISORY PANEL) (USEAP) (§300.168).

USEAP waa in ay ku soo dartaa in aan ka yareyn hal wakiil oo ka socda waxbarasho machad farsamo, jaaliyad, ama urur ganacsi oo u ololeelaya qodobka adeegyada kalaguurka ee ardayda naafada ah.

## VII.E. ISTICMAALKA USOE EE MIISAANIYADDA QEYBTA B (USOE USE OF PART B FUNDS) (§300.704).

USOE waxaa dhici karta in ay isticmaasho miisaaniyadda Qeybta B ee IDEA oo ay u isticmaasho soo saarista iyo hirgelinta barnaamijyada kagudbka, oo ay ku jiraan iskuduwida adeegyada hey'addaha lugta ku leh taagirdda ka gudubka ardayda naafada ah ee ay uga gudbayaan howlaha dugsiga sare ka dib.

# VIII. WAAJIBAADYADA XAFIISKA WAXBARASHADA EE GOBOLKA UTAH.

## VIII.A. MAS'UULKA KORMEERKA GUUD (GENERAL SUPERVISORY AUTHORITY)

Awoodda iyo mas'uuliyadda sharci u sameynta iyo heerar u dejinta ee qeybta waxbarashada ee ardyda naafada ah waxaa iska leh Guddiga Waxbarashada Gobolka Utah oo waxaa ka saaran mas'uuliyad dastuuri ah in kontorool guud iyo kormeer ay u fidiso nidaamka iskuulka dadweynha (Qodobka X, Qeybta 8) iyo sharci dejinta gaarka ah ee ku qoran Xeerka Utah ee ku Sharaxan (UCA) 53A-15-301 ilaa iyo 305. Xeerarkan degan ee la soo qaatay waxay tilmaamayaan qabanqaabyo wadashaqayn oo ku talagal ah oo udhaxeeya Guddiga Waxbarashada Gobolka iyo hey'addaha waxbarashada maxalliga ah (LEAs). Xeerarkan wuxuu barnaamijyada waxbarashda ee kormeerka guud u fidineyaa in ardayda naafada ah ee ay u adeegaan dhammaan LEA iyo xarumaha ay quseyso waxbarashada ardayda naafada ah, sida soo socota:

**UCA 53A-15-301.**

**(1)** (a) Dhammaan ardayda naafada ah, oo ay da'doodu udhaxayso 3 ilaa iyo 22 jir oo aannan dugsiga sare uga qalinjebin shahaadaha caadiga ah, waxay xaq u leeyihiin waxbarasho dadweyne oo ku haboon.

(b) Guddiga Waxbarashada Gobolka waa in ay Xeerarkan isku si uqaadataa sida sharciga Gobolka iyo Federaalka ay uquseyso hirgelintada cutubkan.

**(2)** Xeerarka ay qaateen Guddiga Gobolka waa inuu ku jiraa kuwa soo socda:

(a) Ardayda naafada in lagu aqoonsado waqti ku filan oo haboon.

(b) Ogaanshaha, qiimeynta, iyo noocyada oo uu qabanayo shaqsi uqalma.

(c) Adeegyo iyo fasallo heerar loogu talagay noqdaan.

(d) Qodob ah dhowr degmo dugsiyeed oo isku jira.

(e) Qodobo ah mas'uuliyaddaha bixinta adeegga.

(f) Shahaado/Shati iyo in shaqaalaha casharbixinta ay uqalmaan.

(g) Adeegyo loogu talagay ardayda laba meel ku qoran ee dhigta iskuulka dadweynaha oo waqti nus ah sida hoos timaada UCA 53A-11-102.5.

**(3)** (a) Guddiga Gobolka wuxuu inuu kontorool guud iyo kormeer ka hayaa dhammaan barnaamijyada waxbarashada ee loogu talagalay ardayda iskuullada Gobolka dhigata ee naafo qaba.

(b) Barnaamijyadan waa in ay uhoggaansanaadaan Xeerarka ay qaateen Guddiga Gobolka sida hoos timaada qeybtan.

**(4)** Muraaqibka Gobolka ee Iskuullada Dadweynaha waa inuu cutubkan dardargeliyaa.

**UCA 53A-15-302.**

**(1)** Guddiga Waxbarashada Gobolka waa inuu umagacaabaa Agaasime Gobol ee Waxbarashada Gaarka, kaas oo noqdaa qof u qalma oo qibrad u leh waxbarashada gaarka.

**(2)** Agaasimaha Gobolka waxaa saaran waajibaadyadan iyo mas'uuliyaddahan soo socda:

(a) Inuu Guddiga Gobolka yo Muraaqibka Gobolka ka caawiyo Casharbixinta iskuullada dadweynaha iyagoo ka soo baxaya waajibaadyadooda sida hoos timaada cutubka.

(b) Degmo dugsiyeedka iyo hay'addaha dadweynaha ee awoodda uleh laga gargaaro laguna dhiirigeliyo barnaamijyada ay ugu talagashay ardayda naafada ah.

(c) Kormeer guud in ay ufidiso dhammaan barnaamijyada laga bixiyo iskuullada dadweynaha, ay bixiso hay'ad dadweyne, xarumo dadweyne, ama hay'ad gaar ah ee wax uqabata ardayda naafada ah.

(d) Iskuullada gaarka loo leeyahay iyo hay'addaha gaarka ah ee kale lagala shaqeeyo waxbarista iyo tababarka ardayda naafada ah.

(e) Barnaamijyada Gobolka oo dhan ay iskala shaqeeyaan barnaamijyada loogu talagalay ardayda naafada ah.

**UCA 53A-15-303.**

**(1)** Degmo dugsiyeed kasta waa in ay fidisaa, si gooni ama iyadoo la shaqeyneysa degmo dugsiyeed kale ama xarumo dadweyne, barnaamij waxbarasho [dadweyne] oo bilaash ah ee ku haboon ee loogu talalgalay dhammaan ardayda naafada ah ee degmadaas deggan. Barnaamijka waa inuu leeyahay xarumaha gaarka ah ee daruuriga ah, casharbixin, iyo adeegyada waxbarashada la xiriira. Qarashaadka ku kaca barnaamijka degmo dugsiyeedka, ama qeybta degm dugsiyeedka ee barnaamijka la wadaago, waa in laga bixiyaa miisaanadiyadda degmo dugsiyeedka.

{Iskuulka dadwaynaha ee madaxa bannaan ee kasta waa in ay fidiyaan waxbarasho [dadweyne] oo ku haboon ee loogu talalgalay dhammaan ardayda naafada ah ee dhigta iskuulka.}

**(2)** Degmo dugsiyeedka [iyo iskuullada dadweynaha ee madaxa bannaan] ee bixiya adeegyada waxbarashada gaarka ah sida hoos timaada cutubkan kaasoo waafaqsan Xeerarka quseeya Guddiga Waxbarashada Gobolka waa in Guddiga lacagta usoo celiyaa sida hoos timaada Cutudbka 17, Cinwaanka 53A, Xeerka ugu Yaraan Dhaqaalaha Iskuulka, iyo sharciyada kale ee quseeya.

**(3)** Dugmo dugsiyeedka waxaa dhici karta, si gooni ah ama iyada oo la kaashanaysa xarumaha dadweynaha ee kale, waxbarasho iyo tababar u fidisaa shaqsiyaadka naafada leh oo ka yar 3 ama ka weyn 22 jir. Qarashka sida barnaamijyadan waxaa laga bixin karaa ujrooyinka, tabarrucaadyada, iyo deeqaha kale ee ay degmo dugsiyeedka ay ka hesho ee loogu talalgalay taageerida barnaamijkan, balse lacagta kama soo bixi karo miisaaniyadda waxbarashada dadweynaha.

Si loo helo deeq lagu bixiyo sida hoos timaada Qeybta B ee Xeerka Waxbarasha Shaqsiyaadka La'xaadka la' (IDEA), Xafiiska Waxbarashada Gobolka waa inuu Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka u gudbiyaa, isagoo guud ahaan ku hadlaya Gobolka Utah, Shuruucda iyo hanaanka qoran ee ilaaliya howlaha barnaamijyada waxbarashada gaarka ah, oo waa in ay addeecista shuruudaha maamulka Federaalka ee tixan ee Xeerarkan ku sharaxan. Sidaas darteed, dhammaan qodobada hoos yimaada Qeybta B ee IDEA waxay quseysaa qeyb hoosaadka siyaasadeed ee Gobolka ee lugta ku leh waxbarashada ardada naafada ah, iyadoon la eegeyn haddii qeyb hoosaadka ay hesho wax lacag ah sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA. Tani waxaa ku jirto Xarumaha xabsiyadda dhalinta yar iyo kuwa qaangaarka ee maxalliga iyo kan Gobolka ahba. Shuruudaha hoos yimaada Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarkan waxay isku waafaqsan yihiin in LEA kasta iyo hay'adda dadweynaha ay awood toos ah la leedahay ayna toos u fidinayso waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee ka jira Gobolka Utah.

## VIII.B. XAQ U YEELASHADA GOBOLKA (STATE ELIGIBILITY).

1. Xaq u yeelashada gargaarka (§300.100).

   Gobolka gargaar ayuu xaq u leeyahay sida hoos timaado Qeybta B ee IDEA ee sannad xisaabeedka haddii gobolka soo gudbiyo qorshe hubaal siiya Xog-haya in gobolka awood loogu siiyo shuruucda iyo hanaanka lagu hubinayo in gobolka ka soo baxo shuruudaha qeybtan.

2. Xaq u yeelashada Gobolka ee Iskuulka-barbaradka (§300.804).

   Gobolka wuxuu xaq uleeyahay deeq sida hoos timaada Qeybta 619 ee IDEA haddii gobolka xaq uyeesho sida hoos timaado Qeybta 612 ee IDEA in ay

deeq hesho sida hoos timaada Qeybta B ee idea; iyo in FAPE loo diyaariyo dhammaan ardayda naafada ah, seddex jir ilaa iyo shan jir, ee gobolka deggan.

3. Dalabyada barnaamijka (§300.110).

   Gobolka waa inuu hubiyaa in LEA ay qaadayso tallaabooyinka si loo hubiyo in ardaydooda naafada ah loogu helo barnaamijyada iyo adeegyada waxbarashada ee dhowrka ah ee ay helaan ardayda aan naafada ahayn oo degan aagga ay hay'adda adeegga ka bixiso, adeegyadaaas oo ay ku jiraan maadooyinka aadaabta, miyuusigga, maadooyinka farsamada, waxbarashada aqalka iyo aqoonta guud, iyo waxbarashada xirfaddaha.

4. Barnaamijyada waxbarashada shaqsiga ah (IEP) (§300.112).

   Gobolka waa inuu hubiyaa in arday kasta IEP loo diyaariyo, dib loo eego, and dib loogu saxo arday kasta oo naafo ah sida waafaqsan Qeybta III ee Xeerarkan.

5. Gargaarka farsamo iyo howlaha tababarka§300.119).

   SEA kasta waa in ay fulisaa howlaha si loo hubiyo in macalimiinta iyo maamulayaasha dhammaan hay'addaha bulshada ay:

   a. Si buuxda loogu wargeliyo mas'uuliyaddaha ka saaran in ay hirgeliyaan shuruudaha meesha ugu xadisan (LRE) ee hoos timaada Qeybta B ee IDEA; oo

   b. Loona fidiyo gargaar iyo tababar farsamo oo daruuri ah in laga caawiyo dadaalkan.

6. Habab nidaam oo la dhowro (§300.121).

   a. Guud ahaan.

      Gobolka waa inuu leeyahay Habab nidaam oo la dhowro oo la howlgeliyay si loo hubiyo in hay'ad shacab oo kasta ee Gobolka ka jirta ay soo buuxiso shuruudaha looga baahan yahay§300.500 ilaa iyo 300.536.

   b. Habab nidaam oo la dhowro oo la magacaabay.

      Ardayda naafada ah iyo waalidiintooda waa in la siiyaa hababkar nidaam ee la dhowrey ee ku magacaaban sida hoos timaad Qeybta IV iyo V ee Xeerarkan.

7. Qiimayn (§300.122).

   Ardayda naafada ah waa in lagu qiimeeyaa sida waafaqsan §300.300 ilaa iyo 300.311 iyo Qeybta II ee Xeerarkan.

8. Asturnaanta macluumaadka shaqsiga caddeynaya(§300.123).

   Gobolka waa inuu haystaa shuruudo iyo nidaamyo la raacayo ee howlgashan si loo hubiyo in hay'addaha bulshada ee Gobolka ka jira ay addeecaan §300.610 ilaa iyo 300.626 ee la xiriira ilaalinta macluumaad shaqsiga caddeynaya oo kasta ee la ururiyo, la isticmaalo, ama la hayo sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA.

9. Mas'uuliyadda Gobolka ee la xiriirta ardayda dhigata iskuullada gaarka ah loo leeyahay(§300.129).

   Gobolka waa inuu howlgeliyaa shuruudo iyo nidaamyo la raacayo ee hubinaya in LEAs, iyo, haddii ay jirto, SEA, in ay ka soo baxaan shuruudaha iskuullada gaarka loo leeyahay ee §300.130 ilaa iyo 300.148.

10. Hirgelinta SEA ee Hababka Nidaam ee la Raacayo§300.150).

    SEA (iyo hay'ad kasta oo mas'uuliyad lagu qorey sida uu qabo §300.149(d)) waa in ay leeyihiin oo ay howlgeliyeen nidaamyo oo ay hay'adda dadweynaha ee kasta ay ku wargelinaaan mas'uuliyaddooda oo ah in la hubiyo si taabo gal leh loo hirgeliyo Habab nidaam oo la dhowro ee la raacayo ee ku aadan ardayda ay hayadda dadweynaha ay u adeegto.

11. Mas'uuliyadda SEA iyo hay'addaha dadweynaha ee kale(§300.500).

    SEA kasta waa in ay hubisaa in hayad dadweyne kasta ay dhidibdhigto, ay hayso, oo ayna hirgeliso Habab nidaam oo la Dhowrayo ee ka soo baxa shurudaha Qeybta IV iyo V ee Xeerarkan.

12. Aan isla ekayn oo Aan isku mid ahayn (§300.173).

    Gobolka wuxuu si joogto ah, u howlgeyay, si hootimaada ujeedada Qeybta B iyo Qeybta 618(d) ee IDEA iyo Qeybta II ee Xeerarkan, shuruudo iyo nidaamyo la raacayo ee loogu talagay in loogu hortago in si qalad ah loo magacaabo ama loo aqoonsado inta metasha jinsi iyo qowmiyadda ardayda sida arday naafo ah, oo ay ku jiraan ardayda naafada ah ee qaba dhinnaansho gaar ah.

**VIII.C. DABAGALKA IYO FULINTA GOBOLKA (§300.600).**

1. USOE waa in:

   a. Ladabagalaa hirgelintii Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarkan;

b. Si sanadle ah loo go'aamiyaa waxqabadka ku saabsan mid kasta oo LEA iyadoo la isticmaalayo qeybaha §300.603(b)(1);

c. Lafuliyo hirgelinta Qeybta B ee IDEA iyo Xeerarkan iyadoo la isticmaalayo nidaamyada lagu fuliyo ee ugu haboon, kaasoo la doonayo inuu ku jirto, haddii la heli karo, fulinta nidaamyada lagu caddeeyey ee §300.604(a)(1) (gargaar farsamo), §300.604(a)(3) (shuruudaha maalgelinta ee LEA), §300.604 (b)(2)(i) (qorshe tallaabo ee LEA lagu saxayo), §300.604(b)(2) (qorshe tallaabo ee lagu saxayo ama lagu wanaajinayo qorshaha, §300.604(b)(2)(v) (iyadoo LEA ay ka reebbayso maalgelinta, dhammaan ama qeyb ka mid ah), iyo §300.604(c)(2) (iyadoo SEA ay ka reebbayso maalgelinta, dhammaan ama qeyb ka mid ah); iyo

d. Si sanadle ah looga soo warbixiyo waxqabadka Gobolka iyo mid kasta oo ka mid ah LEA sida hoos timaada IDEA. §300.602(b)(1)(i)(A) iyo §300.602(b)(2).

2. Iyadoo qaadaysa mas'uuliyaddeeda oo ah dabagalka sida hoos timaada Xeerka VIII.C.1.d, Gobolka waa inuu hubiyaa in goorta ay sheegto in ay jirto ku dhaqan la'aan ah shuruudaha qeybtan ee ku aadan dhanka LEA, ku dhaqmi la'aanta waa in sida ugu dhaqsaha badan loo saxaa, oo waa inaysan dhaafin in ka yar hal sanno ka dib marka Gobolka uu soo sheego ku dhaqmi la'aanta.

3. Ahmiyadda ugu horeyso ee howlaha dabagalka ee dhanka Gobolka waa inuu:

   a. Ahaa mid wanaajinaya natiijooyinka iyo howlaha waxbarashada ee dhammaan ardayda naafada ah; iyo

   b. Hubiyaa in hay'addaha bulshada ay ka soo baxdaa shuruudaha barnaamijka sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA, iyadoo si gaar ah dhidabada loo saarayo shuruudahan kuwooda aadka ugu soo dhow ee la xiriira wanaajinta natiijooyinka waxbarashada ee ardayda naafada ah.

4. Ayadoo ay qeyb ka tahay mas'uuliyaddeeda, USOE waxay isticmaashaa tilmaamayaa cabbiraya tirada iyo tilmaamayaa cabbiraya tayada, iyo tilmaamayaal ay dhidabdhigtay Xog-haynta Gobolka ee qorshaha waxqabadka.

5. Sida ay uga baahan tahay qeybtan, USOE waxay ilaalinaysaa hey'addaha bulshada ee Gobolka ku dhexyaallla, iyadoo isticmaalayso tilmaamayaasha cabbirka tirada ee meelahan ugu muhiimsan, oo iyada oo isticmaalaysa tilmaamayaa cabbiraya tayada sida loogu baahan yahay oo si sax ah loo cabbirayo waxqabadka meelahan:

   a. Qodobada waxbarashada dadweynaha bilaashka ah ee ku haboon meesha ugu yar xadisan.

b. Kormeerka guud, oo uu ku jiro Ubad Helid, kormeer taaba-galaya, isticmaalka qaraarka kulamada, dhex-dhexaadista, iyo nidaamka adeegyada kalaguurka.

c. Iyadoon si sax ah aan la isugudheeli tirnayn kooxaha jinsi iyo qowmiyad ku jira waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, iyadoo taasna ay ugu wacan tahay sida saxda ah ee aanan loo kala caddeyn.

6. Howlaha dabagalka ee Meesha Ugu Xadisan (LRE) (§300.120).

a. USOE waa in socodsiisaa howlaha si loo hubiyo in shuruudaha LRE ay LEA kasta howlgeliso.

b. Haddii ay jirto wax caddeymo oo ah in LEA ay sameyso meeleyn aan ku habooneyn shuruudaha LRE, USOE waa in:

(1) Ay dib u eegtaa cudur daarka ama sababta LEA ay u sameyneyso sidaa; iyo

(2) In laga caawiyo qorshaha iyo howlgelinta tallaabo kasta oo lagu saxayo oo darruurina ah.

## VIII.D. DABAGALKA BARNAAMIJKA USOE(USOE PROGRAM MONITORING).

1. USOE ayaa mas'uul ka ah dabagalka iyo qiimeynta dhammaan hey'addaha bulshada ee ku dhexyaala Gobolka Utah ee lugna ku leh waxbarashada ardayda naafada ah, da'da 3 ilaa iyo 21 jir. Iyadoo la mid ah dadaalada dowladda Federaalka oo ah in la abuuro nidaam dabagal oo ahmiyadda saaraya waxtarka barnaamijka iyo natiijooyinka ardayda, USOE waxay soo saartay nidaam lagu daydo ee xoogga lagu saarayo qaabka lagu wanaajinnayo oo uu ujirayo nidaamka adeeg bixinta iyo in si wanaagsan saameyn loogu yeesho guusha ardayga. Nidaamkan dabagalka, Nidaamka Qorshaynta Horumarinta Barnaamijka Utah (UPIPS), wuxuu kor uqaadaa wadashaqayn dhexmarta LEA ama heyad bulsho kale oo kasta iyo USOE. UPIPS waxay kaalin ku leedahay qorshaynta istiraatiijiyada oo waxay sii wadaysaa in si wanaagsan loo addeeco oo loo wanaajiyo.

2. Dhammaan LEAs waxay lug ku leeyihiin nidaamka dabalgalka UPIPS.

a. UPIPS waxaa ka kooban howlo go'an ee u kala socda laga bilaabo is-qiimeyn LEA, qiimeyta USOE ee xaqiiqahan, hirgelinta tallaabada lagu saxayo, haddii loo baahdo, iyo qorshaha tallaabada wanaajinta.

b. LEA waa in ay dhammeystirtaa howlaha looga baahan yahay sida ku qoran waqtiga mudo ee USOE ay siisay.

c. Dhammaan LEA waxaa la siiyay horrumarinta xirfadda shaqaalaha iyo faahfaahinno la daabacay ee dhammaan shuruudaha.

d. Horrumarinta xirfadda shaqaalaha oo dheeraad ah, gargaar farsamo, iyo taageero joogto ah ee la siinayo shaqaalaha LEA si loo wajaho mas'uuliyaddaha iyo shuruudaha waxaa lagu bixiyaa ayadoo loo maro hanaanka, sidii loogu baahdo. Faahfaahin dheeraad ah ee hanaanka iyo shuruudaha UPIPS waxaad ka heleysaa http://www.schools.utah.gov/.

3. Natiijooyinka hanaanka dabagalka si caam ah ayaa loo heli karaa, adiga oo soo codsada.

## VIII.E. QORSHOOYINKA WAXQABADKA GOBOLKA IYO URURINTA MACLUUMAADKA (STATE PERFORMANCE PLANS AND DATA COLLECTION (§300.601).

1. Sida waafaqsan shuruudaha dowladda Federaalka, USOE waxay leedahay Qorshe Waxqabad Gobol (SPP) ee qiimeeya dadaaladda USOE ee ku aaddan hirgelinta shuruudaha iyo ulajeedooyinka Qeybta B ee IDEA, iyo qeex sida USOE ay uwanaajinayso hirgelinta noocan ah.

   a. USOE waxay SPP usoo dirsatay Xog-haynta in la soo ogolaado sida waafaqsan hanaanka ogolaanshaha.

   b. Gobol kasta waa inuu dib u eegaa SPP ugu yaraan lixdii sannadba hal jeer, oo wixii isbadel ah Xog-haynta usoo diraa.

   c. Iyaddoo ay SPP qeyb ka tahay, USOE waxay dhidibada utaagtay bartilmaameedyo laga cabbirayo iyo adag oo tilmaamaya Xog-hayaha wuxuu dhidab dhigey ee hoos yimaada meelaha mudnaanta la siiyo.

2. Ururinta macluumaadka.

   a. USOE waa in ay ururisaa macluumaad la isku haleyn karo oo jira sida warbixinta sanadlaha uu Xog-hayaha ugu baahdo ee lagu tilmaamayaasha uu dhidbay Xog-hayaha ee SPP loogu talagalay.

   b. USOE, sida uu Xog-hayaha uu ufasaxay, waxay ururinayaan macluumaad si gaar ah utilmaamaya oo loo marayo dabagalka ama tijaabada USOE, oo waxay ururinayaan macluumaad ah tilmaan kasta ee LEA ugu yaraan sanadkiiba mar inta lagu jiro mudada SPP.

   c. Ma jirto waxa Qeybta B ee IDEA ku jira oo macnaynaya in la fasaxo in la sameeyo kayd macluumaad oo qaran oo caddeynaya macluumaad shaqsi ahaan sheegaya shaqsiyaadka lugta u leh daraasadda ama macluumaad kale ee la ururiyay sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA.

3. Isticmaalka Gobolka ee ku aadan bartilmaameedyada iyo warbixinta (§300.602).

a. USOE waxay isticmaalaan bartilmaameedyada la dhidab dhigay ee Qorsho Waxqabad Gobol (SPP) iyo meelaha mudnaanta ee lagu falanqeeyo waxqabadka LEA kasta.

b. Warbixinta bulshada iyo asturnaanta.

(1) USOE ga:

(a) Si sanadle ah ayay dadka ugu soo warbixisaa waxqabadka LEA kasta ee ku dhexyaalla Gobolka la bartilmaameedsaday ee SPP sida ugu dhaqsaha badan ee suurtogalka ah balse kama dabadhici karto 120 malmood ka dib marka Gobolka uu soo gudbiyo warbixinta waxqabadka sanadlaha oo usoo gudbiyo Xoghayaha; iyo

(b) Waxay diyaarinaysaa mid kasta oo ka mid ah kuwan soo socda iyadoo qaabab bulsho usoo marinayso; qorshaha waxqabadka Gobolka (SPP_; warbinnada waxqabadka sanadlaha (APR); iyo warbixinnada sanadlaha ee Gobolka ee waxqabadka LEA kasta oo kudhex yaalla Gobolka.

(2) Iyadoo la samaynayo tan, Gobolka waa, ugu yaraan, bogga SEA ku soo dhejiyaa qorshe iyo warbixiinno, oo qorshaha iyo warbixinnada warbaahinta uqeybiyaa iyadoo loo marinnayo hey'addaha bulshada.

## VIII.F. HIMILOOYINKA WAXQABADYADA IYO TILMAAMAYAASHA (PERFORMANCE GOALS AND INDICATORS) (§300.157).

1. USOE himilooyin ayay dhidib dhigtay kuwaasoo ah waxqabadka ardayda naafada ah ee Gobolka kuwaasoo:

a. Gacan ka geysta ulajeedooyinka Xeerarkan sida lagu sheegay Xeerka I.A;

b. Oo la mid ah sida bartilmaameedyada Gobolka ee horumarka ardyda ee ku micnaysan horumarka sanadlaha ee ku filan, oo ay ku jirto horumarka hadafyada Gobolka ee ardayda naafada ah sida hoos timaada Qeybta 1111(b)(2)(C) ee ESEA;

c. Wax laga yiraahdo xeerarka qallan-jebinta iyo xeerarka iskuul ka saaqidka; oo

d. La joogto ah, ilaa xeerka ku haboon, ee himilo kale oo kasta iyo heerarka waxbarasho ee ardayda u dhidbay Gobolka.

2. USOE wuxuu dhidbay tilmaamayaasha waxqabadka ee Gobolka isticmaali doono si uu uqiimeeyo horumarka ku aadan gaaridda himilooyinkan, oo ay ku

jiraan bartilmaameedyada cabbirraada sanadlaha ah ee lagu hormarinayo ardayda naafada ah sida hoos timaada ESEA.

3. Warbixinta sanadlaha ee USOE ee ku socota Xog-hayaha iyo bulshada ee horumarka Gobolka, iyo ardayda naafada ah ee Gobolka, ee ku aadan soo buuxinta himilooyinka loo dhidbay sida hoos timaada Xeerka VIII.F.1, kaasoo uu ka mid yahay aasaaska warbixinnada looga baahan yahay sida hoos timaada Qeybta 1111(h) ee ESEA.

## VIII.G. DIB U EEGIDDA XOG-HAYAHA IYO GO'AAMINTA LA XIRIIRA WAXQABADKA GOBOLKA (REVIEW AND DETERMINATION REGARDING STATE PERFORMANCE) (§300.603).

1. Xog-hayaha si sanadle ah ayuu dib u eeggaa warbixinta waxqabadka ee USOE soo gudbisay.

2. Iyadoo lagu salaynayo macluumaadka ay USOE ku sheegtay warbixinta waxqabadka sanadlaha ee Gobolka, macluumaadka la helay oo ku yimid booqashooyinka dabagalka, iyo macluumaad dadweyne kale oo kasta oo la heley, Xog-hayaha ayaa go'aaminaya haddii USOE:

   a. Ay ka soo baxday shuruudaha iyo ulajeedooyinka Qeybta B ee IDEA.

   b. Ay u baahan tahay gargaar lagu hirgelinnayo shuruudaha Qeybta B ee IDEA;

   c. Ay u baahan tahay dhexgal lagu hirgelinnayo shuruudaha Qeybta B ee IDEA; ama

   d. Ay u baahan tahay dhexgal wax-ku-ool leh oo lagu hirgelinnayo shuruudaha Qeybta B ee IDEA.

3. Ogeysiis iyo fursad dhegeysi ah.

   a. Go'aaminta noocan ah, Xog-hayaha wuxuu bixinayaa ogeysiis caqli gal ah iyo fursad dhegeysi ee go'aamintan ku aadan.

   b. Dhegeysiga wuxuu ka kooban yahay fursad lagula Kalaiyaha Xog-hayaha ee Waxbarashada Gaarka iyo Adeegyada Baxnaanista ee lagu muujinayo sababta ay Waaxdu go'aan uga kaarin sida ku qeexan VIII.G.2.

4. Fulin (Enforcement) (§300.604).

a. Gargaar ubaahan.

Haddii Xog-hayaha go'aamiyo, laba sannadood ee isku xig-xigga, in SEA ay gargaar ubaahan tahay dhanka hirgelinta shuruudaha hoos yimaada Qeybta B ee IDEA, Xog-hayaha wuxuu qaadayaa mid ama in ka badan ee talaabadan soo socda:

(1) Gobolka waxay kula talinaysaa ilaha ay heli karaan ee gargaar farsamo ah ee ay dhici karto in ay SEA caawiso si ay u wajahi la'hayd meelaha ay SEA gargaarka uga baahan tahay, kaasoo ay dhici karto inuu ka mid noqdo gargaar uga yimaada Xafiiska Barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah, xafiisyo kale ee Waaxda Waxbarashada, iyo hey'addo dowladda Federaalka ah, gargaar farsamo kuwa bixinaya ee uu Xog-hayaha, iyo hey'addaha aan dowliga ahayn ay maalgeliyaan ee uu ansaxiyo oo Gobolka wuxuu aagan baahan yahay in ay la shaqeeyaan hey'addaha ku haboon. Gargaarkan farsamo waxaa ka mid noqon kara:

(a) Qabiirada oo ay bixiyaan talo lagu wajahyo meelaha uu Gobolka gargaarka uu uga baahan yahay, oo uu ku jiro qorsho cad ee lagu wajahayo meelaha welwelka ka jiray mudo waqti ah oo cayiman;

(b) Gargaar lagu caddeynayo oo laguna hirgelinayo horrumarinta xirfadda shaqaalaha, tabaha cashar bixinta, iyo noocyada casharbixinta ee ku salaysan daraasad saynis-ku-dheehan;

(c) Magacaabidda iyo isticmaalka muraaqibyo, maamulayaal, maamulayaal waxbarashada gaarka ah, macalimiinta waxbarashada gaarka ah, iyo macalimiinta bixinaya talo, gargaar farsamo, iyo taageero; iyo

(d) Xeeladdo dheeraad ah howlgelinaya si ay ufidiyaan gargaar farsamo, sida wadashaqeyn xarumaha iskuullada waxbarashada sare, hey'addaha adeegga waxbarashada, xarumaha qaranka ee gargaar farsamo oo ay taageerto sida hoos timaada Qeybta D ee IDEA, iyo fidiyayaasha gaarka ah ee ku salaysan daraasad saynis-ku-dheehan.

(2) Waxay tilmaantaa isticmaalka heerka Gobol ee Qeybta 611 ee miisaaniyadda hoos timaado meesha ama meelaha Gobolka uu gargaarka uga baahan yahay.

(3) Gobolka loo aqoonsado inuu yahay sida halis sare oo wuxuu ku soo rogayaa shuruudo gaar ah ee deeqda SEA sida hoos timaado Qeybta B ee IDEA.

b. Baahida dhexgalka.

Haddii Xog-hayaha go'aamiyo, seddex sanno oo isku xig-xigga ama in ka badan, in SEA uu ubaahan yahay dhexgal dhanka hirgelinta shuruudaha hoos timaada Qeybta B ee IDEA, kuwa soo socda waa in lagu dabaqaa:

(1) Xog-hayaha waxaa dhici karta inuu qaaddo mid ka mid ah tallaabada lagu qeexay qeybta kor ee "gargaar ubaahan"

(2) Xog-hayaha wuxuu qaadayaa mid ama in ka badan ee tallaabada soo socda:

(a) Wuxuu SEA uu ugu baahannayaa in ay soo diyaariso qorshe tallaabo ee lagu saxayo ama qorshe lagu hirgelinayo haddii Xog-hayaha go'aamiyo in SEA ay awoodo in dhibka ay hal sanno gudahood ku saxdo.

(b) Gobolka uu aaga bahaan yahay in ay heshiis fulin ah ay la gasho kaasoo hoos imanaya Qeybta 457 ee Xeerka Qodobada Waxbarashada Guud, sida loo la baddalay, 20 USC 1221 iyo kuwa soo socda. (GEPA), haddii Xog-hayaha uu aaminsan yahay sabab ah in SEA aysan hal sanno gudahood qaladka ku sixi karin.

(c) Sannad kasta ee go'aamista, ay ka reebbayso deeqda in ka yar boqolkiiba 20 oo aysanna ka badnayn boqolkiiba 50 ee deeqa SEA sida hoos timaada Qeybta 611 ee IDEA, ilaa iyo Xog-hayaha uu ka go'aaminayo in SEA ay si buuxdo ay u wajaday meelaha Gobolka ee baahida dhexgalka ay uga baahnayd.

(d) Raadinaysaa kabasho ah miisaaniyaddii sida hoos timaada Qeybta 452 ee GEPA.

(e) Ka reebista, dhammaan ama qeyb, miisaaniyad dheeraad kastana ee Gobolka la siin la'haa sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA.

(f) Arrinka loo gudbiyo tallaabo lagu fuliyo ee ku haboon, kaasoo ay dhici karto in ay ku jiraan in loo gudbiyo Waaxda Caddaaladda.

c. Baahi dhexgal wax-ku-ool ah.

Waqti kasta oo Xog-hayaha go'aamiyo in Gobolka uu ubaahan yahay dhexgal wax-ku-ool leh ee hirgelinta shuruudaha hoos yimaada Qeybta B ee IDEA ama ay jirto guul darro ah in la fulin waayay shuruud kasta ee xaq u yeelashada SEA ama LEA sida hoos timaada Qeybta B ee idea,

Xog-hayaha wuxuu qaadi doonnaa mid ama in ka badan ee qorshooyinka soo socda:

(1) Raadinayaa kabasho ah miisaaniyaddii sida hoos timaada Qeybta 452 ee GEPA.

(2) Ka reebista, dhammaan ama qeyb, miisaaniyad dheeraad kastana ee Gobolka la siin la'haa sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA.

(3) Kiiska wuxuu ugudbinnayaa Xafiiska Ilaaliyaha Guud ee Waaxda Waxbarashada.

(4) Arrinka loo gudbiyo tallaabo lagu fuliyo ee ku haboon, kaasoo ay dhici karto in ay ku jiraan in loo gudbiyo Waaxda Caddaaladda.

d. Golaha ummadda lagu Wargeliyo.

Xog-hayaha wuxuu usheegayaa Guddiga Waxbarashada io Shaqaalaha Aqalka Wakiilladaha iyo Guddiga Caafimaadka, Waxbarashada, Shaqada, iyo Lacagta howl-gabka ee Seneetka muddo 30 (30) maalmood ee waxka qabashada iyadoo loo hiigsanayo baahida gargaarka, baahida dhexgalka, iyo dhexgalka baahida wax-ku-oolka leh, ee tallaabada gaarka ah ee laga qaadayo iyo sababaha loo qaaday tallaabada la qaaday.

5. Ka haynta miisaaniyadda (§300.605).

a. Ka hor inta aan laga hayn miisaanad kasta sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA, Xog-hayaha wuxuu siinayaa ogeysiis ku filan iyo fursad dhegeysi ah in SEA lugta ku leh la dhegaysto, sida waafaqsan hanaanka ku qoran §300.180 ilaa iyo 300.183.

b. Iyadoo la sugayo natiijada dhegaysi kasta ee ka haynta lacagaha, Xog-hayaha waxaa dhici karta inuu joojiyo lacagaha qaaha, xannibo awoodda qaataha lagu waajibiyo miisaaniyadda hoos timaada Qeybta B ee IDEA, ama labadaba, ka dib marka qaataha la siiyo ogeysiis ku filan iyo fursad ah inuu sheego sababta ama cudur daarka ee ah sababta lacagaha mustaqbalka ama awoodda miisaaniyadda lagu kala wadayo looga qaadin sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA oo aan laga joojin.

c. Qaabka reebitaanka.

(1) Haddii Xog-hayaha uu go'aamiyo in ay haboon tahay in deeqda dheeraad ah laga reebbo, Xog-hayaha waxaa dhici karta inuu go'aamiyo:

(a) In reebitaanka lagu xadidayo barnaamijyo ama mashruucyo, ama qeybo ah barnaamijyo ama mashruucyo, saameeyey go'aanka Xog-hayaha; ama

(b) In SEA aysan qaadan lacago dheeraad ah sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA ee hey'addo Gobol oo gaar ah ama LEA ga sababtay ama kaalinta ku la'hayd go'aanka Xog-hayaha.

(2) Ilaa iyo Xog-hayaha uu ka qanco in xaaladdaha sababay ka reebitaankii hore aad wax looga badellay:

(a) Gobolka la siin la'haa sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA waa in la reebaa dhammaan ama qeyb ahaan; iyo

(b) Lacagaha SEA sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA waa in lagu xadidaa hey'addaha Gobolka iyo LEA kuwaasoo ficilladooda aysan sababin ama aysan lug ku la'hayn go'aanka Xo-hayaha, sababta wixii ahataba.

6. Dareenka bulshada(§300.606).

Goor kasta oo uu gobalka soo gaaro ogeysiis ah in Xog-hayaha uu qorshaynayo inuu la wareego ama qaadayo talaabo fulin ah, gobolka waa in uu, isagoo hey'addaha bulshada usheegayoa, in qaadida tallaabadan ay daruuri tahay in shacabka gobolka lagu wargeliyo talaabada, oo ay ku jirto, ugu yaraan, in ogeysiiska lagu dhejiyo barta internetka ee USOE oo ogeysiiskana loo qeybiyo warbaahinta iyo iyadoo loo marinayo hey'addaha bulshada (§300.604).

7. Mas'uuliyadda qeyban ee SEA ee ardayda lagu heley dambi sida qof qaangaar ah (§300.607).

Haddii mas'uuliyadda lagu hubinayo in shuruudaha hoos yimaada Qeybta B ee IDEA laga soo baxay marka laga hadlayo ardayda naafada ah ee lagu helo dambi sida qof qaangaar ah sida hoos yimaada sharciga Gobolka oona lagu xiro xabsiyadda dadka qaangaarka ah LEA ayaa lagu qorayaa halka ay USOE ay ka haan la'hayd, oo haddii Xog-hayaha uu ogaado in haddii ay jirto guul darro ah in la fulin waayay qodobada ku qoran Qeybta B ee IDEA ee la xiriira ku guuldaraysiga LEA, Xog-hayaha wuxuu qaadayaa tallaabo lagu saxayo ficilka si loo hubiyo in Qeybta B ee IDEA, aysan ka ahayn:

a. Yarayn kasta ama ka reebis lacag ee dhanka Gobolka ay noqoto mid u dhigmata miisaaniyadda guud ee loo dhigay sida hoos timaada Qeybta 611 ee IDEA ee dhanka Gobolka maadaama tirada ardayda naafada ah ee uqalma ee ku jira xabsiyadda hoos yimaadana kojooga LEA kale ay tahay in ay uqalanto shaqsiyaad xaq u leh ee tirada naafada ah ee Gobolka ka jira ee hoos yimaada maareynta USOE; iyo

b. Ka reebis kasta oo ah miisaaniyadda hoos timaada waa in ay ahaataa mid si gaar ah ugu xadidan LEA ama mas'uuliyadda hey'adda bulshada kale ee guul darro ah in la fulin waayay Qeybta B ee IDEA.

## VIII.H. FULINTA GOBOLKA (STATE ENFORCEMENT) (§300.608).

1. Haddii USOE ay go'aamiso in LEA aysan ka soo baxayn shuruudaha hoos yimaada Qeybta B ee IDEA, oo ay ku jirto bartilmaameedyada ku qoran SPP, USOE waa in ay mamnuucdaa LEA in ay ka yareyso dadaalka gacan ku haynta LEA ee sanad maaliyadeed kasta.

2. Ma jiro meel qeybhoosaadkan lagu micneeyay ee gobolka ka xadidayso in ay isticmaasho awood kale oo kasta ee ay heli karto in la dar geliyo oo la kormeero shuruudaha Qeybta B ee IDEA.

## VIII.I. SHURUUDAHA WARBIXINTA SEA (SEA REPORTING REQUIREMENTS).

1. SEA waa in ay si sanadle ah Xog-hayaha ugu soo gudbisaa macluumaadka looga baahan yahay sida hoos timaada Qeybta 618 ee IDEA waqtiga uu Xog-hayaha u cayimo, oo SEA waa inuu warbixinta ksoo gudbiyaa foormamka Xog-hayaha uu siiyo (§300.640).

2. Warbixin sanadle ah ee ardayda loo adeegay—macluumaad loo baahan yahay in warbixinta lagu qoro(§300.641).

   a. Ulajeeddada warbixinta sanadlaha ee loo baahan yahay in lagu qoro Qeybta 618 ee IDEA iyo §300.640, Gobolka iyo Xog-hayaha Gudaha waa inay xisaabiyaan oo ka soo warbixiyaan tirada ardayda naafada ah ee hesha waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee taariikh kasta inta udhaxaysa 1 Oktoobar ilaa iyo 1 Disember ee sanad kasta.

   b. Ulajeeddada qodobka warbixintan, da'da ardayga waa da'da dhabta ah ee ardayga ee taariikhda ardayga ee la xisaabiyo.

   c. SEA loogama baahna in ay ka soo warbixiso arday qaba in ka badan hal naafo.

   d. Haddii ardayda uu qabo naafonimo in ka badan hal naafo, SEA waa in ay soo sheegtaa ardayga iyadoo la tixraacayo hanaanka soo socda:

      (1) Haddii ardayga kaliya uu qabo laba naafo oo ay la'xaad la'aanta haysana ay kala yihiin dhegoolenimo iyo camoolenimo, oo ardayga aanan la soo sheegin inuu qabo korniin habsaama, ee la doonayo in ardayga la soo sheego sida hoos timaada qeybta "dhegoole-camoole."

(2) Arday qaba in ka badan hal naafo oo aanan la soo sheegin inuu yahay dhegoole-camoole ama qabo korniin habsaanta waa in lagu soo sheegaa qeybta "laxaad la'aan dhawr ah."

3. Ka warbixinta macluumaadka (§300.642).

   a. Ilaalista macluumaadka shaqsiga cadeynaya.

      Macluumaadka lagu sharaxay Qeybta 618(a) ee IDEA iyo §300.641 waa in si caam ah uu gobol kasta usoo sheegaa qaab aannan dhalinayn shaacbixin ah macluumaad caddeeya shaqsi ahaan ardayda.

   b. Tusaalo. Xog-hayaha waxaa dhici karta inuu Gobolka iyo Xog-hayaha Gudaha u ogolaado in uu helo macluumaadka ku qoran Qeybta 618(a) ee IDEA iyadoo loo marayo tusaaleynta.

4. Warbixinta sanadlaha ee ardayda loo adeegay—caddeyn (§300.643).

   SEA waa inuu soo raaciyaa caddeynta warbixinta oo uu soo saxiixo sarkaalka awoodda uleh ee hey'adda bixisay macluumaadka ee hoos timaada §300.640 ay tahay xisaab sax ah oo aannan la oon laba jeer la xisaabin ardayda naafada ah ee hesha waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee taariikhda la isweydiinayo.

5. Warbixinta sanadlaha ah ee carruurta loo adeegay-cabir ahaan lagu saleeyay xisaabinta ardayda (§300.644).

   SEA waxay warbixintooda ay soo raacin karaan ardayda naafada ah ee ku qoran iskuulka ama barnaamijka ee ay howsha wadaan ama taageerto hey'adda bulshada, oo:

   a. Siisa waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira labadaba ee ka soo baxa heerarka Gobolka.

   b. Iyaga siisa kaliya waxbarasho gaar ah, haddii adeegyada la xiriira aysan looga baahnayn, ee buuxisa heerarka Gobolka; ama

   c. Marka laga hadlayo ardayda naafada ah ee ay waalidiintooda ku soo qoreen iskuullo gaar loo leeyahay, xisaabiya ardayda xaqa u leh ee hoos yimaada IDEA oona hesha waxbarashada gaarka ah ama adeegyada la xiriira ama labadaba ee buuxisa heerarka Gobolka ee hoos yimaada§300.132–144.

6. Warbixinta sanadlaha ee carruurta loo adeegay-waajibaadyada kale ee SEA (§300.132–645).

Ka warbixinta shuruudaha kale ka sokow, SEA waa in:

a. Ay dhidabada utaagtaa hanaan ay isticmaalayso LEAs iyo xarumaha waxbarashada kale ee lagu xisaabinayo tirada ardayda naafada ah ee hela waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira.

b. Taariikh haloo qabto goorta ay hey'addahan iyo xarumahan looga baahan yahay in ay SEA ku soo wargeliso si loo hubiyo in Gobolka uu fulinayo §300.132–640(a);

c. Hey'ad iyo xarun kasta laga soo qaato caddeyn ah in si sax ah oo aan laba jeer la soo xisaabin;

d. Soo ururi macluumaadka kala yimaada tiradii laga soo xisaabiyay hey'ad iyo xarun kasta, oo ka soo diyaari warbixin sida hoos timaada ee looga baahan yahay§300.640–644; oo

e. Hubi in dokumentiyada la hayo Gobolka iyo Xog-hayaha u ogolaato in ay taftir ku sameeyaan in tiradu ay tahay mid sax ah.

7. Aan isla ekayn (§300.646).

a. Gobol kasta ee gargaar ka hela sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA waa in ay fidisaa in ururinta iyo baaritaanka macluumaadka lagu ogaanayo haddii ay jiraan isla ekaansho darro xaddi badan oo ku salaysan jinsi iyo qowmidyad uu gobolka ka jiro oo LEAs gobolka marka laga hadlayo:

(1) Aqoonsiga ardayda sida arday naafo ah, oo ay ku jirto aqoonsiga ardayda in ay yihiin arday naafo ah sida waafaqsan dhinnaanshaha gaarka ah ee ku qeexan Qeybta 602(3) ee IDEA;

(2) Gaar ahaan meeleynta waxbarashada ee ardaydan; iyo

(3) Dhacdooyinka, mudada, iyo nooca tallaabo ee la qaaday, oo ay ku jirto ka cayrinta iyo iskuul ka saarista.

b. Dib udarsida iyo dib u baarida shuruucda, hab dhaqanka, iyo hanaanka. Marka laga hadlayo go'aaminta isla ekaanshaha xaddi badan ee ka jira marka laga hadlayo aqoonsiga ardayda in ay yihiin arday naafo ah, ama gaar ahaan meeleynta waxbarashada ardaydan, sida waafaqsan Xeerka VIII.I.7.a, Gobolka waa in:

(1) Uu bixiyaa dib u darsida iyo, haddii ay haboon tahay dib u eegida Shuruudaha, hanaanka, iyo hab dhaqannada loo isticmaalay aqoonsiga ama meeleynta si loo hubiyo in shuruudaha, hanaanka, iyo hab dhaqanka uu waafaqsan yahay shuruudaha IDEA.

(2) Uu in LEA kasta looga baahdaa in ay soo caddeyso sida hoos timaado Xeerka VIII.I.7.a in ay dhowrto xaddiga ugu badan ee miisaaniyadda sida hoos timaada Qeybta 613(f) ee IDEA in ay fidiso isuduwid dhammays-tirian oo ah adeegyo dhexgal hore oo loogu adeeggo ardayda LEA ku jirta, gaar ahaan, balse aan ugaar ahayn, ardayda ku jirta kooxahan kuwaasoo si baaxad leh aannan loo caddeyn sida hoos timaada Xeerka VIII.I.7.a; iyo

(3) LEA loogu baahdo in si caam ah ay ugu soo warbixiso dib u darasidda shuruucda, hab dhaqannada, iyo hanaanka ku qeexan ee hoos yimaada Xeerka VIII.I.7.b(1).

## VIII.J. QODOBKA TAAGEERADA FARSAMO (PROVISION OF TECHNICAL ASSISTANCE) (§300.704(b)(4)(i)).

1. LEA kasta ee Gobolka ka jira waxay gargaar farsamo ay ka heli kartaa USOE ee Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah.

   a. USOE ayaa mas'uul ka ah in ay dhidabada u taagto oo ay xafido xiriirada wadahadal ee LEA oo dhan iyo sidoo kale ay bixiso gargaar farsamo oo la siinayo si LEA loogu taageero in ay bixiso adeegyada waxbarashada gaarka ah ee ku haboon ee ay siinayso ardayda naafada ah.

   b. TAs waxay sidoo kale ay gargaar ufidisaa maamulka LEA iyo shaqaalaha barnaamijka in la sameeyo oo la bixiyo adeeg tabar oo loogu talagalay in shaqaalaha la sooyo xirfaddo iyo karti loo baahan yahay in si taabo gal ah loogu shaqeeyo ardayda naafada ah.

   c. Shaqaalaha USOE waxay LEAs ay ka gargaarayaan in la hubiyo in la sii wado uhogaansanaanta ka dhaxeeya Gobolka iyo sharciga waxbarashada gaarka ah ee Federaalka, oo ay ku jiraan in la xaliyo eedaymaha ku aadan oofin la’aanta lagu ogaaday cabashada Gobolka, dhexdhexaadinta, iyo dacwo qaadid waafaqsan nidaamka.

2. TAs waxay bixisaa taageero joogto ah oo ay siiso LEAs iyadoo uga jawaabcelinaysa arrimaha ku soo baxa ee cusub iyo arrimaha mudada dheer.

## VIII.K. AQOONTA SHAQAALAHA (PERSONNEL QUALIFICATIONS) (§300.156).

1. Joogto u ah shuruudaha qodobada hoos yimaada Qeybta B ee IDEA, USOE waxay dhidbada u taagtey oo ay haysaa xirfaddaha aqoonta si loo hubiyo shaqaalaha daruuriga ah ee loo baahan yahay si loo howlgeliyo ulajeedooyinka qeybtan ay haboon tahay oo in si kufilan loo soo diyaaray oo ay utababaran yihiin, kuwaasoo ay ku jiraan in shaqaalaha ay aqoon iyo xirfad ay u leeyihiin in ay u adeegaan ardayda naafada ah.

2. Nidaamka USOE ee ah in la hubisaa in shaqaalaha si haboon oo ku filan loogu diyaariyay oo ayna tababarna u haystaan kulanka Guddiga Waxbarashada Gobolka Utah ee Maareynta Xeerka.

3. Aqoonta macalimiinta waxbarashada gaarka.

   Aqoonta ay USOE dhidibada utaagtay oo ah si loo hubiyo in qof kasta ka shaqeeya oo ah macalin iskuullada dadwaynaha ee Gobolka ka dhiga waxbarashada gaarka ah ha ahaato dugisga hoose, dugsiga dhexe, ama dugsiga sare yahay macliin dhiga waxbarashada gaarka ah yahay macalin aad ugu qalma waqtina loo qabtay sida ku qoran Qeybta 1119(a)(2) ee ESEA.

4. Adeegyada la xiriira ee shaqaalaha iyo kalkaaliyayaasha macalimiinta.

   Aqoonta waxaa ka mid ah aqoonta shaqaalaha iyo kalkaaliyayaasha macalimiinta ee adeegyada la xiriira kaasoo:

   a. Isku wada mid ah shahaado kasta oo Gobolka ansaxiyay ama Gobolka aqoonsan yahay, shati, diiwaangelin, ama Shuruudo kale oo udhigma ee quseeya heerka xirfadlaha ee shaqaalaha ay u fidiyaan waxbarashada gaarka ah ama adeegyada la xiriira; iyo

   b. In la hubiyo in shaqaalaha adeegyada la xiriira ee adeegyo ku bixiya xirfaddooda ama qeybtooda:

      (1) Ay ka soo baxaan shuruudahooda; oo

      (2) Ayna shahadadooda ama shuruudaha shatigooda loogu saamixin sababo xaalad deg-degga ah, ku meelgaarnimo ah, ama shuruud ku xiran; iyo

   c. Kalkaaliyayaasha macalimiinta iyo caawiyayaasha ee sida haboon loo tababaray oo la kormeerey, sida uu qabo sharciga Gobolka, xeerka, ama shuruudaha qoran, ee ka soo baxeen shuruudaha qeyb ka mid ah, in loo isticmaalo in ay gargaaraan qodobada waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee hoos yimaada Qeybta B ee IDEA ee lagu caawinaya ardayda naafada ah.

5. Wax kaqabadka Shaqaale Yaraanta.

   a. USOE waxay qaadatay sharci oo uu ku jiro shuruudo ah in LEAs Gobolka ka jira ay qaadaan tallaabo ah in la shaaleeyo, la qoro, la tababaro, oo lana hasto shaqaalaha aqoonta leh si ay ubixiyaan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee hoos yimaada qeybtan ee la siiyo ardayda naafada ah.

   b. Xeerarka Maamulka Guddiga Waxbarashada Gobolka Utah waxaa ku jira macluumaad dheeraad ah.

6. Iyadoo ay jirto shaqsi kale oo kasta oo qaada tallaabo xaq ulahaansho oo ah in waalidka ama ardayga ku sugnaan karo sida hoos timaada qeybtan, ma jirto qeyb kale oo ka mid ah qeybtan oo micnayn karta in la abuuro xuquuq tallaabo oo wax loogu qabanayo shaqsiyaad arday ama arday fasal oo ku guul daraysatay USOE, LEA gaar ah, ama loo shaqeeyo hey'ad dadweyne in ay yihiin shaqale aad ugu qalan, ama laga hor istaago waalid inuu Gobolka u dirsado cabasho ku saabsan aqoonta shaqaalaha USOE ka shaqeeya.

## VIII.L. WADA SHAQEYNTA HEY'ADDAHA (INTERAGENCY COLLABORATION).

Waa sharciga Gobolkan in dhammaan hey'addaha adeegyada u fidiya shaqsiyaadka naafada ah ay wada shaqeeyaan oo ay hubiyaan in adeegyada iyo taageerada ay bixiyaan yihiin kuwa qaab qarash ku kaca yihiin. Waa hadafka sharci-dejiyayaasha in adeegyada iyo taageerada la bixiyo ay yihiin kuwa isku wada xiran oo buuxiya baahida shaqsiga ee shaqsiyaadka naafada ah; iyo, inta ay ansaxisay sharci-dejiyayaasha, Agaasimaha Gobolka ee Waxbarashada Gaarka ah, Agaasimaha Meel-marinta ee Xafiiska Gobolka Utah ee Baxnaanista, Agaasimaha Meel-marinta ee Waaxda Adeegyada Bulshada, iyo Agaasimaha Adeeyada Caafimaadka Qoyska ee ku dhexyaala Waaxda Caafimaadka, ama kuwa xilsaaran, iyo hey'adda waxbarashada maxalliga, waa in, ilaa ay suurtogalka ka tahay, ka wadashaqeeyaan in ay isla meeldhigaan barnaamij waxbarasho la isku duwayo oo mid ah, adeegyo daaweyn, iyo taageero shaqsi iyo taageero qoys ee loogu talagalay ardayda naafada ah ee xaqa u leh waxbarasho ku haboon sida hoos timaada UCA 62A-5a-105, kaasoo sidoo kale u baahan adeegyada ay bixiso Waaxda Adeegyada Bulshada, Waaxda Caafimaadka, ama Xafiiska Baxnaaniska ee Gobolka Utah.

1. Guddiga Iskudabaridka ee Dadka Naafada ah (Coordinating Council for People with Disabilities) (CCPD). CCPD waxaa waajib yeeley UCA 62A-5A-103 waa in ay ka koobnaataa:

    a. Agaasimaha Waaxda Adeegyada Dadka Naafada ah ee qeybta Waaxda Adeegyada Bulshada, ama qofka umagacaaban.

    b. Agaasimaha Barnaamijyada Adeegyada Caafimaadka Qoyska, ee magacaaban sida hoos timaada Qeybtan 26-10-3, ama qofka u magacaaban.

    c. Agaasimaha Meel-marinta ee Xafiiska Baxnaaniska ee Gobolka Utah, ama qofka umagacaaban.

    d. Agaasimaha Waxbarashada Gaarka ama qofka u magacaaban.

    e. Agaasimaha Qeybta Maal-gelinta Daryeelka Caafimaadka ee ku dhexyaalla Waaxda Adeegyada Bulshada, ama qofka u magacaaban.

    f. Agaasimaha Qeybta Caafimaadka Dhimirka ee ku dhexyaalla Waaxda Adeegyada Bulshada, ama qofka u magacaaban.

g. Muraaqibka Iskuullada Dhegoolayaasha iyo Indhoolayaasha, ama qofka u magacaaban.

h. Shaqsiga naafada ah, xubin ka mid ah qoyska naafada qaba, ama qof u doodada shaqsiyaadka naafada ah ee uu magacabay xubnaha kor ku qoran.

CCPD wuxuu awood uleeyahay, haddii dadaalada maxalliga ama shaqsiyaadka lagu guuldaraysto, in ay ka wada shaqeeyaan ka gudbidda ku haboon ee shaqsiyaadka naafada ah ee adeegyo iyo taageero ka hela hey'ad Gobol ee adeegyo iyo taageero ka hesha hey'ad Gobol ee kale; isuduwidda shuruucda maamula qodobada adeegyada iyo taageerida shaqsiyaadka naafada ah ay hey'addaha Gobolka; iyo la tixgeliyo arrimaha la xiriira xaq u yeelashada adeegyada iyo taageerida iyo, haddii ay suurtogal tahay, lala yimaada heerar xaq y yeelashada isku wada mid ah hey'addaha Gobolka.

2. Xeerka Hanaanka Maareynta ee Utah wuxuu faahfaahinayaa hanaanyada ee arrimaha barnaamijka iyo mas'uuliyadda maaliyadeed lagu ogaado iyo doodaha ka yimaada hey'addaha isku jira in la xaliyo. Sidoo kale Xeerka Hanaanka Maareynta wuxuu magacaabayaa hanaanka hoos yimaada kaasoo LEAs iyo hey'addaha bulshada ee kale ay ku bilaabi karaan dhacdooyinka si loo suggo lacag soo celinta ka imanaysa hey'addaha ee dhinacyada ay ku heshiiyaan qorshaha waxbarashada iyo daaweynta, ama haddii kale la hirgeliyo qodobada heshiiska. Guddiga Iskudabaridka ee Dadka Naafada ah (CCPD) waa ururka sharciga ee heerka Gobolka oo mas'uulka ka ah, iyada oo uu hoos yimaado tilmaanta Xeerka Hanaanka Maareynta oo amarna ka qaato Xeerka Adeegyada Naafada ah ee Omnibus (1991), ee:

   a. Isku duwaya oo hubinnaya adeegyada iyo taageerada lagu fidiyo kuwa qaab qarash ku kaca. Waa ulajeedka sharci-dejiyayaasha oo ah in adeegyada iyo taageerada ay fidiso ee hoos yimaada cutubka in la isku wadayo si loo buuxiyo baahida shaqsi ee shaqsiyaadka naafada ah.

   b. Goor kasta oo ay suurto gal tahay, marka laga hadlayo dalabyada shaqsiga ee ku saabsan adeegyada iyo taageerada sida wanaagsan ku haboon baahidiisa/eeda shaqsi oo gacan ka geysanaysa madax-banaanidiisa/eeda, waxqabadkiisa/eeda, iyo isdhexgalka nolosheesa/eeda ee dhanka jaaliyadda.

3. Qaababka adeegyada lagu hubinnayo (Methods of ensuring services) (§300.154).

   Sarkaalka Sare ee Meel-marinta Gobolka ama qofka umagacaaban in sarkaalka hubiyo in heshiiska hey'addaha ama qaabka isku duwida hey'addaha ay u howlgalaan inta u dhaxeyso hey'ad bulsho iyo SEA, si loo hubiyo in dhammaan adeegyada loo baahan yahay si la hubiyo in FAPE la fidiyay, oo ay ku jirto qodobada ah in qarashka yimaada inta muranka ay

socdaan. Dhammaan heshiisyada hey'addaha oo dhan ku jira ama qaababka waxaa ka mid noqon doona:

a. Shuruudo iyo nidaamyo la raacayo ee hey'addaha ay ku go'aaminayaan oo ayna ku aqoonsanayaan mas'uuiyaddaha udhaxeeya hey'ad kasta si gacan looga geysto isuduwida iyo in waqtiga loogu talagalay oo ku haboon la bixiyo adeegyada qeybtan ku qeexan, oo ay ku jiraan qodobka adeegyan in qarashka yimaada inta muranka ay socdaan.

b. Caddeynta ama hannaanka lagu qeexayo mas'uuliyaddaha maaliyaddeed ee hey'ad kasta adeegga ay bixiso.

(1) Mas'uuliyadda maaliyaddeed ee hey'ad dadweyne oo aan waxbarashada qaabilsanayn ku waajiban sida hoos timaada sharciga Dawladda dhexe ama Qaranka, ama mas'uuliyadda lagu qorey sida hoos timada shuruucda Gobolka oo ay ku fidiso ama ku bixiso adeegyada ee sidoo kale loo tixgeliyo in ay yihiin waxbarashada gaarka ah ama adeegyada la xiriira, oo ay ku jirto hey'ada caymiska Medicaid ee Gobolka iyo caymiyayaasha dadweynaha ee kale ee caymiya ardayda naafada ah, waa in ay ka hormartaa mas'uuliyadda maaliyaddeed ee LEA, ama mas'uuliyadda hey'adda Gobolka ee lagu qoroaya IEP ga ardayga.

c. Nidaamyada la raacayo in lagu xaliyo muranka hey'addaha (oo ay ku jiraan nidaamyada la raacayo ee hoos yimaada LEAs wuxuu bilaabi karaa dhegeysiyo) sida hoos timaada heshiiska ama nidaamyada kale ee lagu hubinayo in dib ay ubixiyaan lacagaha ka imanaya hey'addaha kale ama haddii kale la hirgeliyo qodobada heshiiska ama nidaamka. (Eeg Xeerka Hanaanka Maareynta ee Utah.)

d. Shuruudaha, qaabka, iyo nidaamyada hoos yimaada kaasoo LEA ku qasbaysa in ay dib u bixiyaan hey'addaha kale.

e. Nidaamyada la raacayo ee hoos yimaada kaasoo LEAs ay dhici karto in ay bilaabaan nidaamyada si loo hubiyo in dib loogu soo qaado hey'addaha kale ee dhinacyada kale ee heshiiska kula jira ama haddii kale la hirgeliyo heshiiska.

f. Shuruudo iyo nidaamyo la raacayo ee hey'addaha ay ku go'aaminayaan oo ayna ku aqoonsanayaan mas'uuiyaddaha udhaxeeya hey'ad kasta si gacan looga geysto isuduwida iyo in waqtiga loogu talagalay oo ku haboon la bixiyo adeegyada qeybtan ku qeexan.

4. Waajibaadka hey'addaha bulshada ee aan waxbarashada qaabilsanayn (§300.154(b)).

Haddii hay'ad kasta oo dadweyne aysan ka ahayn hay'ad waxbarasho oo haddii kale waajib ku ah sida hoos timaada sharciga Gobolka ama kan

Federaalka, ama ku qoran mas'uuliyadda sida hoos timaada heshiiska sharciga Gobolka ama gobollo, in ay fidiso ama ay bixiso adeeg kasta oo sidoo kale loo tixgelinayo inuu yahay adeeg waxbarasho gaar ah ama adeegyada la xiriira ee lagu qeexay sida qalabyada teknoolijiyada caawis, qalabyada teknoolijiyada caawis, adeegyada la xiriira, taageerada iyo adeegyada sooraaca, adeegyada ka gudubka oo daruuriga u ah si ay FAPE ugu xajiisio in ardayga naafada ah ee Gobolka, hay'adda dadweynaha waa in ay ka soo baxdaa waajibaadkaas ama mas'uuliyaddaas, si toos ah ama iyada oo qandaraas ku bixinaysa ama samaysa qabanqaabo kale ama heshiisyo kale.

a. Hey'addaha dadweyne ee aan waxbarashada qaabilsanayn ee qeybtan ku qeexan uma diidi karo in ay uqalmaan adeegga Medicaid dib loogu soo celinayo maxaa yeeley in adeegga lagu bixiyo goob iskuulka.

b. Haddii hay'ad dadweyne oo aan ka ahayn hay'adda waxbarashada ay ku guuldareysato in ay fidiso ama bixiso waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee ku qeexan qeybtan, LEA (ama hey'addaha Gobolka ee mas'uulka ka ah samaynta IEP ga ardayda) waa in ay adeegyadaas ay ardayga waqtigiisa ugu fidisaa ama ay bixisaa. LEA ama hey'adda Gobolka waxaa ay awood uleedahay in ay weydiisato in lacagta dib loogu soo celiyo adeegyada ay uqabatay hay'adda dadweynaha ee aan waxbarashada qaabilsanayn ee ku guuldaraysatay in ay adeegyadan fidiso ama ay bixiso oo waa in hay'addaas ay LEA dib ugu soo celisaa sida waafaqsan shuruudaha heshiiska ama nidaamka kale ee qeybtan ku qeexan.

5. Ardayda naafada ah oo caymis ka haysta manfacyada dadweynaha ama caymis (§300.154(d)).

a. LEA waxaa dhici karta in ay isticmaasho caymiska Medicaid ama barnaamijyo manfacyo caymis dadweyne kale kaasoo ardayda ka qeybqaadanaya loo siiyo ama looga bixiyo adeegga sida hoos timaada qeybtan oo ay uga baahan tahay, iyadoo ay hoos imaanaya oo ay ufasaxayso barnaamijka caymiska dadweynaha, aysan ka ahayn sida ku qoran Xeerka VIII.K.9.b.

b. Iyadoo laga hadlayo adeegyada loo baahan yahay in FAPE ay siiso ardayda xaqa u leh sida ku qeexan qeybtan, LEA:

(1) Waxaa dhici karta in waalidiinta aysan uga baahan in ay yeeshaan ama isku qoraan barnaamij caymis dadweyne si ardaydooda ay uhelaan FAPE sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA.

(2) Waxaa dhici karta in waalidiinta aysan uga haaban in ay galaan qarash inta jeebka laga bixiyo, sida lacagta laga jaro ama lacagta caymiska la raaciyo ee ku timaada markaad caysmiska aad ku

yeelanayso adeegyo aad heshey sida qeybtan ku qeexan, balse waxaa dhici karta in aad bixiso qarashka uu waalidka haddii kale looga baahan yahay in ay bixiyaan (eeg Xeerka VIII.K.11).

(3) Waxaa dhici karta in la isticmaalo manfacyada ardayga sida hoos timaada barnaamijka caymiska dadweynaha haddii isticmaalka kaas uu:

(a) Hoos udhigayo caymiska uu heli karay ama manfac caymis kale oo kasta;

(b) Dhalinayso in qoyska ay bixiyaan adeegyada oo ay haddii kale ka heli kareen manfacyada dadweynaha ama barnaamijka caymiska iyo ee looga baahan yahay ardayda waqtiga uu dibadka ka yahay iskuulka.

(c) Kordhinayo lacagta joogta ah ee caymiska la siiyo ama u horseeda in laga joojiyo manfacyada ama caymiska; ama

(d) Halisgelinaya inuu ka lumo xaqa ku salaysan guriga iyo jaaliyadda ee ka tanaasulida, kaasoo ku salaysan qarashaadka caafimaadka la xiriira.

(4) Waa in ogolaanho qoraal oo hal jeer ah lagala yimaadaa waalidka/arday qaangaar ah ka dib marka la bixiyo ogeysiis qoraal ah oo hoos ku qeexan, ka hor inta aan la helin ardayda ama waalidka manfacyadiisa dadweynaha ama caymiska marka koowaad. Ogolaanshaha waa in ay ku qornaataa:

(a) Macluumaad shaqsiga caddeynaya ee ay dhici karto in la shaacbixiyo (tusaale ahaan, diiwaangelin ama macluumaad ku saabsan adeegyada ay dhici karto in ardayga la siiyo ama uu helayo);

(b) Ulajeedda daah ka qaadista (tusaale ahaan, qarashka adeegyada);

(c) Hey'adda ay dhici karto in daah ka qaadista loo sameeyo (tusaale ahaan, Medicaid); iyo

(d) Waalidiinta/ardayda qaangaarka ah wuxuu fahmayaa oo wuu ku raacsan yahay in hey'adda dadweynaha ay dhici karto in ay hesho manfacyada ardayga ama waalidka ama caymiska adeegyada bixinaya.

(5) Waa in ogeysiis qoraal ah la siiyaa waalidka ardayga dhalay/ardayga qaangaarka ah ka hor inta aan la helin manfaca dadweynaha ee ardayga ama waalidka ama caymiska marka koowaad iyo ka hor inta

aan la helin ogolaanshaha waalidka marka ugu horeyso iyo markaas wixii ka dambeeya. Ogeysiiska qoraalka ah waa in lagu sharaxaa dhammaan ilaalada ay heli karaan waalidiinta/ardayga qaangaarka ah ee hoos yimaada Qeybta B, si loo hubiyo in waalidinta/ardayga qaangaarka ah in si buuxda loogu wargeliyay xuquuqdooda ka hor inta aysan hey'adda dadweynaha aysan helin ardayga manfacooda dadweynaha ama caymiska bixin la'haa adeegyada sida hoos timaada xeerka IDEA. Ogeysiiska waa inuu ahaadaa mid ku qoran luqad ay shabci-weynaha guud ay fahmi karaan oo ayna ku qornaantaa luqadda uu waalidka u dhashay ama qaab kale ee la iskula xiriiro oo ay waalidiin(ta) isticmaalaan, aysan ka ahayn marka ay iska caddahay in aan taasi la heli karin mooyaane.

(6) Waalidiinta ku wargeli in diidmada waalidka ee loo ogolaado inla helo manfacyada dadweynaha ama caymiska aysan LEA ka qafiifinayn ama hey'addaha dadweynaha mas'uuliyaddeeda lagu hubinayo in dhammaan adeegyada la isaga baahan yahay in ay bixiso iyadoon waalidiinta wax qarash ah uga kacayn.

6. Ardayda naafada ah oo caymis ka haysta caymis gaar ah (§300.154(e)).

Marka laga hadlayo adeegyada looga baahan yahay in FAPE ay siiso ardayda xaqa u leh sida ku qeexan Xeerarkan, LEA waxaa dhici karta in ay hesho caymiska gaarka ah ee waalidiinta ay kaliyana ku heli karto haddii waalidku ogolaansho bixiyo. Goor kasta oo ay LEA soo jeediso in ay hesho caymiska gaarka ah ee waalidka waxaa ka horeeya, waa in ay:

a. Heshaa ogolaanshaha waalidka.

b. Waalidka(iinta) ku wargeli in diidmada waalidka ee loo ogolaado inla helo manfacyada dadweynaha ama caymiska aysan LEA ka qafiifinayn ama hey'addaha dadweynaha mas'uuliyaddeeda lagu hubinayo in dhammaan adeegyada la isaga baahan yahay in ay bixiso iyadoon waalidiinta wax qarash ah uga kacayn.

7. Isticmaal miisaaniyadda Qeybta B.

a. Haddii LEA aysan awoodin in ogolaansho ay waalidka ka helaan si loo isticmaalo caymiska gaarka ee waalidka, ama manfacyada dadweynaha, ama caymis goorta waalidka qarash looga baahannayo adeegyada gaarka ah ee uga baahan yahay sida hoos timaada Xeerarkan si FAPE loo hubiyo, LEA waxaa dhici karta in ay isticmaasho miisaaniyadda Qeybta B si adeeggan loo bixiyo.

b. Si looga fogaado qarashka waalidiinta uu ugu kaci karo kuwaasoo haddii kale ogolaan kara in la isticmaalo caymiska gaarka ah, ama manfacyada dadweynaha ama caymiska haddii waalidka qarash galayo, LEA waxaa dhici karta in ay isticmaalaan Qeybta B ee miisaaniyada lagu bixinayo

qarashka ay waalidka(iinta) haddii kale looga baahan la'haa in ay bixiyaan isticmaalka manfacyada waalidka ama caymiska (tusaale ahaan, lacagta la jaro ama lacagta la bixiyo).

8. Ka imaanaysa caymiska gaarka ah ama dadweynaha.

    a. Ka imaanaysa manfacyada dadweynaha ama caymiska gaarka aanan loola dhaqmayn sida barnaamij daqli ee ulajeedka 34 CFR 80.25.

    b. Haddii LEA ay qarashgareyneyso miisaaniyadda dowladda Federaalka (tusaale ahaan Medicaid) ee adeegyada hoos yimaada Xeerarkan, miisaaniyaddan looma tixgelinayo miisaaniyad "Gobol ama maxalli" oo ay ulajeedka yahay qodobada dadaalka gacan ku haynta ee Xeerarkan.

9. Ma jiro meel qeybtan ah oo macnayn ubaahan ee laga badellayo shuruudaha hey'addaha Medicaid ee Gobolka ku soo rogey, ama hey'ad kale oo kasta oo maareysa manfacyada dadweynaha ama barnaamij caymis oo waafaqsan qodobka, xeerarka, ama shuruucda Federaalka kaasoo hoos yimaada Qodobka XIX ama Qodobka XXI ee Xeerka Soshal Sekiyuuritiga, ama manfac dadweyne oo kale oo kasta ama barnaamij caymis.

## VIII.M. WARBIXINTA XEERARKA CAYRISKA IYO KA SAARIDA (REPORTING ON SUSPENSION AND EXPULSION RATES) (§300.170).

1. Sanad kasta, LEAs waa in ay USOE usoo sheegtaa xeerarka ardayda naafada ah iyo kuwa aan naafada ahayn ee mudada dheer laga soo cayriyay iyo ardayda laga saaray, oo ay ku jiraan macluumaadka sida uu ukala baxo sida jinsiga iyo qowmiyadda ardayga, ee sanad dugsiyeedka xigga. USOE waa in ay macluumaadkan baartaa si ay u go'aamin la'hayd haddii uu jiro isqilaaf aad ubaaxad weyn:

    a. LEA ee Utah ka jira; ama

    b. Udhaxeeya ardayda aan naafada ahayn iyo ardayda naafada ah ee LEA ku jira.

2. Haddii isqilaafyo dhacayaan, USOE waa in ay dib u eegtaa oo, haddii ay haboon tahay, ay uga baahataa in dib loo eego shuruucda, nidaamyada, iyo hab dhaqanka USOE iyo LEA labadaba si loo hubiyo in la addeecayo qodobka hoos yimaada Qeyba B ee IDEA.

3. Shuruucda, hanaanka, iyo hab dhaqanka ee dib loo hagaajinayo iyo, haddii ay haboon tahay, dib loo saxayo, waxaa ka mid ah:

    a. Horumarinta iyo hirgelinta IEPs;

    b. Isticmaalka taageeradaha iyo dhexgalka aqlaaqda iijaawiga; iyo

c. Dhawritaanka nidaamka.

## VIII.N. KA QEYBQAADASHADA DADWEYNAHA (PUBLIC PARTICIPATION) (§300.165).

1. OSOE waxay xaqiijinaysaa in, ka hor inta aanan la qaadan shuruuc kasta iyo hanaan kasta ee loo baahan yahay in la addeeco sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA, oo ay ku jiraan bedellaad kasta oo lagu sameynayo shuruudo iyo nidaamyo la raacayo, waxaa la qabanayaa dhegeysi dadweyne, dhegeysiga ogeysiis ku filan ayaa la dirayaa, iyo fursad ay shabci weynaha guud faallo usoo gudbin kara, kuwaasoo ay ku jiraan shaqsiyaadka naafada ah iyo waalidiinta dhalay ardayda naafada ah.

2. USOE waxay addeecdaa shuruudaha ku qoran Xeerka VIII.N.1, iyadoo gacanta lagu haynayo dokumentiyada, ka hor inta aan la qabatimin shuruudo iyo nidaamyo la raacayo, shuruudo iyo nidaamyo la raacayo waxaa la doonayaa in dadweynaha ay dib u eegaan oo ayna faallo ka bixiyaan hanaanka taasoo joogto la ah Xeerarkan oo uuna waafaqsan yahay Xeerka Sharcidejinta Maamulka Utah, Cinwaanka R-15-4-4 ee Xeerka Utah.

## VIII.O. GUDDIGA LA TASHIGA EE WAXBARASHADA GAARKA AH (UTAH STATE ADVISORY PANEL ON SPECIAL EDUCATION) (§300.167–169).

USOE waxay dhidibada utaagtay oo ay heysaa Kooxda la Tashiga ee Waxbarashada Gaarka ah ee Utah (USEAP) ee waxbarashada ardayda naafada ah oo ayna ulajeeddaduna tahay in ay bixiso shuruucda tilmaamaha ESOE marka laga hadlayo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee loogu talagalay ardayda naafada ah, sida qeybtan ku magacaaban.

1. Ka xubin noqashada guddiga la Tashiga ee Gobolka, kaasoo xubin kasta ee uu magacaabo Muraaqibka Gobolka Utah ee Waxbarashada Dadweynaha waa inuu xilkaasi hayaa mudo seddex sano ah, waa inuu ka mid ahaadaa, balse uusan ku xaddidnayn, shaqsiyaadka soo socda oo ah shacabka Gobolka, oo ayna ka koobnaadaan shaqsiyaad lug ku leh, ama ka welwelaya, waxbarashada ardayda naafada ah:

   a. Waalidiinta dhalay ardayda naafada ah;

   b. Shaqsiyaadka naafada ah;

   c. Macalimiinta;

   d. Wakiillada xarumaha tacliinta sare ee shaqsiyaadka u diyaariya waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira;

   e. Saraakiisha waxbarashada Gobolka iyo kuwa maxalliga;

f. Maamulayaasha barnaamijyada loogu talagalay ardayda naafada ah, oo ay ku jiraan maamulayaasha Xeerka Hooy laawaha ee McKinney-Vento (McKinney-Vento Homeless Act);

g. Wakiillada iAE Gobolka ee kale ee lugta ku leh maalgelinta ama bixinta adeegyada ee la siiyo ardayda naafada ah;

h. Wakiillada ka socda iskuullada gaarka ah iyo iskuullada dadweynaha ee madaxa bannaan;

i. Ugu yaraan hal wakiil oo ka socda waxbarasho machad farsamo, jaaliyad, ama urur ganacsi oo welwel uu ku hayo qodobyada adeegyada ka gudubka ee ardayda naafada ah;

j. Wakiil ka socda hey'adda daryeelka caruurta ee Gobolka ee mas'uulka ka ah daryeelka korinta carruurta; iyo

k. Wakiillo ka socda hey'addaha xabiska dadka qaangaarka iyo dhalinyarada ee Gobolka.

2. Xubnaha guddiga badankooda waa in ay ahaadaan shaqsiyaad qaba naafo ama waalidiinta dhalay arday naafo ah.

3. Iyadoo go'aan laga sugayo Agaasimaha Gobolka ee Waxbarashada Gaarka, guddiga waxaa dhici karta in la balaariyo oo lagu daro xubno dheeraad ah ee lug ku leh ama ka welwelsan waxbarashada ardayda naafada ah.

4. Howsha Guddiga La talinta Gobolka waa in ay ku jirtaa kuwa soo socda:

   a. USOE kula talisaa baahida aysan Gobolka buuxin ee waxbarashada ardayda naafada ah.

   b. Ay si caam ah uga faalootaa Xeerar ama waajibaadyada ay soo jeediyaan Gobolka ee ku saabsan waxbarashada ardayda naafada ah.

   c. USOE ay kula talisaa in ay diyaariso qiimeynta iyo ka warbixin ku aadan macluumaadka la siinayo Xog-hayaha Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka ee hoos yimaada Qeybta 618 ee Xeerka Waxbarasha Shaqsiyaadka La'xaadka la'.

   d. USOE ay kula talisaa in ay diyaariso qorshooyin tallaabo lagu saxayo si loo wajaho go'aamada lagu sheegey warbixinnadii daba galka ee Federaalka ay sameeyeen sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA.

   e. USOE ay kula talisaa in ay diyaariso oo ayna hirgeliso shuruudaha la xiriira isuduwida adeegyada la siiyo ardayda naafada ah.

5. Guddiga la Tashiga ee Gobolka waa in:

a. Kulmaan sida ugu badan ee suurtogalka ah si ay howshooda uqabsadaan.

b. Kama dambays 1 Luulyo ee sanad kasta, oo ay warbixin sanadle ah ee howlaha guddiga iyo talo-bixinta ay USOE usoo gudbiyaan. Warbixintan waa in ay shacabka heli karaan in ay ukala saar saari karaan qaab joogto la ah warbixinta dadweynaha kale ee ay uga baahan yihiin sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA.

c. La xaqiijiyaa in daqiiqadaha rasmiga ah ee dhammaan kulamada la qabtay la xifdiyaa oo dad weynaha ay heli karaan markay soo socdsadaan.

d. Lagu dhawaaqo dhamaan kulamada iyo ajandaha guddiga oo mar hore la soo sheggaa in kooxaha danaynaya ay fursad ugu helaan oo ku yimaadaan. Kulamada waa inuu ahaadaa mid dadweynaha u furan.

e. Xaqiiji in tarjumaanno iyo adeegyada kale ee daruuriga ah laga bixiyo kulamada guddiga oo la siiyo kooxaha guddiga ama ka soo qeybgali yaasha.

f. Xubnayaasha Guddiga la Talinta ee Gobolka waa in ay adeeggaan iyadoon wax mushar ah lagu siinayn, balse Gobolka waa inuu uceliyaa xubnaha guddiga qarash kasta ee suurtogal ah ama daruuri ah oo ku yimaada ka soo qeybgalka kulanka iyo wax ka qabashada waajibaadyada.

## VIII.P. QEYBHOOSAADKA G-OGOLAANSHAHA, QEYBINTA, ISTICMAALKA MIISAANIYADDA, IYO AMARKA UQOONDAYNTA(SUBPART G—AUTHORIZATION, ALLOTMENT, USE OF FUNDS, AND AUTHORIZATION OF APPROPRIATIONS).

Xog-hayaha ayaa gobolada siinaya lacagaha deeda oo bixinaya miisaaniyad oo iyaga ka caawinaya si ay ubixiyaan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ardayda naafada ah sida uu qabo Qeybta B ee Xeerka (§300.700).

1. Kabka miisaaniyadda Gobolka, maxalliga, iyo Federaalka kale (§300.162).

   a. Miisaaniyadda la siiyo gobolka sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA ee in la balaariyaa sida waafaqsan dhammaan qeybaha Qeybta B ee IDEA.

   b. Ka reebanaanta lidka ku ah iskudhexdarka.

      (1) Miisaaniyadda la siiyay gobolka sida hoos timaada Qeybta B ma ahan in ay ku dhexjirto miisaaniyadda gobolka.

      (2) USOE ayaa waxaa dhici karta in ay isticmaasho nidaam lagu xisaabinayo ee ay ku jirto tijaabin tafatir ee lagu balaarinayo

miisaaniyadda qarashka sida hoos timaada Qeybta B ee Gobolka la siiyo si loo xaqiijiyo in aysan dhacayn wax iskudhexdar ah.

c. Miisaaniyada gobolka la siiyo sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA waa in la isticmaalaa heerka Federaalka, gobolka, iyo miisaaniadda maxalliga (oo ay ku jirto miisaaniyadda aannan ho

2. Gacan ku haynta Taageero dhaqaale ee Gobolka (§300.163).

   a. Gobolka ma ahan inuu hoos udhigo cadada taagerada dhaqaale ee uu ugu talagalay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee la siiyo ardayda naafada ah, ama haddii kale loo diyaaro sababtoo ah qarashyada dheeraad ah ee ardaydan wax lagu barayo, hoos waa cadada taageerada sannad xisaabeedka tagey.

   b. Xog-hayaha ayaa hoos udhigaya miisaaniyadda loo qoondooyay ee hoos timaada Qeybta 611 ee IDEA ee sanad maaliyadeed kasta ka dib marka sanad maaliyadeedka uu Gobolka ku guuldaraysto inuu addeecco shuruuda gacan ku haynta taageero dhaqaale ee gobolka isla cadada ee Gobolka ku guuldaraysto inuu shuruuda ka soo bixi waayo.

3. Xeerka dhismaha (§300.166). Iyadoo la addeecayo §300.162 iyo §300.163, gobolka ma isticmaali karo miisaaniyadda la siiyay ee hoos timaada qeybtan si loo qanciyo sharciga-gobolka ee waajibiyay waajibaadyada miisaaniyadda ee LEAs, oo ay ku jirto maalgelin ku salaysan isa soo xaadirista ardayga ama isku qorista, ama sicir-bararka.

4. Sifada sanadlaha ee isticmaalka miisaaniyadda Qeybta B. (§300.171)

   a. Si maalgelin looga helo sanad maaliyadeed kasta, gobolka si sanadle ahaan waa inuu sharaxaa:

      (1) Sida lacagta u hartay ee loogu talagalay maareynta gobolka iyo howlaha heer-gobol sida loo isticmaali doono si loo buuxiyo shuruudaha hoos yimaada Qeybta B ee IDEA; iyo

      (2) Sida lacagahan loogu qoondeyn doono howlaha lagu sifeeyey §300.704 si loo buuxiyo mudnaanta gobolka ee ku salaysan talooyinka LEAs laga helo.

   b. Haddii qorshaha gobolka ee loogu talagay isticmaalka maalgelinteeda ee sanadka soo socda aysan waxba ka badellin sanadkii ka horeeyey, gobolka waxaa dhici karta inuu soo diro warqad arrintaas ku saabsan si shuruudo loo buuxiyo.

5. Howlaha heer-gobol (§300.704).

a. Ulajeedka ah maareynta Qeybta B ee IDEA, oo ay ku jirto deeq qarash sareysa, Qeybta 619 ee IDEA, iyo iskuduwida howlaha hoos yimaada Qeybta B ee IDEA, iyo fidinta gargaar farsamo oo la siinayo barnaamijyada kale ee adeegyo siiya ardayda naafada ah, gobol kasta wuxuu keydsan karaa cadada sannad xisaabeedka ee uu Xog-hayaha xisaabiyo.

b. Gobollada qeyb ayay qoodeysan karaan oo ay meel udhigan karaan howlaha heer-gobol. Cadada ugu badan ee uu gobol meel udhigan karo howlaha heer-gobol ee kale waxaa lagu xisaabtaa iyadoo lagu salaynayo shuruudaha §300.704(b)(1–2).

c. Qeyb ka mid ah deeqada la dhigay waa in loo isticmaalaa in lagu howl galiyo howlahan soo socda:

(1) Dabagal, fulin, iyo baaritaan cabasho; iyo

(2) In la dhidibdhigo oo la hirgeliyo hanaanka dhexdhexaadinta ee loo baahan yahay sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA, oo ay ku jirto in la bixiyo qarashka dhexdhexaadiyayaalka iyo shaqaalaha taageerada.

d. Qeyb ka mid ah deeqada la dhigay ayaa sidoo kale waa in loo isticmaalaa in lagu howl galiyo howlahan soo socda:

(1) Taageero iyo adeegyo toos ah, oo ay ku jiraan gargaar farsamo, diyaargarow shaqaale, iyo horrumarinta xirfadda shaqaalaha iyo tababaro;

(2) Si loo taageero howlaha dhimista waraaqaha, oo uu ku jiro balaarinta isticmaalka teknoolijiga ee hanaanka IEP;

(3) Si LEAs looga gargaaro bixinta dhexgalada aadaabta wanaagsan iyo taageerida iyo adeegyada caafimaadka maskaxda ee loogu talagalay ardayda naafada ah;

(4) Si loo wanaajiyo isticmaalka teknoolajiga fasalka dhexdiisa ee loogu talagalay ardayda naafada ah si waxbarashadooda loo wanaajiyo;

(5) Si loo taageero isticmaalka teknooliyada, oo ay ku jirto teknooliyada qaanuunada ee naqshadaynta caalamiga ah iyo qalabyada teknoolijiyada caawis, si loo balaariyo helida manhaj guud ee waxbarasho ee loogu talagalay ardayda naafada ah;

(6) Soo saarista iyo hirgelinta barnaamijyada kagudbka, oo ay ku jiraan iskuduwida adeegyada hey'addaha lugta ku leh taagirdda ka

gudubka ardayda naafada ah ee ay uga gudbayaan howlaha dugsiga sare ka dib;

(7) In LEAs laga gargaaro inay buuxiyaan shaqaale yarida;

(8) In la taageero awood dhisida howlaha iyo wanaajinta bixinta adeegyada ay LEAs si ay u wanaajiyaan natiijooyinka ardayda naafada ah;

(9) Barnaamijyo ka duwan ee loogu talagalay ardayda naafada ah ee laga soo cayriyay, iyo adeegyada loogu talagalay ardayda naafada ah ee ku jira xabsiyadda, ardayda lagu qorey iskuullada Gobolka uu gacanta ku hayo ama iskuullada Gobolka uu taageero, iyo ardayda naafada ah ee dhigata iskuullada dadweynaha ee madaxa bannaan ;

(10) Si loo taageero horumarinta iyo bixinta ku haboon ee meeleynta la siinayo ardayda naafada ah, ama horumarinta iyo qiimeynta kale ee jira oo la isku haleyn karo ee qiimeynta waxqabadka ardayda naafada ah, sida waafaqsan Qeybaha 1111(b) iyo 6111 ee ESEA; iyo

(11) Gargaar farsamo la siiyo iskuullada iyo LEAs, iyo adeegyo toos ah, oo uu ku jiro adeegyada waxbarashada kabka ah sida ku qeexan Qeybta 1116(e) ee ESEA ee ardayda naafada ah, ee iskuullada ama LEA ay u aqoonsatay in la wanaajiyo sida hoos timaada Qeybta 1116 ee ESEA iyadoo kaliya sabab looga dhigayo natiijooyinka qiimeynta koox-hooseed loo kala qeybiyay ee ardayda naafada ah, oo ay ku jiraan in horrumarinta xirfadda shaqaalaha inloo fidiyo iyo in macalimiinta loo fidiyo waxbarasho joogto ah, macalimiintaaso ardayda naafada wax u dhiga, kasoo lagu salaynayo daraasaad saytiifig ah ee lagu wanaajinayo cashar bixin waxbarashada, si markaa loo wanaajiyo horrumarinta akadeemiyadda ee ka soo baxa ama ka hormara bartilmaameedyada uu u dhidibay Gobolka kaasoo hoos yimaada Qeybta 1116(b)(2)(G) ee ESEA.

e. Miisaaniyad qarash-badan hey'addaha waxbarashada ee maxalliga.

(1) Uleejada caawinaada LEAs (oo ay ku jirto iskuullada madaxa banaan kaasoo LEA ama ururka LEAs) iyadoo la wajahayo baahida ardayda naafada ah ee baahida weyn qaba, USOE waxay sanad maaliyadeed kasta meel u dhigtay boqolkiiba toban ah cadada miisaaniyadda ee loo meeldhigo howlaha heer-gobolka ee kale:

(a) Si loo maalgeliyo oo loogana bixiyo sanduuqa qarashka sareeya ee LEAs sida waafaqsan Xeerka VIII.O.5.f.(3) inta lagu jiro sanad maaliyaddeedka koowaad iyo kan xiga ee sanduuqa qarashka sareeya; iyo300.

(b) Si loo taageero qaabab waxqabad iyo wax-tar leh ee qarashka loola wadaagayo Gobolka, LEA, ama ururada LEAs ee kale, sida Gobolka uu ugo'aamiyo iyadoo la isuduwayo wakiillada LEAs ka socda.

(2) Gobolka ma ahan inuu isticmaalo miisaaniyad kale oo gobolka u dhigtay ee kaliya loogu talagalay in LEAs lagu bixiyo, qarashka uga baxa dhidibad u taagida, taageerida, iyo haddii kale maareynta sanduuqa.

(a) Gobolka ma ahan inuu isticmaalo in ka badan boqolkiiba shan ee miisaaniyadda gobolka ay meel dhigtay sanad maaliyadeed kasta ee lagu taageerayo qaababka waxqabadka iyo wax-tarka ee wadaagida qarashka ee udhaxeeya ururka LEAs.

(3) USOE waxay soo saartay, oo waa in si sanadle ah dib u eegtaa, oo ay wax uga bedeshaa sida markaas daruuriga ah, qorshaha Gobolka ee miisaaniyad qarash-badan. Qorshaha waa in:

(a) Dhidibada loo taagaa, la tashi iyo isuduwid lala sameeyaa wakiillada ka socda LEAs, qeexid ah ardayda naafo ah oo qaba baahi sare kaasoo ugu yaraan:

(i) Lagu wajahaa saameynta dhaqaale ee ardayda naafada baahida weyn qaba ee miisaaniyadda ardayda LEA; iyo

(ii) La xaqiijiyaa qarashka ardayda naafada ah ee baahida weyn qaba waa in ka badan seddex jeer ka sareysa isku celcelis qarashka ardaygiiba (sida ku qeexan Qeybta 9101 ee ESEA) ee Gobolkaas;

(b) Dhidabada loo taagaa qaabka loo cabiro xaq u yeelashada ka qeybqaadashada LEA ee, ugu yaraan, xisaabta lagu daraa tirada iyo boqolkiiba tirada ardayda naafada ah ee baahida weyn qaba ee ay LEA u adeegto;

(c) Dhidabada loo taagaa shuruudaha si loo xaqiijiyo in meeleynta la taageero oo maalgelinta ay joogto la tahay shuruudaha LRE;

(d) Lala yimaado qaab maalgelin ee qeybin sannad xisaabeed u fidisa LEAs ka soo baxa shuruudaha Gobolka soo saaro;

(e) Dhidabada loo taago jadwal sanadle ah ee USOE looga baahan yahay u kala qeybiyo miisaaniyadda qarashka sareeya ee sanad maaliyadeed kasta; iyo

(f) Haddii Gobolka doorto in gobolka miisaaniyad meel udhigto iyadoo lagu taageerayo qaabab hal abuur leh oo taabagalaya

ee qarashka lagu wadaagayo, qeex sida miisaaniyaddan loo isticmaali doono.

(g) Gobolka wuxuu sameyn doonaa qorshaha Gobolka ee kama dambeyska ee miisaaniyad qarash-badan ee loo diyaariyo shacabka in aan ka yarayn 30 maalmood ka hor inta uusan bilaabmin sanad dugsiyeedka, oo uu ku jiro kala saar-saarida sida macluumaadka ku qoran barta internetka ee Gobolka.

(4) USOE ayaa sameynaya dhammaan qeybinta sanadlaha ee miisaaniyadda qarashka badan ee la dhidib dhigay sida waafaqsan qorsha Gobolka ee shaaciyay.

(5) Qarashka ku kaca waxbarashada ardayda baahida sare leh oo naafada ah waa qarashka kaliya ee ku kaca bixinta tooska ah ee waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee la siyo ardayda lagu soo qaatay IEP ga ardaygaas, oo ay ku jirto qarashka qolka iyo barta meeleynta la dejiyay oo loo go'aamiyay in ay daruuri tahay si loo hirgeliyo IEP ga ardayda.

(6) Miisaaniyad qarash-badan wuxuu sii ahaanayaa mid Gobolka uu sii kontoroolaya ilaa looga qeybinayo LEA si loogu taageero ardayda gaarka ah ee uqalma sida hoos timaado qorshaha Gobolka ee miisaanaaiyadda qarash-badan ama ay LEAs uqeybiso.

(7) Qeybinta waa in aannan loo isticmaalin in lagu taageero qarashka ku kaca sharci, qarash maxkamad, ama qarash kale ee la xiriira tallaabo dacwad ah ee ardayda naafada ah la yimaado si FAPE loo xaqiijiyo sida ardaygan.

(8) Ma jiro wax qeybtan ah:

(a) Oo xadidaya ama shardi ka dhigaya xuquuqda ardayga naafada ah ee taageero hela sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA si FAPE loo helo meesha ugu xadisan; ama

(b) USOE ama LEA awood loo siiyo in ay dhidabada utaagto xadka ah waxa lagu qarashgarayn karo waxbarashada ardayda naafada ah.

(9) Qeybinta la helo taasoo qeybtan hoos timaada ma ahan in loo isticmaalo in lagu bixiyo qarashka haddii kale la soo celin la'haa sida gaargaarka caafimaadka ee la siiyo ardayda naafada ah sida hoos timaada barnaamijka Medicaid ka Gobolka ee hoos yimaada Cinwaanka XIX ee Xeerka Soshal Sekiyuuritiga.

f. Gobolka waxaa dhici karta in ay isticmaasho miisaaniyadda gobolka u meel uu udhigo si loogu maareeyo, isuduwo, iyo gargaar farsamo ee hoos yimaada Xeerarka VIII.O.1–2 iyadoo loo eegeyn:

(1) Reebanaanta iskudhexdarka miisaaniyaddaha.

(2) Reebanaanta ku badellida miisaanaddaha kale.

6. Deeq hoosaadka la siiyo LEA ee loogutalagay ardayda ay da'doodu udhaxayso 3 ilaa 21 jir (§300.705).

a. Gobol kasta ee deeq hela sida hoos timaada qeybta 611 ee IDEA ee sanad maaliyadeed kasta waa inuu qeybiyaa deeq kasta ee goboka aysan keydin sida hoos timaada §300.704 uu LEAs (oo ay ku jiraan iskuullada dadweynaha ee madaxa bannaan ee ka howlgala sida LEAs) ee gobol xaq u leh inuu helo sida hoos timaada Qeybta 613 ee IDEA ee loogu talagalay in ay isticmaalaan sida waafaqsan Qeybta B ee IDEA. Laga bilaabo miisaaniyadda la helaya 1 Luulyo, 2009, gobol kasta waa inuu miisaaniyaddaha uqeybiyaa LEAs xaqa u leh oo ay ku jiraan iskuullada dadweynaha ee madaxa bannaan ee howlgala sida LEAs, xitaa haddii LEA aysan adeegyo siinayn arday kasta oo naafo ah.

b. Ku meeleynta LEAs.

Sannad xisaabeed kasta oo miisaaniyadda gobollada loo qeybiyo, gobol kasta waxay deeqda umeeldhigaan sida soo socota:

(1) Gobolka marka ugu horeyso waa inuu siiyaa LEA kasta oo xaq u leh siiyaa cadada ay LEA heshey sida hoos timaada Qeybta 611 ee IDEA ee sanad maaliyadeedka 1999, haddii gobolka uu qeybiyay boqolkiiba 75 ee deeqda sanadkaas sida hoos timaada Qeybta 611(d) ee IDEA, maadaama qeybtaas markaa la howl geliyay.

(2) Sannad maaliyadeed kasta wixii ka dambeeya 1999:

(a) Haddii LEA cusub la abuuro, gobolka waa inuu lacagta salka ah ee loo qoondooyey LEAs uqeybiyaa ee mas'uulka ka ahaa inuu u adeeggo ardayda naafada ah ee uu hadda u adeeggo LEA ga cusub, inta udhaxeyso LEA cusub iyo LEAs uu saameeyey ee ku salaysan tirada iskudhow ee ardayda naafada ah ee ay da'doodu udhaxayso 3 ilaa 21 jir, ee imanka LEA kasta ay u fidiso waxbarasho gaar ah;

(b) Haddii hal ama in ka badan oo LEAs ah la isugeeyo hal LEA oo cusub, gobolka waa inuu isku daraa inta asalka ahayd ee loo qoondeeyey LEAs la isku daray; iyo

(c) Haddii, laba ama in ka badan oo LEAs ah, oo mas'uul ka ah xuduudaha juquraafigga ama maareynta ah in ay adeeggo siiyaan ardayda naafada ah ee ay da'doodu udhaxeyo 3 ilaa 21 jir oo isbadello, inta asalka ahayd ee loo qoondeeyey LEAs waa in dib loogu qeybiyaa LEAs ay saameysey iyadoo sal looga dhigayo tirada ardayda naafada ah ah ee ay da'doodu udhaxeyso 3 ilaa iyo 21 jir ee iminka waxbarashada gaarka ah ay LEA u fidiso.

(d) Haddii LEA ay hesho lacagta salka ah ee eber ah sanadka koowaad ee ay howl-gasho, USOE waa in ay isku hagaajisaa lacagta salka ah ee sanad maaliyadeedka koowaad ka dib marka marka la xisaabiyo tirada ubadka ee ay LEA soo sheegto in ay adeegto oo ka tirsan ardayda naafada ah. USOE waa inuu lacagta salka ah ee loo qoondooyey LEAs uqeybiyaa ee mas'uulka ka ahaa inuu u adeeggo ardayda naafada ah ee uu hadda u adeeggo LEA ga cusub, inta udhaxeyso LEA cusub iyo LEAs uu saameeyey ee ku salaysan tirada iskudhow ee ardayda naafada ah ee ay da'doodu udhaxayso 3 ilaa 21 jir, ee imanka LEA kasta ay u fidiso waxbarasho gaar ah; Shuruudan waxay dhaqangalaysaa miisaaniyadda la helo 1 Luulyo, 2009.

c. Dib uqoondeynta miisaaniyadda LEA (300.705).

(1) Haddii USOE ay go'aamiso in LEA ay si isku filnaansho ah FAPE ugu fidinayso dhammaan ardayda naafada ah ee deggan aagga ay adeegga ka bixiso ee hey'addaas ee miisaaniyadda Gobolka iyo maxalliga, USOE waxaa dhici karta in ay dib uqoondeyso qeyb kasta oo miisaaniyaddaas ka mid ah ee qeybtan hoos timaada ee aysan LEA ugu baahnayn in FAPE u fidiso, LEAs kale ee Gobolka ka jira oo aan si aan isku filnaansho la'hayn fidiya waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ardayda naafada ah ee deggan meelaha ay ka adeeggaan ee kuwa LEAs kale. USOE ayaa sidoo kale sii haynaysa miisaaniyaddan loogu talagalay isticmaalka heerka Gobolka ilaa iyo xadka Gobolka uusan meel dhigin cadada miisaaniyadda ee loo ogolyahay inuu meel u dhiggo Howlaha heer-gobol sida waafaqsan §300.704.

(2) Ka dib marka USOE ay miisaaniyadda hoos timaada qeybtan u qebiso LEA xaq u leh ee aannan u adeegin ardayda naafada ah, USOE waa in ay go'aamisaa, mudo suurtogal ah gudahood ka hor inta aan la gaarin dhammaadka mudada xigta, ha noqoto in LEA miisaaniyadan lagu waajibiyay iyo haddii kaleba. Waxaa dhici karta in USOE ay dib uqoondeyso miisaaniyad kasta ee ayna ku waajibin LEA ee LEAs kale ee Gobolka ka jira ee aan si ku filnayn u fidiya waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee dhammaan ardayda naafada ah ee deggan meelaha ay uga adeegto ee LEAs

kale. USOE ayaa sidoo kale sii haynaysa miisaaniyaddan loogu talagalay isticmaalka heerka Gobolka ilaa iyo xadka Gobolka uusan meel dhigin cadada miisaaniyadda ee loo ogolyahay inuu meel u dhiggo Howlaha heer-gobol sida waafaqsan §300.705.

(3) Qeybinta miisaaniyadda hartay. Ka dib marka qeybinta iyo bedellaada, Gobolka waa in:

(a) Qeybi boqolkiiba 85 miisaaniyadda ka hartay LEAs ee ku salaysan tirada arday ee dhigata iskuullada dugsiga hoore ee gaarka ah iyo kuwa dadweynaha iyo iskuullada hoose ee ku dhexyaalla xadka awoodda sharci ay LEA ku leedahay; iyo

(b) Qeybi boqolkiiba 15 ee miisaaniyaddan ka hartay kuwa LEAs sida waafaqsan tiradooda ardayda saboolnimada ku nool, sida ay USOE go'aamiso.

d. Haddii USOE ay go'aamiso in LEA ay si isku filnaansho ah FAPE ugu fidinayso dhammaan ardayda naafada ah ee deggan aagga ay adeegga ka bixiso ee hey'addaas ee miisaaniyadda Gobolka iyo maxalliga, USOE waxaa dhici karta in ay dib uqoondeyso qeyb kasta oo miisaaniyaddaas ka mid ah ee qeybtan hoos timaada aysan LEA ugu baahnayn in FAPE u fidiso, LEAs kale ee Gobolka ka jira oo aan si aan isku filnaansho la'hayn fidiya waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ardayda naafada ah ee deggan meelaha ay ka adeeggaan ee kuwa LEAs kale.

7. Sanadle, USOE waa in ay ku wargelisaa LEA kasta oo xaq u leh ee miisaaniyadda Qeybta B (Eeg Xeerka IX.A).

a. Codsiyada sanadlaha ah ee miisaaniyadda Qeybta B waa in loo gudbiyaa Qeybta Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah ee USOE si markaa dib loogu eeggo oo talana looga bixiyo ogolaanshaha.

b. Shaqaalaha Qeybta Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah waa in marka hore dib u eegaa codsiga in ay waafaqsan yihiin shuruudaha Federaalka oo ay ansaxin doonto codsiyadda haboon.

c. LEA hesha ogolaansho ah maalgelinta waa in si qoraal ah loogu wargeliyaa:

(1) Cadada deeqda.

(2) Mudada degmo dugsiyeedka ay miisaaniyaddan waajibayn karto.

(3) Shuruudaha dowladda Federaalka ee quseysa deeqda.

d. Haddii LEA ay wax ka badesho shuruudaheeda iyo nidaamadeeda, degmo dugsiyeedka waa in ay isla tallaabada u isticmaashaa sida kuwa

ku qoran Xeerka IX.A.1–2 ee soo gudbinta shuruudaha iyo hanaanka asalka ah. Nidaamyada Gobolka ee lagu ansaxinayo shuruudaha iyo hanaanyada la badellay ayaa waxaa sidoo kale ay k uqoran yihiin Xeerka IX.A.

## VIII.Q. QEYB-HOOSAADKA H-ISKUULKA-BARBARADKA EE LOOGU TALAGALAY ARDAYDA NAAFADA AH (SUBPART H—PRESCHOOL FOR STUDENTS WITH DISABILITIES)

1. Xog-hayaha wuxuu bixiyaa deeq sida hoos timaada Qeybta 619 ee IDEA si Gobolka looga taageero in ay u fidiso waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira (§300.800);

    a. Ardayda naafada ah ee ay da'doodu udhaxeyso seddex ilaa iyo shan jir; iyo

    b. Ardayda naafada ah ee ilaa laba-sano-jir oo ay seddex u gali doonto inta lagu jiro sanad dugsiyeedka.

2. Meeldhigida howlaha Gobolka (§300.812).

    a. Gobol kasta waxaa dhici karta in ay keydiso in aan ka badnayn cadada ku qeexan Xeerka VIII.P.4 ee loogu talagalay maareynta iyo howlaha heer-gobol.

    b. Sanad maaliyaddeed kasta, Xog-hayaha wuxuu go'aamiyaa oo uu SEA ugu warbixiyaa cadada taasoo ah boqolkiiba 25 ee cadada Gobolka uu heley sida hoos timaada Xeerka 619 ee IDEA sanad maaliyadeedka 1997, isugeyn Xog-hayaha isku dheellitiray sanad maaliyadeed kasta oo raaca:

        (1) Inta ku koradhay boqolkiiba, haddii ay jiraan, ee ka soo hara sanad maaliyadeedka Gobolka uqoondooyay sida hoos timaada Qeybta 619 ee Xeerkan; ama

        (2) Xeerka sicir-bararka, sida loo cabbirey inta ku koradhay boqolkiiba, haddii ay jirto, ee ka soo hara sanad maaliyadeedka ee laga soo xigtay Tusmada Sicirka Macamiilka ee Dhammaan Rukunka (Consumer Price Index For All Urban Consumers), ee uu daabacay Xafiiska Xisaabaadka Shaqada ee Waaxda Shaqaalaha ay daabacaan.

3. Maareynta Gobolka ee Qeybta 619, iskuulka-barbaradka (§300.813).

    a. Ulajeedka ah maareynta Qeybta 619 ee IDEA, (oo ay ku jirto iskuduwida howlaha hoos yimaada Qeybta B ee IDEA, iyo fidinta gargaar farsamo oo la siinayo barnaamijyada kale ee adeegyo siiya ardayda naafada ah), gobol kasta wuxuu isticmaali karaa in aan ka badnayn 20 boqolkiiba ee

cadada ugu badan gobolka ee meel dhigan karo sida hoos timaada §300.812 ee sanad maaliyadeed kasta.

4. Howlaha kale ee heer-gobolka ee hoos yimaada Qeybta 619 (§300.814).

   Gobol kasta waa in ay isticmaalaan miisaaniyad kasta oo uu gobolka keydiyay oo ma ahan in ay maamul u isticmaalaan:

   a. Adeegyada taageeraada (oo uu ku jiro dhidib u taagida iyo hirgelinta hanaan dhexdhexaadin ee uuga baahan yahay Qodobka 615(e) ee IDEA), kaasoo ay dhici karto in ay ka faa'ideystaan ardayda naafada ah ee ka yar seddex jirka ama ka weyn shan jir mar haddii adeegyadan ay sidoo kale ka faa'idayaan ardayda naafada ah ee ay da'doodu udhaxeyoso seddex ilaa iyo shan jir;

   b. Adeegyada tooska ah ee loogu talagalay ardayda xaq u leh adeegyada hoos yimaada Qeybta 619 ee IDEA;

   c. Howlaha heerarka maxalliga iyo gobolka ee buuxiya himilooyinka waxqabadka ay dhidabada u taagtay gobolka ee hoos yimaada Qeybta 612(a)(15) ee IDEA; ama

   d. Si loo kabo miisaaniyadda kale ee loo isticmaalo in lagu hormariyo oo laguna hirgeliyo nidaamyada adeegyada la isuduwo ee loogu talagalay in lagu hagaajiyo natiijooyinka loogu talagalay ee ardayda iyo qoysaska, oo ay ku jiraan ardayda naafada ah iyo qoysaskooda, laakiin ma ahan in ka badan boqolkiiba hal cadada ay gobolka heshay sida hoos timaada Qeybta 619 ee IDEA ee sannad xisaabeedka.

5. Deeq hoosaadka LEAs ee hoos yimaada Qeybta 619 ee ardayda xaq u yeesha ardayda ay da'doodu udhaxeyso seddex ilaa iyo shan (§300.815).

   Gobol kasta oo deeq hela sida hoos timaada qeybta 619 ee IDEA ee sanad maaliyadeed kasta waa inuu qeybiyaa deeq kasta ee goboka aysan keydin sida hoos timaada §300.812 uu LEAs (oo ay ku jiraan iskuullada dadweynaha ee madaxa bannaan ee ka howlgala sida LEAs) oo gobol xaq u leh inuu helo sida hoos timaada Qeybta 613 ee IDEA. Laga bilaabo miisaaniyadda la helaya 1 Luulyo, 2009, gobol kasta waa inuu miisaaniyaddaha uqeybiyaa LEAs xaqa u leh oo mas'uul ka ah in ay waxbarasho siiyaan carruurta ay da'doodu udhaxeyso seddex ilaa iyo shan jir, oo ay ku jiraan iskuullada dadweynaha ee madaxa bannaan ee howlgala sida LEAs, xitaa haddii LEA aysan adeegyo siinayn arday kasta oo naafo ah.

   a. Uqeybinta LEAs (§300.816).

      (1) Gobolka marka ugu horeyso waa inuu siiyaa LEA kasta oo xaq u leh siiyaa cadada ay LEA heshey sida hoos timaada Qeybta 619 ee IDEA ee sanad maaliyadeedka 1997, haddii Gobolka uu qeybiyay

boqolkiiba 75 ee deeqda sanadkaas sida hoos timaada Qeybta 619(d)(3), maadaama qeybtaas markaa la howl geliyay.

(2) Sanad maaliyadeedka 1998 iyo wixii ka dambeeya:

(a) Haddii LEA cusub la abuuro, gobolka waa inuu lacagta salka ah ee loo qoondooyey ee hoos timaada Xeerka VIII.P.5.a ee LEAs uqeybiyaa ee mas'uulka ka ahaa inuu u adeeggo ardayda naafada ah ee uu hadda u adeeggo LEA ga cusub, inta udhaxeyso LEA cusub iyo LEAs uu saameeyey ee ku salaysan tirada iskudhow ee ardayda naafada ah ee ay da'doodu udhaxayso 3 ilaa 21 jir, ee imanka LEA kasta ay u fidiso waxbarasho gaar ah;

(b) Haddii hal ama in ka badan oo LEAs ah la isugeeyo hal LEA oo cusub, USOE waa inuu isku daraa inta asalka ahayd ee loo qoondeeyey LEAs la isku daray:

(c) Haddii laba ama in ka badan oo LEAs ah, oo mas'uul ka ah xuduudaha juquraafigga ama maareynta ah in ay adeeggo siiyaan ardayda naafada ah ee ay da'doodu udhaxeyo seddex ilaa shan jir oo isbadello, inta asalka ahayd ee loo qoondeeyey LEAs waa in dib loogu qeybiyaa LEAs ay saameysey iyadoo sal looga dhigayo tirada ardayda naafada ah ah ee ay da'doodu udhaxeyso seddex ilaa iyo shan jir ee iminka waxbarashada gaarka ah ay LEA u fidiso; iyo

(d) Haddii LEA ay hesho lacagta salka oo eber ah sanadka koowaad ee ay howl-gasho, USOE waa in ay isku hagaajisaa lacagta salka ah ee sanad maaliyadeedka koowaad ka dib marka marka la xisaabiyo tirada ubadka ee ay LEA soo sheegto in ay adeegto oo ka tirsan ardayda naafada ah oo ay da'dooda u dhaxayso seddex ilaa iyo shan jir. Gobolka waa inuu lacagta salka ah ee loo qoondooyey LEAs ee mas'uulka ka noqon la'haa inuu u adeeggo ardayda naafada ah ee ay da'doodu udhaxeyso seddex ilaa iyo shan sano jir uu hadda u adeeggo LEA, inta udhaxeyso LEA iyo LEAs uu saameeyey ee ku salaysan tirada iskudhow ee ardayda naafada ah ee ay da'doodu udhaxayso seddex ilaa iyo shan sano jir, ee imanka LEA kasta ay u fidiso waxbarasho gaar ah. Shuruudan waxay dhaqangalaysaa miisaaniyadda la helo 21 Luulyo, 2009.

(3) Ka dib marka qeybin la sameeyo sida kor ku qeexan, Gobolka waa inuu:

(a) Qeybi boqolkiiba 85 oo ah miisaaniyadda ka hartay LEAs ee ku salaysan tirada arday ee dhigata iskuullada dugsiga hoore ee

gaarka ah iyo kuwa dadweynaha iyo iskuullada hoose ee ku dhexyaalla xadka awoodda sharci ay LEA ku leedahay; iyo

(b) Qeybi boqolkiiba 15 ee miisaaniyaddan ka hartay kuwa LEAs sida waafaqsan tiradooda ardayda saboolnimada ku nool, sida ay USOE go'aamiso.

b. Deeq bixinta qeybtan hoos timaada awgeed, Gobollada waa in ay si wadajir ah ay udalbadaan dhamaan LEAs macluumaadka ugu wanaagsan ee ay iyagu heli karaan ee ah tirada keyka ku qoran iskuullada hoose iyo iskuullada hoose ee gaarka loo leeyahay iyo kan dadweynaha iyo tirada ardayda saboolnimada ku nool.

6. Dib uqoondeynta miisaaniyadda LEA (300.817).

a. Haddii OSOE ay go'aamiso in LEA ay si ku filan FAPE ay usiiso dhammaan ardayda naafada ah oo ay da'doodu udhaxeyso seddex ilaa iyo shan jir degganna meesha ay ka adeegto LEA iyadoo isticmaasha deeqda maxalliga iyo tan Gobolka, USOE dib ayay uqoondeyn kartaa qeyb kasta oo ka mid ah deeqdaas sida hoos timaada Qeybta 619 ee IDEA ee aan loo baahnayn in LEA in FAPE ay siiso LEAs kale Gobol kale ee si kulan u bixinayn waxbarasho gaar ah oo la xiriira dhammaan ardayda naafada ah oo ay da'doodu udhaxeyso seddex ilaa iyo shan jir ee deggan meelaha ay LEAs ka adeegto. USOE ayaa sidoo kale sii haynaysa miisaaniyaddan loogu talagalay isticmaalka heerka Gobolka ilaa iyo xadka Gobolka uusan meel dhigin cadada miisaaniyadda ee loo ogolyahay inuu meel u dhiggo Howlaha heer-gobol sida waafaqsan §300.812.

b. Ka dib marka USOE ay qeybiso deeqda 619 oo ay u qebiso LEA xaq u leh ee aannan u adeegin carruur kasta oo naafada ah oo ay da'doodu udhaxeyso seddex ilaa iyo shan sano jir, sida ku qeexan §300.815, USOE waa in ay go'aamisaa, mudo suurtogal ah gudahood ka hor inta aan la gaarin dhammaadka mudada xigta, ha noqoto in LEA miisaaniyadan lagu waajibiyay iyo haddii kaleba. Waxaa dhici karta in USOE ay dib uqoondeyso miisaaniyad kasta ee LEA ku waajib ah ilaa iyo LEAs kale ee Gobolka ka jira ee aan si ku filnayn u fidiso waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee dhammaan ardayda naafada ah ee deggan meelaha ay uga adeegto ee LEAs kale. USOE ayaa sidoo kale sii haynaysa miisaaniyaddan oo loogu talagalay isticmaalka heerka Gobolka ilaa iyo xadka Gobolka uusan meel dhigin cadada miisaaniyadda ee loo ogolyahay inuu meel u dhiggo Howlaha heer-gobol sida waafaqsan §300.812.

## VIII.R. MAS'UULIYADDAHA SEA (SEA RESPONSIBILITIES)

1. Adeegyo Toos ah ee ay bixiso SEA (§300.227).

   USOE waa in ay u isticmaashaa lacagta haddii kale ay heli la'hayd LEA ama hey'ad Gobol in ay ku bixiso waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira oo ay toos ugu socoto ardayda naafada ah ee deggan meelaha ay LEA ka howlgasho, ama hey'ad Gobolkaas uu mas'uulka ka yahay, haddii SEA ay go'aamiso in LEA ama hey'adda Gobolka:

   a. Aysan bixinin macluumaadka loogu baahnaa in la dhidib dhigo xaq u yeelashada LEA sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA, ama doortay inaysan dalban qeybteeda oo Qeybta B ah.

   b. Aysna awoodin in ay dhidibabada utaagto oo ay sugto barnaamijyada bilaashka ah ee waxbarashada dadweynaha ee buuxiya shuruurdaha Xeerarkan.

   c. Aysan awoodin ama aysan dooneynin in ay isugu geyaan hal ama in ka badan oo LEAs ah si markaa dhidabada loogu taago oo loo sugo barnaamijyo.

   d. Haya mid ama in ka badan oo ah arday naafo ah oo sida ugu wanaagsan loogu adeeggi karo barnaamijka Gobolka ama deegaanka ama nidaam adeeg bixinta ee loogu talagalay inuu buuxiyo baahida ardaydan.

2. SEA waxaa dhici karta inay bixiyaan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira sida hoos timaada Xeerka VIII.Q.1 ayna ku bixiyaan qaab iyo goobaha ay SEA u aragto in ay haboon tahay. Adeegyada waa in lagu bixiyaa sida waafaqsan ee hoos timaada Qeybta B ee IDEA.

3. Haddii SEA ogeysiis caqli gal ah ka dib iyo fursad ah dhegeysi, ay ku ogaato in LEA ama hey'adda Gobolka ee go'aamisay in ay xaq uleedahay sida hoos timaada qeyb-hoosaadkan ay ku guuldareysanayso in ay addeecdo shuruud kasta oo ah xaq u yeelashada (§300.201–213, Qeybta IX ee Xeerarkan), SEA waa in ay hoos udhigtaa ama waa in aysan lacago dheeraad ah ufidin LEA ama hey'adda Gobolka ilaa iyo SEA ay uga qanacdo in LEA ama hey'adda Gobolka ay ka addeecaan shuruuda (§300.222(a)).

   a. LEA kasta ee hela ogeysiiska ku qeexan Xeerka VIII.R.3 ee kore, waa in, sida digniin bulsho, ay qaadaa tallaabada daruuriga ah ee tallaabo loogu qaadayo sida qeybtan waafaqsan ee digniin lagu siinayo dadweynaha ku nool xadka awoodda sharciga ee hey'adda (§300.222(b)).

   b. SEA waa in ay tixgelisaa go'aan kasta oo dhalinaya in dhegeysi la qabto sida hoos timaada Habab nidaam oo la Dhowro ee §300.511 ilaa iyo

§300.533 oo lid ku ah LEA ama hey'adda Gobolka ee lugta ku leh go'aanka (§300.222(c)).

4. Haddii LEA lagu helo oofin la’aanta ah qodobada IDEA iyo shuruda soo gudbinta ee shuruudaha iyo nidaamyada la raaco ee maxalliga ah, sida ku qeexan shuruucda USOE, LEA waa in la siiyaa ogeysiis caqli gal ah oo ku filan oo la siiyay fursad dhegeysi (§300.155).

    a. Haddii LEA aysan ku raacsanayn go'aanka USOE, waa in dhegeysi ku soo dalbataa 30 maalmood gudahood marka tallaabada la qaado.

    b. Inta lagu jiro 30 ka maalmood ee marka codsiga dhegeysiga la helo, USOE waa in ay dhegeysi qabtaan oo ayna muraajicana talaabadooda ku sameeyaan.

    c. Ma ahan in ay ka daba marto toban maalmood ka dib dhegeysiga, USOE waa in xukunka ay soo saareyso ahaadaa mid qoraal ah, oo uu ku jiro cadeymaha go'aanka iyo sababaha xukunka.

    d. Haddii USOE ay go'aamiso in tallaabadeeda ahayd mid lid ku ah xeerarka Gobolka ama xeerarka Federaalka, waajibaadyada, ama shuruucda barnaamika, USOE waa in ay tallaabada ka tasaasushaa.

5. Haddii USOE ay go'aamiso in LEA aysan awoodin in ay dhidaba utaagto oo ay sugto barnaamijyada leh xajmi iyo xad ku filan ee si taabo gal ahna uga soo baxa baahida waxbarasho ee ardayda naafada ah, codsi miisaaniyad ah oo la isugeeyey ee hoos yimaada Qeybta B waa in loo baahdaa si wadajir ah loo dhidib dhigo xaq u yeelashada (§300.223).

    a. Sanadle, Agaasimaha Gobolka ee Waxbarashada Gaarka ah waa inuu LEAs gobolka dhexdeeda ah ku wargeliyaa in looga baahan yahay in ay soo gudbiyaan codsi wadajir ah.

    b. Codsiga wadajirka ah waa inuu soo buuxiyaa ugu yaraan shuruudaha la mid ah ee codsiga degmo kaliya, oo ay ku jirto in la qabatimo shuruudo iyo nidaamyo la raacayo joogtana la ah Xeerarkan, oo waa inuu soo saxiixaa muraaqibka LEA kasta oo ka qeybqaadanaya(§300.224).

    c. LEAs ka weybqaadanaya codsiga la isugeeyey waa in ay si wadajir ah mas'uul uga noqdaan hirgelinta barnaamijka waxbarashada dadweynaha ee ku haboon oo bilaash ah ee loogu talagalay dhammaan ardaydooda naafada ah.

    d. LEA kasta ee ka qeybqaadanaysa codsiga la isugeeyey waa in ay isticmaashaa nidaam xisaabin ee u ogaalaada aqoonsi ah qarashaadka lagu bixiyo ee deeqhoosaadka hoos yimaada.

e. Gobolka waa inuusan sameyn deeqhoosaad aan ka badnayn isugeyn inta ay xaq ugu yeeshaan LEAs maxalliga oo gooni ah.

f. Qodobka adeegyadan ee loo soo mariyo halka wadajir xaq ugu yeesha waa in ay si joogto ah la noqdaan Xeerka III.P.

## VIII.S. SHURUUDAHA SII HAYNTA DIIWAANGELINTA (RECORDS RETENTION REQUIREMENTS)

Sida uu uga baahan yahay xeerarka Federaalka, dhammaan diiwaangelinta la xiriirta miisaaniyadda deeqda Federaalka iyo addeecista waa in ay USOE iyo LEA ay gacanta ku siihayaan seddex sanadood (ama in ka badan haddii xisaab hubin ka dhaaf tahay) ka dib marka aad dhammaystirto howsha ay deeqda u isticmaalayeen (2 CFR 11 215.53).

1. Diiwaangelinta la xiriirta ee miisaaniyad lagu bixinayo waa in si buuxda u muujisaa:

   a. Cadada miisaaniyad ee deeqda;

   b. Sida miisaaniyadda loo isticmaalay;

   c. Qarashka guud ee mashruucda;

   d. Qeybta qarashkaas ee ka yimid ilaha kale; iyo

   e. Diiwaangelinta kale ee fududeynaysa xisaab hubin taaba-galaya ah

2. Diiwaangelin la xiriira addeecista barnaamijka waa inuu ka mid ahaadaa:

   a. Warbixinnada daba galka kama dambayska ah yo kumeelgaarka ah;

   b. Qorshayaasha talaabada lagu heshiiyay, oo uu ku jiro dokumentiyada talaabada lagu saxayo ee ay qaaday LEA iyo USEA;

   c. Talaabada ay qaaday LEA ee lagu saxayay cabashada rasmiga ahayd ee ay USOE ula tagtay;

   d. Dokumenti taageeraya howl gelinta go'aanka kama dambayska ee sarkaalka dhegeysiga ee dacwo qaadid waafaqsan nidaamka ku timid;

   e. Dokumentiga LEA ee ay nidaamyada macluumaadka USOE usoo gudbisay (tusaale ahaan, UTREx, UCA, YEWS, iwm.); iyo

   f. Diiwaangelinta ardayga shaqsiga, oo ay ku jiraan IEPs, macluumaadka qiimeynta, iyo ogolaanshaha looga baahan yahay iyo foormamka ogeysiiska qoraalka hore.

## VIII.T. OGOLAANSHAHA ISKUULKA GAARKA AH (PRIVATE SCHOOL APPROVAL)

1. USOE waa inay hubisaa in ardayda naafada ah ee dhigta iskuullada gaarka loo leeyahay ama xarumaha LEA oo bixiya waxbarasho dadweyne ee ku haboon oo bilaash ah iyadoo loo soo mariya IEP ayaa leh dhammaan xuquuqaha ardayda naafada ah ee ay LEA u adeegto.

2. Meeleynta ardayga ka hor, USOE iyo LEA ayaa dib u eegaya barnaamijka iskuulka gaarka loo leeyahay, si loo go'aamiyo inuu addeeco xeerarka Gobolka iyo kan Federaalka ee loogu adeeggayo ardayda naafada ah.

## VIII.U. KALA SAAR-SAARIDA MACLUUMAADKA. (DISSEMINATION OF INFORMATION)

USOE waa in ay macluumaadka Gobolka ku baafisaa shuruudaha barnaamijka iyo habdhaqanka guusha ee waxbarashada ardayda naafada ah. Tani waa in ay noqotaa mid joogto ah oo waa in ay ka koobnaataa howlaha sida in Gobolka oo dhan lagu qabto tababaro gudaha ah, la daabaco warbixinno guddiga oo sanadla ah, lana diyaariyo warqaddo gargaar farsamo ah, tilmaamo, iyo tusmooyin, iyo shirarka Gobolka uu wakiisho.

## VIII.V. NIDAAMYADA XISAAB HUBINTA EE SANAD MAALIYADEEDKA (FISCAL AUDITING PROCEDURES).

1. USOE waa in ay qaadataa oo ay hirgelisaa nidaamyada xisaab hubinta ee sanad maaliyadeed oo la mid ah shuruudaha xisaab hubinta Federaalka oo mid ah. Sanadle, Waaxda Maaliyadda Iskuulka iyo Ganacsiga waa inuu qabtaa dib u eegid xisaab hubin goobta ah ee diiwaangelinta sanad maaliyadeedka LEA kasta oo Gobolka ka jira. Natiijooyinka dib u eegiddan waa in Qeybta Adeegyada Waxbarashada Gaarka lala wadaagaa iyaddoo ulajeedka koowaadna uu yahay:

    a. Isuduwida tababarada guddaha ee shaqaalaha degmo dugsiyeedka ee nidaamyada xafidaada diiwaangelinta; iyo

    b. Xaqiiqaha ku darida Nidaamka Qorshaynta Horumarinta Barnaamijka Utah (UPIPS) si loo yareeyo in dadaallada la sii koobiyeeyo.

    c. Haddii FAPE aysan bixin LEA, USOE waxay go'aamin kartaa in waxbarashada gaarka ah ee xisaab hubinta sanad maaliyadeedka shuruud laga dhigo.

## VIII.W. HELIDA WALXAHA CASHARBIXINTA (ACCESS TO INSTRUCTIONAL MATERIALS) (§300.172).

1. Utah waxay qaadatay Heerka Helitaanka Walxaha Casharbixinta Qaran (National Instructional Materials Accessibility Standard) (NIMAS) oo waxay

howl isla wadaan Xarunta Helitaanka Walxaha Casharbixinta Qaran (NIMAC) taasoo ay ulajeedkiisu tahay in walxaha casharbixinta ah la siiyo shaqsiyaadka indhoolaha ah ama shaqsiyaadka kale aragta walxaha daabacan ku adag yahay, sida waafaqsan daabacaada NIMAS ee Diiwaangelinta Federaalka ee ahaa 19 Luulyo, 2006 (71 FR 41084).

2. Dhammaan ulajeedooyinka qeytan darteed, USOE waxay qeexeysa *dhaqan waqtigiisa dhaca* ee sida tan: USOE iyo LEAs waa in ay qaadaan mas'uuliyad ah talaabada walxaha casharbixinta ee nooca ay heli karaan ardayda naafada ah ee u baahan walxaha casharbixinta isla waqtiga ay ardayda kale helayaan walxaha casharbixinta.

3. USOE ayaa mas'uul ka ah in ay hubiso in ardayda naafada ah ee ubaahan walxaha casharbixinta ee noocyada la heli karo, oo aan la raacin sida hoos timaada sharaxaadda shaqsiyaadka indhoolaha ah ama shaqsiyaadka kale ee qaba naafada walxaha daabacan ee qeybtan ama kuwa ubaahan walxaha aan feelalka NIMAS aanan laga soo saari karin, in walxaha casharbixinta ay helaan waqtigiisa loogau talagay.

4. USOE waxay isku duwaan NIMAC, iyadoo qeyb ka ah nidaamka qaadashada walxaha casharbixin daabacan ee kasta, heshiiska, ama howlgelinta kale ama qalabka la isticmaalay in lagu soo iibiyo walxaha casharbixinta daabacan, iyadoo heshiis qoraal ah lala galayo daabacaadlaha walxaha casharbixinta daabaca:

    a. In daabacaadlaha looga baahdo in ay diyaariyaan oo, maalinta ama ka hor inta aan walxaha casharbixinta daabacan ay soo gudbiyaan, ay NIMAC u fidiyaan feelalka elegtaroonigga ah ee ku jira walxaha casharbixinta daabacan ee NIMAS loo isticmaalo; ama

    b. Walxaha casharbixinta ka soo iibso daabacaadlaha soo saara, ama waxaa dhici karta inuu fidiyay, noocyada gaarka ah.

5. USOE, inta xadka ee suurtogalka ah, si wadajir ah ula shaqeeya hey'adda Gobolka ee mas'uulka ka ah barnaamijyada tiknooliyada caawisa.

6. Sharaxaadda qeybtan iyo Xeerka IX.I:

    a. *Shaqsiyaadka indhoolaha ah ama shaqsiyaadka kale ee aragtida waxyaabaha daabacan dhibka ku ah* micnaheedu waa ardayda loo adeeggo sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA ee ay dhici karto inay uqalmaan in ay helaan buuggaag iyo waxyaabo kale oo loo daabaco oo qaabab gaar ah sida waafaqsan Xeerka ku magacaaban "Sharci buuggaag siinaya dadka qaangaarka ee indhoolaha," ee la ansaxiyay 3 Maarso, 1931, 2 USC 135a.

b. *Xarunta Helitaanka Walxaha Casharbixinta Qaran* (NIMAC) micnaheedu waa xarun dhidibada loo taagay iyadoo la tiigsanayo Qeybta 674(e) ee IDEA.

c. *Heerka Helitaanka Walxaha Casharbixinta Qaran*(NIMAS) micnaheedu waxaa lagu siiyay kalmad ku qoran Qeybta 674(e)(3)(B) ee IDEA.

d. *Noocyada gaarka ah* micnaheedu waa lagu siiyay kalmad ku qoran Lifaaqa C ee Qeybta B ee IDEA.

7. Micnaha ku qoran Xeerka VIII.W.6 wuxuu quseeyaa LEA kasta, ha noqoto in LEA ay doorato in ay la shaqeyso NIMAC ama haddii kale.

## VIII.X. REEBITAANKA DAAWADA QASABKA AH (PROHIBITION ON MANDATORY MEDICATION) (§300.174).

1. USOE waxay shaqaalaha Gobolka iyo LEA ay ka reebtay in waalidiinta ay la yimaadaan dawooyo loogu qorey walxaha lagu sheegey ee hoos yimaada jadwalka I, II, III, IV, ama V ee Qeybta 202(c) ee Xeerka Walxaha la Xigmeeyay ee ardayga sida shuruudo iskuulka ku soo xaadiro, helo qiimeyn, ama helo adeegyo sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA (21 USC 812(c)).

2. Xeerka VIII.X.1 kuma jiro wax la macneeyey oo abuuraya wax lid ku ah oo maclimiinta iyo shaqaalaha kale ee iskuulka la shaqeeya sida la taliye ahaan ama wadaagida indhoindhayn dhanka fasalka ku salaysan oo waalidiinta ama la taliyayaasha ee quseeya akadeemiyada ardayda iyo waxqabadka howlaha, ama aqlaaqda fasaka ama iskuulka, ama quseeya baahida qiimeynta ardayda naafada ah ama adeegyada la xiriira ee Ubad Helid la xiriira.

## VIII.Y. MAARAYNTA GOBOLKA (STATE ADMINISTRATION (§300.199).

1. Gobol kasta ee deeq hela sida hoos timaada Qeybta ee IDEA waa:

   a. Inuu xaqiijiyaa in xeerar kasta ee gobol, waajibaadyo, iyo shuruuc kasta ee la xiriira Qeybta B ee IDEA uu waafaqan yahay ulajeedka qeybtan;

   b. Inuu qoraal ahaan LEAs u caddeeyaa meelaha kaga yaalo gobolka iyo Xog-hayaha sida xeer kasta, waajibaadyo kasta, ama shuruuc kasta ee sida shuruud gobolka ku soo waajibiyay ee aan uga baahnayn sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA iyo xeerarka Federaalka; iyo

   c. La yareeyo tirada xeerar, waajibaadyo, iyo shuruucyada LEAs iyo iskuullada ku dhex yaalla gobolka looga baahan yahay sida hoos yimaada Xeerka B ee IDEA.

2. Xeerarka, waajibaadyada, iyo shuruucyada Gobolka sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA waa in ay taageertaa oo ay fududeysaa LEA iyo nidaamka heerka iskuulka ee lagu wanaajinayo ee loogu talagalay in ardayda naafada

ah awood usiiyo in ay ka soo baxaan caqabaddaha ardayga Gobolka uu ka haysto heerarka guul gaarida waxbarashada.

## VIII.Z. OGEYSIISKA LEA AMA HEY'ADDA GOBOLKA HADDII AY DHACDO XAQ U LA'HAANSHO DARO (NOTIFICATION OF LEA OR STATE AGENCY IN CASE OF INELIGIBILITY). (§300.221).

Haddii SEA ay go'aamiso in LEA ama hey'adda Gobolka aysan xaq u la'hayn sida hoos timaada IDEA, markaa SEA waa in ay go'aankeeda ku wargelisaa LEA aa hey'adda Gobolka, oo ay LEA ama hey'adda Gobolka siisaa wargelin macquul ah iyo fursad dhegeysi.

# IX. XAQ U YEELASHADA IYO MAS'UULIYADDAHA LEA (LEA ELIGIBILITY AND RESPONSIBILITIES).

## IX.A. XAQ U YEELASHADA LEA EE MIISAANIYADDA IDEA-B (LEA ELIGIBILITY FOR IDEA-B FUNDS) (§300.200–224).

1. Sanad kasta, USOE waa in ay wargelisaa Hey'addaha Waxbarashada Maxalliga (Local Education Agencies (LEAs), oo ay ku jiraan iskuullada dadweynaha ee madaxa bannaan, miisaaniyadda Federaalka ee la heli karo sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA. Si loo helo IDEA-B ay miisaaniyadda ugu soo qulqusho, LEA kasta waa in ay haystaan shuruucyo, hanaan, iyo barnaamijyo taabo-gal ah ee joogto la ah kuwa Guddiga Waxbarashada Gobolka Utah (USBE) Xeerarka Waxbarashada Gaarka.

2. LEA waa in feelka ay ku haysaa shuruucda iyo hanaanka USOE ee qeytan ku qeexan, oo ay ku jiraan dokumentiyo kasta oo taageera oo daruuri ah si hirgelintooda loo xaqiijiyo. Ugu yaraan, LEA waa in lagu wajahaa qeybaha soo socda:

    a. Macluumaad Guud

    b. Macluumaadka iyo Qeybaha Miisaaniyadda (Budget Information and Categories) (§300.301–376)

    c. Hubaal

    d. Soo tabin

        (1) Hordhac

        (2) Shuruudaha

            (a) Sifada barnaamijka guud

            (b) Waxbarasho Dadweyne ku Haboon oo Bilaash ah/Ka Reebista FAPE ee da' qaar ah (§300.102)

            (c) Mudo faahfaahsan oo lagu dhammaynayo Hadafka Fursad Waxbarasho oo Buuxda

            (d) Ubad Helid

            (e) Qiimeynta iyo go'aanka xaq u yeelashada

            (f) Asturnaanta macluumaadka shaqsiga caddeynaya

            (g) Barnaamijka Waxbarashada Shaqsiga ah

            (h) Nidaam Dhowrista

(i) Meesha Ugu Xadisan

(j) Ka gudbinta ardayda ee Qeybta C ilaa Qebta B ee barnaamijka barbaradka

(k) Ka qeybqaadashada qiimeynta iyo natiijooyinka warbixinta qiimeynta

